

**HOGGAANKA
DHALLINYARADA
UU KU
HOGGAAMIYO
ILAAHAY**

Patricia St. John

Ku socota Rosy qofta ugu horreeysay ee sheekooyinkan loo sheegay

Daabacaaddan (Soomaali) © 2023

ISBN:

Sawirka (Picture): <https://unsplash.com/photos/syADksVMrKk>

Nala soo xariir: <https://noloshacusub.com/isticmaalka>

Daabacaadda (Ingiriis) © 2000

Waxaa dib loo daabacay 2008 iyo 2009

ISBN:978-1-85792-558-6

Waxaa daabacay

Christian Focus Publications Ltd

Geanies House, Fearn, Tain, Rossshire,

IV20 1TW, Scotland, U.K.

www.christianfocus.com

Iimeelka: info@christianfocus.com

Markii ugu horreeysay waxaa daabacay Pickering & Inglis sanadkii 1983, bogga kore ee buugga isku hayo, waxaa sharraxay Daniel van Straaten, Nørhaven ayaa Denmark daabacay, iskuna hagaajiyey. Xuquuqdo dhanna waa la xaafiday. Qayb daabacaaddan ka mid ah dib looma soo saari karo, meelna lama dhigin karo, si dib loogu helo, ama si walba laysku gudbiyo, si elegtiroonig ah, farsamo, (koobi), ama duubidda, iyadoon oggolaansho la waydiisan kan soo daabacay ama aan warqadda oggolaanshaha oo xad kuu yeelayso laga helin. Waddanka Ingriiska warqaddaas oo kale waxaa dadka siiya wakaaladda xaqa daabacaadda bixisa, Saffron House, 6-10 Kirby Street, London EC18Ts. www.cla.uk.

TUSMADA BUUGGA

Hordhac	v
1. Marada Cad	1
2. Doonta Dhuntay	6
3. Daaqadda Xiran	12
4. Sababta Shiikh Cali Uu U Cararay	17
5. Martidii La Garan Waayey	21
6. Raadkii Ku Yaalay Barafka	25
7. Ninkii Dadka Ka Duwanaa	30
8. Faraantiga Iyo Ubaxyada	36
9. Meesha Ammaanka Ah	40
10. Jidka Mamnuuca Ah	45
11. Nolol Nolol Loo Bixiyey	50
12. Jidka La Maro	57
13. Codkii Mugdiga Ku Jiray Halkeed Taagantahay?	63
14. Ka Cad Baraf	68
15. Caqabadda	72
16. Shanta Farood Ee Ducada	78
17. Kabtanka Iyo Wiilka Shaqaalahiis Ah	83
18. Garaacidada Albaabka	90
19. Saaxiibka Soo Xasuustay	96
20. Farriinwadahii	102
21. Guriga U Ah Maryan	106

22. Muqaalkii La Kharribay	112
23. Yaabkii Hoggaamiyahii Tuugga Ahaa	119
24. Hees Guul Ah	126
25. Gelitaanka Guulaysiga	130
26. Buuggii Ku Jiray Armaajada Sariirta Agteeda	134
27. Warqaddii Caaisha	139
28. Badbaadinta	145
29. Maxaa Sababay In Derbigu Dumay?	150
30. Fasaxa Xagga Badda Agteeda	154
31. Funaanadda Qaansa-Roobaadka	159
32. Dambiisha Eberka Ah	164
33. Baska Aanan Istaagaynin	169
34. Hoggaamiyihii Lumay	175
35. Heesta Habeenbarkii	181
36. Xarigga Caways	187
37. Gabadha Aan Ilaawaynin	192
38. Rabbiga Digaagtiisa Caddayd	196
39. Wiilka Oo Ka Baqay Iftiinka	203
40. Ka Soo Bixidda Dabka	209
41. Baakadda Kabriidka Iyo Shilinka	214
42. Waardiyihii Aysan Ku Dhicin Inay Dilaan	217
43. Buurtay Fuuli Waayeen	223
44. Iftiinka Aad U Ifaya	228
45. U Dhashay Duulid	232
46. Tallaabada Socodka Habeenkii	237

HORDHAC

Patricia St. John waxay lahayd karti ay sheekooyinka ku sheegto. Markay yarayd, ayaa la gartay inay toddobaad walba ay carruurta deriska iskugu keento gurigeeda. Patricia waxay qisooyinka Kitaabka Quduuska ah (Baybalka) uga sheekaysay si habaysan, ay ilaa hadda qaarkood waxay yiraahdaan, weligeen ma iloowi doono. Kadibna carruurta derbijiifka ah ee jooga magaalada buuraha lahayd ee Maqrib ku taalo oo halkaas sannooyin qaar ay ka qabatay shaqada caafimaadka ah, ayaa isku yimid inay dhegaystaan sheekooyinka Patricia. Markay hawlgab noqotay, carruurta magaalada Coventry joogtay, ayaa galbihii ku soo ag ururi jirtay, si ay u cayaaraan cayaaraha, iyo si ay u dhegaystaan sheekooyin intay galbanin ka hor.

Sheekooyinka buuggan ku jirta waxaa marka hore loo sheegay Rosy, inanta walaasheed, markay seexan rabtay. Rosy hadda waxay hooyo u tahay afar carruur. Ilaa waagaasna hab fudud oo muhiimna ah ayaa sheekooyinkaas loo diyaariyey inay tusto kala duwanaashaha hadallada diimeed. Qaar badan waxay ka yimaadeen waayo-aragnimada Patricia martay, kuwa kalena waxay ka yimaadeen taariikhda ama sheeka-baraaleyda.

Intay dhimanin ka hor, ayuu macallin u soo qoray warqad Patricia, wuxuuna yiri, 'Waan jeclaan lahaa haddaad arki lahayd 90 qof oo dhegaysanaaya, markaan sheekooyinkaaga akhriyey, markaan subaxdii kulmaynay. Sheekadii markii ay maraysay qaybta ugu xiisa badan, meeshii dhan ayaa wada aammustay. Qaarkeenna oo sheekooyinkaaga isticmaala waxaan kaaga haynaa abaal wayn.' Waxaa soo diray Hazel St. John 1999

SU'AALO BUUGGAN DHEXDIIS LOOGA JAWAABAY:

- Yuu yahay Ilaahay, siduuna u eg yahay?
- Miyuu i daryeela?
- Adduunkan muxuu dhibaato badan u leeyahay?
- Maxaa Ciise loogu yeeraa 'Badbaadiyaheenna'?
- Miyaan Masiixnimadu ku dhalanin?
- Maxaa dhacaya, markaan waxyaalo xun sameeyo?
- Ruuxa Quduuska ah yuu yahay?
- Runtii, miyaan garan karaa Ilaahay?

FAA'IIDOOYINKA BUUGGAN:

- Wuxuu ka caawiyaa dhallinyarada inay fahmaan wax baritaanka Masiixnimada.
- Wuxuu dhallinyarada ku dhiirrigeliyaa, si ay Ilaahay u gartaan.
- Waa qayraad ku habboon kulanka dugsigga.
- Waa qayraad ku fiican hadallada carruurta.
- Wuxuuna ka kooban yahay Qirashada Iimaanka

QIRASHADA IIMAANKA:

Waxaan rumaysanahay Eebbe, Aabbaha Qaadirka ah, ee uumay samada iyo dhulka; Iyo Ciise Masiix, oo ah Wiilkiisa keliya ee Rabbigeenna, Sayidkeenna, oo Ruuxa Quduuska ah, Isaga uuraystay, oo uu ka dhashay Maryan oo bikro ah, oo uu ku hoos silcay Bontiyos Bilaatos, oo iskutallaabta lagu qodbay, oo uu geeriyooday lana aasay; Oo maalintii saddexaad ka soo sarakacay dhimashadii; loona dheelmiyey samada, oo uu fadhiyo Eebbe midigtiisa, oo ah Aabbaha Qaadirka ah; oo halkaasuu ka imaan doonaa inuu xukumo kuwa nool iyo kuwa dhintayba. Waxaan rumaysanahay Ruuxa Quduuska, kaniisadda Masiixa ee quduusan, kulanka awliyada; cafiska dembiyada, sarakicidda jirka, iyo nolosha weligeed ah. AAMIIN

WAXAAN AAMMINSANAHAY ILAAHAY

...Kaasoo Aabbahay oo kale i jecel

Luukos 15:11-32

1. MARADA CAD

Ninka ayaa meel malaasan boosteejada dhinaceeda fadhiyey, wuuna ku dhaygagay dhagxaanta. Dadka qaarkood oo halkaas marayey ayaa ninkii fiiriyey – garkii ayaa ku baxay, garbihiisana way isku dhex dhacsan yihiin, oo kabahiisa xitaa way go'een. Laakiin isagu maba ka war hayo dadkan fiirsanaya, waayo wuxuu ka fikirayey noloshiisa. Mana ahayn derbijiif oo seexda waddada tareenka; wuxuu ahaa wiil ku nool guri yar oo guduudan oo ku yaala waddada agteeda, labaatan sano la soo dhaafay.

Waxaa hadda laga yaabaa gurigaas in la dumiyey; wuxuuna u rajeeyey inay sidoo kale ay burburinin ubaxyada. Waa wax la yaab leh siduu u xasuusto ubaxyada iyo wiifowga aabbihiis u sameeyey, iyo jidkii uu ku baranayey sida baasakiilka loo wado. Bilooyin badan ayey lacag meel u dhigeen, si baaskiilkaas loo gado.

Jirkiisa ayuu samir la'aan darteed u dhaqdhaqaaqiyey, waayo xasuustaas aad ayey u calool xumeeysay, wuxuuna soo xasuustay waxyaalo toban sano ka hor la soo dhaafay. Baaskiilkiisa waxaa lagu beddelay mooto, markaas ayuu bilaabay inuu guriga marmar yimaado. Waqtigaasna wuxuu lahaa shaqo iyo saaxiibo badan. Hooyo iyo aabbo way murugsanayeen, oona daalanaayeen, baarkana aad ayuu u ahaa mid xiiso leh. Ma rabin inuu sanadahaas soo xasuusto

ama maalintii ay deyntiisa ku badatay oo uu guriga tagay, isagoo rabo inuu lacag waydiisto waalidkiisa.

Markaasa lagu soo dhoweeyey koob shaah ah, ceebuuna dareemay inuu sheego wuxuu u yimid. Laakiin wuxuu ogaa meesha aabbihiis lacagta dhigo, inyar kadibna markii ay beerta u soo baxeen, ayuu sii maray oo uu qaatay wixii uu rabay. Maalintaas ayaa ugu dambaysay inuu iyaga arko. Arrintaas kadib ma rabin inuu guriga tago, waalidkiisana way heli waayeen isaga. Wiilkii dibadda ayuu tagay, waalidkiisana war kama hayn sanadahaas uu meelaha wareegayey, xitaa in xabsi la geliyey.

Laakiin markuu isaga xabsiga ku jiray, habeenkii aad ayuu uga fikiri jiray iyaga. Mararka qaar markii hurdada laga soo kiciyo, oo bishiina cirka looga jeeddo, wuxuu ka firiki jiray. Hal mar haddii la soo daayn lahaa, wuxuu jeclaan lahaa inuu iyaga arko, hadday weli noolyihiin, mar walbana wuxuu ka fikiraa hadday rabaan inay isaga arkaan.

Waqtii ayaa la gaaray, markii uu shaqo magaaladaas ka helay, laakiin wuu degi waayey. Wax ayaa u jiidayey xagga gurigiisa, isagoo leh dareen uusan iska reebi karin. Mar walboo uu aado laga baxsi, waxyaalo ayaa xasuusiya gurigii yaraa ee dhagaxa laga sameeyey – sida ubaxyo, cunug wiifow ku fadhiya, iyo wiil yar oo dugsiga ka cararaya.

Ma doonayn inuu lacag la'aan uu guriga tago, wuxuuna socday safar dheer, si uu guriga u yimaado. Dhaqso ayuu imaan lahaa, laakiin wuxuu joojiyey socodka labaan mayl ka hor, maxaa yeelay wuxuu dareemay xumaan. Xaq miyuu u lahaa inuu sidaan ku tago guriga? Miyey la heshiin doonaan qofka sidaan u dayacmay? Miyey umalaynayeen inuu yahay midka niyadda ka jabiyey wiilkay jeclaayeen?

Wuxuu soo gatay cunto oo geed hoos fadhista maalintaas inteeda badan. Habeenkaas warqadduu qoray way gaabnayd, laakiin waqti dheer ayey ku qaadatay inuu qoro. Erayadan ayuu ku dhammeeyey – ‘Waan ogahay inay macquul ahayn inaan weli umaleeyo inaad i arki rabtaan, markaa idinka ayey idinku xirantahay. Waxaan imaan doonaa meeshay waddadu ku dhammato subaxa khamiista ah. Haddii aad rabtaan inaan imaado, maro cad kor saara daaqadda qolkaygii hore. Haddaan arko, waan imaanayaa; laakiinse haddii aan arki waayo, waan nabadgelyeynayaa guriga hore oo kadibna waan tagayaa.’

Markaas waxay ahayd khamiista subaxdeedii. Wuxuu yimaaday meeshay waddadu ku dhammaato. Gurigii weli halkaas ayuu ku yaalay. Laakiin markuu halkaas yimaaday degdeg malahayn, intuu derbiga iska fadhista, ayuu dhagaxyo iska fiirsanaayey.

Haba ahaate, wax badan ma sii joogin, waxaa laga yaabaa inay guureen. Haddii uu maradaas halkaas ka wayn lahaa, su'aalo ayuu waydiin lahaa dadka intuu magaalada ka tagin ka hor. Weli ma uusan lahayn geesinimo uu ku wajaho wuxuu samayn lahaa, haddii ay halkaas joogaan oo iyagu aysan rabin isaga.

Isagoo xanuun dareemaayo ayuu kacay, waayo wuu u bartay bannaan jifka, galabtii ayaa la gaaray. Markuu qabow dareemay oo gariiray, ayuu kacay oo si tartiib ah tagay dhinaca geed duug ah halkaas ku yaalay, si uu si fiican ugu arko guriga duugga ah. Mana fiirinaynin ilaa uu halkaas ka gaaray. Intuu laamihiisa hoos istaagay, ayuu indhihiisa xirtay xooggaa. Markaasuu neef dheer qaatay oo fiiriyey. Markaasuu istaagay, isagoo fiirfiirinaya.

Qorraxda ayaa ku ifaysay gurigii yaraa oo bulukeetiga guduudnaa, laakiin hadda ma ahayn gurigii yaraa oo bulukeetiga guduudnaa, waayo derbi walboo gurigaas ku yaalay waa la qurxiyey oo midab cad la mariyey. Daaqad walba waxaa lagu xiray daahyo, harqado, shukumaano, marada miiska la saaro, masarka iyo aftirka; iyo daahyo cadcad ayaa laga lulay saqafka kore ilaa daaqadda kore. Wuxuu u ekaa sida guri baraf oo kale, kaasoo ka dhalaalayo iftiinka subaxda.

Waalidkiisa ma doonaynin inay halis geliyaan. Ninkii madaxa ayuu dib u tuuray, wuuna ooyey oohinta farxad ah. Markaasuu waddada orday oo toos u galay albaabkii hore ee furnaa.

DULUCDA:

Sida aabbe carruurtiisa ugu naxo oo kale ayaa Rabbigu ugu naxaa kuwa isaga ka cabsada.

Sabuurkii 103:13

Ka sharka lihi jidkiisa ha ka tago, ninka aan xaqa ahaynuna fikirradiisa, oo Rabbiga ha u soo noqdo, oo isna wuu u naxariisan doonaa, oo ha u yimaado Ilaaheenna, waayo aad buu u saamixi doonaa.

Ishacyaah 55:7

DUCADA:

Ebbow, waad ku mahadsantahay inaad aad ii jeceshahay in ka badan aabbaha dunida, waayo jacaylkoo dhan adiga ayuu kaa yimaadaa. Jacaylkaaga ma i iloobin, xitaa markaan ku iloobo. Mar walba ayaad i soo dhoweysaa, xitaa

markaan dembaabo. Waxaad jeceshahay inaad dembiga iga cafiso, xitaa markaan u qalmin. Waad ku mahadsantahay jacaylkaaga aan dhammaanaynin.

KA FIKIR:

Miyaan is dhihi kartaa Ilaahay wuu ku jecelyahay? Sidee baad ku ogaatay jacaylkiisa?

...Kaasoo i abuuray oo i soo celiyey...

Bilowgii 1:26-31 iyo Bilowgii 3

2. DOONTA DHUNTAY

Yahye galab badan oo Sabti ah ayuu joogay garaashka, isagoo dhisayo doontaas. Wuxuu doontii ka qoray geed adag, isagoo goynaya oo simaya. Hooyadiisa waxay ku caawisay shiraacyo, laakiin wuu oгаа qaabkii uu u samayn rabay xarigyada. Waa qaab qurux badan oo doonta lagu safro ah, wixii ugu fiicnaa doontii oo dhan isaga ayaa sameeyey.

Haddaba waa la dhammaystiray, meel ayuu ka dhigay qolka fadhiga oo dadka oo dhan ayaa ka helay doontii. Aabbihiis si gaar ah ayuu uga helay, wuxuuna ku yiri, ‘Waan kugu faanaa, waayo caqlilow baad tahay, Yahyow. Maxaa kaloo dhisi doontaa?’ Laakiin Yahye weli kama fikirin wuxuu dhisi lahaa. Doontiisa ayuu ku qanacsanaa waqtigaan la joogo.

Waxaa la joogay xilliga guga, markaasuu doontii qaaday inuu geeyo biyamareenka, si uu safarka u bilaabo. Wuxuuna tagay meesha ugu fiican – xeeb yar oo bacaad leh oo geedo qarinateen, halkaasoo uu buulka shimbiraha ku soo arki jiray. Waxay ahayd waqti fiican oo safar la galo, waayo qorrax iyo dabayl ayaa jirtay, sidaa darteed, doontiisi markuu biyaha geliyey dabayshii ayaa qabatay shiraacyadii, waxayna ku dhex daadisay biyaha. Intuu ag istaagay, ayuu xarigga ku cayaaray. Waqti yar gudaheed waa inuu fuulo qarka webiga oo jidka dhinaciisa ku ordo. Laakiin marka hore intuu iska fadhiyey, ayuu quruxdeeda fiirsanaayey.

Aad ayuu u fikirayey, xitaa ma maqlaynin cod gadaashiisa ka dhawaaqayey. Wuu isku naxay oo booday, markii ay saddex wiil oo da’diisa ka wayn soo degdegeen oo agtiisa fadhisteen. Markaasuu si xoog leh u qabtay xariggii, waayo muusan garanaynin wiilashaas. Wuxuu umaleeyey inay ka soo degeen mid ka mid ah doomaha yaryar oo meelahan ku safrayey. Markaasaa midka ugu waynaa yiri, ‘Bal aan isku dayno.’ Yahyena wuxuu yiri, ‘Waqti yar gudaheed ayaan ku soo dhex jiidayaa.’

Wuxuu dareemay cabsi iyo kelinimo, wiilashana waxay u ekaayeen carruur qallafsan. Wiilkii ugu waynaa mar hore ayuu xariggii ka qaaday Yahye, oo doonta dhinac ayuu u jiiday oo qooyey shiraacyadii. Markay ku soo dhowaatay webiga qarqiisa, ayaa Yahye wuxuu arkay inuu si uusan filanaynin ugu dhacay duurka.

Wuxuu isku dayey inuu wax qabto, laakiin wuxuu qabanayey dhiiqo, taasoo indhaha kaga firdhisantay, kadib uu waxba arki waayey. Markuu isku dayey inuu istaago, oo cawska iyo dhiiqada tufo, wuu waayey wiilashii iyo doontiiba, waxa keliya uu ujeeday waxay ahayd caws lagu tuntay iyo geedo.

Wuxuu fuulay webiga qarqiisa, laakiin wiilashii waxay ku dhex qarsomeen geedaha dhexdooda. Xitaa ma ogayn dhinaca ay ka baxeen. Ka sokow, haddii uu iyaga qabto, ma jirin wax uu ka qaban karay saddexdooda, sidaa darteed, intuu gacanta tirtirtay, ayuu guriga u laabtay. Wuu oгаа waalidkiis inay baxeen oo shaah soo cabayeen, wuxuuna ka shakiyey, hadduu askarta waco oo uu u sheego inay yaabi doonaan.

Waalidkiisa markay soo laabteen, aabbihiisa wuu baxay, si u su’aalo u soo waydiiyo dadka, laakiin dadka meelahaas

deggan ma arkin wiilashaas yaabka leh. Yahye aad ayuu u aammusnaa waqtigii cashada, markuu sariirta tagayna, wuu ooyey. Aabbihiis wuxuu rabay inuu ku caawiyo inay sameeyaan doon kale, laakiin isku mid ma noqon doonaan. Waayo taasi waa tiisi ugu horreeysay oo uu sameeyey, ma iloowi doono.

Toddobaadyo markay ka soo wareegatay, Yahye iyo aabbihiisa mid kale ayey sameeyeen oo ay keeneen webiga, laakiin Yahye ma ilaawin doontiisii ugu horreeysay. Marmarka qaar, isagoo soo jeedo, ayuu fikir galaa oo soo xasuustaa rinjiga dhalaalkiisa iyo babbashada shiraacyadii, oo kadibna la yaabayaa halkay taalay.

Maalin ayuu baaskiilka la tagay ilaa magaalada inuu hooyadiis u soo gado hadiyad, waayo waxay ahayd maalintii dhalashadeeda. Markuu helay wixii uu rabay, wuxuu ku soo laabtay jid cariiri ah ilaa guriga. Wuxuu jeclaa dukaanka yar ee lagu gado alaabta la soo isticmaalay, halkaas ayuu ku daahay, markuu daaqadda ka fiiriyey oo kadibna joogsaday, waayo dukaankaas wuxuu ku dhex arkay kaban duug ah iyo birta wax lagu dubo, waxaa agtooda yaalay doontiisa. Intuu baaskiilkiisa derbiga ku tiiriyey, ayuu dukaankii galay. ‘Doontii daaqadda saarnayd,’ ayuu qaaday oo yiri, ‘Waa tayda, aniga ayaa sameeyey!’

Duqii yaraa ee dukaanlaha ahaa ayaa ookiyaalahiisa ka dhex fiiriyey oo yiri, ‘Maya, anigaa leh! Waxaan ka iibsaday dhowr wiilal toddobaadyo la soo dhaafay. Hadda ayaan daaqadda dhigay.’ Markaasuu Yahye yiri, ‘Laakiin aniga ayaa sameeyey, runtii aniga ayaa leh, fadlan i sii.’ Dukaanlihii wuxuu yiri, ‘Maya, ilaa aad qiimaha u qalma oo warqadda ku qoran bixisid.’

Yahye wuxuu yiri, ‘Laakiin lacagtaydoo dhan ayaan ku bixiyey.’

‘Markaa waa inaad heshid lacag taas ka badan.’

Yahye wuxuu ogaaday in hadalkan uusan rajo lahayn, laakiin weli waqti ayuu haystay. Guriga ayuu u cararay aabbihiisa beerta ayuu ka shaqaynayey, isagoo neeftuurayo ayuu yiri, ‘Aabbow, ma i amaahin kartaa afar boqol oo shilin?’ Markaasaa aabbihiis si taxaddar leh u waydiiyey, ‘Sabab? Sidee baad iigu soo celin doontaa?’

Markaasuu Yahye yiri, ‘Waxaan dhaqi doonaa baabuurka ama caws ayaan jarayaa, wax walbood rabtid ayaan samayn doonaa ee waa inaan lacagtaas helaa. Waayo waxaan soo arkay doontayda... Waa inaan ku dhaqsado intaan la xirin dukaanka.’ Aabbihiis intuu si xiiso leh u fiiriyey ubaxiisa, intuu neefsaday, ayuu madaxiisa ruxay oo tagay dhinaca baabuurkiisa. ‘Soo gal, waxay ku dhowdahay waqtigii xiritaanka. Baaskiilka kuma keeni kartid, isagoon hallaabin.’

Waxaa la gaaray waqtigii la xiri lahaa dukaanka daaqaddiisa, markiiba Yahye oo qaylinaya ayaa orod ku soo galay, ‘Waan helay, haddaba i sii doontayda!’ Markaasaa duqii, isagoo qoslaayo, ku yiri, ‘Doontaydaan kaa iibinayaa’. Kadibna wuu siiyey.

Guriga ayey tageen, iyagoo aammusan, Yahye wuxuu tijaabiyey khasnaddiisa. Markay albaalka soo gaareen, ayuu aabbihiis ku yiri, ‘Aabbow, ma ogtahay? Waxaan ka fikirayey in doontan aan mar labaad leeyahay. Aniga ayaa sameeyey, haddana anigaa iibsaday. Taas la yaab maahano?’ Markaasaa aabbihiis yiri, ‘Aad iyo aad, taasaa sabab aad ku ilaalisid ku siinaysa...’ Laakiin Yahye ma dhegaysanaynin, wuu orday oo hooyadii soo tusay mucjisada.

MOWQIFKA QORAAGA:

Ilaahay wuxuu noo abuuray inuu na lahaado, laakiin anagu waa lunay, waxaan bilownay inaan nolol danaysi ah ku noolaano, waxaan dooranay inaan iska farxino. Dembiga iyo caasinimadda Ilaah waxay noo keentay inaan xoogga shaydaanka aan hoos tagno. Laakiin Ilaahay wuxuu noogu yimaaday, isagoo Ciise Masiix isticmaalaya, Ilaahaygii binu-aadanka ahaa ayaa ciqaabta ee dembigeenaa oo dhan ku bixiyey noloshiisa. Ilaahay wuu na furtay, sidaa darteed, mar labaad ayuu na lahaaday.

DULUCDA:

Erayga ‘furasho’ wuxuu macnaynayaa, waxa aad adiga leedahay, in mar labaad aad gadatid. Ishacyaah 43:1 wuxuu leeyahay,

‘Rabbigii idin uumay wuxuu leeyahay, ‘Ha cabsanina - waayo, anigaa idin soo furtay, oo magiciinna idiin bixiyey - oo kuwayga baad tihiin.’

DUCADA:

Ilaahow, Aabbahaygow iyo Abuurahaygow, waad ku mahadsantahay inaad ii abuurtay inaad ii lahaatid darteed oo aad i jeclaatay intaan dhalan ka hor. Waad ku mahadsantahay inaad Ciise Masiix iigugu imaatay oo aad qiimaha dembiga ii bixisay, Ciise Masiix markuu dhintay. I caawi inaad mar labaad kugu soo laabto, waayo adiga ayaa ii abuuray, waana i furtay.

KA FIKIR:

Maxaad umaleeysaa Ilaahay inuu weli dadka daryeelaayo, xitaa kumanaan sano oo la soo dhaafay oo ay weli ka cararayaan? Maxaa Ilaahay ka celinayo inuu dhaho, ‘Haddii ay dadku doorteen inay jidkooda raacaan beddelkii jidkayga, waan iska dhaafaya’?

...Kii derbiga anaga iyo isaga naga saaray

Efesos 2:12,18

3. DAAQADDA XIRAN

Nimco weligeed ma xanuunsanin, wax aan ka ahayn hargab, mana fahmaynin sababta dhuunta ay u cuncunaysay iyo sababta ay si xun u dareentay. Hooyadeed way fiirisay, markay Nimco diiday hilib duban iyo digir. Markaasaa hooyadeed ku tiri, ‘Cashadan waa tan aad ugu jecelayd, maxaa ku haya, Nimcooy?’

Nimco hoos ayey u hadashay oo tiri, ‘Waxba.’ Isla markii ayaa wax walbo isbeddeleen oo ay madaxa saartay miiska. Hooyadeeda ayaa cod cabsi leh ka dhawaajisay meel fog, ‘Waad xanuunsantahay, Nimco! Bal aan taabto madaxaaga, muxuu madaxeeda kulayl u yahay! Aan sariirta ku geeyo, macaanto!’

Waxay ahayd habeen yaab leh. Nimco way soo kacday, oo way hurudday, iyadoo karkarayso oona jaraynayso; mar walbo ay seexatayna riyo xun ayey ku riyootay oo ay hooyadeed u yeertay, iyada oo la joogtay had iyo jeer. Mugdigii markuu dhammaaday oo shimbirahu ay bilaabeen inay heesaan, Nimco way soo kacday oo waxayna rabtay inay ogaato waxa ku dhacay iyada. Markaasaa hooyadeed ku tiri, ‘Waxaa ku hayey dhuun xanuun xun iyo qandho’, iyadoo u eg qof aan xalay oo dhan seexanin. ‘Aabbahaa dhakhtarka ayuu hadda u wacaya.’

Dhakhtarkiina dhaqso ayuu u yimaaday oo candhuufta ka qaaday dhuunteeda inuu baaritaan ku sameeyo. Si dhugmo

leh, ayuu ula hadlaayey hooyadeeda, iyagoo taagan marinka, laakiin Nimco may maqli karin waxay ka hadlaayeen.

Saacaddo ayaa ka soo wareegatay, Nimco way seexatay oo ay soo kacday oo ay biyo kabkabatay, hooyadeed ayaa soo ag fariisatay. Kadibna hurdo ayaa qaadday, haddana waxaa la gaaray habeen, hooyadeed waxay seexatay joodari oo dhulka yaalay. Nimco waxay is tiri, ‘Inta ay joogto, wax walba waa hagaag. Laakiin waan doonaya in xanuunkan dhuunta i daayo.’

Subixii markii la gaaray telefoon ayaa soo dhacay, aabbaheedna wuu qabtay telefoonka, waxaana loo sheegay natiijada. Natiijooyinka waxay tusaayeen in ay Nimco leedahay qandho. (Qandho la kala qaadayo oo waagii hore jiri jirtay). Waa inay diyaar u ahaato in isbitaal la geeyo. Ambalas ayaa u imaanaya 30 daqiiqo kadib.

Markaasaa Nimco cod culus leh, iyadoo hooyadeed fiirinayso, ku tiri ‘Hooyo, waad i raacaysaa, maahano?’ Markaasaa hooyadeed, iyadoo laballaabaynayso oo dhibaato ka muuqato, ku tiri, ‘Uma maleeyi inay oggolaanayaan. Way ku kaxaysanayaan waayo, waxaad tahay qof faafiye ah. Laakiin waan ogahay in kalkaalisoooyinka ay naxariis leeyihiin, anigana galabtan ayaa kuu imaanayaa.’

Nimco hadday caafimaad qabi lahayd, way ka heli lahayd isbitaal joogidda, waayo carruur kale ayaa joogay qaybta kaloo isbitaalka oo kalkaalisoooyinka aad ayey naxariis u laahayeen. Laakiin aad ayaa dhuunteeda u xanuunaysay iyo gurigana aad ayey ugu xiistay, sidaa darteed, halkaas ayey iska jiiftay, iyadoo illinta isku celinaysay oo albaabka fiirinayso. Hooyadeeda way ku tiri inay galabtaas imaanayso, Nimcana waxay iyada rabtay wax in ka badan adduunka.

Isla markaas ayaa kalkaalisada u timid oo ay ku tiri, ‘Nimco fiiri, waa taasa hooyadaa oo taagan daaqadda. Ha fariisanin hadda! Iyada gacan u haadi keliya oo si fiican u dhoollacaddee.’

Laakiin Nimco, iyadoo oohnaysa, ayey ku dhahday, ‘U sheeg halka albaabku ku yaalo. Fadlan, ha soo gasho dhaqso. Wax ayaan u sheegi rabaa... waa wax aad u muhiim ah.’

Kalkaalisadii ayaa si jilicsan ku tiri, ‘Waan ka xumahay, laakiin qofna looma oggolo inuu soo galo, waayo carruurta halkaan joogaan oo dhan way faafin karaan cudurka. Miyaad doonaysaa in hooyadaa ay xanuunsato? Haddaad rabtid inaad wax u sheegto waan u gudbin doonaa.’

Nimco madax ayey ruxday. Ma haynin farriin ay u sheegto, aad ayeyna uga xumaatay oo mana ka hadli karin. Hooyadeed oo adadkayd oo u qalbiqaboojin lahayd halkaas ayey taagnayd, qofka keliya oo waxyaalaha hagaajin kara, laakiin wax keliya ay samayn karaan waa inay dhalada iska dhex fiiriyaan, iyagoon arrinta waxba ka qaban karin. Kalkaalisadii ma furin daaqadda xitaa, laakiin si geesinimo leh ayey u dhollacaddeeyeen inay is dhiirrigeliyaan oo ay gacanta isku taageen, iyadoo is nabadgelinaya. Nimco, iyadoo aad u xanuunsan, ayey wejigeeda ku qarisay barkin oo ay oowsay, waayo waxay u ekayd in hooyadeed ay adduunka ka tagtay.

Waqtiga ayaa si tartiib ah u sii socday, ayaa Nimcona sii caafimaadaysay maalin walba, kadibna wax cajiib ah ayaa dhacay. Nimco waxay fadhiday dhinaca daaqadda, iyadoo cambuurkeeda xiran, hooyadeed ayaa sida caadiga ah u timaadday. Laakiin galabtaas kalkaalisada daaqadda ayey wadda furtay.

Oo waxayna ku dhahday, ‘Hadda si fiican ayaad u hadli kartiin.’ Aad ayey u hadleen, waayo toddobaad ayaa ka soo wareegatay, sidaa darteed, war badan ayey isku sheegayeen oona iska dhegaysanayeen. Sida ay u hadlayeen ayaa qorraxdii dhacday, markaasaa kalkaalisadii u sheegtay Nimco inay sariirteeda ku laabato. Habeenkaas si fiican ayey u seexatay, iyadoo og in markale waxba ka dhex imaan doonin iyada iyo hooyadeeda. Maalin walbana daaqadda waa la furaa.

Hadda waqtii aad ayuu u tagay, waayo cimilada aad ayey u fiicnayd, Nimco waa loo oggolaaday inay beerta ku dhex socdaan iyada iyo hooyadeed oo ay bannaanka ula soo cayaarta carruurta kale. Waxay deyrka ka arki kartaa ubaxyo iyo idaha yar oo ordaya, haddaba way ogaatay inay waqti dheer uga harin aadiista guriga. Runtii, maalinta waa la gaaray, iyadoo shaah miiska qolka ku dhex cabayso, markuu dhakhtarka yimaaday, isagoo waraaq gacanta ku wato.

Markaasuu yiri, ‘Nimco, waa lagu fasaxayaa. Fadlan, kalkaalisay, wac hooyadeed. Nimco maanta way tagi kartaa.’ Sidaa darteed, galabtaas beddelkay ganjeelka ay nagu macsalaamayn lahayd, Nimco baabuur ay raacday oo ay tageen. Malahan daaqaddo ama macsalaamayn kale! Nimco xaafadda ayey tagaysay.

MOWQIFKA QORAAGA:

Ilaahay ayey ka yimaadaan noloshoo dhan, jacaylka, qalbiqaboojinta iyo farxadda. Waxyaalaha oo aan ka fikirnoo dhan, weligeen ma helayno farxadda aan weligeed dhammaanaynin wax aan isaga ka ahayn. Laakiin dembi ayaa dhexdeenna ka sameeyey derbi. Ilaahay uma imaan

karo ilaa derbiga dembiga laga saaro. Ilaahay wuxuu iigu yimid, isagoo Ciise Masiix isticmaalayo iyo dhimashadiisa, derbigaasna wuu dumiyey. Axdiga Cusub wuxuu leeyahay inuu Ciise Masiix qaado derbigaas oo wuxuu ku qodbay iskutallaabta. Sidaa darteed, jid furan ayaa jiraa oo Ilaahay ku geynayo, jid furan oo jannada ku geynayo kuwii u diyaar ah oo aaminsan inuu Ciise Masiix yahay Jidkaas.

DULUCDA:

Hortaada farxad baa ka buuxda, Gacantaada midigna nimco baa ku jirta weligeed.

Sabuurkii 16:11

Laakiinse xumaatooyinkiinnaa idin kala soocay idinka iyo Ilaahiinna, oo dembiyadiinnaa wejigiisa idinka qariyey, oo saasuusan idiin maqlin.

Ishacyaah 59:2

DUCADA:

Ilaahow, waan ogahay in adiga keliya aad farxad i siin kartid. Dembigaygu ayaa derbi naga dhex sameeyey, laakiin Ciise Masiix wuu qaaday. I caawi, si aan tani u fahmo, haddaan aammino, waxna ay dhexdeenna ku jirin. Waqti walbaan kuu imaan karaa, maalin ama habeen. Waad ku mahadsantahay inaad meel jannada aad nooga diyaarinayso. I nadiifi, oo iigu diyaari yeeritaankaaga.

KA FIKIR:

Muxuu Ilaahay qiimo badan ugu bixiyey derbiga dembiga inuu ka saaray - dhimashada Wiilkiisa? Muxuu Ilaahay u dhaafi waayey binu-aadanku dembigooda, si uu u badbaadin lahaa Wiilkiis oo aad u jeclaa?

WAXAAN AAMMINSANAHAY WIILKA ILAAHAY CIISE MASIIX
Ciise Masiix: Sida uu Ilaahay noogu yimaaday –
Muxuu Masiixu noogu yimaaday.

Cibraaniyada 1:1,2 iyo 2:9-18

4. SABABTA SHIIKH CALI UU U CARARAY

Cali oo ahaa Shiikh Carabi ah, wuxuu fariistay miiskiisa, isagoo jooga gurigiisa qaaliga ah. Waa qol qurux badan oo ka soo hor jeeda beerta ubaxa ku baxo hoos geedka quraca oo leh laamo isku laalaabma. Shiikha hanti badan ayuu lahaa, buugagtiisa oo xisaabta waa lagu hor furay, xoghayahiisana aad ayaa u dadaalay.

Mararka qaar wuxuu ku mashquulaa buugagtiisa, marar kalena wuxuu daaqadda ka fiirsadaa wiil yar oo fuulaya geedka quraca oo leh laamo isku laalaabma. Mid oo indha madow, timo madow leh, oo surwaal qaba, wiil caadi ayuu u ekaa; laakiin kaas wuxuu ahaa Saalim. Kaasoo ah wiilka keliya ee aabbihiis ka dhaxli lahaa, oona ah iftiinka indhaha aabbihiis, oo hoos ayuu ku cayaarayey, taas darteed, ayaa xisaabtu tartiib u socotay subaxdaas.

Shiikh Cali bogga buuggiisa xasuus qor ah ayuu rogaayey, isagoo fikir lahaa. Habeenkaas marti sharaf ayaa imaanaysay, naagtiisana waxay tagtay aroos oo qaraabadooda ah. Laakiin dhib malahan! Wuxuu lahaa adeegayaal badan oo shaqadooda ku fiican. Wuxuu taabtay gambaleelka koronto ku shaqeeya, markaasaa adeegahiisii yimaaday, isagoon buuqaynin.

Markaasaa sayidka yiri, ‘Bal u soo yeera Cabdullaahi iyo midka cuntada kariyo.’ Inyar kadib ayey hortiiisa soo istaageen, iyagoo dhar nadiif ah iska qabaan. Cabdullaahi waa inuu suuqa tagaa oo uu soo iibiyaa waxyaalihii loo bahnaa oo dhan. Intuu u sujuuday, ayuu baxay. Midka cuntada kariyo waa inuu wax dubaa, oona cunto qaali ah u adeego xafladda. Madaxeeda ayey janjeerisay oo qolka ka baxday.

Markaasaa sayidka yiri, ‘Bal u soo yeera midka beerta ka shaqeeyo’, wuuna yimaaday. Isaguna waa inuu doorto miro iyo ubaxyo ugu fiican, kadibna wuu dhoollacaddeeyey, wuuna baxay. Wuxuu jeclaa inuu tuso gurashadii beertiisa quruxsan.

Waxaa jiray warqaddo la diro iyo wareysiga la diyaariyo. Derbi ayaa dhinaca xerada idaha ka dumay, oo kan idaha ilaalinaayey ayaa lala tashtay. Waxyaalo badan ayaa loo baahan yahay in laga shaqeeyo, adeegayaasha badanna, iyagoo aammusan, ayey meelo kala duwan tageen. Sayidkuna bunkiisii madow ayuu kabaday, oo miiskiisa kama dhaqaaqin. Ma u bahno inuu miiskiisa ka kaco, halkaas keli ayuu amar ka bixiyaa.

Si kadib ah, ayaa qayli dheer ka timid dhinaca beerta. Isla markii ayaa sayidka kor u booday oo u orday dhinaca daaqadda. Wiilkiisa ayaa geed ka soo dhacay, isagoo qaylinaayey. Wuxuu ku dhex yiilay beerta ubaxa, isagoo gacantiisa kor u qaadayo, oo caawimaad waydiisanayo. Laakiin aabbihiisa gambaleelka ma taabanin, misena adeegayaashiisa uma dirin. Isaga ayaa jaranjarada ku kor orday oo dhaafay ninkii beerta ka shaqaynayey oo halkaas taagnaa oo fiirsanayey siduu sayidka hoos u ordayey.

Markaasuu yiri, ‘Waan ku soo socdaa, wiilkaygiyow’, markuu dhulka soo joogsaday, halkii ayuu qaaday wiilkii oo nabarro leh, tartiib ayuu u caawiyey canqowgiisa oo murgacday. Wiilkii ayuu xambaaray, isagoo qabo labbis qaali ah, intuu qaaday ayuu la ag maray midka beerta ka shaqaynayey iyo xoghayahiisa, ilaa qolkiisa ayuu geeyey.

MOWQIFKA QORAAGA:

Ilaahay, Abuuraha ah, Aabbaheen, Kan na furtay iyo Isha nolosha iyo jacaylku oo dhan, wuxuu leeyahay adeegayaal badan oo doonistiisa sameeya. Laakiin Ilaahay markuu maqlay oohinta carruurtiisa, kuwaas oo noloshooda ku kharribay dembiga, ma soo dirin malag ama nebi, isaga laftirkiis ayaa yimaaday. Wuxuu soo qaatay jirka binu-aadanka oo noogu yimaaday xagga Ciise Masiix, Wiilka Ilaahay. Bawlos wuxuu yiri, ‘Ilaah duniduu Masiix kula heshiiyey.’ Ciise Masiix wuxuu yiri, ‘Kii i arkay wuxuu arkay Aabbaha.’

DULUCDA:

*Malaa ‘igihiiisa xoogga badan oo eraygiisa oofiya...
Rabbiga ammaana ... Idinkoo ah midiidinyadiisa wuxuu
doonayo sameeyow!*

Sabuurkii 103:20,21

*Dab iyo roob dhagaxyaale, baraf cad iyo ceeryaamow,
Iyo dabayl duufaan ah oo eraygiisa oofiyoow
[ammaana].*

Sabuurkii 148:8

*Ilaah wuxuu waagii hore siyaalo badan oo kala
duduwan awowayaasheen kula hadlay nebiyadii.
Cibraaniyada 1:1*

DUCADA:

Ilaahow, Aabbahaygiyow iyo Abuurahaygiyow, waxaan rabaa inaan ka fikiro waynaantaada. Waxaad tahay Sayidka koonka, xiddigyaha iyo bannaanka. Malaa'igtaada iyo adeegayaa-shaada waxay addeecaan mar walba amarradaada. Waxaan kaaga mahadceliyaa in markaan dembaabay oo iska halleeyey noloshaad i siisay, waad ii imaatay, adigoo ah Ciise Masiix. Waad ii jeclaatay oo aad ii imaatay - waxaad noqotay cunug sida aniga oo kale, si aad igu soo dhowaato oo aad igu hoggaamiso Ilaahay. I bar inaan jeclaado Ciise Masiix, waayo Isaga ayaan ka helayaa Ilaahay.

KA FIKIR:

Adigu sideed u aragtaa, maxay kula tahay in Ilaahay QUDHIISA yimaaday, isagoo isticmaalaya Wiilkiisa, maxay dabecaddiisu na tusaysaa?

Ilaahay, oo laga dhex garan waayey Ciise Masiix
Yooxanaa 1:1-13

5. MARTIDII LA GARAN WAAYEY

Xilligii taariikhdiis Ingiriiska markii Ingiriiska ay rabshada qabsatay quruunta badda ku safraysa la oran jirtay Daanish waxay ahayd xilli argagax leh. Waxay ku yimaadeen maraakiib cabsi leh oo wax madax bahal u eg marakiibta meesheeda hore ku leh, waxayna gashanaayeen koofiyad bireed. Meel walbo ay tageena, way bililiqaysteen, dadkiina way dileen, guryihii iyo kaniisadihiina way gubeen, dadkii Ingiriiska ahaana way ka carareen, ilaa uu boqorkii geesi ahaa oo la oran jiray Caynaanshe uu ka hor istaagay badda iyo dhulkaba. Ugu horrayntii wuu ku guulaystay, ilaa markii dambe gadaal loo soo celiyey. Markaas ayaa rabshadii awoodda lahayd iyo cadowgiisii ay soo weerareen, waxayna ku kalliftay inuu ka cararo qasrigiisii oo uu duurka ku dhuunto, waxa uuna isku ekaysiiyey derbijiif. Boqorkii Daanishka ayaa madaxiisa dul dhigay lacag aad u fara badan, waxa uuna isku dayey in uusan qofna u sheegin marka laga reebo inyar oo raacsan oo uu aad ugu kalsoonaa ma ahane.

Mid waxaa uu ahaa xooladhaqato la oran jiray Xuseen, kaasoo jeclaa boqorkiisa oo aan weligiis khiyaanayn. Xuseen waxaa uu boqorka ka codsaday in uu cariishkiisa kula hooydo, laakiin ma uusan aamminaynin xaaskiisa, taasoo ahayd mid hadal badan, marka uma uusan sheegin martida cidda ay tahay.

Caynaanshe aad ayuu u murugaysnaa, waxaa uuna aad uga welwelsanaa boqortooyadiisii uu waayey iyo inuu isku dayo qaabab uu dib ugu aasaasi karo ciidan militari ah. Laakiin naagtii ninkii xooladhaqatada ahaa ayaa la yaabtay nin wayn oo meel iska fadhiya oo welwelaya. Markii uu hadlay ma aysan ogayn inay dhegaysanayso boqorkeeda. Waxaa u taalay shaqo badan oo in la qabto u baahan, waxayna fahmi waysay sababta uu ninkeeda u oggolaaday ninkan derbijiifka ah inuu iska fadhiyo shaqo la'aan. Waxayna sugtay inta uu Xuseen ka baxayey oo uu ka aadayey beerta, waxayna bilowday in ay la hadasho, oo ku dhahdo ninka ajnabiga ah, 'Hadda soo bax, waxaad tahay nin fiican. Looma baahna in shaqo la'aan la iska fadhiyo. Uma ekid mid wax badan garanaya, laakiin waxaad ii sii fiirisaa doolshadan foornada ku jirto, inta aan ka soo laabanayo ceelka. Marka uu guduudan rabo dhinaca kale u geddi, marka uu guduutanna ka deji dabka.'

Caynaanshe ayaa dabkii ag faristay, aad ayuuna u fikirayey. Wuxuuna ka dhex arkay guul qoryaha holacooda. Haddiise uu awoodi lahaa in uu isku soo aruuriyo ciidankiisii, si uu uga hor yimaado uuna iskaga celiyo cadowgiisii ... haddii uu awoodi karo in uu la kulmo hoggaamiyayaashiisii. Dharbaaxo dhegta uga dhacday ayuu ku soo naxay iyo cay aad u badan. Wuxuu ka soo toosay riyadiisii dagaalka iyo guushii urkii gubashada. Doolshooyinka ayaa u madoobaadeen sida dhuxusha oo kale. Naagtii ninkii xooladhaqatada ahaydna aad ayey u xanaaqday, waxay ku tiri, 'Waxaad ku fiicantahay malaha wax caajis badan baad tahay, xitaa ma ku aammini karin, miyaa?'

Xuseen si naxdin leh wuxuu ku yiri 'Us us, haweeneeyeey!', markii uu soo galay, iyadoo ogayn sababta uu ugu qayliyey

ayuu u sii raaciyey si xoog leh, 'Qabo afkaaga! Ma garanaysid boqorkaaga?'

Ma garanayno waxa dhacay intaas kadib, laakiin waxaan ognahay inuu Caynaanshe ahaa nin deggan, uuna aad uga xumaaday dayacii uu sameeyey. Waxaan sidoo kale ognahay ugu dambayntii in uu isku soo aruuriyey raggii daacadda ahaa way la kulmeen, wayna jabiyeen cadowgii. Caynaanshe isagana waxa uu ku laabtay qasrigiisii, waxaa uuna xukunkii boqortooyada sii hayey sanado badan. Wuxuu ahaa boqor la jecelyahay oo la xushmeeyo. Laakiin ma uusan ilaawin naxariistii Xuseen. Wuxuu ka kaxeeyey xooladhaqatadii, wuxuuna ka dhigay midka wadaadka ugu sarreeya. Marka xaaskiisu waxay mar walba madaxeeda hoos u dhigi jirtay boqorka, iyadoo ka xun in ay garan waysay, markii uu u yimid isaga oo is qarabaya.

DULUCDA:

Wuxuu ku jiray dunida, dunidana waxaa laga sameeyey xaggiisa, oo duniduna ma ay garanayn isaga. Wuxuu u yimid kuwiisii, kuwiisiina ma ay aqbalin isaga.

Yooxanaa 1:10,11

In aad u yar ayaa aqoonsatay Ilaahay in u ku dhex jiray cunugga. Mulkiilaha hoteelka albaabka ayuu ka xirtay. Markii dambe, walaalihiis iyo deriskiiba waxay umaleeyeen cunug caadi ah. Markuu mucjisooyin sameeyey, waxay is dhaheen laga yaabo inuu nin fiican yahay keliya. Laakiin inyar ayaa u aqoonsatay Ilaahnimo arijirradii iyo raggii xigmadda badnaa; Simecoon iyo Anna; waalidiintiisii, iyo markii dambe xertiisii

iyo inyar oo ka mid ah dadka uu daweyey iyo kuwii uu la hadlay, iyo askarigii Roomanka ahaa ee iskutallaabta joogay.

DUCADA:

Ilaahayow, midka Aabbahay iyo Abuurahayga ahow, igu caawi inaan Ciise Masiix kaa dhex arko. Igu caawi inta aan akhrinayo Injiilka, inaan ammaantaada Ciise Masiix ka dhex arko. I bar inaan maqlo codka Ilaah, aniga oo akhrinayo erayada Ciise Masiix.

KA FIKIR:

Ilaah kuma imaan sidii ay dadka badankiisu filayeen - isagoo qaba dhar aad u qurux badan, sida boqor. Sideed u filaysay inuu yimaado? Weli, miyaad umalaynaysaa hadda, inuu Ilaahay kuugu yimaado qaabab kala duwan, laakiin aad awoodi wayso inaad garatid?

Muxuu Ciise Masiix dhulka ugu noolaaday

1 Butros 2:21-25

6. RAADKII KU YAALAY BARAFKA

Xaawa waxay ku faraxsanayd gurigooda cusub ay ku lahaayeen baadiyaha. Waxay markii ugu horraysay booqasho ku tageen bishii afaraad, oo markay aabbaheed iyo walaalkeed oo garaashka iyo meesha alaabta la dhigto fiirinayeen, hooyadeedna guriga dhexdiisa fiirfiirinaysa, Xaawa waxay ku orodday dhankii beerta. Cawska beerta degaandeeda ahaa ee beerta gadaasheeda waxaa ku yaalay geedo tufaax ah, waxaana kasii dambeeyey meesha ay ubaxyada ka baxaan. Meeshii ayey iska jiiifay cawskii dhexdiisa, iyada oo cirka fiirinaysa, reerkeediina waxay heleen labaan daqiiqo kadib.

Hooyadeed ayaa qososhay. Waxayna ku tiri. 'Xaawa, guriga uma xiiso qabtid miyaa? Waad ogtahay beerahan kuma dhex noolaan kartid!' Xaawa waxay ku jawaabtay, 'Haa waan ogahay, ee fadlan ma heli karaa qolka jiiifka ee beerta xaggeed u jeeda? Weheliye ayaa sidoo kale yiri, 'Ana ma heli karaa qolkaas qabyada ah, si aan u dhammaystiro?' Aabbahood ayaa isagana yiri, 'Anigana beerta meesha ugu hoosaysa ma u heli karaa digaagtayda?'

Qof walba wuu helay wuxuu rabay. Digaagtu way cadcadaayeen, waxayna dhali jireen ukumo badan. Carruurtuna kama daali jirin inay soo aruuriyaan ukumaha. Aabbahoodna shaqada ayuu ka aadi jiray aroortii, wuxuuna

guriga ku soo laaban jiray tobanka iyo laba galabnimo. Sidaas darteed, Weheliye ayaa digaagta quraac u geyn jiray, inta uusan iskuulka aadin kahor, Xaawana waxay siin jirtay cashada, markay iskuulka ka soo laabato. Waxay ku dhex wareegi jirtay cawska dhaadheer dhexdiisa iyo dhirta ku taala beerta, waxayna sugi jirtay ilaa ay shimbiraha ka soo buuxsamaan cagaheeda agtooda. 'Xilliga guga digaagta waxay haysan doonaan jiijiilayaal,' waxay u fikiraysay si farxad leh oo tiri, 'Waan fiirsan doonaa, markay ukunta ka soo baxayso.'

Dayrtii ayaa la gaaray, tufaaxiina wuu bislaaday. Carruurtiina waxay gurteen miro badan. Geedihii ka dambeeyey beerta waxay isku beddeleen guduud, bunni iyo dahabi, shimbirihiina way ka carareen. Caleemihiina waxay bilaabeen inay daataan, waxayna dab ka shidi jireen alwaaxyada fiidkii; habeen habeenada ka mid ah, markay seexdeen, waxaa bilowday baraf. Aad ayuu barafku u da'ay, mana kala joogsan saddex habeen iyo laba maalmood, oo baadiyaha oo dhan baa daboolay. Digaagta ayaa ku dhex ururay buulkooda, iyadoo qaylinaya, shimbirahiina waxay yimaadeen daaqadda.

Maalintii saddexaad aabbihii ayaa kacay aroortii hore, waddadii albaabka ayuu xaaqay, iskuulkii ayeyna u lugeeyeen. Berrina waa sabti oo waxay aadayaan cayaartii ku taraarixidda barafka. Xaawa waxay iskuulka ka timid tobankii galabnimo, guriga ayeyna u soo lugaysay, Weheliyena saaxiibkiis ayuu raacay. Waxay jeclayd jawiga aammusnaanta ee baadiyaha, raadka ciddiyaha xayawaanka ee ku yaalay barafka dushiisa, iyo geedaha waddada geeskeeda ku yaal, iyo raadadka. Waxaa ku yaalay iftiin huruud dhanka galbeed, hoos buluug nooc kale ahna wuxuu ka muuqday barxadda.

Guriga aad ayuu u aammusnaa, hooyana guriga way ka maqnayd.

Dharkii ayey si dhaqso ah is kaga beddeshay, waxay xiratay buudkeedii, cunto ayeyna u diyaarisay digaagtii. Sida ay u dhaxamaysnaayeen ayna u caajisanaayeen, ayey ka fikirtay, iyadoo cawska u sii ordaysa. Kadib way istaagtay, wayna neeftuuraysay. Sidee bay uga gudbi doontaa? Way yareed, da' deedana way ka fududeed, barafkana waxa uu ahaa mid adag oo jabnayn, aad ayuuna uga hooseeyey dhererka buudkeeda. Qorraxdu way sii dhacaysay, mugdi ayeyna noqon doontaa xilliga uu Weheliye guriga ku soo laabanayo. Waxay ahayd inay ka fikirto xal.

Waxay fiirisay cawska. Ma hoos baa, mise waxa ku yaala calaamad barafka dushiisa? Ma aysan ka garan karin shucaaca dartiis. Kadib waxay xasuusatay Weheliye inuu digaagta siiyey quraac; isaga ayaana meesha maray saakay. Dhabcan, waxaa ka soo wareegatay saacaddo badan, baraf badan oo soo datayna wuu tirtiray raadkiisii, laakiin ugu yaraan way isku dayday. Lugteeda ayey si tartiib ah u dhigtay calaamadii ugu horraysay, wax yar ayeyna hoos u gashay barafkii adkaa. Haddii ay horay u qaadi lahayd labo tallaabo, si nabad ah ayey ku gaari lahayd.

Aad ayey ugu adkayd sababtoo ah Weheliye waxa uu leeyahay lugo dhaadheer iyo cago waawayn. Laakiin way ku guulaysatay inay isku aadiso, iyadoo awood isticmaalaysa cagteeda yarta ahna dhigaysa raadka ka horreeya, horay dhinaca beerta way u fududayd, waxay qabsatay geedka tufaaxa laantiisa. Digaagtii aad ayey u farheen, waxayna ku soo dhoweeyeen sawaxan, meel ayey u banneysay wayna u yimaadeen, cuntadoodii ayeyna bilaabeen inay cunaan. Barafkii wuu joogsaday, waxayna la joogtay ilaa ay kulligood

buulkooda ka galaan. Waxay doorbidaysay inay ku qayliyaan aammusnaanta ballaaran ee barafka.

Soo noqodka wuu ka sahlanaa, maxaa yeelay raadkii aad buu u caddaa, laakiin cagaheeda ayaa aad u qaboobaa, dhulkana wuu beddelnaa. Markii ay ka soo baxday beerta, iftiin ayaa ka ifayey jikada horteeda, waxayna ogaatay in hooyadeed ay imaatay. Aad ayey u faraxday. Waxay fiicnaan lahayd in kabahaas laga bixiyo oo la siiyo shaah kulul, hooyadeedna ay uga sheekayso socodkeedii.

Raadkii ayaa ilaa albaabka keenay, waxayna ku dhici lahayd albaabka ilaa diirimaadda iyo iftiinka dhexdooda. Hooyadeed ayaa ku tiri, 'Xaawa, adiga miyaa? Albaabka xir dhaqso! Soo qabow ma aha? Kaalay, aan kibis iyo shaah samaysanee oo dabka agtiisa fariisane.''

DULUCDA:

Waayo, taasuu waa wixii laydiinku yeedhay, maxaa yeelay, Masiix baa idiin xanuunsaday, oo wuxuu idinkaga tegey masaal inaad tallaabooyinkiisa raacdaan.

1 Butros 2:21

DUCADA:

Ilaahayow, inta aan akhrinayo Injiilka, waxaan arkaa raadka Ciise Masiix sida dhalaalka waddada addeecidda, jacaylka, runta, iyo dhiirrigelinta. Igu caawi inaan raaco tusaalihiiisa. Waan ogahay inta badan waxaan maraa jidkayga, laakiin maantay igu caawi inaan noqdo mid si dhab ah u raacsan

Ciise Masiix, inaan u noolaado oo u hadlo sidiisa oo kale, markuu ahaa da'dayda. Igu hag inaan ku dambeeyo Gurigaaga Jannada.

KA FIKIR:

Muxuu Ciise Masiix ugu noolaa soddon iyo saddex sano adduunkan? Muxuu cunug u noqday, wiil yar oo dhex jooga meesha alwaaxyada lagu hagaajiyo, nin safray oo daalay oo gaajooda gurina aan haysan? Waa maxay waxa ugu muhiimsan ee tusaalihii Ciise Masiix? Waa sidee qaabka ugu fiican aad adiga ahaan ugu raaci kartid?

Ciise Masiix, nolohiisii iyo tusaalihiisii

Yooxanaa 13:1-13

7. NINKII DADKA KA DUWANAA

Sanado badan kahor, inta uusan Shiinaha ahanin waddan Shuuciyad ah, labo nin oo dhallinyaro ah ayaa subax alisay ah soo raacay waddadii baadiyaha ee adkayd. Iyagoo dhabarka ku sita boorsooyin oo ka buuxo Kutubta, Axdiga Cusub iyo afarta Injiil, iyagoo u socda in ay gadaan kutubtooda, hadday macquul tahayna, la hadlaan dadka degaanka, kuwaasoo caabudayey sanamyoo, ayna u sheegaan wax ku saabsan Ilaaha nool. Waxay si farxad leh ugu dhex wareegteen beer bariis oo cagaaran dhexdeeda, labo saacadood kadibna waxay gaareen suuqii magaalada afkeeda hore meel bannaan uu dad ka buuxo, baqallo iyo alaab. Nimankii way hakadeen.

Yacquub oo ahaa midkii ugu yaraa ayaa yiri, 'Waxaa laga yaabaa in aysan weligood arkin anaga oo kale.' Daa'uud ayaa ku yiri, 'Maya, waxaan tusaynaa kutubta,' labadii kale midkii waynaa ayaa yiri, 'Ina keena, waxaan umalaynayaa inay na arkeen.'

Runtiis ayey ahayd. Markii ay xaggooda u soo dhaqaaqeen dadkii oo dhan baa soo wada fiiriyey, waxaana ku soo heeraarsaday dad raba inay wax ogaadaan. Qaarkood ayaa qoslay, qaar ayaa su'aalo waydiiyey, qofna cadow uma ekayn. Kutubtiina si fiican ayaa loo iibsaday, inkastoo beeraleyda inta badan aysan wax akhrin karin, laakiin intooda badan waxay lahaayeen carruur iyo qaraabo akhrin kara, sida lagu

helo kitaabna waxa uu ahaa dhif iyo wax qiimo badan - raqiisna way ahaayeen!

Daa'uud iyo Yacquub ayaa si tartiib ah suuqii u dhex galay. Waxay ahayd meel murugo leh. Dawarsadayaasha ayaa shilimaadka garaacayey, ganacsatadana way riixayeen. Qof walbana wax ayuu gorgorinayey, qaylo iyo khiyaano, ama iyagoo raba midba midka kale wax ka fiican inuu helo. Nimankii ayaa aaday geed hoostiisa, halkaas ayeyna la faristeen dadkii qaar ka mid ah oo ku qadaynaya hooska, waxayna soo saareen kutubtii soo hartay.

Nin beeraley ah ayaa yiri si tartiib ah, 'Noo sheeg muxuu ka hadlaya, ma naqaano sida wax loo akhriyo.' Muxuu Daa'uud sheegi karaa? Maxayse ka fahmi karaan waxa ku saabsan Ilaaha nool oo dadka jecel? Dan kama galin, miyaa? Waxa uu soo fiiriyey, iyagoo soo wada fiirinayo, qaar caajisan qaar damaaci ah oo dhagar qaba, wuxuuna bilaabay in uu ka hadlo wax ku saabsan Ciise Masiix, midkii u baxay inuu wax fiican sameeyo.

'Waxa uu dadka baray inay cadowgooda jelaadaan, waxa uuna yiri, "Waxaa barakaysan kuwa nabadda ka shaqeeya iyo kuwa naxariista iyo kuwa qalbiga nadiifka ah leh"' Dadkii ayaa si cajiib ah u dhegaystay, kuwo kalena way yimaadeen. Iyagoo uga digaya waxa uu sheegayo, Daa'uud wuu sii waday hadalkii...

Si kadis ah, ayaa loo kala dhex galay. Nin ayaa dadkii dhex riixay, isagoo dhoollacaddeynaya, 'Waan ogahay ninkaas,' ayuu ku dhawaaqay. 'Wuxuu ku nool yahay tuuladeenna. Kaalay, oo waan kuu geeyn doonaa.' Si guuldarraysan, Daa'uud wuxuu u sharaxay in ninka uu ka hadlayaa uu

muddo dheer ka tagay dhulkan. Ninkii ayaa dhinac iska dhigay sharaxaaddiisa.

Daa'uud iyo Yacquub ayaa isku diyaariyey inay raacaan; hadalladii ninka ayey rabeen inay wax ka ogaadaan waqti badanna way haysteen. Ninkii beeraleyda ahaana aad ayuu u degdegsanaa, marka boorsooyinkoodii ayey xambaarsadeen, wayna raaceen, iyagoo qadadoodi jidka ku sii cunaya. Hal saac markay socdeen, ayey soo gaareen xaafaddii, meel bannaan oo guryo jajaban ku yaalaan, xoolahana ay dhulka fadhiyaan, waddada geesaheedana qashinqub ayey ahayd.

Ninkii ayaa ku yiri, 'Saaxiibkaa inta ayuu ku noolyahay,' wuxuuna iska riixay cunug yar oo isha caabuq ka galay oo bararsantahay. 'Wuu yaabi doonaa inuu idin arko.'

Inta uusan ninka beeraleyda ah istaagin ka hor, Daa'uud iyo Yacquub way ogaadeen in la soo gaaray. Qashin ma oollin gurigan hortiisa, beddelkii dhiiqo, doog ayaa koray. Wuu ka duwanaa. Ninkana fadhiyay albaabka dadka wuu ka duwanaa. Wejigiisa kama muuqanin damacnimo iyo dhagar, laakiin waxaa ka muuqday naxariis iyo dabacsanaan. Cunuggii isha caabuqa leh lahaa ayaa tartiib albaabka u soo galay, lama ceyrinin.

Ninkii beeraleyda ahaa ayaa yiri, 'Saaxiibaada adiga ayey suuqa dhexdiisa kaaga hadlayeen. Waan soo waday.' Kadib Yacquub ayaa ninkii beeraleyda ahaa shilin siiyey, wuuna iska baxay. Waxaa looga tagay ninkan deggan ee aysan aqoonin. Wuxuu ku yiri, 'Soo gala, oo fadhista. Meel fog ayaad ka soo lugayseen, wax ayaan idiin keenayaa. Waxaan idiin soo karinayaa shaah. Maxaad ka samaynayseen tuuladan?'

'Kutub ayaan iibinaynay.'

'Oo kutubtiinnu maxay ku saabsanyihiin?'

'Waxay ku saabsanyihiin Ilaahay midka Abuuraha ah iyo wiilkiisa Ciise Masiix.'

'Ciise Masiix?'

Ninkii ayaa istaagay, isagoo wejigiisa iftiin ka baxayo. 'Malaga yaabaa inuu isla isagii yahay? Ma taqaanaan?' Wuu neefsaday. 'Malaga yaabaa inuu yahay ninka aan garanaayo?'

Wuu baxay, wuxuuna ku soo noqday dhanka sanduuqa, wuxuuna soo laabtay, isagoo gacanta ku haya Injiilka Markos oo jeexjeexan. 'Waa kan, kitaabka ka sheekaynayo Ciisahayga,' ayuu ku dhahay, waxa uuna u ekaa mid magaca ugu dhaqaaqay si kalgacayl leh. 'Sanado kahor ayaa nin iiga gaday suuqa, waxaanna akhriyaa maalin iyo habeen. Weligay ma baranin nin isaga oo kale ah! Waxaan ku dhahay, 'Aad ayuu u wanaagsanyahay, malaga yaabaa inaan isaga oo kale noqdo?' Maalin walbo waxaan iswaydiiyaa, muxuu samayn lahaa, hadduu gurigayga joogi lahaa? Marmarka qaar waxaan is dhahaa, hubaashii gurigayguu joogaa ama bannaanka ayuu ila xaaqayaa ama beerta ayuu ila guraya, ama suuqa ayuu ila aadayaa. Malaga yaabaa Ciisahaas inuu yahay midka aad idinka ka hadlaysaan?' Wejigiisa ayey fiiriyeen, aad ayuu u iftiimayey, jacayl ayaana ka dhalaalayey.

Yacquub ayaa ku dhahay, 'Haa, waa isla Ciisahaas. Hal Ciise Masiix oo keliya ayaa jira.' Si la ma filaan ah, ninkii beeraleyda ahaa ayaa albaabka madaxa ka soo dhiibtay oo cod wayn ku waydiiyey, 'Ma saxsana? Ninkan miyaa ninkii aad ka hadlayseen?'

‘Ninkii aad ka hadlaynay, halkan ayuu nala joogaa,’ Daa’uud ayaa dhahay. ‘Gurigan ayuu ku noolyahay, aad ayaad u saxsanayd.’

MOWQIFKA QORAAGA:

Weligaa ma tagtay beerta ubaxa qorraxda inta aysan soo bixin kahor oo ma aragtay ubax kasta oo xiran? Saacaddo kadib ubax walba wuu is furaya oo qorraxda ayey isku aaddinayaan. Ma aha in ay rafaadayaan ama shaqaynayaan, laakiin kor ayey iftiinka u fiirinayaan keliya. Marka haddaan ka fiirino noloshii Ciise Masiix ee jacaylka iyo dheellitirka ahayd Injiilka oo aana raadino, inaan isaga oo kale noqono, waxaa hubaal ah inaan is beddelayno.

DULUCDA:

Laakiin dhammaanteen innagoo aan indho shareernayn, ammaanta Rabbiga ayaynu arkaynaa sidii oo muraayad lagu arko, oo isu-ekaanta ayaa laynoo roogayaa, ammaan ilaa ammaan, sida tan xagga Rabbiga Ruuxa ah ka timaada.

2 Korintos 3:18

DUCADA:

Sayidow, sida aan uga akhrinaayo Injiilka wax Ciise Masiix ku saabsan, aana uga fikiraayo inaan noqdo isaga oo kale fadlan, i beddel, si aan u noqdo isaga oo kale.

KA FIKIR:

Si taxaddar leh u samee qodobo ka kooban toddobo, ficil ahaan, kaasoo aad ogtahay inaad Ciise Masiix ku raaci kartid, reerkaagana aad ku tusi doontid inaad jeceshahay. Qodobadan xoogga saar, adigoo hal mid ka bilaabaya, maalin walbana mid kale ku soo daraya. Markii aad ku rafaado toddobaad ugu horreeyo, isku day in aad sii wadid ilaa aad noloshaada isbeddel ka aragtid.

8. FARAANTIGA IYO UBAXYADA

Goortii uu Farxaan dhashay, qofna kama shakinin inuu dhib qabo. Wuxuu ahaa cunug caadi ah oo qurux badan. Markuu gaaray dhowr bilood, ayaa waalidkiis yaab iyo cabsi gashay. Muxuusan madaxiisa u leexinaynin, markay qolkiisa soo galaan? Muxuu u nixi waayey walaashiis ka wayn, markay albaabka xoog u soo xirto? Muxuu shagaxlahiisu raaxo u siinayn? Ugu dambayntii, waxay u tageen dhakhtar, laakiin lama yaabin, markii uu dhakhtarka u sheegay warka xun. ‘Farxaan waa dhagool, waxaa laga yaabaa inuusan weligiis hadlin.’

Markii hore waalidkiis way caloolxumaadeen, laakiin waqti markay ka soo wareegatay, waxay u muuqatay wax aan suurtooggal ahayn in la dareemo murugo, marka la joogo Farxaan yare. Aad ayuu u faraxsanaa oo caqlilow ayuu ahaa, wuxuuna ahaa cunug aad u rabo inuu wax walbo uu aragti ku ogaado. Wuxuuna bartay wax ku fahmo bishimaha dhaqdhaqaaqooda iyo luuqadda tilmaanta, iyaguna way fahmeen tilmaamihiisa iyo qayladiisa yaabka leh.

Waxay geeyeen dugsiga gaarka ah ee carruurta dhagoolaha ah loogu talaggalay, halkaasna wuxuu ku bartay nooc walboo lagu hadlo. Hooyadiis intay firiso, ayey dhahdaa, ‘Sidee baan u murugoon karaa? Waayo qofna ma haysto cunug wiilkayga ka fiican, ka caqli badan oo ka faraxsan!’

Farxaan wuxuu jeclaa shimbiro iyo ubaxyo, kaynta ayuu dhex socon jiray marar badan. Laakiin weligiis qofna ma barin wax ku saabsan Ilaaha Abuuraha ah ilaa uu abtigiis u yimaaday inuu iyaga la joogo, oo wuxuuna u keenay qisooyin Kitaabka Quduuska ah oo sawirro leh. Farxaan iyo abtigiis si dhaqso ah ayey isku fahmeen, habeen walba way isla fariistaan oo sawirro iyo luuqadda tilmaanta iyo dibin akhriska ayuu Farxaan ku bartay, sida uu Ilaahay Ciise Masiix ahaan noogu yimaaday iyo sida uu Ciise Masiix dartiis u gartay Ilaahay. Mar walbo wuxuu la yaabaa yaa abuurka soo baxsha, yaana haga shimbiraha, markay duulayaan, sidaa darteed aad ayuu ugu faraxsanaa inuu Ilaahay bartay.

Laakiin habeen ayaa jirtay uu Farxaan abtigiis bogga kitaabka rogay oo Farxaan wuxuu arkay sawir ah Ciise Masiix oo iskutallaabta ku qodban, isagoo laba nin u dhexeeya oo dad badan ayaa hortiisa ku ururay. Farxaan ma fahmaynin, sidaa darteed, wuxuu rabay inuu xanaaq iyo niyadjab darteed la ooyo. Laakiin abtigiis, isagoo isticmaalaya warqad, iyadoo ku sawiran wadnaha cad iyo madow, ayuu isku dayey inuu u sharaxo Ciise Masiix oo lahaa qalbi nadiif oo dembi la’aan ah inuu u dhintay dembiyada dadka uu qalbigoodu dembaabay.

Laakiin inkastoo uu Farxaan sawirkaas marar badan arkay, waxaa jiray waxyaalo uusan fahmi karin. Wuu ogaa in hal nin dhimanayo beddelkii kuwa kale. Wuxuu farta ku fiiqay Ciise Masiix oo iskutallaabta ku dhimanaayey iyo tuuggii dhimanayey oo kadibna madaxa ayuu ruxay. Laakiin sidee baa hal nin ugu dhiman karaa dadkan badan, dadkan oo dhan ee jooga meesha iskutallaabta, dadka jooga meelaha kale? Intuu dad badan oo sawirka ku jiray uu farta ku fiiqay, ayuu madaxa ruxay.

Abtigiis intuu xoogaa fikiray, ayuu iska siibay faraantigiisa arooska ee dahabka ahaa, kadibna miiska saaray. Kadibna wuxuu tagay beerta, halkaasoo ubaxyada hore u jiray weli baxaayaan, wuxuu isku ururiyey in badan oo ubaxyo qallalay, caleemuhuna hallaabeen oo ay diyaar u yihiin inay ubaxyada ka daataan. Intuu miiskii soo ag fariistay, ayuu caleentii agdhigay faraantigii.

Markaasuu tilmaam ku waydiiyey Farxaan, ‘Midkee baad dooran lahayd?’ Farxaanna wuxuu farta ku fiiqay faraantigii dahabka ah. Abtigiis intuu ubaxyadii ruxay, markay gaareen toban caleemo, ayuu isku aruuriyey oo kadibna tilmaamo ku yiri, ‘Midkee baad dooranaysaa?’ Farxaan haddana wuxuu doortay faraantigii dahabka ah. Abtigiis wuu sii waday, isagoo ruxaaya ubaxyadii oo caleemo hallaabay miiska ku kor daadinayey, faraantigii dhalaalaya agtiisa. Laakiin inkastoo ay caleemahu boqolaal gaareen, Farxaan shaki la’aan ayuu dooranayey faraantiga.

Isla markii wuu fahmay oo tilmaam abtigiis u sheegay inuu joojiyo. Intuu caleemihii halkaas ka saaray, ayuu faraantigii si taxaddar leh u saaray iskutallaabta, kadibna caleemihii ku kala firdhiyey dadkii badnaa. Wuu ogaa abtigiisu hadduu isku soo aruuriyo ubaxyo oo ku kala firdhiyo adduunkoo dhan, faraantiga inuu ka qiima badanyahay buurta caleemaha hallaabay. Wuuna ogaa in nolosha dhalaalayso oo dembi la’aanta ah oo ninka iskutallaabta ku qodban inay qiimo leedahay, oona loo bixin karo dembiga nimanka, naagaha iyo carruurta adduunkoo dhan oo dembaabay oona hallaabay. Farxaan, isagoo dhoollacddeynaya, ayuu gacantiisa saartay faraantigii dahabka ah.

DULUCDA:

Waxaa dadka looga dhigay inay mar dhintaan, taas dabadeedna la xukumo, sidaas oo kalena Masiix, isagoo mar loo bixiyey inuu qaado dembiyada kuwa badan, ayuu dembila ‘aan mar labaad badbaadin ugu muuqan doonaa kuwa isaga sugaya.

Cibraaniyada 9:27, 28

DUCADA:

Rabbiyow, waad ku mahadsantahay, waayo noloshaada waxay ahayd kaamil iyo dembi la’aan ah, markaad noloshaada u bixisay beddelkii kuwa dembaabay, waxay ahayd allabari kaamil ah. Waad ku mahadsantahay, waayo waxaad jacaylkaaga u bixisay danaysigayga, wanaaggaagana dembigayga ayaad u bixisay. I caawi, si aan u fahmo micnaha dhimashadaada. I caawi, si aan kuu jeclaado, waayo aad ayaad ii jeclaatay.

KA FIKIR:

Maxay kula tahay dhimashada Ciise Masiix?

OO ISKUTALLAABTA KU DHINTAY
INUU BADBAADIYO DUNIDA IYO ANIGABA
Ciise Masiix wuxuu u dhintay
inuu iga badbaadiyo dhimashada weligeed ah
Rooma 5:6-9

9. MEESHA AMMAANKA AH

Beerta ayaa ku jirtay xilliga kulaylka xagaaga; beergoyska ayaa ku jiray, gallaydu way kaydsatay, waqtiga gurashadu wuu soo dhowaaday. Beeraleyda intuu ganjeelka ku tiirsaday, buu fiiriyey beertiis oo wax laga jarjaray. Waxay ahaan jireen dalag wanaagsan, si fiican ayuu digaagta u ilaaliyey sidoo kale.

Burhaan oo ah kan beerta ka shaqeeyo wuxuu ku hoos nasanayey caws engegan. Qadadiisa iyo cabitaankiisa ayuu dhammaystay oo haddaba wuxuu cabayey sigaar. Soddon daqiiqo ayaa ka dhinayd inuu shaqada ku laabto, wuuna ku wacnaa inuu hooska oo cawska engagan hoos fariisto. Waxaa uu beerta uga soo uray dhir gubanayso, Burhaanna wuxuu dareemay hurdo...indhihiisa ayuu xirtay oo kadibna wuu seexday.

Si kadis ah, ayuu u soo kacay, inyar kadibna wuxuu la yaabay qaylada wayn halkay ka timaadday. Kadibna, waxaa u soo uray qiiq oo kor ayuu u joogsaday, isagoo aad u qaylinaya. Gummudkii sigaarka ayaa ku dhacay cawska gubtay, shaqo xun buu sameeyey. Cawskii engegnaa kol horay buu dabka qabtay oo qiiqii baa aadayey dhinaca digaagga lagu hayey iyo guriga.

Burhaan wuxuu u orday, si uu weligiis u ordin. Beeraleydu wuu cashaynayey oo waa inay u wacaan kuwa dabka demiya. Waxba ma laga qaban karin cawskii engegnaa. Mar hore ayuu ku beddelmay dab holcaya: Laakiin waxaa laga yaabaa inay badbaadin karaan digaagga iyo guriga. Siduu qof waalan oo kale guriga soo galay, buu wacay lambarka 999. Markaasuu yiri, ‘Dhaqso imaada. Halkaas waxay ku taalay waddada wayn laba iyo bar mayl bay ka fogtahay.’ Intuu riixay kan ka qabtay, ayuu helay beeraleydii, isagoo argagaxsan. Wuxuuna ku yiri, ‘Bakhaarkii wuu gubtay, waxaana ku xigaa digaagga iyo guriga. Fur saddexda ganjeello ee beerta oo u cayri digaagga oo dhan dhinacaas - waxayna heli doonaan meel ay ka baxaan; tuubbada ayaan biyaha ku xiraa oo waxaana ku daadinaa guriga digaagga iyo derbiga guriga.’

Waxyaalahan oo dhan way isla sameeyeen, iyadoo dabkii ololaya ilaa wejigood madow noqday oo sunnayaashoodu gubtay. Beeraleydii naagtiis waxay carruurtood geysay dhinaca shishee ee goobta, oo si dhaqso leh ay waxyaalahooda ee muhiimka ah aruurinaysay. Waxay ahayd qofta ugu horraysay oo maqlay qaylada dheer ee gambaleelka dabka oona arkay gaariga dabka demiyo oo goobta soo galay.

Waqtii ayey qaadatay in holacii la demiyo. Cawskii engegnaa iyo bakhaarkii way gubteen oo dambas qoyan ayey noqdeen, laakiin guriga digaagga, guriga iyo xerada waa la badbaadiyey. Naagtiina cunuggeeda yar iyo waxyaalihii qiimaha u lahaa oo dhan bay ku celisay guriga. Waxayna shaah u karisay nimankii dabka demiyyey oo daalan. Burhaanna si dhaqso leh ayuu u galbaday, si aan loo waydiinin dabka siduu ku bilaabay.

Beeraleydii ayaa tagay guriga digaaggu oo cunto halkaas u dhigay, digaaggiina way yimaadeen, iyagoo qaylinayaan oo

shakisan. Wuxuuna u xisaabay si taxaddar leh, laakiin hal reer ayaa ka maqnaa, digaagtii caddayd iyo jijiilayaasheedii. Intee laga yaabaa inay tageen? Digaagga ayaa aad u yaraa, sagaal carruur oo yaryar oo u eg banooniga huruud ah. Laakiin wuxuu arkay iyagoo ka daba ordaayaan digaagta oo dhinaca ammaanka leh ee beerta aadeen. Hooyo fiican ayey ahayd. Waa inuu tago oo soo arko.

Waxaa derbiga dhagaxa ah ka jiray saddex albaab oo ka sii baxaya beerta, beeraleyduna wuxuu ka baxay albaabkii waynaa, isagoo tartiib u socdo oo godadka fiirinaya. Markuu wax heli waayey, ayuu aaday meel u dhow bakhaarkii gubanayey, halkaas ayuu istaagay, wuxuuna fiirinayey dhulka. Wuxuu arkay digaagtii oo meel kor fadhido oo madaxeedu hal dhinac ku suranyahay, baalkeedu gubteen oo qiiqu midab la'aan ka dhigay. Way dhimatay, oo jidka ay ku badbaadi lahayd horteed buu ku yaalaa, wuuna furnaa. Bal maxay u fariisatay oo ay sidan ugu dhimatay?

Beeraleydii intuu soo foorarsaday, ayuu soo qaaday, baalasheeda hoosteeda jijiilayaashii ayaa ku jireen, iyagoo weli nool oo cod bixinaya. Intuu meel ku aruuriyey, beeraleydii ayuu agdhigay jikada, isagoo buste saaray. Beeraleyda gabadhiisa oo toddoba jir ah macquul ayey u noqon waysay, waayo ma fahmin, wayna aammini wayday in digaagtaas dhimatay.

Waxay aabbaheed ku tiri, 'Si fudud ayey isku badbaadin kartay, maahano Aabbe?' Waxayna sii dhahday, 'Waxaa laga yaabaa in jijiilayaasha ay aad u yaryaraayeen oo aysan dhaqso u ordi karin... waxaa laga yaabaa qiiqii ayaa badnaa oo wax ma arki karin, oo waxaa kaloo ee noqon kartaa inay meel xun u socdeen. Waxaan umaaleeyaa in halka ammaanka ah ay ahayd baalasheeda hoosteeda, maahano Aabbo?

Waxaan umaaleeyaa inay jijiilayaasha ku dhahday, 'Kaalaya, oo hoostayda soo gala' oo iyadana fadhiga ku dhimatay beddelkii jijiilayaasha. Hooyo fiican ayey ahayd, maaho Aabbe?'

Markaasaa naagtii beeraleyda waxay ku calaacashay, 'Malihi waqti badan oo aan ku noqdo hooyo fiican, haddaan korin lahaa sagaal digaag yar. Inkastoo waxyaalahaan horay u soo sameeyey ay ku filneen!'

Laakiin cunugtii toddoba jirka ahayd, intay madaxeeda timaha duudduuban leh busto saartay, bay cod hoos ah ku tiri, 'Albaabku wuu furnaa, digaagtu way is badbaadin lahayd; laakiin waa inay jijiilayaasheeda dhaafto oo ay ku dhumaan qiiqa. Jijiilayaalow, jijiilayaalow, waan idin ku faraxsanahay inaad u timaadeen hooyadiin, markay idiin yeertay, haddii kale waad dhiman lahaydeen. Jijiilayaalow, maanta ka bilaabato hooyadiin baan noqonayaa.'

MOWQIFKA QORAAGA:

Ciise Masiix wuxuu ahaa dembi la'aan. Wuu awooday inuu jannada ku laabto, isagoon dhimanin; laakiin keligiis ayaa tagi lahaa. Anagu waxaan hari lahayn, anagoon xariir la lahayn Ilaahay dembigenna dartiis, tanina waxay noo hoggaamin lahayd dhimashada weligeed ah. Sidaa darteed, Ciise Masiix wuxuu doortay inuu u dhinto beddelkeenna, si aan isaga ugu imaano anagoo nool.

DULUCDA:

Taasaynu jacaylka ku garanaynaa, waayo, isagu naftiisuu u bixiyey aawadeen.

1 Yooxanaa 3:16

*Waxaan ku noolahay rumaysadka xagga Wiilka Ilaah,
kan i jeclaaday oo naftiisa u bixiyey daraadday.
Galatiya 2:20*

Ciise Masiix – Siliciisa madaxfurashada
Ishacyaah 53

DUCADA:

Sayidoow, waan ogahay inaad aad ii jeclaataay oo aad ii dhimatay, si aan u lahaado nolosha weligeed ah, waxaad dembiyadayda aan ku dhintay iga yeertay, si aan u imaado aan Ciise Masiix ku magangalo. Igu caawi, si aan ugu jawaabo wacitaankaaga. Waad ku mahadsantahay inaad i jeclaataay; waad ku mahadsantahay inaad ii dhimatay.

KA FIKIR:

Ciise Masiix dartaa ayuu u oggolaaday in kuwa kale ay silciyaan ilaa uu ka dhintay. Jacaylkiisa miyaa laga shakin karaa? Miyaad umalaysaa in arrintan kugu caawinayso inaad kuwa kale la wadaagtid dhibaataadooda?

10. JIDKA MAMNUUCA AH

Farxiya waxay deganayd Waqooyiga London, aad ayeyna u faraxday hal maalin, markay maqashay hooyadeed oo iyagoo quraacanayaan tiri, ‘Ayaan, oo ah saaxiibtay muddo dheer ah, ayaa u guurtay aqal keynta ku yaalo. Waxayna rabtaa inaan Sabtida soo booqano. Waxayna leedahay beer qurux badan, halkaas ayaad ku cayaaraysaa intaan sheekaysanayno.’

Maalintii Sabtida ayaa la gaaray, qorrax ayaana jirtay, Farxiya iyo hooyadeed baabuur bay qaateen oo waxay tageen qadada kadib. Wax yar kadibna magaaladii ayey ka baxeen. Waxay arkeen iyagoo dhex socda geedo qurac ah. Farxiya intay daaqadda madaxa ka baxsatay, bay neef qaadatay oona tiri, ‘Hooyo, waxaan jeclaan lahaa inaan meelahan oo kale degno!’ Markaasaa hooyadeed tiri, ‘Laga yaabaa hal maalin ayaan degi doonnaa. Aabbahaa markii la dallacsiyo, waan jeclaan lahaa aniguba. Fiiri, waa kaasaa aqalka.’

Farxiya si edeb leh ayey u salaantay tii iyaga martigelisay, laakiin ma arkin sida ay u egtahay, waayo maskaxdeeda waxay jirtay dhinaca beerta. Waxaa beerta buuxay ubaxyadii xagaaga oo xitaa cawska ka dhigay inay dhalaalaan, oo geedahuna hoos siiyeen balliga. Hooyadeed way qososhay. Waxayna tiri, ‘Farxiya mar dhow ayey soo kici doontaa. Mararka qaar ayey tagtaa meel sidan oo kale oo ay soo aragto xaaladda baadiyo.’ Markaasay tiri, ‘Ilaa waqtiga shaaha laga cabo laga gaaro, miyey sii fiifirin kartaa?’

Markaasaa Ayaan tiri, ‘Haa, tag halkaad rabtid... waxaan ka ahayn jidkaas ka dhexeeyo deyr, waayo... Waa kana eygeenna! Fadhiiso! Aad ha ugu farxin! Waa ey fiican oo saaxiibtinimo garanaya. Laakiin martida wuu ku boodaa; eygu wuxuu rabaa inuu kula soo socdo, Farxiyooy. Waqtiga shaaha markii la gaaro, gambaleelkaan garaacaynaa, kadibna waad ka maqli doontaa, adigoo joogta beerta cawska.’

Ayaan iyo Farxiya hooyadeed waxay galeen guriga oo Farxiya iyo eygiina waxay tageen balliga. Soddon daqiiqo ayey farxad ku qaateen, iyagoo dhiiqo ku soo dhex cayaareen, oona meelaha soo fiirfiiriyeen, kadibna beerta ayey ku soo noqdeen. Farxiya aad bay uga fikiraysay jidka qalloocan ee duurka sii galaya. Waxay umalaysay inuu tagayo beerta tufaaxa, waayo meel fog ayey ka arkaysay laamaha. Markaasaa Farxiya is tiri, ‘Waxaan la yaabanahay waxay iigu diidday inaan waddadan raaco. Miyey umalaysay inaan tufaaxeeda ka cunaayo? Anigu ma cunaayi, laakiin waan la yaabanahay.’ Waxay dhex socotay beerta, laakiin isla meeshii ayey ka soo baxaysay. Markaasaa Farxiya is tiri, ‘Runtii, waxaan rabaa inaan ogaado waxaa laga yaabaa inay sir tahay, mise xayawaan khaas ah... waan tagaa ilaa meesha qalloocan, oo aan halkaas ka fiirinayaa. Ilaa halkaas waxba malahan!’

Iyadoo ciribta ku taagtaagsanaysay oo waddadii raacday. Eygiina wuu guuxay. Markay geeska ka fiirisay, wax yaab leh maysan arkin. Sida ay u fikiraysay baa waddadii geysay ilaa beer yar oo tufaaxa. Waxayna is tiri, ‘Maxay noqon kartaa waxa khatarta ah, ama beerta sir may leedahay?’ Waxay tagi lahayd geeska geedaha, iyadoo ciribta ku taagtaagsanayso, kadibna orod ku soo laaban lahayd.

Eygii wuu guuxay mar kale, laakiin iyada ma isku dhibin inay taxaddar qaadato. Farxiya waxay is tiri, ‘Waxba maba jiraanee.’ Iyadoo geedka ugu horreeyey is taagan, ayey kor fiirisay oo ay tiri, ‘Waa meel fiican, waan la yaabanahay... I CAAWI!’

Waxay geedkii tufaaxa ku arkin shinni badan. Timiheeda duudduuban ayaa taaban gaaray, si aan la filanaynin ayey iyagoo xanaaqsan kaceen sida daruur madow. Farxiya intay qaylisay, ayey orodday, shinniyadiina way daba ordayeen, eygii ayaa iyada badbaadiyey. Eygii gadaal buu ku ordayey, isagoo aad u ciyey, kadibna shinnidii way laabteen. Hal shinni oo kor u duulaysay ayaa iyada raacday, iyadoo duurka ku dhex ordaysay dhulka ayey ku dhacday.

Ayaan iyo hooyadeed waxay maqleen qayladeeda oo waxay ku soo ordeen daaqadda. Markaasaa Ayaan tiri, ‘Ala xumaa, waa shinnidii! Waxaan u sheegay halkaas inay aadin...’ Laakiin hooyadeed ma sugin inay dhegaysato wixii Ayaan u sheegaysay Farxiya. Waxay u orodday beerta dhinaca gabadhii yarayd ee cabsida qabtay, iyadoo shinni wayn madax uga kor qaylinaysay. Markaasaa hooyadeed ku qaylisay, ‘Farxiyooy, gadaashayda gal, dhaqso is qari!’

Farxiya way orodday oo hooyadeed gadaasheeda ayey isku qarisay, shinnidii intay gacanta hooyadeed ku kor degatay ayey qaniintay. Intay haddana dhinaca garabkeeda u buubtay, bay sii wadday inay Farxiya ku kor guuxdo. Farxiya way qaylisay oo waxay tiri, ‘Waa tanaa shinnida way i daba socotaa.’ Hooyadeedna waxay tiri, ‘Maya, shinnida maahan, way dhammaatay. Ha baqin. Fiiri gacantayda, way i qaniintay. Shinnidu hal mar bay wax qaniintaa. Hadda waad badbaaday.’ Farxiya markay fiirisay gacantii hooyadeed oo guduud noqotay oo barari rabtay, bay gariirtay oo ay ooyi

gaartay. Hooyadeed waxay si tartiib ah u tiri, ‘Waa hagaag, Farxiyooy. Way dhammaatay. Laakiin mar kale samee waxa lagu sheegay.’

Ayaan intay ka bixisay qodaxdii shinnida oo ay waxa jeermis dila marisay, laakiin Farxiya aad ayey u aammusnayd, markii ay shaaha cabbaysay, oo ay hooyadeed hoos ka gashay. Waxay fiirinaysay halkii shinnida hooyadeed ka qaniintay oo barartay, laakiin waxba ma dhihin, ilaa laga gaaray waqtigii la seexanayey, markii hooyadeed u imaatay oo ku tiri, ‘Habeen wanaagsan.’

Markaasaa Farxiya tiri, ‘Hooyo, waan ka xumahay,’ iyadoo busto ku jirta. ‘Mar dambe kuma noqonayo. Aniga ayey ahaan lahayd qofkii la qaniini lahaa, maahano?’ Hooyadeed waxay tiri, ‘Waa run, laakiin waan ku faraxsanahay inay aniga i qaniintay.’ Farxiya waxay tiri, ‘Waayo?’ intay si kadis ah go’a ka soo dhex baxday. Markaasaa hooyadeed tiri, ‘Maxaa yeelay waan ku jecelahay, haddaba seexo.’

MOWQIFKA QORAAGA:

Ciise Masiix markuu gacantiisa ku kor fidiyey iskutallaabta oo yiri, ‘Way dhammaatay’, wuxuu ka waday: ‘Wax walba way dhammaadeen. Waan bixiyey qiimaha dembiga, si laydiin cafiyo. Markaad i aammintaan cabsida dhimasha iyo ciqaabta waad dhaafaysaan, waayo Ilaahay dembiga hal mar keliya ayuu ciqaabaa. Bal fiiriya nabarradaan gacantayda ku leeyahay - tani waxay tusaysaa intaan idin jecelahay.’

DULUCDA:

*Laakiinse waxaa isaga loo dhaawacay
xadgudubyadeenna, waxaana loo nabareeyey
xumaatooyinkeenna, edbintii nabaadiinadeennana
dushiisay ku dhacday, dildillaaciisiina waynu ku
bogsannay.*

Ishacyaah 53:5

DUCADA:

Sayid Ciisow, markaan ka fikiro waxa ku saabsan silacaad soo martay iyo nabarrada gacantaada ku yaalo, igu caawi inaan fahmo intaad i jeceshahay. Igu caawi inaan necbaado dembiga aad silaca u martay, waayo aniga ayaa silacaas mari lahaa. I caawi, si aan uga adkaado dembiga. I bar inaan ku jeclaado, waayo aad ayaad i jeceshahay.

KA FIKIR:

Haddaad dadka kale jeclaato, waxaad muujinaysaa inaad Ilaahay jeceshahay. Waa maxay waxyaalaha ugu yar aad maanta samayn karto, si aad dadka kale u caawiso?

Ciise Masiix – Dhimashadiisa – Xaqnimadiisa ayaa nala siiyey

2 Korintos 5:14-21

11. NOLOL NOLOL LOO BIXIYEY

Tani waa sheeko qadiimi ah oo ku saabsan laba walaal oo ku noolaa waddanka Isbayn, sanado badan oo la soo dhaafay, goortii maxkamadda aysan saas wax u daryeelaynin sida hadda oo kale. Aadan iyo Cabdi waxay ahaayeen mataano, gurigooda wuxuu ahaa guri cad oo saqafkiisuna simanyahay oo ka baxsan derbiyada magaalada buuraha lahayd. Waalidkood way dhinteen oo inyar oo dhaxalna waa loo dhaafay, oo wiilashiina gurigooda duuga ah ayey degnaayeen. Aad ayey iskugu ekaayeen oo dadka magaaladaas deggan ma kala garan karin.

Laakiin markii ay waynaadeen, ayey u koreen si kala duwan. Cabdi wuxuu lahaa shaqo fiican; wuxuuna ahaa qof naxariis leh, xasillan oo aad u dadaal badan, qof walbana waxyaalo wanaagsan ayuu ka sheegaa. Laakiin Aadan wuxuu ahaa nin caajis badan oo shaqaysanaynin. Waxba kama fikiro waxaan raaxadiisa ahayn. Habeen walba wuu cabaa khamri oo khamaar cayaaraa, mararka qaarna ma yimaado guriga ilaa subixii laga gaaro. Waxtar la'aan, Cabdi wuu ku daalay siduu uga baryayey inuu saaxiibadaas daayo oo noloshiisa dib u bilaabo. Laakiin Aadan wuu ku qoslay.

Waxay ahayd habeenbarkii, bishu waxay ku iftay derbiyadii cadcadaa ee magaalada. Cabdi wuxuu fariistay daaqadda, si la yaab leh ayuu welwel u dareemaayey, isagoo fiirinayo

waddada tagto ganjeelka magaalada. Aadan sida caadadiisu ahayd weli xaafadda ma imaanin, laakiin habeenkaas walaalkiisii hurdada ma ka soo dhicin.

Wuxuu arkay muuqaalkii ordayey, isagoon maqlin shanqarta cagahiisa, wuxuuna aaday xagga albaabka. Aadan keligiis ayuu ordayey, wuuna riixay oo guriga ayuu galay. Faynuusta markay wejiga kaga iftayna wejigiisa wuu cadaa, dharkiisuna way jeexjeexnaayeen bar dhiig ayaana ku yaalay. Wuu gariirayey, mana hadli karin.

Markaasaa isagoo neeftuuraya yiri, 'Cabdiyow, i qari! I qari! Way imaanayaan oo way i wadayaan, taasna dhimasho ayey ii tahay!' Cabdina intuu daaqadda ku orday ayuu waydiiyey, 'Maxaad ka wadaa?' Wuxuuna arkay in dad badan ay halka magaalada laga gelayo ay ka soo ordayaan... oo u soo ordayaan gurigooda. Aadan wuxuu yiri, 'Aad ayaan khamri u cabnay... oo aan dagaal galnay... ma ugu talaggalin inaan sameeyo.. intuu dhacay, ayuu dhintay. Fadlan, Cabdiyow, i qari! Maxaan sameeyaa?'

Laakiin Cabdi mar hore wuu ogaa wuxuu samayn lahaa, wuxuu siibayey khamiiskiisa. Waqti ma haysanin. Cabdi wuxuu ku amray Aadan oo ku yiri, 'Dharkan xiro oo kaaga i sii! Dhaqso, hana gariirin! Haddaba, ka bax albaabka guriga gadaashiisa oo aad xagga buuraha, hana soo noqonin ilaa ay waqti dheer ka soo wareegato...orod, walaalkaygiyow, orod!'

Runtii, waqti fiican ayey isku diyaariyeen, waayo qayladii iyo jugta cagahooda waxay soo gaartay ganjeelkooda. Inyar kadibna, askariga magaalada ilaaliyo iyo dadkii badnaa oo faraxsan ayaa gurigii soo galay oo Cabdi soo hor istaagay.

Isagoo aad u neeftuuraayo ayuu istaagay, timihiisi kala jeedaan oo wasakh wejigiisa iyo gacantiisa ku leh oona xirnaa khamiis jeexan oo bar dhiigga ku yaalo. Gacanta ayey ka xireen, laakiin isagu kama diidin. Isagoo aammusan ayuu tagay xabsiga magaalada. Maalmo kadib ayaa waxaa la hor keenay maxkamadda oo lagu xukumay dhimasho, qofkuu dilay dartiis.

Nimankii magaaladaas oo dhan ayaa maxkamadda yimaaday inay fiirsadaan maxbuuska. Maxkamaddii markii ay dhammaatay, kuwii daawanaayey ayaa fariistay maqaayadda oo ka hadleen dacwadaas, dhammaantoodna isku wax ayey dhaheen: ‘Sida uu u taagnaa, isagoo aammusnaa! Sida uu isku difaacaynin, ama uusan naftiisa u baryin, isagoon u ekayn inuu cabsanayn. Wuxuu yiri, „Waad aragteen barta dhiigga ku daatay khamiiskayga, sidaa darteed, malihi waxaan isku difaaco.““ Markaasaa kuwa kalena waydiiyeen, ‘Ee aaway walaalkiisii fiicnaa? Muxuu u imaan waayey maxkamadda? Mana uusan joogin shaqada saaka. Miyuu ceeb ku dareemay walaalkiis oo uu u dhaafay inuu keligiis dhinto?’ Laakiin qofna muusan ogayn jawaabta su’aashaas, dhowr maalmood kadib, Cabdi waa la xukumay. Nolol ayaa nolol loo bixiyey.

Aadanna toddobaadyo badan ayuu isku qariyey tuulooyinka buurta ku yaaleen. Dharkiisii magaalada lagu joogay wuxuu ku beddelay kan beeraleyda, wuxuuna u shaqeeyey beeralay waqtigii gurashada oo dhan. Maalmihii hore ma isku dayin inuu hoygiisa ka soo baxo; habeen walbo wuxuu soo kacaa, isagoo gariiraayo, waayo wuxuu ku riyoodaa riyo xun, isagoo la cayrsanayo. Laakiin waqtigu siduu u tagaayey ayuu

adadkaaday. Wuuna ka xumaaday inuu saaxiibkiis dilay, aad ayuuna ugu xiisay walaalkiis. Wuxuuna is dhahay, ‘Waxaa laga yaabaa inay joojiyeen inay i raadiyaan. Maalinta suuqu jiro ayaan tagayaa magaalada, anigoo is qarinaya, si aan ula soo hadlo walaalkay.’

Haddaba gar ayuu bixiyey oo wejigiisa qariyey, qofna ma garan karin. Wuxuuna gashtay dharka beeraleyda, wuxuuna ku darsoomay niman arijiir ah, kadibna wuxuu tagay magaalada. Markii ay gorgortamaayeen ayaa Aadan intuu la hadlay kuwa halkaas taagan tartiib tartiib sheekadii ugu beddelay arrinta ku saabsan dilka mar dhow dhacay. Markaasaa wuxuu yiri, ‘Waxaan maqlay ninkaas xun wuu fakaday. Weli ma la raadinayaa ama way iska dhaafeen?’

Ninkuu la sheekaysanaayey ayaa isagoo yaaban ku yiri, ‘Iska dhaafeen aa? Ciidankeenna wax ma iska daayaan! Isla maalintaas ayaa la qabtay oo toddobaadkaas gudahiis ayaa maxkamadda la geeyey, laba maalin kadibna wuu dhintay. Xaqnima ayaa jirtaa! Waxa la yaabka leh waxaa jiray walaalkiis, kaasoo isla maalintaas la waayey, mana soo laabanin ilaa maalintaas... dadka qaar waxay dhahaan...’

Laakiin mana dhegaysanin waxyaalaha dadku ay dhaheen, waayo Aadan intuu aad u qayliyey ayuu suuqii ka cararay. Isagoo illinta indhaha ka buuxdo, wuxuuna gaaray taliyaha gurigiis oo isku dayey inuu xoog ku galo. Taliyihii markuu u yimaaday inuu arko waxa buuqa keenay, ayaa Aadan lugihiisii ku dhacay. Intuu aad u ooyey, marar badan ayuu ku yiri, ‘Waxaad dishay nin aan waxba galabsanin. Waa aniga kan dembiga galay, maahan walaalkay. Haddaba, anigana sidoo kale i dil, waayo malihi sababtan u sii noolaan lahaa.’

Taliyihii wuu tagay. Dood badan kadibna wuu soo laabtay. Wuxuu yiri, ‘Sharcigu wuxuu dhahaa, nolol nolol ha loo bixiyo. Haddii uusan walaalkaa waxba galabsanin, sidee baan ku garan karnaa? Khamiiskiisii waxaa ku daatay dhiig, wuu diiday inuu is difaaco. Kiiskana waa la dhammeeyey. Haddaba tag, oo afkaaga xiro, dhib kalena ha keenin!’

Laakiin markii uu Aadan tagay, isagoon waxba arkaynin illinta darteed, ayaa taliyihii hadlay mar labaad oo yiri, ‘Joogso, ma waxaad tahay walaalka keliya ee ninka la dilay?’

Markaasuu Aadan yiri, ‘Haa, waa aniga keliya.’

‘Warqad ayaan kuu hayaa oo walaalkaa kuu qoray, markuu xabsiga ku jiray, oona ii dhiibay intuusan dhimanin ka hor. Bal aan kuu keeno.’

Isagoo dhex fadhiya gurigoodii hore, halkii ay isaga iyo walaalkiis waqti fiican ku soo qaateen, iyagoo yaryar, Aadan aad ayuu u ooyey. Waxaa la joogay galbihii, markii qorraxdu dhici rabtay, intuusan warqaddii furin kahor. Waxay ahayd warqad aad u gaaban, marar badan ayuu ku laabtay oo akhriyey, ilaa uu mugdiga soo galay oo uu arki waayey qoraalkii, oo hadalladii oo dhan qalbiga ayuu ku haystay. Warqaddii waxaa ku qornaa, ‘Walaalkaygiyow, subaxan waan dhiman doonaa, anigoo raalli ka ah, anigoo gashan khamiiskaagii barta dhiigga ku daatay. Haddaba, waxaan kaa baryayaa inaad ku noolaatid khamiiskayga nadiifka ah. Waan ku jecelahay, Ilaahayna ha ku barakeeyo. Cabdi’

Aadanna wuu fahmay. Kaasoo ahaa midka noloshiisa ku cayaaray, midka isu noolaaday oo dagaalamaayey oo dilay, waxaa lagu xisaabi lahaa kan xabsiga ku dhinto. Ninka wax jeclaaday oo la silciyey oo bixiyeyna waa inuu sii noolaado. Waa inay saas ahaataa. Wuu fariistay oo ka fikiray arrintan

oo dhan, ilaa iftiinka subixii ku soo ifay qolka. Kadibna intuu kacay, ayuu dharkii wasakhda ahaa iska siibay. Wuuna qubaystay oo dhar nadiif ah gashtay, sidii uu Cabdi samayn lahaa, wuuna baxay oo nolol cusub bilaabay.

MOWQIFKA QORAAGA:

Masiixu markuu iskutallaabta kor joogay, wuxuu qaatay booskii dembiilayaasha oo dhan oona dhintay, isagoo gashan dembigenna. Haddaba, wuxuu na dhahayaa, inaan Ruuxeenna u galino dharka cusub, kaasoo ah jacaylkiisa iyo wanaaggiisa. Ilaahay markuu arko inaan waxyaalahan samayno, wuu ku farxaa, waayo mar dambe ma xasuusto dembigenna. Waayo wuxuu arkaa keliya Ciise Masiix oo nagu dhex nool sida Sayidka. Mid walba oo aqbala Sayidnimada Ciise Masiix, Ilaahay wuxuu u furayaa albaabada jannada.

DULUCDA:

Wuxuu isaga oo aan dembi aqoonin ka dhigay inuu dembi noqdo aawadeen, inaynu noqonno xaqnimada Ilaah ee ku jirta isaga.

2 Korintos 5:21

Sidaas daraaddeed haddii qof Masiix ku jiro waa abuur cusub, oo waxyaalihii hore way idlaadeen, bal eega, wax waliba way cusboonaadeene.

2 Korintos 5:17

DUCADA:

Rabbiyow, waad ku mahadsantahay inaad dembigayga qaadday, si aad ii galisid xaqnimadaada. Maalin walba igu caawi, si aan u muujiyo wanaagga, daahirnimada iyo quruxda Sayid Ciise Masiix. I bar inaan fahmo sida ku noqon karo. I bar inaan jecelaado kan ii dhintay.

KA FIKIR:

Sidee baad u muujin kartaa wanaagga iyo jacaylka Ciise Masiix, adigoo wax samaynaya?

WAXAAN AAMMINSANAHAY CIISE MASIIX...

KAASOO DHIMASHADA KA ADKAADAY,

MARKUU DHIMASHADA KA SOO SARAACAY

Masiixu wuu ka adkaaday dhimashada - Qisada sarakacidda

Matayos 28:1-10; Yooxanaa 20:1-23

12. JIDKA LA MARO

Roob ayaa da'ayey saddex maalin oo isku xigtay oo daad ayaana jiray, Xamdina mugdiga markuu soo galaayey ayey bannaanka fiirisay, aad ayeyna u welwelsanayd.

Waxay baabuurkeedii kaga soo baxday xaafaddeeda oo ahayd xeebta Waqooyiga Afrika, si ay u booqato saaxiibadeed oo jooga magaalada Fez. Laakiin galabtaas waa la soo wacay oo loo sheegay inay hooyadeed xanuunsatay. Waa inay isku dayda oo imaataa maalinta ku xigto, laakiin roobku hadduu saan u da'o, jidka wayn daad ayaa buuxsami doonaa. Markuu biyaha webiguna kor u kacaa, marar qaar dhinaca Koonfurta iyo Waqooyiga way kala go'aan in toddobaad oo kale.

Marar badan ayey habeenkii soo kacday oo waxa keliya ay maqasho waa roobka daayo, subixiina raadiyaha wuxuu xaqiijiyey cabsideedii ugu waynayd. Jidka waynaa ee xiriiriya Waqooyi iyo Koonfur daadkii ayaa buuxiyey. Baabuur, tareen ama basas wax mari karo malahan. Khariidadda ayey fiirisay. Waxayna aragtay jid oo duur dhex maraya oo cidlana ah, kaasoo ku keenaya ilaa buuraha; laakiin togga dhexdeedana wuu maraa, kaasoo isagana laga yaabo inuu daadkii buuxiyey. Saaxiibadeed way ku waaniyeen inay sugto, laakiin Xamdi way welwelsanayd oo waxaa laga yaabaa in cimiladuna kasii

xumaato. Waxay go'aansatay inay safarka gasho, waayo kadibna haddii ay u ahaan wayso, way soo laaban doontaa.

Markay afartan daqiiqo ay duurka ku dhex safraysay, ayey ka shallaysay go'aankeed, waayo waxay baabuurka ku dhex waddaysay ceeryaamo badan, waxna si fiican uma arkaynin wax aan ka ahayn dhagaxyada dhinaca waddada yaalay. Tartiib ayey baabuurka u wadday, markay maqashay hoonka baabuur kale oona aragtay iftiin oo baabuurka kale soo socday; way iska hor yimaadeen oo ay is ag istaageen, iyagoo maraya jid ciriiri ah oo daaqaddahoodii ayey fureen. Markaasaa Xamdi waydiisay, 'Waddadu xaaladdeedu sidee tahay?'

Ninkii baabuurka waday ayaa af Faransiiska ku yiri, 'Waddada ma fiicno, webiga daadkiisii ayaa togga buuxiyey. Anigu waan laabanayaa.' Laba ama saddex baabuur kale ayaa soo laabatay, laakiin Xamdi ma ku soo kala firayn karin buurta dusheeda. Jidka ay u sii socota wuxuu hoos u degtaa, isagoo ceeryaamo leh, sidaa darteed, sida keliya ay baabuurka u waddo, waa inay ku socotaa daadka qarqiisa, oo haddana waddada ku soo laabato. Iyadoo si taxaddar leh hoonkeeda garaacayso ayey waddada toosan imaatay, markay halkaasi ku dhowaatay, ayey maqashay qaylada carruurta, markaasay aad u faraxday inay la joogto dadka mar kale.

Tuuladoo dhan ayaa isku soo baxday oo ay fiirsanaayeen, iyagoo taagan qarka daadka. Webiga ayaa marayey jidka, isagoo wareejinaya biyaha oo ku dhex lumaya ceeryaamo. Dadkii tuuladii degganaa ayaa Xamdi salaameen, iyagoo ku qoslaya, saddex qof ayaa waydiistay in la sii qaado ilaa magaalada Fez.

Laakiin Xamdi aad ayey u rabtay inay xaafaddeedii tagto. Intay bannaanka u baxday, ayey cirifka ku istaagtay, markaasay waydiisay, 'Ilaa intee ayuu dheeryahay?' Kuwii tuuladana aad ayey ugu farheen, waayo Xamdi luuqadooda ayey ku hadlaysay, waxayna ugu jawaabeen, 'Qof garanaayo malahan, laakiin aad ayuu u dheeryahay.' Xamdi waxay haddana waydiisay, 'Webigaa ilaa intee uu aadaa?'

'Qof garanaayo malahan, laakiin waa shaki la'aan inuu meel fog aadaayo, waayo waa webi wayn.'

'Qofna weligii miyuu dhinaca kale u gudbay?'

'Maya, maya qofna weligii dhinaca kale ma u gudbin. Yaa doqon ah? Yaa raba inuu biyaha ku hafado?'

Xamdi waxay si geesinimo leh u tiri, 'Waan arki doonaa.' Hab ahaatee, waanadii iyo welwelka dadka tuulada intay iska dhegatirtay, ayey kabaha iyo sigsaanta iska siibtay oo ay baabuurkana soo xirtay. Waxayna u qaadday si taxaddar leh tallaabo yar, iyadoo dhex socota daadkii biyihiiina waxay u gaareen anqowga. Kuwii aan waxba ka ogayn ayaa gadaasheeda ka qayliyeen, way sii socotay, iyadoo isku dayeyso tallaabo walba oo wadnaheeduna aad u garaacayo.

Way sii tagtay ilaa ay ku dhex dhuntay ceeryaamidii, dadkii tuuladana waxay dhaheen, biyo ayaa laqay, laakiin weli biyuhu anqowga ayey u joogeen, iyagoo qulqulaya. Waxay u ekayd safar dheer oo qabow leh, laakiin markay hore fiirisay, waxay ceeryaamidii inyar ayey sii dhammaanaysay, horteedana waxay ka aragtay waddada, taasoo ilaa meel la fuulo ku geynayso. Laakiin weli biyihii ma dhaafin anqowgeeda. Daqiiqado yar kadib waxay ka tallaabsatay biyaha qarqiisa. Markaasay si dhaqso ah u laabatay, waxay

dadka biyaha qarqiisa joogay maqashay, iyagoo farxaaya intaysan qofna waxba arkin ka hor. Waxayna yiraahdeen, ‘Naag doqon ah! Daadkii ayaa qaaday. Anagu soo maanan u sheegin?’

Si kadis ah, buuq wayn ayey maqleen, welwelkoodina wuxuu ku beddelmay farxad, marki ay arkeen qof qoyan oo dhiiqo leh oo dhex socotay ceeryaamada... Baabuur xamuul ah iyo laba baabuur kale ayaa halkaas yimaaday waqtigaas, waxayna sugeen waxa dhici doono. Waxayna Xamdi ku salaameen farxad. Markaasay qayliyeen oo ay yiraahdeen, ‘Mala hubaa in la mari karo?’ Xamdi waxay ku jawaabtay, ‘Si caadi ah ayaa loo mari karaa, biyaha anqowgayga ma dhaafaynin. Ceeryaamuduna dhinaca kale ayey ku dhacaaysay, waddadana way dheertahay.’

Ninka dareewalka ah oo baabuurka xamuulka wado oo jidka si fiican u yaqaanay, ayaa yiri, ‘Haa, haddaan kan sii goyno, waan gaari doonaa waddada wayn oo daadka ka dambayso. Kaalay walaal, markaad diyaar tahay ayaan wada goynaynaa.’

Dadkii oo faraxsan ayaa baabuur badan meeshii mareen, iyagoo shaaggooda biyaha firdhinaya, iyagoo qoslaya ayey waddada ku soo dhaceen. Markay ceeryaamo sii dhex socdeen, waxaa soo baxday qorrax si fiican u nuuraynin. Markay buurta kor joogtay Xamdi intay jeesatay, ayey gadaal fiirisay oo neeftuuray. Waayo daadkii dambaska u ekaa oo ay aad uga cabsanaysay, wuxuu u dhalaalayey sida qalin, buurtii dhalaalaysay waxaa korkeeda ku yaalay qaansa-roobaad.

MOWQIFKA QORAAGA:

Nin caan ah oo la yiraahdo Roger Bacon ayaa yiri, ‘Binu-aadanku waxay ka cabsadaan dhimashada sida ay carruurta uga cabsadaan mugdiga.’ Malahan qof dhintay oo soo laabtay oona u sheegay kuwa kale waxa dhacay – hal qof mooyaane! Ciise Masiix. Wuu dhintay, xertiisana waxay umaleeyeen inay mar dambe arki doonin. Laakiin way qaldameen, waayo saddex maalmood kadib wuu soo laabtay, isagoo nool oo sarakacay, wuxuuna is tusay kuwa badan oo xertiisa ah. Isaga keliya ayaa dhimashada ka soo sarakacay oona soo laabtay, wuxuuna na dhahay kuwa isaga jecel oo raacsan weligood ma cabsan doonaan. Ciise Masiix dartiisu dhimashada waxay kugu hoggaamisaa nolosha weligeed ah, adigoo la jira Ilaahay.

DULUCDA:

Ciise Masiix ayaa ku yidhi, ‘Anigu waxaan ahay sarakicidda iyo nolosha. Kii i rumaystaa, in kastoo uu dhinto, wuu noolaan doonaa. Kii kasta oo nool oo i rumaystaa weligii ma dhiman doono. Waxan ma rumaysan tahay?’

Yooxanaa 11:25, 26

[Anigu waxaan ahay] kan nool. Anigu waan dhintay, oo bal eeg, waan noolahay tan iyo weligayba, oo waxaan haystaa furayaasha dhimashada iyo Haadees.

Muujiintii 1:18

DUCADA:

Rabbiyow, waad ku mahadsantahay, waayo waxaad martay dhimasho oo aadna soo laabatay oo na dhahday, Ha baqina. Waan ku faraxsanahay kuwa ku jecel oo ku aamina in

dhimashadu u tahay qaybta ugu dambayso ee guriga ku geynayso. Waad ku mahadsantahay farxadda kuwa naga hor tagay, waana ku mahadsantahay, waayo waan is arki doonaa mar kale.

KA FIKIR:

Miyaad aaminsantahay in sarakacidda Ciise Masiix run ahaantii ay dhacday? Haddaad aaminsantahay, sidee bay u saamaysay noloshaada? Dhimashadu maxay kula tahay? Maxaa kala duwanaasha ah uu Ciise Masiix kuu keenaa, markaad ka fikirto dhimashada?

Ciise Masiix – Sarakaciddiisa iyo muuqashidiisa ugu horreeysay

Yooxanaa 20:19-23

13. CODKII MUGDIGA KU JIRAY

Hooyadiis ayaa waydiisay, ‘Ma hubtaa inaad waxba ka qabin inaad keligaa imaato, Nadiifo? Waxaan ku dhihi doonaa Absame ‘imaaw’, si uu kula kulmo haddaad rabtid.’ Nadiifana aad ayey madaxeeda u ruxday. Waayo mar walba aabbaheed ayaa soo kaxayn jiray, markuu ka yimaado shaqada. Laakiin duhurkaas isaga iyo hooyadeed ayaa bannaanka tagayeen. Nadiifo maalmo badan ayey aad uga welwelaysey waxan, waayo mugdi ayaa soo gali doonaa, markay dugsiga ka soo baxdo, aad ayeyna u nacbanayd waddada yar oo mugdiga ah oo ku taalo intaysan guriga gaarin ka hor.

Geedihii ayaa laamahoodii kor iska qabsadeen oo si yaab leh u samaysmeen, galbihii dabaysha markay ku dhacdo waxay bixiyaan cod qofka ka naxiyo. Hadday soo daahdana waxaa laga yaabaa inay mugdi noqon doonta.

Hal wax ayaa u darnaan doonta, hadday keligeed waddadaas marto, taasna waa walaalkeed Absame, walaalkeed iyada ka yar, kaasoo u imaanayo inay xaafadda isla aadaan. Absame wuxuu ahaa wiil adadag oo waxba ka cabsanaynin, marar badan ayuu la kaftamaa Nadiifo, waayo waxay ka cabsataa caarooyinka ama lo’ iyo waxyaalo kale. Absame hadduu maqli lahaa inay ka cabsato waddada gadaal marto, ilaa dhammaadkii way maqli lahayd, waayo wuu la kaftami lahaa.

Maalintoo dhan fikirki waddadii mugdiga ahayd ayaa Nadiifo dhibaayey, oo qalbiga ka saaray casharraheeda. Waxa ugu daran waa maalintii oo si fiican oo daruur la'aanta ahaydna waxay noqonaysaa daruuryo, dabayshana way dhacaysay. Sagaal saac iyo soddon daqiiqo fasalkooda nalkaa laga shiday, onkodna ayaa dhacaayey.

'Qof kasta oo ka qayb qaadan doonaa imtixaanka muusikada, fadlan gadaal ku har daqiiqado yar fasalka kadib.' Nadiifo markay ogaysiiskaas maqashay, ayey isku naxday. Waayo taasi aad ayey u daahin doontaa, magaceeda liiska ayuu u dambeeyaa. Haddaba, mugdigii ayaa soo gali rabaa. Carruurta kale si dhaqso leh ayey guriga u tagayaan onkodka ka hor.

Nadiifo markay dugsiga ka tagtay mugdi ayey ahayd, roobna wuu daayey, naalkii waddada ku yaalayna wuu ifaayey. Dad badan ayaa waddada socday oo weli malaha wax laga cabsado. Dabayl ayaa dhacaysay hareeraha waddada keliya oo dhibicahii roobka ayaa wejigeed ku da'aayey. Waxayna ka fikirtay sida ay ugu noqon doonto waddadii yarayd, markii laamahu ay cod bixiyaan.

Haddaba waxaa la gaaray halkii ay ka leexan lahayd oo ay waddada geedaha badan qaadi lahayd. Markaasaa waxaa dhacay onkod oo cabsigeliyey. Haddaba, kaftankii Absame waa la dhegaysan lahaa waqtigan. Waxay ogayd waxyaalo cabsi leh, laga yaabaa niman xunxun inay meelahaas ku dhuuntaan oo weerari lahaa. Intay is adkaysay, ayey u istaagtay, iyadoo la dagaalamayso cabsideeda oo rabto intay oroddo ay waddadii marto. Waxay ahayd waddo gaaban.

Kadibna qayladii dabaysha iyo roobkii dhexdooda ayey ka maqashay qof magaceed ugu yeerayo, oo dhahayo,

'Nadiifooy, halkaan maad joogtaa?' Codkiina way garatay, iyadoo welwelkii wax yar ka yaraaday, intay hooskii dhex orodday ayey gacanta aabbaheed isku tuurtay. Markaasaa aabbaheed isagoo yaaban yiri, 'Gabadhaydii yaraydeey is deji, wax ma kugu dhacay?' Nadiifo, iyadoo gariirayso, ayey tiri, 'Waxba, waxaan umaleeyey... waxaan umaleeyey inaad halkan joogin!'

Aabbaheedna wuxuu yiri, 'Runtii, ma joogin, laakiin goor hore xaafadda markaan ku soo laabtay, kuma helin. Mana jeclayn inaad bannaanka keligaa joogtid xilligan oo onkodka jiro, sidaa darteed, ayaan u imaaday. Ee na keen... guriga tagnee!' Waddadii ayey isla mareen si dhaqso leh, Nadiifana mana maqlin qayladii dabaysha, waayo waxay aabbaheed u sheegaysay sida ay gool u dhalisay kubbadda shabaqa. Wayba ilowday hororkii iyada ku sugaayey geedaha gadaashooda oo weerari rabay, waayo aabbaheed ayey gacantiisa ku dheganayd.

MOWQIFKA QORAAGA:

Saddexda maalmood dhimashada Ciise Masiix kadib, aad ayey xerta cabsi u gashay. Saddex sanno markay wadajireen, waxay arkeen haddana iyagoo keligood ah, laga yaabaa inay dhibaato ku jiraan ama la dili doono, laakiin haba ahaatee, hadday dhintaan ama ay noolaadaan waa inay sayidkooda la'aantiis maraan. Waayo Ciisahan ay aammineen, wuu samayn waayey shaqadiis oo kadibna dhintay dhimasho xun. Sidaa darteed, ayaa xertii naxsanaa Ciise Masiix ugu soo muuqday maalinta saddexaad galabtii, si aan la filanaynin. Isagoo dhex taagan koox, isagoo nool oo adadkaa, intuu gacantiisa fidiyey ayuu yiri, 'Nabadi ha idinla jirto.

Gacmahayga iyo cagahayga arka inaan anigu isagii ahay.’
Xertii intay fiirinayeen gacantiisii la muday, ayey ogaadeen in
xooggiisu ka wayn yahay xoogga dhimashada.

DULUCDA:

*Sidaa daraaddeed xertii waa ku farxeen markay Sayidkii
arkeen.*

Yooxanaa 20:20

DUCADA:

Sayid Ciisoow, waan ku faraxsanahay inaad dhimashada
ka soo laabatay oo aad maanta nooshahay. Waxaan kuugu
mahadceliyaa inaad ila jirtid, cabsi ama kelinima dareemi
maayo mar dambe, oo waxba ku ma dhibaatoonayo haddaan
ku la socdo. Aad igu dhowow noloshaydoo dhan, ilaa aad iga
geyso Gurigaaga.

KA FIKIR:

Marmar miyaad dareentaa cabsi? Bal ka fikir xaalad cabsi
leh oo kadibna sawiro in Rabbigu halkaas kula joogo, isagoo
gacanta kuu taagaya oo dhahaya, ‘Nabad... waa aniga.’

HALKEED TAAGANTAHAY?

Ilaa hadda waxaan isku daynay inaan fahano waxa ku saabsan
Ilaaha Aabbaha iyo Abuuraha. Haddana waan fiirinay siduu
noogu yimid sida Ciise Masiix, anagoo u fiirsanayno sida uu
u noolaa inay noloshiisa tusaale noo ahaato, wuuna u dhintay,
si uu noo badbaadiyo uuna kacay, si uu u noqdo Saaxiib nool
oona nala joogo nolosheenna oo dhan, dhimasho iyo nolosha
weligeedba.

Ilaahay waxyaalahan qof walbuu u sameeyey, adiga xitaa
waad ka tirsantahay. Waxaa laga yaabaa in waxyaalahan
ay kugu cusubiyihiin oo aad hadda qaadan karin. Oo aad
u baahantahay inaad ka fikirto, si aad fursad u heshid oo
aad kuwa kale kula hadasho iyo duco. Laakiin haddaad
aammintid waxyaalahaad soo akhrisatay hadda oo runtii aad
noqon rabtid cunugga Ilaahay, oona rabtid inaad garato, sidii
aad ku noqon lahayd Masiixi. Waa inaad saddexdan tallaabo
raacdid:

Inaan go’ansado oo aan Ciise Masiix raaco waxaan u
baahanahay:

- Inaan ka toobadkeeno dembigayga
- Inaan rumaysto oo si dhammaystiranna isku dhiibo
- Inaan ku aqbaloo Ruuxiisa Quduuska ah qalbigayga.

Toobadda, mawduuca saddexda sheekooyin oo soo socoda
waxay macnaynaysaa:

- Waan ogaanayaa dembigayga
- Ilaahay baan u qirayaa dembigayga
- Waan ka leexanayaa dembigayga.

Toobadkeenku macnihiisu waa garashada dembigaygu

Ishacyaah 6; Ayuub 42:1-6

14. KA CAD BARAF

Caasha waxay ku noolayd tuulo ku taalo Waqooyiga Afrika. Ninkeedu wuxuu lahaa ari badan iyo dhowr lo' ah, nolosheedu way ka roonayd kuwa badan oo deriskeed ah. Badidooda waxay ku noolaayeen aqallo caws laga sameeyey oo biyahuna waxay ka soo dhaansadeen ceel tuulada ku yaalo, dharkooduna waxay ku dhaqdeen durdurka oo mara togga. Laakiin Caasha gurigeed wuxuu lahaa saqaf dhagax ah, waxayna lahayd burjiko gaas leh; dharka reerkeedana waxay ku hoos dhaqday geed berde ah hoostiisa oo wayna ku warataa saqafkeeda, si ay u qallalaan. Wax walboo ay lahaydna way ku faantay, wayna ku farxi jirtay, waayo way ka fiicnaayeen waxa kuwa kale ay lahaayeen. Dadka kale waxay suuqa u qaateen baqallo ama way socdeen saddex ama afar mayl, si ay u qaataan baska, laakiin ninkeeda wuxuu lahaa gaari duug ah, ee dhib la'aan ay magaalada tagtaa.

Waxay ahayd maalin qaboob badnayd oo ah bisha Disembarka oo ay suuqa ka yimaadeen. Nus mayl oo dhan ayaa waddada xumaatay, laakiin iyada ma ogaanin, waayo waxay ku mashquulsanayd waxay soo iibsatay. Naagaha tuuladaas badidood waxay dharka ku dhaqeen saabuun geed oo huruud ah, laakiin iyada waxay daawatay xayaysiis oo saabuun budo ah, kaasoo dhahaya inuu si fiican dharka u caddeeyo. Waxayna jeclayd dharka carruurteeda inay dadka kale ka nadiifsanaadaan, waxaana sugayey dhar badan inay

dhaqdo. Waxayna rajaysay in cimilada sideeda ahaato, maxaa yeelay dabayshu oo ka imaatay xagga waqooyi way soo martay buuraha togga ka dambayso tuulada.

Caasha aad ayey u faraxday, markay guriga gaartay, carruurteed ayey iskugu yeertay oo jalmadda dabka saartay. Subaxnimo aroortii ayey soo kacday oo ay biyihii kululaysay. Aad ayeyna u shaqaysatay oo dharkiina ku wartay saqafka, si ay dadka tuulada oo dhan u arkaan. Caasha, iyadoo qanacsan, ayey hareeraheeda fiirisay. Waddada dhinaca xigaa deriskeeda way ku surtay maro yar oo jeexan deyrka, waxayna u ekaayeen kuwa masaakiin ah iyo wasakh ah, haddii xaaladdooda la is barbardhigo. Saabuunteedii budada ahayd aad ayey dharka u caddeesaa. Aad ayeyna qaboob u noqotay; cirku buurta ka saareeyana si cajiib ah ayuu u soo madoobaaday oo korkeedana waxay u ekayd inay dhowdahay, waana cabsi badnayd.

Waxbana hal habeen kuma qallalin, oo reerkuna waxay isku kululaynayeen dhuxul dab leh oo dhaqso ayey sariirta aadayeen. Subixii markii la gaaray, qorraxdu way ifeysay Caashana carruurteed ayey quraac siisay oo ay dugsiga u dirtay. Kadibna, waxay fuushay jaranjarta bannaanka, si ay u soo fiiriso dharkeeda ay dhaqday. Si shaki la'aan, aad ayey u dhalaali doonaan, markii ay qorraxdu ku ifeysay - aad ayey u caddaan doonaan oo xitaa dadka tuuladu ay u jeestaan, si ay u fiirsadaan daahirnimadiisa oo ayna la yaabaan. Intay daaqadda saqafka furtay, ayey istaagtay. Iyadoo xanaaqsan intay hore u socotay, ayey qaylisay, 'Yaa dharkaygoon dhaqay ku shubay wasakh?'

Kadibna, way istaagtay oo ayna ogaatay in qofna dharkeeda ka wasakhaynin; laakiin xalay baraf wuu dhacay, xitaa buurta gadaasheedii ku taalayna waxay ku qarsoontay baraf cad oo

dhaalalaya, kaasoo aad u cad aan la firin karin. Haddii la is barbardhigo dhalaalkaas oo daahir ah, go'eedii waxay u ekaanayaan midabka dambas camal. Markaasay cod hoos ah ku tiri, 'Runtii, caddaanta Ilaahay waxba uma ahan.' Iyadoo si dhaqso ah halka ka saaraysay, laakiin markay gadaal u jeesatay, waxay aragtay maradii jeexjeexnayd oo deyrka ku waran, waxayna dareentay raaxo.

MOWQIFKA QORAAGA:

Haddii aad is barbardhigtid kuwa kale, waxaad mar walba helaysaa mid kaa liita, oo maal haysanin oo kaa akhlaaq yar. Taasna waxay kaa dhigaysaa inaad ku faraxdid. Laakiin haddaan firino noloshii Ciise Masiix oo dhalaalaya iyo jacaylka kaamilka ah mar kale farxad ma dareemi lahayn. Waxaan ogaanaynaa sida aan u gafnay heerkiisa. Inaan firino Ciise Masiix iyo inaan ka fikirno noloshiisa, taasoo i barayso inaan ahay dembiile.

DULUCDA:

Waayo, kuma dhacno inaannu isku tirinno ama isu ekaysiinno kuwa is-ammaana. Laakiin iyaga qudhooda oo isku qiyaasaya qudhooda oo isu ekaysiinaya qudhooda waa garaadlaawayaal.

2 Korintos 10:12

DUCADA:

Rabbiyow, markaan akhrisanaayo Injiilka oo firiyo jacaylka, runta iyo wanaagga Sayid Ciise Masiix, igu caawi, si aan u arko sidan u ahaan waayey wixii aad rabtay inaan ahaado. Aan joojiyo inaan dadka kale isku barbardhigo, laakiin adiga

aan isku ekeeysiyo. Iga dhig inaan ka shallaayo noloshaydii aan u ekayn tan Ciise Masiix, iguna caawi inaan noqdo qof fiican.

KA FIKIR:

Markaan akhristo nolosha kaamilka ah ee Sayid Ciise Masiix, maxay i tusaysaa oo igu saabsan?

Toobadkeenka waa qirashada dembigayga

1 Yooxanaa 1

15. CAQABADDA

Yusra waxay ku noolayd xeebta badda Atlaantiga oo ku taalay Waqooyiga Afrika. Ninkeeda wuxuu ahaa curyaan, sidaas darteed, iyada carruur ma lahayn. Laakiin waxay samaynaysaa shaqo aan caadi ahayn, inyarna way tuugsataa, waxayna qashin ka aruurisaa meesha xeebta, sidaas ayey ku noolayd.

Kadibna, waxaa magaaladaas yar oo xeebta ku taalo wax yaab ka dhacay. Dhakhtar Yurub ah ayaa wuxuu farmasi ka furtay guriga cad oo ku dhowaa bacad. Dad badan waxay u tagaan, si loo daaweeyo. Yusrana way tagtay, si ay u soo waydiiso ninkeeda daawo dareere ah, waayo ninkeed aad buu daciif u ahaa inuu tago.

Waxay ahayd meel fiican, farmasigan cusub waa nadiif oo qaylo lahayn. Dadku waxay ku fadhiyeen kursi dheer oo ayna sugayeen waqtigooda in la gaaro, mana jirin in qof gadaal ka riixayey dadka masaakiinta ah, buuq malahan oo laaluushna malahan. Yusra si deggan ayey u fariisatay, iyadoo daaqadda beerta ubaxyo ka dhalaalayo ka fiirinaysay. Iyadoo weli sii fiirsanaysay ayaa gabar yar oo timo jilicsan soo baxday inay ku hoos cayaarto geed berde ah. Waqti yar kadibna, waxaa yimaaday walaasheed oo xoogaa ka wayn oo iyada u eg ayaa iyada soo raacday.

Yusra siday u fiirsanaysay, si kadis ah ayaa fikrad cajiib ah ku soo dhacday. Labada gabdhood oo yaryaraana waxay

cayaarayaan ciidda; dharkooduna wuu wasakhoobaa oo aabbahoodna wuxuu gashnaa khamiis cad. Hubaal, waxay u baahanyihiin naag oo dharka u dhaqdo, hubaal farmasiganna wuxuu u baahanyahay in la rugo maalin walba! Way iloobday inay daawo dareere ah u imaatay, intay baxday ayey meelaha tagtay oo ay albaab garaacday. Naag timo jilicsan ayaa albaabkii ka furtay oo ay waydiisay, iyadoon luuqadda Carabiga si fiican u garanaynin, waxay rabtay.

Markaasaa Yusra ku tiri, ‘Waxaan u imaaday inaan noqdo naag dharka kuu dhaqdo, dharkadana si fiican ayaan u dhaqaa oo aan caddeeynaa sida caanaha; meelahana waan rugaa oo cuntana karinaa. Maalin walbana waan imaanaa.’

Naagtii way qososhay oo waxay ku tiri, ‘Runtii, waxaan u baahanahay naag dharka ii dhaqdo. Balse berri soo laabo, aniga waxaan la sii hadlayaa ninkayga.’

Yusra way galbatay, iyadoo faraxsan. Way hubtay inay shaqadaas heshay; iyada iyo naagta da’da yar way is fahmeen, gabdhahaas yar oo leh madax sida digaag huruud way ku dhoollacddeeyeen sidoo kale. Laakiin markay guriga ku soo dhowaatay, waxay aragtay wax ka sii fiican shaqadeeda mustaqbalka. Qof ayaa albaabka dhaafay, isagoo furan, kaasoo ah guriga iyaga ku xigay. Digaag buuran ayaa kuu fakatay waddada, iyadoo buska qodayso oo ka ah cayaar.

Waxay Yusra u ahayd maalintii ugu nasiibka badnayd. Hareeraha ayey fiirisay, qofna uma jeedo. Digaagtii waxay ahayd mid rabbaayad ah oo saaxiibtimo aqaanto oo cod bixinayso. Intay dafto ayey diraceeda wayn oo laablaabma isku dhex qaristaa oo kadibna ku carartaa gurigeeda yar. Abaalmarinteed ayey u tustay ninkeeda, kaasoo isagana ku farxay. Waqti dheer ayaa ka soo wareegatay inuu cunto

hilib leh cuno, sidaa darteed, intuu xagga deyrka tagay ayuu digaaqta soo qalay. Yusra si dhaqso leh ayey uga riftay baalashii oo ay carrada ku duugtay. Kadibna, waxay shidday dhuxul, inyar kadibna digsigay ku jirtaa oo ay karaysaa, waxaana lagu daray dhir, basal, dabacase iyo dhir kaloo cunto lagu daro. Waxayna ahayd maalin aad u wanaagsan!

Markay su'aalo waydiisay kadib, naagtii Ingriiska ahayd oo da'da yar way u oggolaatay Yusra inay shaqayso, iyadoo tijaabinayso, Yusrana aad ayey u faraxday sidii ay weligeed u ahaan jirtay. Waxay jeclaatay bunka macaan ah oo caano lagu kariyey oo ay cabto subax walbo markay imaato. Waxaa kaloo ay jeclaatay labadii gabdhood oo leh timo baalasha digaaqta u eg. Laakiin hal wax ayey fahansanayn. Maalin walbaa markay bunkii cabbayso, naagtay u shaqayso way soo ag fariisataa oo ay uga akhrisaa Kitaabka Quduuska ah waxyaalo ku saabsan Ciise Masiix.

Yusra intay qososhay ayey tiri, 'Miyey umaleeysaa anigoo da'dan ah inaan akhrin karo ama fahmi karo?' Ugu horrayntii ma dhegaysan oo mana xasuusan. Way iska dhegatirtay. Laakiin Erayga Ilaah wuu noolyahay, xoogna wuuna leeyahay inuu dhex maro danayn la'aanta.

Toddobaadyo kadib ayaa Yusra is aragtay, iyadoo xasuusanayso waxyaalaha ay ogayn inay dhegaysanaysay: Sida qisadaas ugu dhow 5,000 oo qof oo lagu quudiyey shan kibis iyo labo kalluun! Taasi waa qiso qurux badan, waxayna u sheegtay ninkeeda; iyo qisada kaloo lax luntay. Tartiib tartiib ayey is aragtay, iyadoo ogaan rabto qisooyinkan, gaajo iyo nasasho la'aan baa ku dhacaa, hadday waysay qisooyinkaas, way adkayd inay ogaato inay jeclaanayso kan caafiyey indhoolayaasha oo kuwa dhintayna soo sarakiciyey.

Tartiibna waxay ogaanaysay inuu weli noolyahay oo ag joogo, isagoo la arkaynin, markay akhrinayeen wax isaga ku saabsan, isla gurigaas kaasoo laga jeclaaday oo lagu soo dhoweeyey. Isaga dartiis ayaa gurigaas nabad, xasilloonaan iyo qosol u leeyahay, aad ayey u jeclayd inay halkaas joogto, wayna ka xumaataa inay tagto.

Isagay rabtay, naagtay u shaqaysana ku ma daalin inay u sheegto inuu iyadana rabo. Aad ayeyna uga yaabisay intay wax isaga ku saabsan ka fikirto. Hal duhur xilliga xagaaga markay keligeed joogtay guriga, bannaankay u baxday oo ay meel fariisatay, iyadoo fiirsanayso badda deggan. Waxay u ekayd inuu Ciise Masiix u dhowaa, wayna ogayd waxay samayn lahayd – waa inay ku soo dhoweeyso isaga qalbiga oona go'aansato inay jidkiisa raacdo. Laga yaabaa inay halkaas ku samayso ... laakiin inkastoo ay go'aan gaartay, waxay weli arkaysaa digaaqta cad oo carrada isku rafayso, iyo suugo digaaqta ah way soo carfayso.

'Haddaynu dembiyadeenna qiranno, isagu waa aamin iyo caaddil inuu dembiyadeenna inaga cafiyo, oo uu inaga nadiifiyo xaqdarrada oo dhan.' Naagtay u shaqayso taas ayey bartay. Farxaddeedii ayaa ka tagtay, waayo waxay ogayd in digaaqtaas cad ay caqabad ka noqotay dhexdeeda iyo Rabbigeeda. Arrintaas ayaa qalbiga ka bixi waysay. Wax walba way hallaabeen. Guriga ayey soo gashay, ninkeeday ku qaylisay, hurdana kama soo dhacin.

Kadibna, waxaa ku soo dhacay fikrad cajiib ah: Wax ayey ka qaban kartaa caqabaddii. Weligeed ma maqlin in qof horay u sameeyey, laakiin waxay umaleeysay in la samayn karo. Jimcaha naagtay u shaqayso ayaa lacagteeda siisay, isla maalintaas ayey rabtay inay digaaqta yar oo cad oo ceeb leh iska saarto.

Jimcaha dhaqso ayey guriga timaadday, intay si fiican u labbisatay ayey tagtay halka digaaguhu lagu xannaaneeyo. Way ogayd in ninku uu shaqada ku maqanyahay, laakiin waxay rabtay inay aragto naagta deriskeeda ah. Intay ag fariisatay joodariga korkiisa, intay gacanta isku xajisay, oo illintana dhabanka ku soo dul daadanayso, ayey Yusra sheekadeeda sheegtay. Waxayna ka bariday oo ay tiri, ‘Walaashay, i cafi! Waxaan kuu iibin doonaa booloboolo, ama waxaad rabtid oo dhan... laakiin i cafi.’

Naagtii si la yaab leh ayey u fiirinaysay. Digaagta iyo xitaa lacagta waa wax dhammaanaya oo la ilaawi doono, haddii laysku fiiriyo wax dhacayo. ‘Laakiin weligay ma ogaan lahayn inaad neef qaadatay,’ ayey tiri, ‘Maxaad, maxaad u imaatay inaad ii sheegto?’ Naagtii ayaa cod hoos ah ku dhahday, ‘Hal maalin ayaan kuu sheegi doonaa; laakiin hadda ma ahan.’ Intay qiimaha digaagta ay deriskeeda gacanta ka saartay, ayey gurigeed dhaqso ugu laabatay. Waxay lahayd ballan oo ay ilaaliso, haddaba malahan caqabad.

DULUCDA:

Haddaynu dembiyadeenna qiranno, isagu waa aamin iyo caaddil inuu dembiyadeenna inaga cafiyo, oo uu inaga nadiifiyo xaqdarrada oo dhan.

1 Yooxanaa 1:9

DUCADA:

Rabbiyow, waan ogahay inaad nadiifin karin waxaan qariyey, sidaa darteed, waxaan rabaa inaan kuu sheego waxyaalaha qaldan aan sameeyey noloshayda oo dhan. Waad ku mahadsantahay, waayo markaan qirto,

waad ballanqaadday inaad ii cafin doonto. Waana ku mahadsantahay dembiyaashaan iloobay oo aad ii cafisay. Haddaan qof kale u gafay, i caawi, si aan iyaga isla xalino sidoo kale adigana. Haddaan qaato wax aan iska lahayn, i caawi, si aan u celiyo. Haddaan wax been ah sheegayna, igu caawi, si aan u dhaho ‘run ma ahan’. Haddaan la doodo ama qof xumeeyo, i caawi, si aan u raalligeliyo.

KA FIKIR:

Waxaad ku ducaysatay oo dhan isku diyaari inaad samaysid, Ilaahay aammin ku lahaw inuu ku siiyo geesinimo. Miyaad u jeeddaa shallayga iyo toobadkeenka inay kala duwanyihiin?

Toobadkeenka
– Ka noqoshada dembiga oo aad u laabatid Ciise Masiix

Luukos 15

16. SHANTA FAROOD EE DUCADA

Sharmarke wuxuu saacaddo ku dhex safri jiray duur ku yaalo waqooyiga Kanada. Aad ayuuna u daalaa, markuu gaaro hoteel yar, halkaasoo ay ugaarsadayaasha iyo kuwa u shaqeeya shirkadda ay safarkoodii ka bilaabaan. Waddayaashaas aad ayuu u jeclaa, mayl ilaa mayl oo la dhex socdo geedaha waawayn ee cagaaran. Wuxuu u socday meel waqooyi ah oo dad deggan, wuxuuna soo dhowayey fikrad oo galab deggan ah.

Laakiin ma dhaci lahayn. Markuu qolkiisa kiraystay, ayaa maammulaha hoteelka u yimaaday, isagoo gacan fidisan oo wejigiisuna dhalaalaya ayuu ku yiri, ‘Wadaad Sharmarke, meeshii degaanka ayaa laygu sheegay inaad maanta imaanayso. Waana run, waan ku faraxsanahay inaad halkan joogtid, ku soo dhowow shaah.’ Sharmarke ma diidi karin sida wanaagga badan ee loo soo dhoweeyey, markuu ag fadhiyey, maammulihii ayuu maqlay sheekadan. Halkaas waxaa joogay lamaane Masiixi ah oo cidlo hayso, oo gooni loo saaray aana tagi karin kaniisadda si joogto ah, waxayna ku farxeen imaanshaha wadaadka. Reerkii ayaa waxay ka baryeen inuu la casheeyo, iyagoo weli halka fadhiya ayaa midka isaga casumay soo jeediyey, hadduu isaguba aan degdeg ku jirin, ayuu rabay inuu casumo martida hoteelka inay gadaal ku haraan quraac kadib, si reerka loogu duceeyo.

Markaasaa Sharmarke ku yiri, ‘Waan ku faraxsanahay inaan hoggaamiyo, laakiin waxaan jeclaan lahaa in shaqaalahaagu sidoo kale yimaadaan. Goor hore, markaan qolkaygi u socday, waxaan maray naag wejigeed murugo ka muuqato oo daaqad dhaqayso. Markaan salaamayna, way iga jeesatay, laakiin ma ilaawaayi murugada indhaheeda ka muuqatay.’

Maammulaha, isagoo ka fikiraya, ayuu yiri, ‘Iyada! Waxay tahay qof oo Maraykankii hore ku dhashay, musiibo badan ayaa ku dhacday. Runtii, iyadaan ka ilaaliya naxarista, waayo waxaa ka tagay rabitaankeedi oo ay ku shaqayn lahayd. Uma maleeyi inaan martidayda dhex keeni karo, waayo weligeed ma isku dhibin inay wax nadiifiso ama nidaamiso.’

Sharmarke wuxuu dhahay, ‘Iska dhaaf xitaa albaabka agtiis ha fariisatee, hadday rabto, waayo waan jeclaan lahaa inay imaato.’ Subixii ku xigay martidii way yaabeen, markay maqlen in cibaado yar ay jirto quraacda kadib, badi way joogeen, waayo waxay ku jireen safarka kelinimada ah, si dhif ah ayey kaniisad u arkaan.

Si edeb leh, ayey u dhegaysteen, kuwa qaar ah ayaa wadaadka u mahadceliyey, laakiin mid keliya ayey halkaas ku hartay inay su’aalo waydiiso, taasna waxay ahayd naagta murugaysnayd oo fadhiday albaabka hortiiis, iyadoon la arkin. Martidii markay ka tageen qolkii lagu cuntaynayey, iyadana wadaadkii ay soo raacday ilaa halkii la marayey oo ay cod hoos ah ku tiri, ‘Mudane, weligay sidaad u sheegtay uma maqlin. Miyaad i bari kartaa duco yar? Anigu wax ma baran, laakiin waan jeclaan lahaa inaan ducaysto.’

Sharmarkena si qaboob ah ayuu ku yiri, ‘Haa, waan ku barayaa. Waa inaad maalin walba ku ducaysataa ilaa aan

toddobaadka soo socdo ka soo laabanaya, kadibna waan ku arki doonaa.’

‘Duco gaaban, Mudane. Anigu dugsi ma aan tagin ee wax badan ma xasuusan karo, sidaa darteed, waa inay gaabnaataa.’

‘Waa mid aad u gaaban, waa shan eray keliya, eray walbana shantaada farood ayaad u kala qaybinaysaa, si aad u ilaawin. Iga daba dheh... hal eray hal far... Rabbiyow, aniga i tus qofkaan ahay.’

Wadaadkii wuu sii tagay oo dhex maray duurkii, laakiin hal toddobaad kadib wuu soo laabtay. Markuu salaamay qofkii martigeliyey, wuxuu waydiiyey wax ku saabsan naagtii daaqadda dhaqaysay. Maammulahii intuu neefsaday, ayuu yiri, ‘Waxay u egtahay inay sidii hore ka sii dartay. Markaan arkaba, waxay ku hor ooysaa baaldigeeda. Hadday saan sii waddo, waa inaan shaqada ka ceyriyaa, waayo kuwa kale ayey ka xanaajisaa.’

Wadaadkii wuu tagay inuu soo raadiyo, wuuna helay, iyadoo shaqaynayso. Markaasuu yiri, ‘Haye, waan soo laabtay. Miyaad xasuusatay ducadaada, miyaadna ku ducaysanaysay?’ Iyadoo illinta indhaheeda ka soo daadanayso, ayey gacmaheed intay laabtay ayey cod hoos ah ku tiri, ‘Haa, maalin walba waan ku ducaysanaayey, maalin walbana way ka sii daraysay; waayo maalin walba waxaan soo xasuustaa xumaantaan sameeyey. Maalin walbana qalbigaygu cuslaadaa, maxaan sameeyaa?’

‘Waan kuu sheegayaa waxaad samaynayso. Ha ku ducaysanin ducadaas hadda. Mid kale ayaan ku barayaa.’

‘Mid gaaban, Mudane. Ha iloobin, anigu ma akhrisanin. Wax badan ma xasuusanayo.’

‘Waa mid gaaban; waa shan eray sida tii hore, eray walbana shantaada farood ayaad u kala qaybinaysaa... iga daba dheh... Rabbiyow, adiga naftaada i tus.’

‘Ilaa waqtigee ayaa ducadaan ku ducaysan doonaa, Mudane?’

‘Waad ku ducaysan kartaa maalin walba, xitaa nolloshaadi oo dhan.’

Sanado kadib ayaa wadaad Sharmarke booqday degmadii haddana, si uu ka soo wacdiyo kaniisad cusub oo ku taalay degaankii u dhow. Ugu dhowaan qof walba ayaa yimaaday, martida waxaa ka yaabiyey wejiga dhalaalaya oo dhallinyarada oo sida ay u heeseen.

Markuu wax ka sheegay, ayaa wadaadka cusub wuxuu yiri, ‘Haa waan ku mahadceliyaa dhallinyaradeenna, laakiin waan caawiyey keliya. Badi waxaa keenay lamaanaha deggan degmada. Waxay is guursadeen waqti aan fogayn, waxayna ka dhex sameeyaan shaqo cajiib ah carruurta iyo dhallinyarada. Waxay u tahay hooyadood labaad. Waa sheeko cajiib ah waxay tahay qof oo Maraykankii hore ku dhashay oo aadna ma u akhrisan...’

Markaasaa Sharmarke yiri, ‘Waan doonayaa inaan la kulmo.’

Naag si fiican u labbisan oo timaheeda madow ah ayaa hor imaatay, iyadoo dhoollacaddeeynayso oo gacanteedana is saartay, markaasay tiri, ‘Mudane, ma ii xasuusataa?’

Markay aragtay, isagoo weli ka laballaabaynaya, ayey qososhay. Waxayna tiri, ‘Ma filaayi inaad i soo xasuusato, laakiin ducadaada waad soo xasuusan doontaa, hal eray walbana shantaada farood ayaad u kala qaybinaysaa.’ Aqoonsi ayaa indhihiis ka muuqatay, laakiin iyada way sii wadday hadalka iyadoo rabto. ‘Waxaan ku ducaysanaayey

ducadii maalin walbo ilaa aad iga tagtay.. isagaa i soo tusay naftiisa.. waxaan hadda baranayaa, sidaan u sii jecnaan lahaa.. Mudane, waxaan ku sii ducaystaa ducadaas maalin walba ilaa intaan isaga ka arko.’

Naagtan ma arkin keliya dembigeed oo ay qiratay, laakiin waxay ka laabatay dembigeed oo ay u laabatay Ciise Masiix. Maxaa yeelay way ogatay in xumaatiday fashay oo dhan oo la soo dhaafay la cafiyey, way ka tagtay nolosha hore oo murugo ahayd. Waxayna bilaabday nolol cusub, taasoo farxad oo xornimada ka buuxdo oo ayna gadaal fiirinaynin waxaan hore ka ahayn.

DULUCDA:

Waxaa jiraa laba duco oo Daa’uud ku ducaystay oo Sabuurrada ku jirto –

*Igu daahiri, oo anna nadiif baan ahaan doonaa,
I maydh, oo anna baraf cad waan ka sii caddaan
doonaa.. Wejigaaga ka qari dembiyadayda, Oo iga tirtir
xumaatooyinkayga oo dhan. Ilaahow, igu dhex abuur
qalbi nadiif ah, Oo igu dhex cusboonaysii ruux qumman.
Sabuurkii 51:7-10*

*Ilaahow, i baadh, oo qalbigayga garo, I tijaabi, oo
fikirradayda ogow, Oo bal fiiri inuu jid xumaan ahu igu
jiro iyo in kale, Oo igu hoggaami jidka weligiis ah.
Sabuurkii 139:23, 24*

KA FIKIR:

Waa maxay labada cashar oo muhiim ah oo aan ka baranay sheekadan?

17. KABTANKA IYO WIILKA SHAQAALAHIIIS AH

Kabtan Axmed wuxuu noolaa waqtigii markab la shiraacayey. Markabkiisa wuxuu ahaa mid ugu qurux badnaa ganacsiga ciidanka badda. Dunida oo dhan ayuu ku safray, isagoo ganacsanaya dhiirranaantiisa iyo edebtiisa badan waa la yaqaanay. Shaqaalahiisa waa kuwa af xun, aad u khamri caba oo aan waxba ka cabsanaynin. Waxaad u baahantahay inaad adadkaatid, haddaad rabtid inaad Kabtan Axmed la safartid, haddii kale ma sii joogaysid.

Wuxuu ahaa nin geesi ah, laakiin weli waxaad arkaysaa in kuwa kale ay ka hadlayaan inuu duq yahay oo u baahan inuu shaqada iska dhaaf. Laakiin si tartiib ah ayey u hadlayeen, si uu u maqlin, waayo hadduu maqlo badda ayuu ku tuurayaa. Qofna uma sheegin Kabtan Axmed goortuu shaqada dhaafayo.

Markabkiisa, “Gorgorka dahabka ah”, wuxuu dhex marayey Badda Atlaantiga hal maalin ee xilliga xagaaga. Kabtan Axmed wuxuu is yiri, ‘Waa inay waqti dheer aysan qaadan inay la gudubto dabaysha wanaagsan. Kadibna, waxaan la tashan doonaa dhakhtar dhakhaatiirtaas Maraykanka ka mid ah, waayo si fiican ma dareemayi sidaan ahaan lahaa, laakiin xeebta meel fiican maahan, waxaa laga yaabaa hawada badda inay caadi iga dhigi doonto.’

Laakiin ma fiicnaynin, maalmo kadib wuxuu arkay inuu qayli dadka ku amri karin, waayo si fiican uma neefsan karin. Markuu fulay tiirka markabka, wuxuu dareemay wareer, taasoo ka digtay inuu halis is gelinin mar kale. Wuxuu joojiyey shaqada, wuxuuna ka fadhiistay qolkiisa, isagoo sida libaax duqoobay u cabaadayo, wuxuuna u yeeray badmaaxa ugu horraysay.

Wuu gunuunucay, isagoo xanaaqsan, ‘Waa inaad hal maalin ama laba maalmood shaqada iga qaadaa, waxaa layga hayaa xabadka! Hawada baddaa i caafin doonta waqti yar gudaheed.’ Laakiin habeenkaa inyar ayuu seexday oo subixiina waxaa u yimaaday dhakhtarka markabka saarnaa inuu isaga arko. Wuxuu ku yiri, ‘Maalmo yar naso, waa hubaal in hawada badda aad ku caafimaadi doonto.’

Laakiin dhakhtarka markuu qolka bannaankeeda joogay, ayuu madaxiisa ruxay, isagoo fiirinayo badmaaxa ugu horreeyey. Wuxuu yiri, ‘Uma malaynaayi in odaygan duqa ah xeebta gaarayo, waayo xabadkiisa wuu xirmay oo qabow ayaana galay. Weli waxaa u roona inuu badda ku dhinto, beddelka dhulka ku dhiman lahaa. Mana jeclo dhulka xitaa.’

Kabtan Axmed oo qolka ku jiray, sidoo kale wuu ogaa in hawada badda ay naftiisa u nolol celinaynin. Laakiin kama xumaanin, waayo wuxuu rabay inuu badda ku dhex dhinto; laakiin wuxuu ahaa nin af xumaa, oo duq ahaa, hadda noloshiisa way ka dhammaanaysay. Marka ugu horraysay sanado badan gudahooda, ayuu ka fikiray wixii dhaci doono hadhow. Haddii uu Ilaahay jiri lahaa, diyaar ma ahayn inuu la kulmo, welwel ayuuna bilaabay.

Hadduu xeebta joogi lahaa, wuxuu aadi lahaa kaniisad ama wadaad ayuuna u soo yeeri lahaa ama Kitaabka Quduuska

uu meel ka amaahan lahaa. Laakiin markabkiisa dhexdiisa, hadduu ku arko qof oo Kitaab akhrisanaayo wuu ka qaadaa oo uga tuuraa badda. Sidaa darteed, maalinta oo dhan buu jiiifay, isagoo riyo xun ku riyoonaaya, galabtiina markuu soo kacay, wuu ogaa in xaaladdiisu ka sii daraysay, oo welwelkiisuna wuu sii kordhay. Markii oo badmaaxii sare uu soo galay inuu amarro qaado, wuxuu si kadis ah u waydiiyey, ‘Ma jiraa qof markabkan ku jiro oo Kitaabka Quduuska ah haysta?’ Badmaaxii sare wuu fiiriyey oo is yiri: ‘Duqan ma garanayo wuxuu ku hadlayo!’

Kabtankii kor ayuu isku durjiyey xagga barkinta. Intuu neeftuuray, ayuu isagoo xanaaqsan yiri, ‘Waxaan dhahay, ma jiraa qof markabkan ku jiro oo Kitaabka Quduuska ah haysta? Jawaab toos ah ma iga siin kartaa su’aashaas?’

Markaasaa badmaaxii sare isagoo ka warwareeganayo uu yiri, ‘Maya Mudane, uma maleeynayo, haddad rabtid, waan soo waydiin karaa.’ Markaasuu Kabtanka yiri, ‘Tag, oo ha soo laabanin, adigoon wadin.’

Shaqaalihii markay maqleen Kabtanka inuu raadinayo Kitaabka Quduuska ah, waxay umaleeyeen kaftan wayn. Laakiin badmaaxii sare cayaar iyo qosol ku ma jirin. Wuxuu ka baqay wuxuu kabtanka samayn doono. Markaasaa midkoodi yiri, ‘Muxuu noo maleeya? Dugsiga axadda?’ Laakiin tani waxay bilaabday inuu isku tababbaro fikrad cusub. Xoogaa ayuu tixgeliyey. Wuxuuna yiri, ‘Bal wax yar sug, intaan dugsiga axadda aan ka hadlayno, waxaa jiraa wiil yar oo shaqaale cusub ah oo magaciisu yahay Moxamed. Hoosta ayaan ku arkay, isagoo wiifowga ku fadhiyo oo wax buuna akhrinayey. Qof yar oo jilicsan ayuu u ekaa, laakiin si fiican ayuu u shaqeeya...’

Markaasuu badmaaxii sare yiri, ‘Keena!’ Inyar kadibna Moxamed, shaqaalahii oo dadka markabka saaran oo dhan ugu yaraa, ayaa soo hor istaagay badmaaxii sare, isagoo gariiraayo. Wuxuuna ku yiri, ‘Moxamedow?’

‘Haa, Mudane.’

‘Waxaan maqlay in wiifowga lagugu arkay, adigoo wax akhrisanayso.’

Wuxuuna ku jawaabay, ‘Mudane, markaan shaqada dhammeeyo keliya ayaan xagga aadaa.’

‘Maxaad akhrisaa?’

‘Kitaabkayga Quduuska ah, Mudane.’

‘Haye, bal Kitaabkaaga Quduuska ah soo qaad oo u gey Kabtanka qolkiisa. Una sheeg inaan ku soo diray, dhaqso.’

Wiilka wejigiis wuxuu ku beddelmay caddaan. Wuu ka baqay kabtanka aad, laakiin malaha wax uu sameeyo inuu dhaqso amarka addeeco maahane. Waxaana jiray cabsi kale oo ka daran cabsida kabtanka u qabay. Kaba soo qaad, haddii bal Kitaabkiisa Quduuska ah laga qaado?

Wuu orday, isagoo haysta Kitaabkiisa qaaliga ah, wuxuu garaacay albaabka qolka kabtanka. Laakiin ma ahayn sida hore ee qayli lagu soo dhowayn jiray. Laakiin cod hoos ah oo si fiican u neefsan karin, ayaa soo dhoweeyey. Markuu Moxamed soo galay, wuu garan waayey Kabtankiisa. Qofkan daalan oo sariirta ku jiifo uma ekayn ninka xanaaqa badnaa oo qaylin jiray oo ahaa Kabtan Axmed. Moxamed cabsidiis waxay ku beddelmatay naxariis, goortii uu taagnaa oo uu sugayey kabtanka inuu hadlo.

‘Yaa tahay?’

‘Moxamed, Mudane, shaqaalahaaga.’

‘Yaa ku yiri, imow?’

‘Badmaaxa sare, Mudane, wuxuu igu yiri Kitaabka Quduuska ah gey.’

‘Haa, Kitaabka Quduuska ah!’ Codkii daalanaa aad ayuu u danaynayaa, wuxuuna yiri, ‘Fariiso, wiilow, fariiso! Anigu wax ma akhrin karo, waayo indhahaygu si fiican uma arkayaan, bal wax iga soo akhri Kitaabkaas Quduuska ah... waxaa laga yaabaa inaan dekadda gaari doonin.’

Moxamed, isagoo cabsi leh, ayuu rogay bogga Kitaabkiisa Quduuska ah, waayo wuxuu u jeedaa in duqa uu aad u xanuunsan yahay. Ugu dambayntii, wuxuu gaaray Kitaabka Yooxanaa cutubka saddexaad, qisada Nikodemos, kaasoo aad u rabay inuu boqortooyada Ilaahay arko. Si tartiib iyo si cad ah, ayuu u akhriyey, laakiin Kabtanka indhihiisu way xirmeen, mana tusaynin inuu wax fahmaayo. Sidaa darteed, Moxamed markuu gaaray aayadda toban iyo lix, si tartiib ah ayuuna u akhriyey.

‘Ilaah intuu dunida jacayl u qabay ayuu siiyey Wiilkiisa keliya oo dhashay in mid kastoo isaga rumaystaa uusan lumin laakiinse uu lahaado noloshu weligeed ah.’

Kabtankii intuu indhahiisa furay, ayuu fiiriyey. Moxamed wuu dhiirranaaday inuu hadlo, ‘Fadlan, Mudane, aayaddaas miyaan u akhriyaa sida hooyaday ii sheegtay inaan u akhriyo?’

Kabtankii wuxuu yiri, ‘Sidaad rabtid u akhri, wiilow, laakiin sii wad, waayo waqtiga wuu gaaban yahay.’ Sidaa darteed, Moxamed wuu akhriyey aayaddaas haddana.

‘Ilaah intuu Moxamed jacayl u qabay ayuu siiyey Wiilkiisa keliya oo dhashay, in Moxamed rumaystaa uusan lumin laakiinse uu lahaado nolosha weligeed ah.’

Kabtanka intuu u jeestay, wiilkii ayuu aad u fiiriyey, isagoo aad u neefsanaayo.

Wuxuuna cod hoos ah ku yiri, ‘Mar labaad akhri, wiilow, mar labaad akhri .. oo magaca Kabtankaaga halkaas geli.’

Sidaa darteed, Moxamed wuu akhriyey haddana, ‘Ilaah intuu Kabtan Axmed jacayl u qabay ayuu siiyey Wiilkiisa keliya oo dhashay, in Kabtan Axmed rumaystaa uusan lumin laakiinse uu lahaado nolosha weligeed ah.’

Markaasaa Kabtankii hoos uga hadlay, ‘Waa sidaas, taasi waa barroosinka, waxay i geynaysaa ilaa dekada!’ Markaa Moxamed wuu iska baxay, Kitaabkiisii Quduuska ah oo qaaliga ahaa ayaa ku hoos qarsoonaa direyskiisa, kabtanka duqa ahaana wuxuu u jeestay xagga dekada jannada.

MOWQIFKA QORAAGA:

Waan aragnay sida uu Ilaahay noogu yimaaday Ciise Masiix gudahiisa, oona dhintay inuu bixiyo dembiyada dunidoo dhan, oo soo sarakacay inuu noqdo Badbaadiyaheenna iyo Saaxiibkeenna. Si kastaba, waxyaalahan oo dhan kuma caawinayaan, ilaa aad ula imaatid dembigaaga, oona aammintid inuu yahay Badbaadiyahaaga iyo Saaxiibkaaga.

DULUCDA:

‘Ilaah intuu ... jacayl u qabay ayuu siiyey Wiilkiisa keliya oo dhashay in ... isaga rumaystaa uusan lumin laakiinse uu lahaado nolosha weligeed ah.’

DUCADA:

Sayidow, waan ogahay inaad dunida jeclaatay, oo aadna dhimatay inaad ka badbaadiso dembiileyaasha dembigooda. Sidaa darteed, maanta waxaan iskutallaabtaada kuugu keenayaa dembigayga. Waxaan rabaa inaan qirto oo aan ka leexdo. Waxaan rabaa in la ii cafiyo. Waxaan aaminsanahay inaad i jeceshahay, haddaba waxaan ku aamminayaa sida Badbaadiyahayga oo aan isku ka dhiibayaa, si aan kaagi u ahaado weligay. Magacayga ayaan aayaddan gelinayaa.

KA FIKIR:

Miyaad dareentaa inaad ka dhahi kartid qalbigaaga iyo caqligaaga, ‘Wiilka Ilaah [wuu] i jeclaaday oo naftiisa u [i] bixiyey?’

Galatiya 2:20

WAXAAN AAMMINSANAHAY RUUXA QUDUUSKA AH IYO
JOOGITAANKA ILAAH ANAGA DHEXDEENNA
Helidda Ruuxa Quduuska ah

Yooxanaa 14:15-23

18. GARAACIDDA ALBAABKA

Maryan nolosheeda gurka oo dhan waxay ku noolayd qalcaddii waynayd ee buurta. Ninkeedii wuxuu iyada keenay aqalka webiga qarqiisa, markay aroosad ahayd, halkaas ayeyna ku dhashay oo ay reerkeedana ku korisay. Markay halkaas yimaadeen, ayaa Amiir Abshir dhisay qalcaddii oo dhagax adag ka sameeyey. Taalo yar ayaa ku dul taalay taalada wayn, taasoo muuqalka kala muujinaaysay, meel fog haddii laga fiiriyo waxay u egtahay in dhagax gooni u go'ay. Gadaasha waxaa ka soo jeedaa buur korkeeda, horteedana dalcadda iyo beerta boqortooyada, taasoo tagta ilaa webiga qarqiisa. Deriska Maryan waxay u arkaan inay mid nasiib leh ay tahay, waayo ninkeeda waxaa loo doortay inuu noqdo kan beerta hantideeda ilaaliyo. Lacag fiicanna wuu keenaa gurigiisa si joogto ah.

Rooblana mar walboo uu habeenkii guriga yimaado, wuxuu dhahaa 'Waa boqorad fiican.' Maryan iyo carruurtana agtiis ayey ku soo ag ururaan oo ay su'aalo waydiiyaan. Reerkii boqortooyada markay joogeen degaanka, sheekooyin cajiib ah buu u sheegay. Mar kasta waxay yimaadeen waqtiga xagaaga, markiii ay buuraha guduud noqdeen ubaxa dartiis.

Galabtii markii la gaaro, Rooble iyo Maryan iyo carruurta waxay ku fariistaan kursiga dheer iyo gambarka ku yaalo

barsada oo ku taalaa dhinaca galbeedka ee qorraxdu u dhacdo. Aabbahuna wuxuu dhuuqay biibiilaha oo u dib u soo tiriyeey waxyaalihii uu maalinta dhacay. Amiirada yaryar beerta dhexdeed ayey xarigga ku bodboodayeen - maya, aabbahuna ma soo xasuusto dharkay qabeen siduu u ekaa - iyo wiilasha quruxda badnaa waxay la baxeen aabbahood Amiir Faisal.

Boqoradda, oo weli ahayd naag yar malmahaas, ayey badanaa ku dhex socotay beerta, oo mar walbana waxay salaantay Rooble oo ay xaaskiisa iyo carruurtiisa waraysatay. Mararka qaar xaflad ayey dhigteen, oo Rooblana wuxuu gaarifarasyo iyo naago qurux badan ka soo sheekeeyey. Marmarna waxaa lagu dhahaa ubaxyada gey qalcad, sidaa darteed, wuxuuna soo arkaa wixii oo kookaha diyaarinayo. Axmed yariisow oo ahaa cunug buuran oo hunguri leh, wuxuu jeclaaday inuu waxyaalahaas maqlo. Way ku qosleen, markuu jilibka aabbihis ku fadhiyay, isagoo urinayo oo faruuraha leefayo, markuu ka fikiray xafladda wayn.

Laakiin sanadahaas farxadda badan wuu tagay. Amiir Abshir wuu dhintay, boqoraddiina way duqoobtay dhaqso, ma jirin xaflad ka wanaagsanayd. Laakiin Rooble weli wuxuu ka shaqeeyey beertii, isagoo sidiisii aammin u ah, ilaa hal Jiilaal markuu guriga yimaaday, isagoo qufacayo. Ciidda ka hor Rooble ayaa qabow u dhintay oo barafka ayaa lagu duugay. Boqoraddiina aad ayey uga xumaatay dhimashadiis oo ay warqad oo mahadnaq ah ayey dirtay. Waxayna naagtiis u diyaarisay lacagta hawlgabka ah, tani waxay ahayd qalbiqaboojis wayn, waayo labadooduba waxay noqdeen carmallo hadda.

Carruurtii intay koreen ayey mid mid gurigii ka tageen, waxay meelaha kale ka guursadeen ama magaalooyinka ka

shaqaysteen. Waxayna hooyadood ka bariyeen inay imaato oo ay la noolaato, laakiin kama tagi karin gurigii iyo qalcaddii iyo qabrigii Rooble. Sidaa darteed, badanaa way soo booqan jireen, waxaan ka ahayn xilliga Jiilaalka oo barafka jidka xiro. Maryanna keligeed ayey ku hartay fikraddeeda iyo xanuunkeeda jirka.

Kadibna waxaa yimaaday Jiilaal xun. Qofna weligiis tuuladaas ku ma arkin cimilo qabow ah sidan oo kale. Baraf ayaa dhacay oo qofna tuuladaas kama baxi karin, cuntada iyo shidaalkana aad ayey qaali u noqdeen. Maryan waxay lahayd lacagtii hawlgabka, laakiin xilliga qabowga lacagta way ka dhammaatay. Saqafkeeda wuu daadiyay, waxay rabtay inay hagaajiso, wiil ayeyna laba jeer lacag siisay, si uu barafka jidka uga xaaqo.

Haddaba, markii ugu horraysay ayey deyn lagu lahaaday. Mayna dhiirranin inay tagto dukaanka ku yaalo tuulada oo ay cunto ka soo iibsato, waayo may awoodin inay bixiso waxay horay u soo iibsatay. Foostada mishaarida waxay ahayd eber, sidoo kale burka. Dabkeedana wuu demi rabay oo mana awoodin inay dhuxul ku darto. Qalbigeeduna wuu daalay oo cidlo ay dareemaysay sida cirka ka hooseeya barafka dushiisa. Way ooysay oo ay tiraahday, 'Rooblow, Rooblow, haddaadan iga tagi lahayn, sidaas ma ahaan lahayd.'

Albaabkeeda ayaa la soo garaacay, wayna ka jeesatay. Yaana xilligan albaabkaa ii soo garaacaya? Fikrad xun ayaa maskaxdeeda soo gashay - waxaa laga yaabaa inuu yahay ninkii dukaanka, waxaa laga yaabaa inuu lacagtiisa u yimaaday. Ceeb ayey dareentay, ma awoodin inay fiiriso Mudane Muuse oo ay u sheegto inay bixin waysay deynkeeda toban maalmood dambe. Intay jikada gali doonto, ayey albaabka isku soo xiri doonta, xoogaa kadibna wuu tagi

doona, xilligaas darteed ma u suurtagalayso inuu dhaqso u soo noqdo.

Mar kale ayaa haddana si adag albaabka la soo garaacay. Way ku faraxday inay daahyada kahor xirtay. Intay kacday, ayey cirbataagsatay oo ay ilaa jikada ku tagtay, iyadoo xoogaa qoslayso. Ma tagi doonto albaabkii hore ku yaalay, markay doonto maahane. Qofna ku ma qasbi karin.

Laakiin markay taagnayd albaabkii jikadeeda, wadnaha ayaa aad u garaacmay. Kaba soo qaad, hadday noqoto qof dhib ku jiro! Waxaa jiray Ubox, naagta oo joogto buurta korkeed oo gabadheeda Yasmin yar aad uga xanuunsanayd... kaba soo qaad, albaabka waxay u garaacayso inay dhahdo Yasmin way dhimatay? Mise kaba soo qaad, in qof masaakiin ah oo barafka joogay oo hooy u baahanyahay? Markaasaa haddana albaabka la soo garaacay si xoog ah. Intay qolalkeeda ku soo dhex orodday, ayey albaabka furtay, markaasay yaab darteed gadaal ugu dhici gaartay.

Waxaa waddada istaagay gaarifarar quruxsan oo deriskeedi oo dhan waxay joogeen albaabkooda hortiisa, iyadoo maro huwan oo xushmad tusayo. Albaabka hortiisa waxaa taagnaa nin shaqaale ah, oo gashan direyska guriga boqortooyada looga shaqeeyo oo wada dambiil wayn, markay boqoradda ka dhoollacadeysay daaqadda gaarifaraska.

Boqoradda erayo qaar oo naxariis leh iyo weer oo lagu qadarinaayo sanadkii oo Rooble shaqaynaayey ayey bixisay, farasyaduna waxay u sii baxeen aqal kale. Laakiin dambiishii waynayd waa laga saaray marinka, taasna waxay ahayd waxyaalo ay Maryan u baahnaan doonto waqti dheer oo soo socda. Laakiin ma ahayn marada, ama baakadda caleenta shaaha, ama mishaarida ama hadiyadda lacagta oo

qiyaas badan leh oo ka keentay Maryan dhabankeeda oo duudduubmay oo illinta ku kor qulqulaysa. Waxay ahayd wax kale. Maryan waxay hoos uga hadashay marar badan, ‘Iyada laftirkeed ayaa imaatay, boqoradda laftirkeed ayaa imaatay, mana ogayn inay albaabka soo garaacday. Waad ku mahadsantahay, Rabbiyow, waad ku mahadsantahay Rabbiyow wanaagsanow inaan albaabka furay.’

MOWQIFKA QORAAGA:

Boqoraddu albaabka Maryan waqti yar bay ku sugtay, laakiin Ilaahay Ruuxiisa Quduuska ah, kaasoo Ciise Masiix uu ka ballanqaaday xertiisa, intuusan adduunkan ka tagin ka hor, wuxuu rabaa inuu galo qalbigeenaa oo u weligiis halkaas joogo. Ruuxa Quduuska ah wuxuu rabaa inuu ku noolaado qalbi nadiif ah oo loo dembidhaafay. Noloshiisa cusub darteed anaguna mar labaad ayaan dhalanay. Noloshiisa cusub darteed ayaan ku kori karnaa Masiixnimada.

DULUCDA:

Aniguna Aabbahaan baryi doonaa, isna wuxuu idin siin doonaa Gargaare kale inuu idinla jiro weligiin.

Yooxanaa 14:16

Bal eeg, albaabkaan taaganahay oo garaacayaa; haddaba haddii nin codkayga maqlo oo albaabka iga furo, waan u soo gelayaa, oo waan la cashayn, isna wuu ila cashayn.

Muujiintii 3:20

DUCADA:

Sayid Ciise Masiixow, qalbigayga soo gal, qalbigaygu nafaas ayuu kuu leeyahay.

KA FIKIR:

Miyaad ogtahay in Ruuxa Quduuska ah uu noloshaada ka shaqaynayo? Sidee baad ku baranaysaa inaad ogaato codkiisa?

Shaqada saddex-midnimada

2 Korintos 5:14-21

19. SAAXIIBKA SOO XASUUSTAY

Bashiir iyo Cumar waxay ahaayeen saaxiibo qaali ah. Dugsigana way is ag fariisteen oo ay shaqada macallinka isla qaban jireen. Bashiir wuu ka caqli badnaa Cumar, wuuna jeclaa inuu isaga caawiyo. Waqtiga fasaxna way isla tageen oo ay tareen soo fiirsan jireen, waxayna lahaayeen beer yar oo ay khudaar ku beerteen oo khudaartuna saaxiibadood ka iibiyeen. Waxay ahaayeen carruur uun, hooyooyinkood waxay u barten inay leeyihiin laba wiil beddelkii hal. Inkastoo ay badanaa tageen xaafaddii Bashiir, waayo Cumar gurigooda ma ahayn meel farxad leh, hooyadiis dhibaatooyinkeeda ayey ka fikirtaa oo wiilkeeda war maba ka hayso.

Sanado ayaa ka soo wareegatay oo Bashir wuxuu noqday cunugga fasalkood ugu horreeyo, laakiin Cumar waa inuu ku laabto fasalkaas. Ma u fududayn inay isla joogaan, inkastoo uu Bashiir doonayo inuu caawiyo, Cumar ma doonin inuu isaga dhibo. Laakiin, Bashiir wuu ku dadaalay imtixaankiisa...tartiib ayey u kala go'een.

Bashiir wuxuu tagay kulleejada oo uu akhristay sharci. Laakiin Cumar shaqo badan ayuu isku dayey, laakiin kuma guulaysanin, aabbiihiisna aad ayuu u dhibayey, isaga sidaa darteed mar dambe guriga waalidkiisa ma ku soo noqonin. Wuxuu kiraystay guri oo ku yaalo baar uu aad u jeclaa agtiisa, wuxuuna u noolaaday sida ugu wanaagsan oo

uu awoodo. Mar buu guursaday, laakiin naagtiisa waxay ku daashay dabeecaddiis oo ay ka tagtay. Sidaa darteed, sanado badan ayaa dhaafay, markii Bashiir loo doortay sida garsooraha deggaankaas, wuxuuna reerkiis u iibiyeey guri wayn, kaasoo ku yaalo buurta magaalada gadaasheeda, Cumar wuxuu go'aansaday inuusan boqonin.

Laakiin mar dhow waxaa u qornayd inay isla kulmaan, waayo Cumar sharciga ayuu jebiyey, waana la raadinayey. Hal ama laba mar waxaa la geyey xaruunta booliska sakhraannimo iyo nidaamdarro darteed, waxyaala kale oo yaryarna way jireen. Shaqo yar ayuu haystay, laakiin wuxuu arkay inay ku adag tahay inuu ku noolaado oo ayna u deeqdo khamrigiisa iyo sigaarka, sidaa darteed, wuxuu bilaabay inuu si tartiib ah wax uga xado meel cunto lagu iibiyo. Aad ayuu isu ilaalinaayey oo weligiisna lama qabanin, ilaa hal maalin askarta istaajisay suuqa wayn hortiiisa oo ay ku dhaheen, 'aan boorsadaada baarno.' Wuu ka xumaa inay ku qabteen hilib shiidan, wuxuu u diyaarsaday inuu shiisho oo uu cashada ku cuno.

Maxkamadda waqti horay ayaa la geyey, aad ugama welwelin dhowaanahaan, wuxuu dareemay daal oo waxbana kama welwelo, wax aan ka ahayn khamrigiisa. Qofna uma taxaddaraynin, sidaa darteed, isaguna muxuu iskugu taxaddaraa? Hal wax keliya ayaa dhibaayey, taasna waxay ahayd fikirka oo uu la kulmi doono Bashiir. Wuxuuna is yiri, 'Laakiin waxaa laga yaabaa inuu qof kale noqdo. Xitaa, haddii uu isaga yahay, waxaan umaleeyaa inuu mar hore ii iloobay.'

Laakiin ma ahayn qof kale. Waa kaasaa, isagoo suudkiisa ficnaa ku labbisan, mana la ogo in Bashiir uu iloobay iyo in kale. Laakiin Cumar wuxuu isku dayey inuusan fiirin in dhahaas oo midab dambas ah oo deggan uu si fiican u

xasuusto. Wuxuuna is dhahay, ‘Waa qofka keliya oo ii daryeelaya.’ Codkii oo ku dhawaaqayey ganaaxuu bixin lahaa meel fog ayuu ka dhawaaqay. Waxayna ahayd ganaax ka badan intuu ka filaayey, mana heli karo lacagtaas, waxay dantu ku qasabtay inuu xabsiga aado.

Aad ayuuna uga xumaaday, markuu galay qolkiisa wasakhda lahaa galabtaas. Wuxuuna marar ku riyoodaa, isagoo is nadiifinaayo oo uuna wacaayo Bashiir, laakiin waxay ahayd ugu dambayntii oo riyadaas iyo qorshihii mugdiga ahaa. Waxaa dhacday inuu naco saaxiibkiis hore. Wuu soo dayni lahaa, hadduu rabay inuu xaladdaas xaliyo, iyo waxyaalaha kale oo dhan, laakiin Bashiir wuxuu sameeyey wax ka sii daran. Intuu dhinaca armaajada tagay, ayuu jeexjeexay warqadahii baakaddana ku jiray, oo waqti dheer halkaas ku jiray. Oo isaga iyo Bashiir warqad isu qori jireen sanado badan oo la soo dhaafay, waqtigii iyagoo dugsiga ka baxeen kadib.

Intuu sariirta ku jiifsaday, ayuu ka fikiray waxyaalo xun. Nalkiina muusan daarin, xoogaa mugdi bay ahayd, markuu maqlay albaabkiisa oo la garaacayo. Wuxuuna ku hadlay cod hoos ah, albaabkana ma furin, ‘Haddii ay tahay gabadhii duqda ahayd oo u imaatay ijaarkeeda, waxaa ka dhiman saddex maalmood.’ Laakiin qofkii ay tahayba, wuu sii waday inuu albaabka garaaco si xishood leh, maahan sida naagta guriga leh u garaacdo albaabka. Intuu kacay, ayuu nalkii daaray oo uu albaabka furay. Waxaana jiray waqti dheer oo aammusnaan ah. Markaasaa ugu dambayntii Bashiir yiri, ‘Ma soo gali karaa, Cumarow?’

Cumarna wuxuu yiri, ‘Haddaad rabtid, soo gal.’ Wuxuuna fiirinaayey saaxiibkiisa, Bashiir kulleetigiisa iyo nagtiinkiisa la’aantood si ka duwan ayuu u egyahay, nin caadi ah oo

funaanad iska qabo, nin wayn oo xoogaa duqoobay, laakiin ma ahayn kan ka duwan wiilkii caqliga badnaa, kaasoo ku caawin jiray xisaabta. Cumar wuxuu yiri, ‘Soo dhowow!’

Bashiirna wuxuu ugu jawaabay, ‘Waad mahadsantahay.’ Wayna aammuseen, kadibna Bashiir ayaa hadlay. Wuxuuna yiri, ‘Cumarow, miyaad xasuusataa beertii khudaarta?’ Cumar wuxuu yiri, ‘Haa, ma iloobi karo. Shaah miyaad rabtaa?’

‘Mahadsanid.’ Haddana waxaa dhacay aammusnaan kale, intii uu Cumar shaaha shubaayey. Way ka sii fududayd, iyagoo shaaha cabaayaan inay hadlaan.

‘Cumarow, miyaad shaqo leedahay?’

‘Shaqo? Maya, xabsiga ayaa shaqadayda kale, sidee baad umalaysaa inaan ganaaxaas bixinaayo?’

‘Taasi waa waxa aan u imaaday. Ganaaxa waa la bixiyey, Cumarow ... keligayna ma karaayo beerta. Way wayn tahay, wayna hallaabi doontaa. Waxaad ahayd beeraley iga fiican, Cumarow. Miyaad xasuusataa, markuu dixiriga jilicsan cunaayey saladh, aniguna ma garanaynin waxay u dhacday? Hadda, waan isku fikiray.... Waxaa jiraa aqal yar oo ku ag yaala guriga, ganacsiga si fiican ayaad u samayn kartaa. Farxad ayey noqon doontaa intaan wada joogno haddana. Ma tixgelin lahayd?’

Markaasuu Cumar si kulul ku yiri, ‘Sidee baad ku garan kartaa inaan dahabka naagtaada ka xadin?’ Laakiin wuu qoslay. Wuxuu weligiis jeclaa beerta. Bashiir wuxuu waydiiyey, ‘Goormaad imaan doontaa? Ma berri baa?’

Cumar wuxuu ku yiri, ‘Waan ka fikiri doonaa, aad baad u mahadsantahay.’ Intuu daaqadda istaagay, ayuu fiiriyey Bashiir oo roobka ku dhex wadaayo gariga, laakiin aad ayuu

u fikiraayey. Wuu ogaa beerta, marar badan intuu deyrka korkiis ka fiiriyeey, ayuu ka fikirayey siduu u beddeli karaa. Waxaa jiray derbi oo qorraxda ku ifto oo u wanaagsan geedaha miraha leh, meel hoos leh oo beerta ka tirsan wuxuu ku beeri doonaa miro kale. Waqti dheer ayuu halkaas taagnaa, laakiin muusan arkaynin nalka waddada iyo roobkii oo ku dhacayey meesha malaasan. Wuxuuna ka fikirayey, isagoo taagan qorraxda deyrka hore oo ku wareegsan ubaxyada udgoonka fiican leh, isagoo duurka ka fiirsanayo balanbaalista.

MOWQIFKA QORAAGA:

Garsoorahii oo ninka xukumay, kan deynta ka dhiibay iyo saaxiibka Cumar siiyey nolol kaloo cusub waa hal qof. Sidaas oo kale ayaa Ilaahay maalin xukumi doonaa oona ciqaabi doonaa dembi, waayo wuxuu yahay garsoore xaq ah, hal dembi xitaa lama iloobi doono. Mushahaarada dembigu waa ‘dhimashada weligeed ah’, taasi waxay macnaynaysaa in dembi ina kala fogeeyey anaga iyo Ilaahay, mushahaaradaasna waa in la bixiyaa. Laakiin Ilaahay, Garsooraha, intuu ammaantiisa iska dhigay, ayuu noogu yimaaday Ciise Masiix. Deyntii dembiga dhammaan ayuu bixiyey, markuu ku dhintay iskutallaabta. Haddaba, wuxuu noogu imaanaya xagga Ruuxa Quduuska ah, si aan qalbigeenaa uga aqbalno, oo aan nolol cusub isaga la bilaabno, anagoo nala cafiyey oo farxad leh.

DULUCDA:

Isagu wuxuu u dhintay dhammaan in kuwa nooli aanay u sii noolaan nafsaddooda laakiin ay u sii noolaadaan

kan aawadood u dhintay oo u sara kacay... Sidaas daraaddeed haddii qof Masiix ku jiro waa abuur cusub, oo waxyaalihii hore way idlaadeen, bal eega, wax waliba way cusboonaadeene.

2 Korintos 5:15,17

DUCADA:

Waad ku mahadsantahay, Rabbiyow, inaad deyntayda ku bixisay iskutallaabta. Waad ku mahadsantahay intaad dhimashada ka soo sarakacday, si aad nolol cusub ii siisid. Waxaadna i siisay Ruuxaaga Quduuska ah, si ay noloshayda waxtar u noqoto, oo ay macno u lahaato. Igu caawi inaan ka leexdo waxyaalaha noloshayda halleeya. I bar inaan kuu dhowaado oo aan kuu shaqeeyo. Waad ku mahadsantahay fursadaan labaad oo cajiibka ah.

KA FIKIR:

Miyaad shaqsi ahaan noloshaada ku martay bilowgan cusub? Haddaad martay, sidee baad u aaminsantahay in Ruuxa Quduuska ah kugu caawiyo bilowgan cusub?

SHAQADA RUUXA QUDUUSKA AH –
XOOGGA ILAAHAY OO NALA JIRO
Nolasha Masiixa oo laga arko Masiixiyiinta

Kolosayo 3:1-4

20. FARRIINWADAHII

Waxay ahayd meel qurux badan oo Yuusuf iyo Shukri la noolaayeen carruurtooda, meel tuulo ah tog leh kuna taalo Baraasil. Yuusuf wuxuu macallin ka ahaa dugsiga Kitaabka Quduuska ah oo tuulo ku yaalo. Waxayna ku noolaayeen guri yar oo ay ugu yeereen si gaar ah ‘Guriga oo kumanaan booddada’, waayo qofkii ugu dambeeyey oo halkaas ku noolaan jiray, wuxuu guriga dhexdiisa ku hayn jiray xoolo. Ilaa hadda jirka wuu joogaa. Laakiin aad ayey farxad u lahaayeen, oo deriskooda oo Baraasilkana aad ayey u soo dhoweeyeen.

Meel aan ka fogayn halka ay deganyihiin, waxaa ku yaalaa tog leh buundo alwaax ah oo aad u khatar ah. Hoostiisa waxaa maraa webi oo ka imaanayo bari ilaa galbeed, qarka webigana waxaa dhinacyada ka mara waddo dheer. Qarka koonfureed wuxuu ka soo degaa beer falan oo ah beerta quruxda badan xilliga guga. Maalinta oo dhan ayaa qorraxdu baxdaa, xididka geedahuna waxay hoos u gaaraan dhinaca biyaha. Biyo yar ayaa ubaxyada hoos mara oo balanbaalistana way ku dul duulayaan. Laakiin qarka kaloo u jeeda xagga waqooyi wax yar wuu ka duwanaa. Wuxuu ku dhegan yahay kaynta, halkaasna qorraxdu ma soo baxdo oo xididka geedahuna waxay dhammeeyaan carrada. Waxba halkan ka

ma soo baxaan wax aan ka ahayn caaryada oo ah xidido, dhulka iyo urta qarmuunka ah.

Yuusuf maalin subaxnimadii ayuu guriga ka baxay, isagoo fuushan baqashiisa. Wuxuu u socday magaalada oo subaxdiina aad ayey u qurux badnayd. Wuxuu fiirsanaayey qorraxdii oo ka soo baxayso xagga buuraha, oo hooska wareegsanaayo. Halkaas oo togga shimbiruhu is kugu wacdeen, balanbaalistana waxay ku fadhisatay dhagax wayn, sidii iyadoo Ilaah ku ammaanaysa subaxan quruxsan. Naagahuna waxayba joogeen webiga oo dharka ku dhaqanayeen, oo riyaha cadna waxay ku dhex boodboodayeen cawska.

Wuxuuna joogay buundadii kala barkeeda, markuu ogaaday mucjisada - buundada qarkii waqooyiga u dhow, halkaas oo qorraxdu weligeed aan soo baxin, waxaa jiray ubax cad oo kaamil ah.

Xididkii iyo caaryada dhexdooda ubaxan wuxuu u dhalaalayey sida xiddig cad. Yuusuf intuu baqashiisu geed ku xiray, ayuu u degdegay xagga qarka, si uu u baaro. Mu aqoonin wax ku saabsan dhirta, laakiin wuxuu umaleeyey inuu yahay ubax. Si tartiib ayuu ubaxaas kor u soo bixiyey, wuuna soo baxay. Mana lahayn xidid, wuxuu lahaa laamihiisa keliya oo ku duudduuban tiirka oo ay ku dhageen alwaaxyada dhinaca hooseya oo buundada. Laamahiisa jilicsan si fudud ayey u jebi karaan, laakiin shaqadooda ayey samaynayeen. Laakiin dhinaca kale oo ubaxyada soo baxeen oo shimbiruhu ku heesayeen oo qorraxdana ku iftiintay ayaa xididka wayn oo geedka yaalay, isagoo nolol laamihii siinaya. Oo ay is dhalayaan xilligan oo qabowga ah - quruxnimo oo dadkoo dhan ka helaan.

Hadduu ubaxaas hadli lahaa, sidaan ayuu dhihi lahaa, ‘Ma lihi awood aan carradan madowga ah oo qabow uga soo dhex baxo, laakiin noloshayda waxay ku xariisan tahay noloshaas oo ka baxaysa dhulkaas qorraxda leh. Waxaan ka tirsanahay xididaha muhiimka ah, ubaxyadayda waa sida ubaxyadaas oo meesha qorraxda ku korayaan. Quruxda noloshaas oo dhan ayaan keenay meeshan murugada leh oo nolol la’aanta ah. Waxaan ahay farriinwade ka imaaday dhulka qorraxda leh.’

MOWQIFKA QORAAGA:

Inkastoo aan ku dhex noolnahay dembiilayaasha waa inaan sidooda oo kale u noqonin. Ruuxa Quduuska ah wuxuu qalbiyadeenna u keenay nolosha Ilaahay oo nagu xariiriyey Ciise Masiix. Sida noloshan cusub ay noogu dhex korayso oo aan addeecno codka Ruuxa Quduuska ah iyo Kitaabka Quduuska ah, waa inaan ahaano sida Ciise Masiix, sida kuwa nala nool ay u arkaan runta iyo dhiirranaanta Ciise Masiix ay naga dhalaalayso meelahan mugdiga ee dunida. Noloshaada waxay noqonaysaa sida nolosha Ciise Masiix.

DULUCDA:

Ciise Masiix wuxuu yiri, ‘Waan noolahay, taas aawadeed idinkuna waad noolaan doontaan.’

Yooxanaa 14:19

Oo noloshiinnuna Masiixay kula qarsoon tahay Ilaah.

Kolosay 3:3

DUCADA:

Ilaahow, waad ku mahadsantahay, waayo hadda Ruuxa Quduuska ah wuxuu ku dhex nool yahay qalbigayga. Noloshaada si dhab ah ayaan kula wadaagayaa, waan ku xariisanahay. Sidaa darteed, maanta waxaan kaa baryayaa inaan nolosha Ciise Masiix muujiyo: Jacaylkiisa iyo naxariistiisa beddelkii danaysigayga. Daahirnimadiisa marka kuwa kale wax xun ku hadlaan. Runtiisa beddelkii khiyaanada, daacaddarrada iyo beenta. Sidaa darteed, iga buuxi Ruuxa Quduuska ah, si Ciise Masiix haddana iigu dhex noolaado halkaan maanta joogo.

KA FIKIR:

Waxay laamahan ubaxan u ahayeen waxa ay ducadu u tahay xariirka aad la leedahay Ilaah.

Shaqada Ruuxa Quduuska ah – Isbeddelka xooggiisa

2 Korintos 3:18; Rooma 8:1-11

21. GURIGA U AH MARYAN

Waxay ahayd meel shar badan oo dadka macdanka qoda ku noolyihiin oo nolol shar ah bay ku noolaayeen. Deggaanku wuxuu ka koobana guriyo aqalo ah oo jajabsan iyo baarar, qof walbana wuxuu wataa mindi. Badankooda way dabeecad xumaayeen, kuwaas oo lahaa sababo fiican oo ay ugu soo carareen xagga galbeedka, iyadoo la jiraan kooxda dahabka qoda, degaankoo dhan xeradan xumaan bay caan ku ahayd sakhraanimada, dilka iyo xumaan guudba.

Isbitaalku aad buu u fogaa, sidaa darteed, qofna muusan garanaynin wuxuu sameeyo, markii hal habeen gabar daalan gaartay inay istaagga ka dhacdo, iyadoo halkaas ku daandaantay oo ay bariday hooy. Aqal eber ah oo ay tagtay ayey joodari ku jiifiyeen, gabadhiina intay indhaheeda xiratay, ayey dhinaca derbiga u jeesatay, goortay iyagana raadinayaan, si ay u caawin lahaayeen. Laakiin markay soo laabteen waxay ahayd goor dambe. Gabadha daalanayd way dhimatay, waxayna ka soo tagtay cunugteeda yar oo oohnaysa, oona garanaynin halkay ka imaataay iyo halkay u socoto.

Haddaba, qofna ma garanaynin waxay samayn lahaayeen. Intay awoodeen, ayey ka qaybqaateen inay ku duugaan xagga dhulka jilicsan oo ku yaala webiga agtiisa, qofba wuxuu soo jeediyey in cunugta yar gaariga ka imaado xagga macdanka laga qodo la saaro oo loo geeyo naagaha diimeedka oo dadka

caawiya. Laakiin ma jirin gaari ilaa saddex maalmood. Cunugta yarna aad ayey u oohnaysay, iyadoo dhan cunugtii fiirinaayey, iyagoon caawin karin, markaasaa oday Warsame dadkii soo dhex istaagay oo uu kor u qaaday cunugtii wasakhda lahayd oo oohnaysay. Markaasuu si kadis ah u yiri, ‘Ii daaya, mid iyada ka yar ayaan horay u soo koriyey. Adigu Ibraahimow, bal raadi arijirka oo buuraha joogo oo u sheeg inuu caano si dhaqso ah ku keeno. Adiguna Mustafa, bal tag dukaanka oo hana soo noqonin, adigoo wadin masaasadda caanaha cunugta ku cabto.’

Nimankii dhan ayaa wada yaabay. Warsame wuxuu ahaa ninka ugu da’ wayn xeradaas, aqalkiisuna waa kan ugu wasakh badnaa. Wuxuu ahaa nin oday ah oo cidlaysan oona murugaysan, si dhif ah ayuu ku biiraa kooxda dhallinyarada. Waqti badan wuxuu fariistaa, isagoo fiirinayo muuqaalka dhuleed ah oo hallaabay, isagoo rugaayo tubaakadiis. Si dhif ah ayuu u hadlaa, qofna ma oga halkuu ka yimid ama wuxuu ka soo cararay. Warsame wuxuu ahaa qof la yaab leh oo go’doon ah, qofna ma doonin inuu ka xanaajiyo.

Warsame intuu cunugtii yar qaaday, ayuu geeyey gurigiisa oo uu ku seexiyey bustahiisa oo wasakhda lahayd. Intuu istaagay, ayuu cunugtii fiiriyey, isagoon rajo lahayn. Wuxuu lahaan jiray gabar yar, laakiin xaaskiisa way ka tagtay oo ay cunugtana la tagtay. Mana ka xumeen inay xaaskiisa ka tagtay, laakiin markuu waayey cunugtiisa Maryan, aad ayuu u qalbijabay. Markaasuu isku yiri cod gaban, ‘Waxaan magaca u bixin doonaa Maryan. Laakiin Maryantayda nadiif ayey ahayd sida ubax cad, waxaa wanaagsan inaan u qubeeyo.’

Qoryo, kabriid, baaldi iyo saabuun kaashanayo ayuu Maryan u qubeeyey oo ay nadiif ahaatay. Laakiin ma wanaagsanayn in cunugta saan nadiif u ah lagu duudduubo bustaha

wasakhda ah. Laakiin wuxuu lahaa hal shaati iyo shukumaan oo nadiif ah oo ku jiro sanduuqiisa.

Wuxuuna iyada ku duudduubay maradaas oo uu la socsoconaayey inuu ka sasabo oohinteeda ilaa uu arijirkii la yimaaday caanaha laxda. Laakiin masaasaddii cunugta caanaha ku cabi lahayd ayaa soo daahday, sidaa darteed, intuu dhinac ka jeexay shukumaankii ayuu caanihii geliyey, si ay u dhuuqdo. Inyar kadibna, way dheregtay oo ay seexatay.

Intuu dhabankiisa saartay madaxeeda jilicsan ayuuna yiri ‘Waxay u baahantahay sariir carruureed.’ Wuxuuna bilaabay inuu iyada jeclaado. Wuxuu lahaa dahab oo uu gurigiisa hoostiisa lagu qariyey, arijirkii wuxuu iskuugu oggolaaday inuu maalin walbo imaado. Intuu aayar jiifiyey, ayuu baxay inuu la soo tashto ninka baar lahaa, kaasoo soo saaro sanduuq eber ah iyo bal qallaalan. Isbitaalkiina waxay siiyeen maryo badan oo caddaan ah, dukaankiina waxay soo siiyeen masaasaddii iyo dharka cunugta iyo buste.

Degaankii oo dhan ayaa wuxuu noqday mid xiiso leh, waayo way aamminayeen inay oday Warsame cunugtiisa noqotay mid oo nasiib wanaagsan keento. Warsame wuxuu istaagnaa maalmo yar kadib, isagoo gabadhiisa cusub fiirsanaayo. Runtii, halkaas bay jiiftaa sida ubax cad, iyadoo ku duudduuban bustaha nadiifka ah iyo maradii cadna ku duudduuban sanduuqii. Laakiin si bay ula ekaatay inay wanaagsanayn, waayo marka ugu horrayso uu ogaaday wuxuu dhulka ku arkay baro wasakh ah. Waxay sariirta carruurta ee nadiifsan ka dhigtay inay meel xun taalay, markaasuu wuxuu bilaabay inuu si fiican dhulka u nadiifiyo oo ay midab kale noqotay. Markaasuu cod dheer ku yiri, ‘Haddaba, sariirtaas carruurta way hagaagsan tahay.’ Intuu ka qaaday sariirta korkeed ayuu dhulka ku celiyey.

Laakiin haddana dhulkii dhan ayaa wax ka qaldan yihiin, waayo weligiis ma ogaanin wasakhda ku dheggaan derbiga iyo cayayaanka, mise qiiqa madoobeeyey derbiga iyo saqafka. Wuxuuna is yiri, ‘Waa inaan marka hore cunto siiyaa oo aan Ibraahim u geeyaa, oo kadibna dukaanka soo maraa oo aan saabuun iyo buraash soo iibsadaa. Waxaanna u baahanahay waxaan cayayaanka ku dilo.’

Wuxuuna shaqeeeyey laba maalin, hal ama laba saaxiibadiis ahna way caawinayeen oo mid kalena Maryan ayuu ilaalinaayey, midda aan waxba galabsanin ayaa dhib keentay. Galabtii labaad ayuu qaaday, isagoo ku faanaya, oo uu geeyey gurigooda cusub oo uu ku hayey jilibkiisa. Waxayna bilaabtay inay fiiriso si sharaf leh derbiga cad iyo saqafka, kadibna intay soo jeesatay, ayey isaga fiirisay, iyadoon indhaha isku qabanin, dharkiisa oo leh bar tubaako, iyo garkiisa caawdo ah oo timahiis aan la shanleeynin, iyo gacmahiis wayn ee wasakhda leh. Wuxuuna dareemay welwel, raaxo la’aan buu ku dareemay nadaafaddaradiisa.

Wuxuu yiri, ‘Waxaa laga yaabaa inaan isku fiiriyo muraayad.’ Laakiin malahayn. Intuu iyada seexiyey, ayuu ku wareegay webiga. Intuu horay u foorarsaday, ayuu biyaha iska dhex fiiriyey ayuu qoslay oo yiri, ‘Waxaan u baahanahay inaan is nadiifiyo.’ Ninka timojarena timaha iyo garkuu ka jaray, dhar cusub ayuuna ka gatay dukaanka. Dharkiisa horayna intuu dhaqay, ayuu meel dhigay, si uu u isticmaalo, markuu wax qodaayo, laakiin waxba ma qodi karin waqtigaas, waayo aad buu u mashquulsanaa.

Laakiin wuu ku faraxsanaa dahabkii yaraa oo kaydka oo lagu hoos duugay looxyada hoosteeda. Sidaa darteed, Maryan yariisay waxay ku barwaaqawday guriga, oo uu aabbaheeda soo korsaday si fiican nadiif uga dhigay. Xilliga guga

markii la gaarayey, cimiladu way si kululaatay intuu qaado sariirteeda carruureed oo uu bannaanka geeyo, halkaas oo ay ku cayaarayso oo ay qayliso intay cirka fiirisana shimbiruhu ku dhoollacaddeeyso.

Warsame wuxuu ka fikiray inay mar dhow fariisan doonto, indhaheeda maxay ku fiirin doontaa? Waxay ku fiirin doontaa carrada iyo haramaha, iyo qashinka raagay oo badan! Tani ma dhacayso!

Sidaa darteed, Warsame wuxuu bilaabay inuu qodo jidkiisa oo kuwa dukaankuna waxay siiyeen abuurka ubaxa. Intuu duurka aaday, ayuu soo goostay geedo uu deyr ku dhisto intay cunugtiisa oggolaanayso oo qoslayso. Qorraxda subixii iyo hawadii buurta ka imaanaysay ayaa ka dhigay in abuurkiisa dhaqso u baxaan waqtigii ay Maryan timaheeda koreen, beertiisa waxay noqotay meel cagaar ah oo qurux badan.

Nimanka kale oo qallafsanna markay arkeen isbeddelka Warsame keenay, dabeecaddiisa ayey qaateen. Si tartiib tartiib ah, ayey beero kale u bilaabeen, aqallada kalena waa la dhaqay oo la caddeeyey. Nimankiiba waxay dhaheen, ‘Ma jirto sabab aan weli ku noolaanayno sida doonfaaro, ma jirta?’ Malahan sabab; laakiin sababta dhabta ah oo beddelka waa nolosha yar ee cunugta oo loogu qubeeyey baaldiga biyaha.

MOWQIFKA QORAAGA:

Markii uu Ruuxa Quduuska ah qalbigaaga galo, nolol cusub oo nadiif ah ayuu kaa dhex abuuraa. Waad diidi kartaa ama xoogga saari kartaa. Oday Warsame wuxuu noloshaas yar ee cusub ka dhigay udub-dhexaadka gurigiisa. Waxa walbana

waa inay ku waafaqsanaadaan, wax aan ku habboonaynin waa in la beddelaa. Anagu tani waxay noo tahay dhigidda: Masiixu waa udub-dhexaadka, kaasoo na tusaayo waxa aan wanaagsanayn. Masiixu waa udub-dhexaadka, kaasoo na siinaya xoogga aan ku beddelna. Masiixu waa udub-dhexaadka, kaasoo nolosheenna ku beddelayo quruxdiisa iyo jacaylkiisa.

DULUCDA:

*...hore ugu doortay inay u ekaadaan suuradda Wiilkiisa.
Rooma 8:29*

DUCADA:

Rabbiyow, waxaan kaa baryayaa noloshan cusub aad i siisay inay noqoto tan dhexe ay ii noqoto midda ugu muhiimsan wax walba. Waxaan kaa baryayaa anigoo mar walba Ciise Masiix fiirinayo inaan arko waxyaalaha xun oo dembiga ah. Waxaan kaa baryayaa inaad Ruuxaaga Quduuska ah iga buuxisid sida noloshaas cusub oo igu jirto darteed noloshayda oo dhan ay isku beddesho quruxda iyo jacaylka Ciise Masiix.

KA FIKIR:

Bal ka fikir waxyaalaha xun ee Ruuxa Quduuska ah uu qalbigaaga ka saaray dhowaantaan. Miyaad isticmaalaysaa xooggiisa sidaad u saxdo?

22. MUQAALKII LA KHARRIBAY

Mudane Daa’uud yariis ayaa ahaa midka ugu horreeyey oo arkay iyagoo imaanaya. Wuxuu ku tiirsanaa ganjeelka, isagoo murugo dareemayo sida caadiga ah, markuu si kadis ah kor u fiiriyeey ayuu aqoonsaday nin timo xiiran oo dharka askariga Ingiriiska qabay, oo soo dhex ordaayey beerta cagaaran ee sarreenta oo gurigiisa ku wareegsan.

Waxay ahayd sanadkii 1646, oo Mudane Daa’uud wuxuu murugo dareemay ilaa qabowgii bisha kowaad, markuu faras yimaaday, isagoo sida onkodka camal u yimaaday ilaa albaabkiisa, isagoo dhididka ka socdo oo kan fuushanaa ka soo degay, oona sheegay war xun. Wuxuuna yiri, ‘Boqor Caynaanshe dil baa lagu xukumay, wiilkiisana wuu is qariyey, qorshahoodii ayaa lumay.’

Wax inka badan baa jiray, laakiin Daa’uud kaasoo ah toban iyo saddex jir, isaguna maba sii joogin intuu dhegaysto warka. Beerta ayuu u cararay oo duurka isku qariyey oo aad u ooyey. Ugu dambayntii, markuu illintiisu iska tirtiraayey, wuxuu arkay barafka ugu horreeyey oo geedka ku dhacay. Markuu ka fikiray, wuxuu dareemay in wax walba ay weli dhammaanin. Laga yaabaa in maalin uun noqon doonto bilowgii cusub.

Wuxuuna bilaabay in si mala-awaal ah ugu fikiro wax ku saabsan Amiirka is qarinaayey, waxaa laga yaabaa inuu dhawr mayl uu tagay baadiyaha xilligan Jiilaalka ah, isagoo

iska fiirinaya qof walboo uu la kulma, haddiiba ay dhacdo. Waayo waxaa la sheegay in Boqor Caynaanshe wiilkiisa uu ku dhuumanaayo meel uun xagga dhinaca galbeedka. Wuxuu ku waashay fikirkaas oo Amiirka bannaanka loo saaray, kaasoo hooy ka raadsanaayo gurigooda wayn oo ku yaala tuulada. Sidaas darteed, isaga ma daryeelin Gariigta iyo luuqaddii hore ee Roomaaniyiinta, macallinkiisana wuu niyadjabay. Aabbihiis aad ayuu u canaantay oo ugana hanjaabay inuu garaac; laakiin Daa’uud si edeb leh ayuu u dhegaystay waxyaalihii aabbihiis dhahay oo dhan, kadibna si xamaasad leh ayuu ku yiri, ‘Mudane wanaagsan, haddaba sariirta ma diyaarinaa, lacalla Boqor Caynaanshe wiilkiisa hadduu hooy soo doonto?’

Isla markiibaa muuqaalkii aabbihiis ku beddelmay murugo iyo dabacsanaan. Wuuna ogaaday waxa uu wiilkiisa yar oo daacadda ah casharkiisa aan qalbi u haynin. Wuxuuna ku yiri si dhab ah, ‘Wiilkaygiyow, Ilaahay ha xafido Amiirka oo ha ku hoggaamiyo meel nabad ah. Sidoo kalena, Ilaahay ha noogu xafido booqashadaas oo kale. Miyaad rabtaa inaan anagoo dhan Boqorka la dhimanno? Miyaan nala garanaa inaanu nahay kuwa taageera Boqorka? Fikradahan iska daa, cunuggaygow, oo xoogga saar wax barashadaada mar labaad.’

Sidaa darteed, Daa’uud ma sii hadlin, waayo aabbihiis wuu beddelmay. Wuxuu gooyey timahiisa duudduuban oo dharkiisa wanaagsanaa meel iska dhigay, wuxuu sababay in Daa’uudna sameeyo sidoo kale. Waxayna gashadeen dharka nimanka beeraleyda, qofna ma ogaan karin xisbiga ay ka soo jeedaan, mar dambena kama hadlin waxyaabaha boqortooyada.

Inkastoo wiilkii uusan ilaawi karin arrintaas, wuxuu si taxaddar leh u diyaariyey qolkiisa jiifka, waxaa ka buuxay

maryo badan oo nadiif ah, uu ka soo bixiyey armaajada dharka, oo gacantiisa u dhow. Isla markii wuxuu ku suray sawirka yar ee Boqor Caynaanshe-kii ugu horreeyey, derbiga ku yaalo sariirtiisa horteeda. Sawirka oo aabbihiis uga soo iibiyey, marka ugu dambaysay uu booqday qasriga, mid muuqaal wanaagsan leh oo sida farsamayaqaan caan ah oo sawiray. Amiirka hadduu imaan lahaa, wuu ku farxi lahaa inuu arko.

Laakiin Amiirkii weligiis ma imaanin. Keliya maalintaas oo bisha afaraad ah oo kooxda askarta adag yimaadeen, iyagoo dhex ordaya baadiyaha oo ilaa gurigiis imaanaya. Daa'uud intuu ganjeelkii ka kacay, ayuu u orday ilaa waddada. Waqti yar ayuu lahaa, waayo kuwii faraska waday, way arkeen isaga oo ay u soo ordayeen. Wuu maqlayey siday qoobabka farasyada ku afarqaadeen waddada, markaasuu albaabka galay, markii ay kor u soo baxeen. Laakiin waxay ku qasbanaayeen inay ka degtaan, isagana aabbihiis keligiis ayuu tegay. Isagoo neeftuuraayo ayuu yiri, 'Mudane wanaagsanow, aabbahay, way u yimaadeen... nimankii cadowga ahaa... gurigay wax ka raadin doonaan oo ay su'aalo ku waydiin doonaan, sidii ay ku sameeyeen Mudane Daahir.'

Aabbihiisna wuxuu yiri, 'Haddaba, waxaad hooyadaa ku dhahdaa, 'qari qalinka astaanta qallafsan ku yaalo, iyo dharkeenna oo dhan oo caddaynayaan inaan tageerno boqorka'. Caawi hooyadaa inay qariso caddaynta, intaan iyaga ku hayo qolka fadhiga.' Daa'uud wuxuu orod ku gaaray qolkiis yar intay kooxda baaritaanka gaarin. Markay jaranjarta ku dul socdeen, wuu soo xasuustay sawirkii boqorka oo surnaa derbiga. Waqti ma haysanin oo uu ku qariyo, mana jirin meel kaloo nabad ah uu dhigo. Markaasaa codkii aabbihiis qalbigiis ku soo dhacay oo dhahaya, 'Miyaad rabtaa inaan anagoo

dhan Boqorka la dhimanno?' Si cabsi leh, ayuu hareerahiisa u fiiriyey.

Miiskiisa waxaa ku yaalay buraash iyo alwax rinji la saarto iyo muuqaal dhir ah oo aan weli la dhammaynin, waayo Daa'uud wuxuu ahaa farsamayaqaan yar. Intuu buraashka qaaday, ayuu mariyey rinjiga cagaarka ah oo uu mariyey wejiga boqorka - wuxuu sawiray tufaax qallafsan - dharkii dahabka lahaa waxaa lagu rinjiyeeyey guduud - wuxuu sawiray timir yar - saxanka rinji huruud la mariyey, kadibna Mudane Daa'uud si geesinimo leh ayuu sawirka hor istaagay, isagoo lugaha kala qaaday, oo ilaalinayo boqorkiisa, markay qolka soo galeen.

Laakiin waxba ma arkin oo tusaya inay boqorka daacad u yihiin, laakiin markay tageen kadib ayaa Daa'uud u dhiibay sawirka aabbihiis, kaasoo ku qariyey armaajada dhexdeeda, halkaas ayeyna ku jirtay oo lagu iloobay sanado badan. Mudane Daa'uud wuxuu noqday nin Amiirkiisa ku soo dhoweeyey carshiga Ingiriiska. Sanado badan ayuu amiirka u adeegay si daacad ah, markuu dhintayna wiilkiisa iyo farcankiisoo dhan waxay ku noolaadeen guriga wayn. Saddex qarni kadib, mid iyaga ka mid ahaa oo jeclaa inuu wax sawiro, wuxuu marinka dheer oo dhan ka sameeyey sawirro yaryar, oo sawirka yar ee rinjiga xun la mariyay, waxaa loo soo saaray iftiinka.

Kan guriga wayn dhaxli lahaa wuu yaabay. Waayo waxay u ekayd sawir aan micno lahayn, laakiin way caddahay inay sawir duug ah yahay, jirkiisu wuu qurux badnaa, sidaa darteed, wuxuu ahaa mid u qalma in la haysto. Wuxuuna suray meel dheer oo gees ah mugdina ah. Isagoon waxba ka ogayn, wuuna ka xiisa dhacay, ilaa ay maalin ka gaartay oo nin caan ah oo ganacsiga farshaxan sameeyo ayaa

u yimaaday, si uu u arko sawirradiisa. Waxayna u soo bandhigeen sawirradii, isaguna wuu joogjoogsanaayey oo sawirradu fiirsanaayey, tijaabinayo oona ku gorgortamaayo. Markaasaa qorraxdii galbeedka daaqadda ka soo iftay, markaasaa iftiinkiina ifiyay sawirkii yaraa oo cajiibka ahaa oo geeska surnaa. Ninkii farshaxanka ka ganacsanaayey wuu istaagay oo si fiican u fiiriyey, intuu kursiga fuulay, ayuu si fiican u fiiriyey, kadibna wuxuu ku hadlay cod xamaasad qarsoon leh. Wuxuuna waydiiyey, ‘Sawirkan yar ma soo dejin karaa, si aan u baaro?’

Mulkiilaha wuxuu ku jawaabay, ‘Soo dhowow, waad dejin kartaa, waxaan aaminsanahay in reerka haysteen sanado badan, hadda waxaa laga joogaa bartimihii qarnigii toddoba iyo tobnaad, laakiin weligay ma ogaanin waxay tahay ama taariikhdiisa.’ Markaasuu ninkii farshaxanka ka ganacsanaayey waydiiyey, ‘Oggolaanshahaada ma ku qaadan karaa sawirkan, si aan u baaro?’

Oggolaanshaha ayaa si sahlan loo bixiyey, habeenkaasna reerkiisa markay jiiifeen, ninkii farshaxanka ka ganacsanaayey intuu soo fariistay, ayuu isku dayey inuu ogaado waxyaalaha ku qarsoon sawirka. Wuu oga in rinjigaas xun la mariyey, aysan ahayn kan oo midka sawirka sameeyey uusan marinin, asal qiimo leh lagu qariyey. Mindi iyo kiimiko ayuu ku fiiqay rinjigii foosha xumaa ee huruudda iyo cagaarka ahaa, isla markiiba si caddaan ah oo nolol camal ah, ayaa loo jeedaa sida maalinta la sawiray, oo tusaysa astaamaha Boqorka.

MOWQIFKA QORAAGA:

Markaana Ruuxa Quduuska ah qalbigeenna ka aqbalno, jirkeennu wuxuu noqdaa halkuu Ruuxa Quduuska ah degnaada. Nolosha iyo jacaylka Ciise Masiixna waa inuu ka dhex dhalaalaa, isagoo iftiinna ku soo kor daayo. Laakiin waxaa jiraa waxyaalo qaar ah oo qarabaya ammaantiis iyo quruxnimadiis, sidaa darteed, dadku ma naga dhex arkayaan inuu Ciise Masiix nagu dhex nool yahay, taxaddar la’aanta, edebdarrada, daahir la’aanta, xanaaqa dhaqsoda iyo dhaqanxumada. Dadka qaar waxay umaleeyaan waxyaalahan inay macno lahayn, laakiin wax kasta oo qariya dabeecadda Ciise Masiix, waxay muhiim u tahay qofka Masiixiga ah.

DULUCDA:

Waayo, waa Ilaah kan yidhi, Iftiin ha ka ifo gudcur, kan qalbiyadeenna uga ifay inuu iftiinka aqoonta ammaanta Ilaah inaga siiyo Ciise Masiix wejigiisa.

2 Korintos 4:6

DUCADA:

‘I sii quruxda gudaha binu-aadanka, si ay bannaanku iyo gudahuna midnaadaan.’

(Tani waxaa laga soo qaaday ducada Socrates - nin caan ah oo falsafad hore.)

Halayga arko quruxda Ciise Masiix
naxariistiisa cajiibka ah oo dhan iyo daahirnimadiisa
Ruuxa rabaani ah
nadiifi dabeecaddayda oo dhan
ilaa quruxda Ciise Masiix layga arko.

KA FIKIR:

Noloshaada waa maxay waxyaalaha xun ama qaldan aad u aragtid inay kugu adkaatay, markaad ka adkaan rabto? Bal isku day inaad Ilaahay waydiisato maalin walbo, si uu kugu caawiyo, iimaankaaga saaro Ilaahayga oo wax aan la samayn karin, sameeyo.

LAAKIIN MIDHAHA RUUXU WAA JACAYL, FARXAD, NABAD,
DULQAADASHO, ROONAAN, WANAAG, AAMINNIMO,
QABOWNIMO, ISCELIN. GALATIYA 5:22, 23
Ruuxa wuxuu soo saaraa jacayl

Galatiya 5

23. YAABKII HOGGAAMIYAHII TUUGGA AHAA

Cilmi wuxuu ahaa nin Shiine ah oo hoggaamiyaha tuugga ah maalmahaas, markay dadka shisheeyada waddanka Shiinaha ku tagi kareen, iyagoo xor ah. Wuxuuna ka tirsanaa koox caan ah, aad ayaana loo yaqaanay xirfaddooda iyo sharnimadooduba.

Tuugada waxay ku noolaayeen meel ay isku qariyaan oo ah dhagaxyo oo ku taalo beerta dheer, halkaasoo dowladda askartoodu weligood aan ka helaynin. Habeenkiina waxay mugdiga si tartiib ah ugu soo baxaan habeenada dabaysha, iyagoo hubaysan, ayey tagaan xuduuddada tuulada. Baaq markay la siiyo, ayey kulligood isla markaas ku ordayaan oo ay eyaha daran ee tuulada toogtaan, waxyaalo qaataan oo ay wax xadaan, oona toogtaan mid walbo isku dayo inuu diido. Waxay xadaanna aayar ayey u iibiyaan, suuq halkaas ka fog ayey ku iibiyaan oo mar kale ayey weeraraan, markay faa'iidooyinkooda ka dhammaato.

Sidaa darteed, malahan tuulada ku taalo buurta wayn oo nabad dareenta, maxaa yeelay malahan qof oo isku dayey inuu ka adkaado tuugadaas ama weeraro. Laakiin haddaba waxaa soo socdaa qorshe wayn. Cilmi wuxuu la tashtay

dadkiisii, iyagoo joogo dhagaxa korkiisa. Waxaa jiray dad badan aan fiicnayn, ugu dhowaan kulligood waxay naceen oo ay ka cabsadeen hoggaamiyahooda, kaasoo mar walba uu qaato saamiga ugu wayn oo wixii ay soo boobeen. Laakiin badidood waxay ka cararayeen xabsiga mise dhimashada oo lagu xukumay, ma isku dayi karaan inay ku laabtaan shaqadoodii hore, sidaa darteed, si xanaaq leh ayey u dhegaysteen Cilmi, markuu hadlaayey.

Wuxuu u sheegay kooxdiiisa inay dadka tuulada ku nool dhowaanahaan keenaan bililiqo yar, kooxdiiisa waa inay hami yeeshtaan. Dhinaca koonfurta ee buuraha waxaa ku yaalaa magaalo yar. Waxaa magaaladaas yar ku yaalaa dukaamo iyo maal la dhaco. Waxaa ugu fiican isbitaal oo saddex shisheeya ka shaqaysa. Dadku degmo walbay ka yimaadaan oo ay daawo halkaas ka raadsadaan, xitaa isbitaalka wuxuu leeyahay sariiro aan badnayn oo ay kuwa aad u xanuunsan lagu seexiyo. Waa hubaal in dhakhtariintu ay taajir yihiin. Isbitaalkaas wuxuu leeyahay lacag, busteyaal iyo qalabyadoo dhan ay shisheeyadaas isticmaalaan. Dhacitaan wayn ayaa ka dhici doonaa magaaladaas. Nimankii si xanaaq leh ayey u dhegaysteen, waayo mashruuc kan ka khatarsan ma jirin oo ay horay u soo sameeyeen, laakiin hoggaamiyaha wax laga ma diido, haddii kale waa dhimasho. Si aad u weerarto, ugu yaraan keliya waxay ka dhigan tahay dhimasho macquul ah.

Waxay weligood fuushanyihiin faraska dhimashada, waxayna sii qarisyay noloshooda, laakiin may garanaynin si kale ay u noolaadaan, oo bustahana wuu ku fiicnaan doona qabowga buurta - haddii loo oggolaan lahaa inay haystaan. Weerarkii waxaa la qorsheeyey habeenkii bishu dhalanaysay, markay

aad mugdi u ahayd, basaaskiina mar hore ayuu galay suuqa, wuxuuna sawiray jaantuska dhulkaas. Waxay ku ag urureen sawir qallafsan ee dhuxul ah, qof walbana waa loo sheegay wuxuu samayn doono, halkay tagi doonaan iyo waxay weerari doonaan. Markay arrintooda dhammaystaanna, waxay dhaqso ku soo laabanayaan foorida Cilmi. Dhacitaanku wuxuu qaadanaa dhowr daqiiqo, Cilmi qudhiisa iyo kuwa kale waxay weerari doonaan isbitaalka.

Habeenkii waa la gaaray, wayna weerareen, bilowgii wax kasta oo ay waqti hore qorshaysteen, wuu fulay. Cilmi iyo laba weheladiisa ah waxay ka adkaadeen wardiyaha habeenkii isbitaalka. Waxay soo galeen qol yar oo kuwa xanuunsan la jiifiyo, iyagoo wax xadaya, waxay ku ifiyeen kalkaalisada faynuus aad u ifayso, iyadoo naxsan.

Intay baxin, ayaa dhakhtar shisheeye yimaaday, isagoo ordaya oo laba naag oo caddaan ah, oo ka soo daba ordaya, laakiin si dhaqso ah ayey looga adkaaday sidoo kale. Cilmi seeftiisa si xoog leh ayuu ku dhuftay dhakhtarkii gacantiisa oo fidsan, ilaa u maqlay laftiisa oo jabaysa. Naagaha ma haysanin hub, sidaa darteed, markay arkeen mindida dhalaalayso, ayey gadaal gadaal u laabteen. Markuu rabay inuu fooriyo, ayuu ogaaday in wax qaldanyihiin; magalaadu way is diyaarisay xilligan, ciidankuna wayba is diyaariyeen.

Dagaal wayn ayaa socday. Waxaa jiray dad qaylinayo oo aad u naxsan. Cilmi wuu laballabeeyey. Miyuu caawin karaa nimankiisa u dagaalamaya ama wuu iska daayaa dhacitaanka oo isku qariyaa geedaha mugdiga ah oo ka dambeeyo isbitaalka? Wuxuu ku go'aansaday arrintan inay tahay mid qof naftiisu isugu caawiyo, kadibna wuu baxay, intuu faynuustiisa ku tuuray meel alwaaxyo leh, waayo rabshada dabkii waxay u qarinsaa inuu dib u laabto.

Isagoo habaartamaayo, turunturoonaya, nabarro leh ayuu iskuu jiiday dhinaca qashinka badan leh, intuu ku dhex dhacay bohollo, oo dhir qodaxyo leh la soo halgamay, ilaa ay qaylidii iyo isku dhaciddii hubka iyo rasaasta dhammaatay, holacii dabka ayaa cirka ka sameeyey wax guduudan oo dhalaalaya. Kadibna, wuxuu ogaaday inuu keligii yahay habeenka iyo aammusnaanta buuraha. Keligiis, laakiin ma nabad qabo!

Subixii wuxuu ugu bariyey, isagoo jiifa oo tabcaan ah, oo ku jiro meel hoos ah oo wax laga arkaynin oo ku taalo buur geedo badan leh – isagoo cararayo oo naxsan oo rabo inuu noloshiisa la baxsado. Ma la qabanin. Maalmo ayuu safraayey oo dhex marayey buuraha, isagoo tuulada ka tuugtuugsanaayo oo mararka qaarna uu ku caawinayo beergooyaska, qofna muusan ka shakinin in qofkan daalan, oo lugaha nabarro ku leh inuu yahay Cilmi, Boqorka Tuugga ah, argagixiyihii baadiyaha.

Weli mu nasanaynin. In kastoo u ahaa mid shar leh oo danayste ah, wuxuu u ahaa hoggaamiyaha kooxdaas. Wuu ka adkaa iyaga, wuuna khiyaanay, laakiin haddaba kelinimadiisa iyaga ayuu u xiisay. Isaga iyo kooxdaas xariir saaxiibnimo ama jacayl kama dhexaynin, laakiin si yaab leh ayuu iyaga ku faanaa. Meeqaa dagaalkaas ku dhimatay? Meeqaa ayaa ciidanka qabtay? Meeqaa ayaa fakatay, isaga ka ahayn?

Ugu dambayntii, wuu u dulqaadan waayey. Raadistiisa mar hore ayaa lagu daalay, xitaa nimankiisa ma aqoonsan karin, waayo intuu timaha iska xiiray, ayuu u gashtay dhar sida shaqaale masaakin ah. Wuxuu tagaa magaalada oo uu wax soo waydiiyaa, iyo xagga kale ee dhulka cawska leh wuxuu ka raadsadaa shaqo, laga yaabaa inuu gato dhul yar oo uu ku beerto bariis. Jacaylkuu dagaalka u qabay wuu dhammaaday,

markay raggiisii dhinteen. Haddii ay jiri lahayd si uu nabad u raadiyo, wuu raadin lahaa.

Maalinta suuqa jiray, wuxuu la soo galay dadka oo tuulada deggan, intuu magaalada socday, ayuu waxyaalo fiiriyey, isagoon u ekayn inuu wax fiirinayo. Isbitaalkii weli dib looma dhisin, shisheeyadii halkaas ma joogin. Intuu istaagay, ayuu baaritaan ku sameeyey waxyaalihii oo burburay, kadibna qof halkaas deggan ayuu su'aalo waydiiyey. 'Tani waa wax murugo leh, waxaan maqlay inuu ahaa guri shisheeye. Siduu ku gubtay?'

'Tuugadii habaarka qabay ayaa yimaadeen. Waxayna gubeen isbitaalka oo dhakhtarkeenna way dhaawaceen. Hadda wuu tagay. Laakiin waa hubaal inay soo laaban doonaan oo dib ay u dhisaan.'

'Maxaana ku dhacay tuugadaas habaarka qabay? Ma la gowracay sidaas ayey u qalmeene?'

'Badi waa la gowracay, qaar waa la qabtay. Saddexna waa la dhaawacay, wayna jifeen, iyagoo dhiman raba.'

'Kuwii dhaawacmay maxaa ku dhacay?'

Wuxuu yiri, 'Ciidanku waxay rabeen inay wadaan, iyagoo dhimanaya, laakiin dhakhtarka ayaa ka baryey inay halkaan ku dhintaan.'

'Wuu ka baryey, aa? Sabab? Miyuu rabay inuu iyaga dilo?'

'Maya! Waxay faafiyaan diin jacayl ah. Isbitaalkii waa la gubay, laakiin wuxuu geeyey gurigiisa. Isaga xitaa wax ma samayn karin, waayo gacantuu ka jabsanaa, laakiin naagihii buu u sheegay waxay samayn lahaayen. Dhakhtarkii wuxuu

tagay magaalo kale, si gacanta looga soo xiro, kadibna maalinta ku xigtay wuu soo laabtay. Maalin iyo habeen ayuu ilaalinaayey tuugadan oona u daryeelaayey sida carruurtiis oo kale. Libaaxyadaas waxay noqdeen wan. Hal ayaa dhintay, labada kalena way nolaadeen.’

‘Oo hadda halkay joogaan? Miyuu ciidanka u dhiibay?’

‘Maya! Ciidanku waxay u qaateen inay dhinteen, oo mar dambena ma soo laabanin. Markuu dhakhtarku baxay, labadooduna way raaceen. Waxay noqdeen sida wiilashiisa oo kale. Uma maleeynaayo inay ka tagi doonaan.’

Cilmi wuu aammini waayey, markuu marar badan maqlay, ayuu bilaabay inuu aammino inuu waxan dhacay. Nin oo cadowgiis jeclaaday, oo waxyaalo wanaagsan u sameeyey kuwii isaga weeraray oo dhacay oona hantidii ka gubay, cadowguna saaxiib noqdeen. Runtii, jacaylka waa ka xoog badanyahay seefta. Tani weligeed la ma maqlin. Tani ma ahayn jacaylka dunidan, kaasoo ku dhashay qalbiga binu-aadanka. Habeenkaas hurdadaa ka soo degi wayday, Cilmi wuxuu go’aansaday inuu raadiyo jacaylkan halkuu ka yimid. Dadka magaaladaas waxay yiraahdeen, tani waa diin jacayl ah, kuwa kale ayaa jiraa oo diintan haysta.

Go’aankiisii wuu dhowray. Isagoo ka shaqaynaya shaqo aan caadi ahayn, kuna wareegaayey magaalo ilaa magaalo oo doonayey diintan ka dhigtay nin inuu jeclaado cadowgiisa; oo maalin ayaa la gaaray oo Cilmi la kulmay kuwa Ciise Masiix raacsan, wuuna bartay waxyaalaha ku saabsan kan jacaylkaasi ka yimaado.

MOWQIFKA QORAAGA:

Kan jacaylku ka yimaado waa Ilaah, jacaylkaasuna wuxuu dunida ku yimid xagga Ciise Masiix. Isla jacaylkaasna waxaa nagula siiyey xagga Ruuxa Quduuska ah, si aan u barano, si wax loo jeclaado oo dadka u cafino sida Ilaahay u cafiyo.

Haddaad rabtid inaad garato jacaylka Ilaahay, akhri 1 Yooxanaa 4:7-21. Haddaad rabtid inaad ogaato muhiimkeed, akhri 1 Korintos 13.

DULUCDA:

Maxaa yeelay, jacaylka Ilaah baa qalbiyadeenna ku dhex shubmay, oo waxaa ku shubay Ruuxa Quduuska ah oo layna siiyey.

Rooma 5:5

DUCADA:

Jacaylku ma guuldarraysto, jacaylku waa dahab saafi ah. Jacaylku waa midka Ciise Masiix u yimid inuu na tuso. Naga dhig kuwa aad jeclaatay, Rabbiyow, waxaan kaa baryeenaa. Nagu caawi, si aan u xasuusano jacaylku waa jidkaaga.

KA FIKIR:

Ciise Masiix wuxuu muujiyey caqiidada Ilaahay oo ah cafiska kaamilka ah ee ku jira baryada Rabbiga. ‘Oo naga cafi qaamahayaga sidaannu u cafinnay kuwa noo qaamaysan.’ Sidee baan tani ugu dhaqmi karnaa?

Ruuxu wuxuu keenaa farxad

Yooxanaa 16:20-33

24. HEES GUUL AH

Qofna ma ogayn, muxuu Boqor Nero uu aad ugu neebanaa Masiixiyiintii hore oo joogay Rooma. Xoog buu ku lahaa nolosha iyo dhimashada kuwa isaga hoos joogoo dhan, cabsi ayeyna ku noolaayeen; laakiin Masiixiyiintan cabsi ku ma noolayn, waayo cabsida dhimashada way ka baxday. Way ogaayeen in xitaa dhimashadu aysan ka saaraynin jacaylka Ilaahay, iyaga dhimashadu waxay u tahay farxad ay ku galaan joogitaanka Masiixa, badidood way heesaayeen, markii la dilaayey. Waxay ogaadeen in Nero uu dili karo jirkooda keliya, oo laakiin uusan jebin karin ruuxdooda. Waxaa laga yaabaa tani inay tahay sababtuu iyaga u nacay.

Inkastoo uu xilliga xagaaga Nero uu ka helo inuu dhex fadhiyo dhismo wayn, dhismaha wayn oo weligiis la dhisay oo hawo fiican leh, oo isaga iyo dadwaynaha Rooma ay ku raaxaysanayaan Masiixiyiintu dugaagga duurjoogta ah loo tuuraayo. Laakiin qabowgu markuu dhaco, dhismaha wayn waa la xiraa. Nero wuxuu ka fikiray waxa la samayn lahaa, waxaa jiraa afartan qof oo Masiixiyiin ah oo la ogaaday oo la qabtay, waxayna sugaayeen Boqor Nero inuu ku raaxaysto ciqaabtooda.

Nero wuxuu yiri, ‘Ha qaboojiyaan!’ Isagoo fiirinayo muuqaalkii oo barafka cadku dhacaayo. Wuxuu u yeeray kabtanka oo askartii gurigiisa ilaaliyo inuu afartankaas maxaabiista ah inuu u kaxeeyo war yar oo barafaysan oo ku

taalo xagga buurta ee magaalada shiishe, dharka ka siib oo ha galaan wartaas habeenkoo dhan, si ay u dhintaan ama ha ka laabtaan iimaankooda. Kabtanka iyo nimankiisa dab wayn bay ku shiteen wartii qarkeeda, ilaa midka ugu dambeeyo oo la xukumay uu dhinto ama imaado xagga dabka, isagoo ka laabanaayo iimaankiisa.

Tani waxay ahayd amarradii Nero, sidaa darteed, afartan nin way isla istaageen dhexda warta barafaysan, iyadoo bisha jirto. Laakiin marmar qaylida dabkii shidnaa iyo hilibkii shiilan oo aad u kulul yahay, ayaa qayli kale la maqlay - ‘Afartan askar oo Masiixiyiin ah ayaa silaca dartaad u marayaan, Masiixow! Guul ayey kuu keenayaan, oo kuu sheeganaya taajka.’

Kabtankii si murugo leh ayuu aammusnaan ku dhegaystay, waayo isaga xitaa wuu garanaya waxyaalaha ku saabsan Ciise Masiix. Isaga xitaa wuxuu aaminsanahay in jidkan ku geynayo nolosha weligeed ah, laakiin weligiis ma isku dhiirrinin inuu qirto, waayo wuxuu arkay kuwa badan oo la silciyey. Sidee buu ugu dulqaadan karaa waxyaalaha ay mareen?

Si kadis ah, ayaa qof walba aammusay oo u jeestay xagga warta. Mid turaanturoonaya ayaa xaggooda yimaaday, isagoo madaxiisa ceeb darteed u foorarinayey, waayo xanuunka qabowga iyo aragtida dabkaas ayaa ka guulaystay dulqaadashiisa. Askartii ayaa ku jeesjeeseen oo ku qosleen. Intay qar kaas ka soo qaadeen, ayey dhar u geliyeen oo ay cunto siiyeen oo ay gudaha ka quursadeen. Laakiin xagga barafka heestii guusha way dhammaatay. Kooxdoo dhan ayaa istaageen oo qalbijab la aammuseen, qof heesaayna ma jirin.

Haddana, kooxdii jeesjeesay oo dabka ag fadhiday, way wada aammuseen, iyagoo la yaabaya oo qosolkiina joojiyeen. Waayo kabtankii ayaa dharka kulaylka ah iska siibay oo wartii barafaysan galay, intuu aammusay, ayuuna adkaystay. Kooxdiiisa farxad ayey ku soo dhoweysay, haddana codkii oo sii baabba'ayey ayaa heesay, taasoo gaartay jannada, iyagoo leh, - 'Afartan askar oo Masiixiyiin ah ayaa silaca dartaad u marayaan, Masiixow! Guul ayey kuu keenayaan, oo kuu sheeganaya taajka.'

DULUCDA:

Hortaada farxad baa ka buuxda, Gacantaada midigna nimco baa ku jirta weligeed.

Sabuurkii 16:11

DUCADA:

Rabbiyow, waxaan kaa baryayaa wax walboo igu dhaca, i xasuusi inaad tahay kan farxaddayda ka imaata. Oo haddaan ku garto oo aan ku jeclaado, waan ku faraxsanaan doonaa Ciise Masiix, inkastoo aan dareemo murugo ama xanuun.

Iga badbaadi gunuunuca, isu-naxariisasho ama niyadjab, bal aan tuso kuwa aan la kulmo in Masiixi yahay qof faraxsan. Na sii daacadnimada gudaha ee farxadda keenta, iyo nabadda oo ka imaanaysa ku ag noolaanshahaada. Mar walbana nagu dhex cusboonaysii dareenka farxadda, noo yeel inuu Ruuxaagu weligiis nafteenna iyo jirkeenna dhex degnaado, isagoo naga buuxinaayo iftiin iyo farxad, si aan ula kulano wax walba oo imaanaya, xitaa dhimashada nafteeda, anagoo ah geesi iyo nabadna leh, mar walba iyo wax walba waan kaaga mahadcelinayna. Amiin.

KA FIKIR:

Mahadnaqaaga xagga Ilaahay miyuu ku xiranyahay noloshaada oo ma ficantahay ama ma wanaagsanayn? Ama miyaad garanaysaa macnaha, 'Mar kasta Rabbiga ku faraxsanaada'?

25. GELITAANKA GUULAYSIGA

Ardayda fasalka farshaxanka ayaa garoonka cayaarta ku hadlayeen. Imtixaankoodii oo dugsiga lagu xiraayey wuu soo dhowaa ee mid kasta waxaa laga rabaa inuu dhiibo sawir. Waxaa la siiyey fursad ay ku doortaan, mawduuca mid ka mid ahna waa ‘Nabad.’ Mid ayaa wuxuu dhahay, ‘Waxaa jiraa fursado badan oo laga doorto. Muuqaal wanaagsan ee badda ... aliseydii muuqaalkeeda... qorrax-dhac...’

Mid kalena wuxuu yiri, ‘Laakiin taas maahan midda asalka ah! Muuqaalka habeenka ayaa ka roon, laakiin muuqaalkii habeenka aad ayuu u adagyahay.’

‘Ka warran nin oday ah oo baaritaan ku samaynaayo wixi uu ka soo shaqeeyey? Laakiin muujinta wejigiisa waxay u baahantahay xirfado ka wayn aan leennahay. Taasi ma noqonayso sidoo kale.’

‘Laga yaabaa sawir ku saabsan xayawaanka, bisadda oo qorraxda isku kululaynayso, laakiin sidee baan ku sawiraa codka bisada?’

‘Waxaad ka dhigi kartaa wax aan la taaban karin, waxaana isku daraysaa rinjiyo.’

‘Waxaa laga yaaba in fursado badan jirto, laakiin dhammaanba waa isku mid, aniga waxaan dooranayaa mawduuc kale!’

Baaraaha wuxuu kala saaray gelitaanka mawduucoda. Arday badan waxay doorteen mawduuca ‘Nabad’, wuuna ku cajisay doorashadooda. Muuqaalka qof adag ayuu is kala bixiyey xagga xeebta, isagoo qabo dharka dabaasha, jirkiisuna wuxuu u ekaa mid aan dhaqaaqaynin; qorraxdiina aad ayey u baxaysay, qofna weligiis iftiin sidaas oo kale ma arkin. Intuu neeftuuray, ayuu u jeestay sawir kale, wuuna joogsaday. Khalad miyuu sameeyey? Ma muuqaalkan naxdinta leh oo rogmanaaya lagu yeeri karaa ‘Nabad’? Mar labaad ayuu fiiriyey, wuuna fahmay.

Farshaxamadii yarayd waxay sawirtay duufaan badda ka kacayso. Waxay sawirtay daruuraha oo dhaqso u socda iyo hirarka xoog leh oo xumbo noqonayo, oo kuna dhacayo markabka dushiisa. Markabka gadaashiisa waxaa jooga dad aan si fiican loo sawirin oo foorarsan. Haa, gabadhan wax way sawiri kartaa. Sawirku wuxuu muujinaa argagax, wejiyada qaar waxaa cirka loo qaaday, iyagoon raja lahayn, iyagoo fiirsanaayo joojintii duufaanta. Laakiin sawirka hortiisa ee markabka gadaashiisa waxaa hor taagnaa sawir qof wayn loona sawiray si fiican. Nin oo is diyaariyey oo albaabka hor taagnaa, isagoo iska ilaaliyey dabaysha oo hoos ugu firinaayo cunug uu garabkiisa ku hayo. Cunugga wejigiisa yar oo kor u qaaday, ma lahayn cabsi ama dhibaato. In kastoo duufaantii ay kacsantahay oona ay ku wareegaysantahay, isagu wuxuu ku jiifaa gacmaha aabbihiis.

MOWQIFKA QORAAGA:

Nabadda ay dunida na siiso, waxay ku xirantahay cirka buluugga ah, hareeraha ammaanka ah, ammaanka iyo dhibla'aanta iyo welwel la'aanta. Laakiin nabaddu Ciise

Masiix na siiyo, way nagu filantahay duufaanta dhexdeeda. Waxaba ma na taaban karo ama dhaawaci karo, hadduu Ilaahay oggolaanin inay dhacdo faa'iidodeen darteed. Si aan u ogaano, oo u aammino inuu gacantiisa ku hayo xaaladdeenna oo dhan, taas waa nabad.

DULUCDA:

Wax yar intuusan dhiman, Ciise Masiix wuxuu xertiisii ku yiri, 'Nabad baan idiinka tegayaa, nabaddaydana waan idin siinayaa, sida dunidu u siiso anigu idiin siin maayo. Qalbigiinnu yuusan murugoon, yuusanna biqin.'
Yooxanaa 14:27

DUCADA:

Soo daadi dhibicyaasha oo aammusnaan,
ilaa aan dadaalkeenu joojino
nafeenna ka saar cadaadiska iyo walbahaarka
kana dhig in nolosheenna nidaamsan inay qirato quruxda
nabaddaada.

KA FIKIR:

Sida dhirtii yar u baahantahay nafaqo, biyo, qorrax iyo roob inaad korto uu caafimaad qabta, sidaas oo kale ayaad u baahantahay cuntada 'Ruuxiga', si aad u korto, sida Masiixiga. Halkan waxaa jiraa waxyaalo ku caawinaayo oo iimaankaaga wayneenayo:

- Codka Ilaahay - Ilaahay si kala duwan ayuu noola hadlaa, laakiin mida ugu muhiimsan wuxuu nagula hadlaa Kitaabka Quduuska ah dhexdiisa.
- Ducada - Ducadu maahan inaad liiska wax iibsashada oo mar walba aad barinaysid. Ducadu waa inay ka mid

noqotaa noloshaadu si joogto ah inaad ku noolaatid, adigoo og joogitaanka Ilaahay, inaad qalbiga ku furtid oo aad maalintoo dhan la hadashid.

- U adeegidda Ilaahay - Bal isku day, si aad Ilaahay ugu adeegi lahayd sida ugu fiican, adigoo ka fikiraysid qofkaad tahay, hadiyadda iyo kartida uu Ilaahay ku siiyey, waqtiga iyo fursadda aad leedahay.
- Gargaaritaanka Masiixiyiinta - Inaad ku biirto kaniisad, dugsiga axadda ama kooxda dhallinyarada, taasi waxay noqon kartaa gargaar wayn iyo dhiirraan, laakiin waxay ku gelinaysaa xaladda aad kuwa kale ku caawisid.
- Saafnimada qalbiga - Haddaad dembaabto, dembidhaaf waydiiso si dhaqso ah, sidaad damiirkaaga u nadiifisid.
- Iimaankaad Ilaahay ku leedahay - Wuxuu u baahanyahay inuu koro. Markaad waqti adag joogtid, waxaad soo xasuusataa Ilaahay xooggiisa wayn iyo jacaylkuu kuu qabo beddelkii dhibaataadaas.

KORITAANKA RUUXIGA 1 –
XARIIRKAAD LA LEEDAHAY ILAAHAY
Ku koritaanka nolosha Masiixnimada –
Ilaahay codkiisa Qorniinka dhexdiisa

Sabuurkii 11

26. BUUGGII KU JIRAY ARMAAJADA SARIIRTA AGTEEDA

Muuse wuxuu u dhashay Yuhuudda Faransiiska, yaraantiisa oo dhan waxaa la geyn jiray sunagogga, Sabti ilaa Sabti wuxuu dhegaysan jiray Axdigii Hore oo la akhrinayo. Aabbihiis wuxuu ahaa nin ganacsade ah oo aadna uga dambeeyey diinta, sida dadka Yuhuudda kaloo dhan oo diimeed, wuxuu sugaayey Masiixa oo loo ballanqaaday imaanshadiisa. Weligiis ma akhrisan wax ku saabsan Ciise Masiix, kan uu qoraalku Axdigii Hore oo dhan fuliyey, midka imaan doono. Muuse wuu jeclaa oo xushmeeyey aabbihiis, aad uuna sugaayey maalinta uu wehelkiis u noqon doono xagga shirkadda.

Marar badan ayey isla hadleen, laakiin maalin bay waxay galeen mawduuca diinta, Muusena wuxuu aabbihiis u sheegay wiil ay isku fasal ahaayeen, oo aad uga helay. Muuse wuxuu yiri, ‘Waa wiil naxariis badan leh, wiilka ugu fiican aan garanayo, laakiin wuxuu akhristaa Axdiga Cusub oo marar badanna ka hadlaa. Aabbow, maxay aad u xuntahay in Axdiga Cusub la akhriyo?’ Isla markiiba aabbihiis aad ayuu u murugooday. Wuxuuna yiri, ‘Wiilkaygiyow, kitaabkaas ka fogow, waayo been ayuu sheegaa. Wuxuu dhahaa

Masiixeenu mar horay ayuu yimaaday, laakiin bulshadii waddankeenna way garan waayeen oo ay isaga qodbeen. Muusow, waxaan rabaa inaad iga ballanqaadid inaad weligaa kitaabkaas akhrisanaynin.’ Muuse wuu tixgeliyey. Waxyaalaha kitaabkaas ku qarsoona ayaa isaga xiisa geliyey. Wuxuuna aabbihiis ugu jawaabay, ‘Marna waa waqti dheer, laakiin waan kaa ballanqaadayaa inaan furaynin ilaa aan ka gaaro labataan iyo kow sano. Markaas kadibna aniga ayaa ka tashanaa,’ Taasna aabbihiis waa inuu ku qanco.

Sanado ayaa dhaafay oo Muusana wuxuu jiraa labataan sano, wiil yar oo aaminaad ah shirkadda aabbihiis, isagoo ku koraayo inuu noqdo wehelka aabbihiis. Maalin wanaagsan ayey u ahayd, markuu aabbihiis u diray waddanka Ingiriiska inuu wakiilka shirkadda ahaado oo heshiis ganacsi muhiim ah soo sameeyo. Muuse weligiis ma tagin waddanka Ingiriiska, inkastoo uu af Ingiriis si fasiix ah ugu hadlo iyo saddex luuqad oo kale, magaalada London aad ayey uga farxisay. Shaqooyinkiisii markuu dhammaystay, maalmo kale ayuu sii joogay, si uu dalxiis u aado. Hoteel fiican ayuu qaatay oo dagay qolkiisa, galabtii ugu horraysay ayuu kala saaray warqadihiisa, si uu diyaarsado wareysiyo.

Laakiin waxaa Ingiriiska iyo Mareykanka jiray shirkad Masiixi ah oo Kitaabka Quduuska ah iyo Axdiyada dhigaan isbitaalka, hoteellada iyo ha’yadaha kale. Laakiin Muuse aad ayuu u yaabay, markuu armaajada sariirtiisa agteed furay oo uu helay Axdiga Cusub oo halkaas yaalo! Si dhaqso leh, ayuu u xiray armaajadii oo wuxuu isku dayey inuu is iloowsiiyo, laakiin waqti adag ayuu lahaa inuu ku mashquulo ganacsigiisa. ‘Waa maxay kitaabkan la ii diidaayo khatarta uu leeyahay iyo waxyaalaha ku qarsoon?’ Wuxuu jeclaa inuu fiiriyo, laakiin weli bilooyin yar ayaa ka dhiman inta

uu labaan iyo kow sano gaarayo, ballantii uu qaatay, way ka celisay. Hase yeeshee, ballaanta beecsharadiis iyo dalxiisnimada fikradahaas way dhibaayeen. Wuxuuna is yiri, ‘Maxaa aabbahay uu u naca oona uga cabsadaa kitaabkan? Maxaana ka dhigaya inuu kitaabka khatar oo xiiso leh yahay?’

Habeenkii ugu dambayey oo booqashadiisii ah ma u dulqaadan karin, wuxuuna is yiri, ‘Aabbahay ma lahan xaquu iigu xiro ballantaas, waayo waxaan ahay labaan jir, waxaana ahay nin. Cutubka ugu horreeyo ayaan akhriinaa keliya, kadibna waan seexanaa.’ Isagoo farihiisa gariirayaan, ayuu furay cutubka ugu horreeyey oo Matayos, laakiin siduu u akhriinaayey wuu yaabay oona ka xumaaday; waxay ahayd abtirisyada, liiska magacyooyinka oo Axdigii Hore ku jiray oo uu isaga horay u yaqaanay. Malahan waxyaalo khatar ah ama qarsoon oo kitaabkan ku jira, kadibna si geesinimo leh ayuu u akhriyey ilaa dhammaadkii cutubka. Waxaa ku jiray qiso yar oo dhalashada Ciise Masiix. Si tartiib ah, ayuuna u akhriyey, aayadda 21 ayuuna ku joogsaday, isagoo naxsan. ‘Oo waxay umuli doontaa wiil, magaciisana waxaad u bixin doontaa Ciise waayo dadkiisa ayuu dembiyadooda ka badbaadin doonaa.’

Muuse aayaddas ayuu marar badan akhriyey. Waayo malahan waxa diintiisa hore ee Yuhuudda ah uga sheegay inuu binu-aadanka laga badbaadin doono dembiyadooda. Wuxuu rabay inuu sharciga Ilaahay ilaaliyo oo waxyaalo wanaagsanna sameeyo, laakiin wuu oga inuu yaraantiisa ilaa hadda uu jebiyey marar badan, wuxuuna umaleeyey in mar walba uu sameeyo. Runtii, ma jiro qof oo dembiyadiisa ka badbaadinayo, qof oo ka xoreeyo dareenkiisii oo dembiga

oona ka dhigo qofkuu noqon rabo? Haddii ay jirto, wuxuu jawaab u helay su’aalihiisii u waynaa noloshiisa.

Kitaabkii ayuu xiray, waayo ma doonin inuu ballantii aabbihiis sii jebiyey, laakiin ma seexan karin, wuxuu rabay inuu wax badan sii ogaado. Subixii ku xigay ayuu u safray xaafadda, beecsharadiisana si guul leh ayuuna u dhammeeyey. Laakiin faanka uu aabbihiis uu tusay, muusan ku farxin siduu uga filanaayey. Goor dambe oo dabbaaldegi soo noqodkiisa uu dhammaanaayey, ayuu Muuse aabbihiis ku yiri, ‘Aabow, waxaan jebiyey ballantayda, waxaan akhriyey Kitaabkii.’ Muuse wuxuu la kulmay waqti adag, aabbihiis wuxuu u caddeeyey, haddii uu go’aansado inuu Masiixi noqdo ma sii joogi karo shirkadda ama ma ahaanaayo wehelkiisa shirkadda. Muuse wuxuu sugay ilaa uu ka gaaray labaan iyo kow sano, isagoo qalbigiis nadiif ah ayuu Kitaabkii akhristay saacaddo badan. Isagoo akhriinaya Ilaahay ayaa la hadlay, wuxuuna ogaaday Ciise Masiix inuu yahay Masiixa Axdigii Hore, Wiilka Ilaahay, Badbaadiyahiisa, kaasoo waxyaalaha oo dhan isaga iska leh. Xaafaddooduu ka tagay oona bilaabay inuu ku wacdiyo Injiilka dadkiisii Yuhuudda.

Ma garanaayo sida sheekada u dhammaatay, ama hadduu dib u laga dhoweeyey reerkiisa. Laakiin markaan la kulmay, wuxuu ahaa mid cidlo iyo silaca hayo. Laakiin qalbigiis wuxuu ka ahaa nin farxad leh, waayo kitaabkii dhexdiis ayuu ka helay jawaabta saxda ah oo nolosha; wuxuu helay Ciise Masiix.

DULUCDA:

*Eraygaagu wuxuu cagahayga u yahay laambad,
Waddooyinkaygana iftiin.*

Sabuurkii 119:105

DUCADA:

*Indhahayga fur Si aan waxyaalo yaab badan
sharcigaaga uga arko.*

Sabuurkii 119:18

KA FIKIR:

In Kitaabka Quduuska ah la akhristo, adigoo rabto oo aad addeceeyso oo aad wax ka baratid, waa caddayn inay tahay jidka runta ah oo lagu maqlo codka Ilaahay. Qorniinkuna waxaad ka baran kartaa waxyaalo badan oo ku saabsan ruuxa iyo dabeecadda Ilaahay. Tani waxay kaa dhigaysaa inaad isaga la hadashid maalin walba.

Magaca Ciise Masiixa ku ducaayo

Yooxanaa 16:23-27

27. WARQADDII CAAISHA

Caaisha oo ka mid ahayd waayeelka waxay ku noolayd tuulo ku taalo meelo dhagaxyo leh oo ah buuraha. Nolosheeda oo dhan waxay ku noolayd tuuladaas, waxan ka ahayn mararkay suuqa aado, waxay ahayd adduunka ay garanaysay oo keliya. Markay yarayd, waxay ku daajin jirtay ri'yo, halkii oo kuwa dhuxusha duurka ku gubaan joogaan. Kadibna waa la guursaday, waxayna ku safartay faras. Waxay ka gurtay aqalka yar oo ku yaalo geedaha hoostooda tuulada xaggeeda kore, waxay u gurtay aqal kaloo xagga hoose ee tuulada. Halkaasna waxay ku beeratay galley oo maalin walbana biyo ayey u soo dhaamisaa, halkaas ayeyna ku dhashay carruurteeda oo ay ku soo korsatay. Laakiin hadda ninkeeda wuu dhintay oo carruurteeduna way guursadeen oo tuulooyin kale tageen, sidaa darteed, Caaishadii waayeelka ahayd keligeed ayey soo hartay.

Aad ayey u murugootay, waayo indhoole ayey noqotay, maxaana ku dhici doonaa? Gabdhaheedu way jeclayd, laakiin wiilashii ay soddohda u ahayd, may rabin inay gurigooda ku soo dhowaato, sidoo kale aad ayeyna u jeclayd gurigeeda yar. Waxaa laga yaabaa in araggeedu wax laga samayn karo. Habeenkaas deriskeedu markay ka yimaadeen suuqa, waxay kala tashatay arrintaas. Way ku dhiirrigeliyeen. Haa, waxaa jirtaa kalkaalisad oo diin u adeegta, waxay leedahay daawo fiican. Kuwa badan ayaa u tageen, iyagoo leh qufac,

nabarro iyo indha xanuun, lacagna kama qaadaniin. Xaqiiqdii, Caaishadii waayeelka ahayd waa inay tagtaa, waxay iyada ku qaadayaan dameer, marka dambe oo ay magaalada tagaan.

Caaisha guriday tagtay, iyadoo qanacsan, oona hubta in araggeedu loo soo celin doono. Hal toddobaad kadib, Caaisha waxay tagtay isbitaalkii, wayna fadhizatay oo ay sugaysay goorteeda, iyadoo meelaha fiifirinaysay. Markii iyada la soo gaaray kalkaalisad iyo si naxariis leh u salaantay, intay indhaheed baartay, ayey haddana ‘fariiso’ ku tiri. Markii kuwii xanuunsana oo dhan tageen, ay kalkaalisaddii ayey aayar u timaadday oo ay afkeeda kula hadashay, arrintanna aad ayey Caaisha kaga yaabisay, waayo waqti dheer ayaa ka soo wareegtay in la dhegaysto. Ugu dambayntii, way wada hadleen.

Kalkaalisadii waxay ku tiri, ‘Indhahaagu waxba uma samayn karo, waxaad u baahantahay qalniin. Laakiin walaalkay oo magaalada dhinaca xeebta deggan waa dhakhtarka indhaha. Waxaan umaleeyaa inuu araggaaga kuu soo celin karo.’

‘Laakiin, sidee baan isaga ku gaari karaa?’

‘Bas ayaa ku geynayaa.’

‘Laakiin weligay safar dheer uma safrin ee lacagna ma haysti.’

‘Waxaa laga yaabaa in carruurtaada ku caawiyaan.’

‘Laakiin haddaan halkaas tago, maxaan sameeyaa? Weligay ma tagin magaaladaas, waan lumayaa.’

‘Waxaad waydiisaa halka isbitaalka ku yaalo, qof walba wuu garanaa isbitaalka.’

‘Haddaan halkaas gaarno, waxaa laga yaabaa in dhakhtarku ii oggolaan doonin, waayo waxaan ahay naag duq ah oo masaakiina, afkayguna isaga si fiican uma fahmi doono.’

‘Dhakhtarka wuxuu maalin walba arkaa naago badan oo waayeel ah oo masaakiin ah, luuqadaadu ayuu ku hadlaa. Xitaa, waxaan kuu dhiibayaa warqad, anigoo ku dhahaya meel fog ayaad ka imaadday.’

Qorshahan warqadda aad ayuu uga qalbiqaboojiyey. Tuuladii ayey u laabatay oo ay carruurteedii wacday. Maalin ayaa iyada la imaadday wiilka ay soddohda u tahay, kaasoo u gooynaayo tigidka oo baskana saarayo, oo qof kale oo qaraabo ah wuu la kulmi doona oo meel ay seexato siin doona. Laakiin waxay rabtay warqaddaas. Aad ayey u aammintay warqaddaas.

Laakiin waqti dheer ayaa ka soo wareegtay in kalkaalisadii ay iyada aragto. Ugu dambayntii, markay aragtayna wayba garan waysay, waayo Caaisha waxay qabtay ookiyaale, oo si kalsooni leh ayey u socotay. Lughii ay hoos ku jiidaysay iyo sida ay wax u fiirinaysay, way beddelmeen. Wax bay aragtaa.

Waxay mar kale soo gashay farmasiga, laakiin waxay sugtay in dadkoo dhan ay kala tagaan, waayo waxay lahayd sheeko ay u sheegto kalkaalisada. Sidaa darteed, kalkaalisadii waxay geysay jaranjarta kore, shaah ayna siisay, Caaisha dib ayey uga sheekaysay waxay martay, kalkaalisadiina way dhoollacaddeysay, iyadoo sawiranayso wixii dhacay - waaxda bukaan socodka, albaabka dadka ka buuxo,

dhakhtarka mashquulsan iyo Caaisha - naagta duqda ah oo go'aan gaartay.

Caaisha way bilaabday oo tiri, 'Aliseydii ayaan kacay sidaad igula talisay, sidaan kuu sheegay waan lumay. Qaraabadii aan la joogayna, wuxuu i siiyey lacagta baska, laakiin mid khaldan ayaan qaatay, markaan gaaray, waxay ahayd salaaddii labaad. Albaabkiina waa la xiray oo dad badan ayaa bannaanka joogay, kuwa sidayda soo daahay, waxayna garaaceen albaabkaas xiran. Laakin midka albaabka waardiyeeyo wuu soo baxay oo na yiri, 'qolka wuu buuxaa, sidaa darteed, taga oo duhurkii soo laabta, ama maalinta ku xigto.' Qof kale ma soo gali karin. Dadka way doodeen oo kuwa kalena way xanaaqeen, laakiin wax faa'iido ah malahayn. Albaabka waa la xiray. Laakiin intaan warqaddii kor u qaaday, ayaan cod dheer ku qayliyey, 'Laakiin waxaan ku imaaday magaca walaashiis, waxaan ku imaaday magaca walaashiis.'

Caaisha way sii wadday inay sheekadeeda sheegto. Ninkii albaabka waardiyeeynayey wuxuu fiiriyey warqaddeeda. Waxay u ekayd mid run ah, wuxuuna ogaa inay wixii degdeg u baahan tahay. Intuu qaaday ayuu geeyey qolka ay dhakhtarka ku aragto, dhakhtarkiina wuu aqoonsaday qofka warqaddii soo diray, wuuna akhristay oo isla markii fiiriyey indhaheeda. Xaaladdu way iska caddayd, wuxuuna ku yiri, 'waan ku jiifna'. Waxayna ahayd dhacdo caadi ah, laakiin iyada waxay u ahayd mid cajiib ah.

'Ninkii albaabka waardiyeeyna ayaa i yeeray, oo soo gal igu yiri,' way sii wadday sheekadeeda, iyadoo indhaheedu dhalaalaya. 'Aniga keliya! Kuwa kaloo dhan way tageen. Dad

badan ayaa sugaayey, laakiin wuxuu igu dhex waday dadkii badnaa hortooda, ilaa uu ii keenay dhakhtarka. Haddana, waxaan dhahay, 'Waxaan ku imaaday magaca walaashaa.' Dad badan ayaana sugaayey, laakiin wuu ka jeestay oo warqaddii iga qaaday uu halkaas ku akhriyey. Wuuna ii soo jeestay, anigoo ah waayeel oo masaakiin ah, wuuna ii sameeyey wixii aad codsatay oo dhan, sariir, qalitaan... haddaba, waan arki karaa.' Intay aammustay, ayey tixgelisay. Markay hadashayna codkeedu, wuxuu noqday mid jilicsan oo la yaab ah. Waxayna tiri, 'Magacaaga aad ayuu ugu qiimo badanyahay, waxaad codsatay oo dhan ayuu ii sameeyey. Magacaaga aad ayuu ugu qiimo badanyahay.'

MOWQIFKA QORAAGA:

'Magaca Ciise Masiix' maahan wax mucjiso ah in ducadeenna lagu jawaabo. Sidaan u aragnay, waa nolosha Ciise Masiix, dhimashadiisa iyo sarakiciddiisa ayaa anaga Ilaahay noo soo celiyey. Waa waxyaalaha Ciise Masiix sameeyey ayaa naga dhigay kuwa Ilaahay aqbalay oo aan ku imaan karno xagga ducada. Sidaa darteed, iimaankaan Ciise Masiix ku qabno dartiis, iyo aamminkaam aaminsannahay ayaa ka dhigay in ducadeenna la aqbaloo. Anagoo ku ducaysanayno 'Magaca Ciise Masiix', si fudud waxaan Ilaahay u qiranaynaa, oo anaguna is xasuusinaynaa xariirkeenna cusub aan Ilaahay la leennahay. Xariirkan oo ka yimaaday Ciise Masiix iyo shaqadiisa keliya. Macnaha kale waxaa waaye: Sidii kalkaalisada ay waxyaalo ugu codsatay Caaisha, markay warqadda ku qortay magaceeda, sidaas oo kale ayaan u codsan karnaa oo aan heli karnaa wax walboo

Rabbiga doono inaan lahaano. Tani waxaa ka mid ah wax walboo Ilaahay naga ballanqaaday Kitaabka Quduuska dhexdiisa.

DULUCDA:

Ciise...weligiiis waa nool yahay si uu ugu duceeyo iyaga.
Cibraaniyada 7:25

Sidaas daraaddeed dhammaan (Ciise Masiix) buu u badbaadin karaa kuwa Ilaah ugu dhowaada isaga.
Cibraaniyada 7:25

Ciise Masiix wuxuu yiri, 'Runtii, runtii, waxaan idinku leeyahay, Haddii aad wax uun wayddiisataan Aabbaha, magacayga ayuu idinku siin doonaa.'
Yooxanaa 16:23

Dadka kale u duceeya
Filiboy 4:6,7; Kolosay 4:2

28. BADBAADINTA

Guuleed maaliin Sabti ah wuxuu soo kacay subaxnimo, wuxuuna ogaa in xagaaga soo dhowaa: Qorraxdu aad ayey u baxaysay oo shimbiruhuna si degdeg ah ayey u heesaayeen. Intuu sariirta ka booday, ayuu daaqadda u orday. Adduunku wuxuu u ekaa siduu u filanaayey, beertu way dhalaalaysaa, ceeryaamuduna waxay ku duudduubmeen geedaha qarka webiga. Ubaxyaduna way kala baxi doonaan inyar kadib, waqti la lumiyo malahan. Guuleed intuu dharka xirtay, ayuu cirbaha ku joogjoogsaday jaranjarta. Eygiisa yar ayuu eegay, oo kaasoo booday dambiishiisa oo soo raacay. Waxay bannaanka u baxeen oo ay dhex socdeen beertii quruxda badnayd. Wuu ku farxay inay ahayd Sabti, waayo laga ma sugaayo inuu dhaqso u laabto dugsiga. Qof walba wuu jiifay, waayo Sabti ayey ahayd, sidaa darteed, wuxuu lahaa waqti dheer ilaa waqtiga quraacda laga gaaro.

Ganjeelka ayuu ka laballabeeyey. Waxaa jirtaa meelo badan oo la booqdo, way adagtahay middii la dooran lahaa. Wuu fuuli karay buurta guriga gadaashiisa ku taalo, oo uu fiijiyo dameerraha duurjoogta ah, kadibna wuu raadin karaa buulasha shimbiraha, mise intuu dhinaca bidixda ah u jeesto oo uu fiiriyo in carruurta shimbirtu ay duulaan. Laakiin ugu dambayntii, wuxuu go'aansaday inuu raaco waddada xagga togga aadaysa. Waddadaas oo geynaysa ilaa biyo durdur ah inuu ka fiiriyo sida ukunta raha ay tahay, waayo waqtigan

waxaa la rabay in halkaas oo dhan ay noqoto halka rahu carruurtiisa ay ku boodboodi lahaayeen.

Aad ayey u xiiso lahayd inaan qarka durdurka oo ku hoos yaalo dariiqa duurka aan soo arko, marka la dhex maraayo cawska oo mararna dhagax lagu istaagayo, goortaasi oo eyguna ku kor ordaayo cawska. Wuxuu ku dhowaa barkadda raha, markuu si kadis ah u joogsaday, isagoo ku dul kufay wax oo qarka yaalay, oo cawska iyo dhirta la qariyey.

Waxayna ahayd sac, Guuleedna wax yar uu ku dul istaagi gaaray iyada. Waa hubaal inay halkaas ay ku dhex dhacday oo si xun dhaawac u gaaray, waayo si deggan ayey u taalay, madaxeeduna nus biyuu ku dhex jiraa, nuska kalena biyuu ka kor jiraa, sankeeduna wax yar ayuu biyaha ka koreeyey. Si culus ayey u neefsanaysay, wiilka intuu joogsaday ayuu hoos u fiiriyey, markaasay ci' daciif ah ku qaylisay.

Markaasaa Guuleed yiri, 'Haba ahaatee, way nooshahay, waa inaan halkan ka saaro. Waayo way ku hafan doontaa, haddii madaxeedu biyahaa sii galo.' Inyar ayuu biyaha qarkooda ka sii baxay, kadibna intuu lugaheed qabtay, ayuu bilaabay inuu jiido, laakiin xayawaanka wayn aad ayuu u culus yahay. Intay saynteeda dhoobada leh ay shaatigiis ku qabatay, ayey ci' yar bixisay. Guuleed intuu dacaskiisa iska siibay oo surwaalkiisna kor u laalaabtay ayuu biyihii galay. Waxaa laga yaabaa inuu qaadi karo, wuxuu awooday inuu madaxeeda culus uu dhagax u saaro, waana intaas oo keliya, iyaduna ma jeclayn. Intay indhaheeda ugu wareejisay ayey halgantay, iyadoo daciif ah.

Markaasaa Guuleed yiri, isagoo murugaysan, 'Faa'iido malahan, xanuun uun ayaan u geysanaaya. Wax kale ma samayn karo. Aad ayey u culustahay. Mana ogi waxa ay

hooyaday ka dhihi doonto dharkayga, waayo waxay leeyihiin dhiiqo oo wayna qoyanyihiin, anigoon wax macna leh samaynin!'

Wuxuu soo fuulay qarka biyaha oo geedihii quraca ka soo baxay oona yimaaday beerta ubaxa, halka oo lo'da kale ku daaqayeen. Intuu eygiisa qaaday, ayuu agagaarkiisa si fiican u fiiriyey. Wuxuuna is yiri, 'Lo'dan qof ayaa iska leh, laakiin guri ma arki karo, waxaa laga yaabaa in qof beeraley ah meelahan joogo. Doqonnimadayda maxaan waqtigayga u luminayaa. Ninka beeraleyda wuu garanayaa wuxuu samayn doono haddii keliya aan heli lahaa.' Wuxuuna fuulay dalcadda, halkaasna korkeed waxaa ku yaalay guriga beerta oo maqsiinnada ku wareegsan qiiqa ka baxaayo.

Ninka beeraleydu iyo naagtiis waxay ku jireen jikada oo ay cunaayeen hilib duban iyo ukun, markay maqleen albaabka aad loo garaacayo. Wuuna furay albaabkii oo wuxuuna arkay wiil yar oo dharkiisa qoyan oo wasakh leh oona faraxsan, wuuna boodboodayey iyo ey oo gadaashiisa ka ciyaayo.

Guuleed, isagoo neeftuuraayo oo aad u ordayey, ayuu yiri, 'Waa sac, waxay dhex jiiftaa biyaha durdurka, wax yar ayaana u dhiman in madaxeedu biyaha hoos galo, fadlan si dhaqso ah kaalay.' Ninkii beeraleydu shaahiisuu dhammaystay, wuxuuna naagtiisa ku yiri, 'Rooble u wac, waxaan soo qaadanayaa xarig... wiilkaygiyow, adiguna na tus jidka.'

Waqtii yar gudaheedna waxay gaareen biyihii durdurka, iyagoo fiirinayaan makhluuqa masaakiin ah. Ninkii beeraleydu wuxuu yiri, 'Waxaa wanaagsan inaan xagga cawska ku soo bixino oo aan halkaas ku firino.' Wuxuuna Rooble ku yiri, 'Bal xariggu lugaheeda hore ku xir, aniguna

dhabarkeeda ayaan ka firinayaa.’ Guuleedna wuxuu waydiiyey, ‘Ma idin caawiyaa?’

Ninkii beeraleydu intuu wejigiisa rajada leh firiyey, ayuu dhoollacaddeeyey. Wuxuuna ku yiri, ‘Haa, waayo qoyan baad tahay, sidaa darteed, waa inaad biyaha gashid oo madaxeeda qabatid.’ Guuleedna biyihii ayuu galay, intuu sacii cabsida lahayd la hadlay, kadibna madaxeeda qabtay. Goortii oo labadii nin oo xoog leh si tartiib ah u jiidayeen xagga beerta qorraxda leh. Guuleedna markuu xasuustay xoog iyo raja la’aantiisii, wuu qoslay. Wuuna isla hadlay, ‘Ka soo qaad, ninka beeraleydu inuu halkaas joogay waqtigan oo dhan. Maxaan dhaqso u fikiri waayey oo aan u keeni waayey oo si toos ah ugu sheegi waayey?’

MOWQIFKA QORAAGA:

Haddaan Ilaahay jecelnahay oo aan kuwa kalena caawin rabno, waxaa jirtaa waqti gaar ah oo aan garanaynin, waxaan samayno ama sidee aan ku caawin lahayn. Laakiin hal wax ayaan ku qaldameeynin: dadkaas waan u ducayni karnaa oo aan Ilaahay waydiisano inuu iyaga caawiyo. Isagaa abuuray, wuuna jecelyahay, si fiican ayuuna u garanay waxay u baahan yihiin. Haddii aan qof Ilaahay u dhiibno, Ilaahay qofkaas si cusub ayuu ugu soo dhowaadaa.

DULUCDA:

Waxba ha ka welwelina, laakiinse wax kastaba baryadiinna Ilaah ku ogeysiya tukasho iyo duco mahadnaqid la jirto.

Filiboy 4:6

DUCADA:

Ebbow, waxaan u ducayn rabaa reerkayga iyo saaxiibadayda siiba _____, kaasoo aad ugu baahan caawimaadaa. Ebbow, ku dhowow oona barakadee, wax jacaylkaaga ku saabsan bar. Aniguna, i tus haddii ay jirto waxyaalo aan ku caawin karo.

KA FIKIR:

Ducadaada, inkastoo aad umalaysid inay qiimo lahayn, nolosha dadka kale ayey taabataa. Markaad u ducaysid dadka kale, miyaad xasuusataa in Ilaahay uu iyaga jecelyahay oo daryeelo iyaga si ka badan taada? Miyaad umalaysaa inuu Ilaahay iyaga caawiyo? Mararka qaar miyaad tixgelisaa inaad tahay caawiye oo Ilaahay u doortay qofka aad u ducaynaysid?

Adkaysiga ducada

Efesos 6:11-18

29. MAXAA SABABAY IN DERBIGU DUMAY?

Lilias Trotter, gabar ka imaadday reer wayn, waxaa lagu soo koriyey xaafad qurux badan, sanado badan oo la soo dhaafay. Laakiin markii ay soo barbaartay, qofna ma ogaanin hibada cajiibka ay leedahay oo ahaa farshaxan.

Goortii ay waqtiga fasax ah ay hooyadeed la qaadanaysay, iyadoo joogaan hoteel ku yaal Talyaaniga, wax bay sawiraysay. Hooyadeedna waxay maqashay in nin farshaxanka ku caan ah oo la yiraahdo John Rushkin, joogay isla hoteelkaas. Waxayna u qortay warqad, iyadoo waydiinayso inuu fiiriyo sawirrada ay Lilias sawirtay. Wuu oggolaaday, isagoon rabin. Waayo mar walba wuxuu oгаа in naaguhu ay waxba sawiri karin. Laakiin wuxuu arkay ayaa fikraddiisa beddeshay.

Wuxuuna noqday macallinkeeda iyo saaxiibkeeda, isagoo ku qanacsan in gabadha yar Lilias inay noqoto mid kamida oo farshaxanka ugu waawayn oo qarniga. Laakiin mu fahmin in farshaxanku uu u ahayn Lilias waxay aad u jeceshahay. Aadna wuu u niyadjabay, markay iyadoo gabar yar waxay iska daayeysay xirfadda farshaxanka. Waxayna tagtay Aljeeriya xagga Waqooyiga Afrika inay ka dhex shaqeeyso naagaha Muslimka. Waxay asaastay hay'adda oo waqti yar kadib lagu magacaabay Algiers Mission Band (Kooxda Hawlgalka Aljeeriya).

Aad ayeyna u dadaal badnayd, iyada oo aad u jecel wax quruxda ku saabsan. Waxay nolosheed ka bilaabday dibadda xaafad dad sabool ah ku noolyihiin iyo luuqyada magaalada wayn, laakiin wayna safartaa, waxayna jeceshahay meesha wayn bannaana oo Saxaraha. Marar badanna waxay sawirtaa muuqaalka lamadegaanka. Sariirteeda korkeed waxaa ku surnaa khariirada Waqooyiga Afrika, saacaddo badan ayey jilbaha dhigataa khariirada horteed oo ay u ducaysaa magaalada kala firdhisn iyo tuulooyinka Aljeeriya. Dad aad u yar ayaa farriinteed Injiilka dhegaystay, mararka qaarna waxay dareentaa niyadjab. Mararka qaar waxay damacdaa inay waydiiso, 'Ducadu wanaaggeeda waa maxay? Waxay u egtahay inuu Ilaahay uusan ka jawaabaynin ducada oo dad yar ayaana aamminaya Masiixa!' Laakiin maalin ayaa wax dhacay oo iyada baray inay sii ducayso, waayo ducadu weligeed ma khasaarayso.

Maalin subaxnimo ah, way jiihtay iyadoo joogto xaafaddii dadka ku badnaayeen oo luuqyada ahayd, markaasaa si kadis ah derbiga u dhexeeyey iyada iyo guri kale dumay, diigniin la'aan. Si naxariis leh, iyadu waxba kuma dhacin, laakiin gurigeed waxaa ka buuxay bus, alwaaxyo iyo malaas, markaasaa waxay aragtay waddaddii yarayd oo kala qaybinaysay gurigeed iyo dukaanka rooti lagu dubo albaabkiisa. Iyadu ma fahmi karin, waayo kuma arkin derbiga wax dillaaca ah. Laakiin waxay u yeertay fuundiga oo ay ku tiri, 'Dib u dhis derbiga, soona baar waxa dumiyey.' Fuundiga oo ahaa midka sawira naqshada dhismaha ayaa si fiican u fiiriyey wixii dhacay oo kadibna bannaanka soo socsoday, wuuna soo laabtay, isagoo faraxsan, wuxuuna yiri, 'Waan ogaaday waxa dhibkan keenay, runtii, waan kuu sheegayaa derbigaaga sababtuu u dumay.'

Wuuna fahansiyeey, in dukaanka rooti lagu dubaayo hoostiisa uu lahaa maqsin dhagax ahaa oo lahaa fooro, marnaba dhinac dhinac aaddayso oona ah mashiina rootiga kala fidinayso. Habeen walba ninkii wax dubaayo wuu shidaa mashinka, sidaa darteed, labaatankii sano ee la soo dhaafay ayuu sidaas samaynaayey, taas ayaa sababtay in derbigu uu daciif noqdo, ilaa ay ka gaartay subaxaas oo gariirka shaqadiisa qabtay oo derbigiina dumay. Sidaa darteed, derbigii dib ayaa loo dhisay iyo deriskeedu way u naxariisteen oo ay ku yiraahdeen, ‘Dacwee ninka wax dubo’, laakiin Liliis kama xumaanin, waayo dhacdadaas waxay bartay waxyaalo muhiim ah.

Waxay ogaatay in ducadeedu aysan khasaarin. Waxay ka shaqaynaysay meel dembigu iyo silaca ku badnaa, laakiin dagaalka waawayn hal maalin laguma guulaysto. Tartiib tartiib, ayaa loogu guulaystaa. Sida gariir walba uu daciifinaayey derbiga, sidaas oo kale ayaa duco walba oo lagu ducaysto magaca Ciise Masiix ay daciifisaa wax walboo adag. Iyada iyo kuwa kale oo iyada la jirayna way sii wadeen inay ducaystaan maalin walba. Waayo way ogaayeen maalin uun, hadday dulqaad lahaadaan oo aamminaan oona adkaystaan, waxa adag way dumayaan.

MOWQIFKA QORAAGA:

Axdiga Cusub wuxuu na barayaa inaan gashano gaashaanka Ilaahay oo aan la dagaalno xoogga sharta ah. Hubka ugu xoog leh aan leennahay waa duco, waayo waa duco oo wax walba ka sarreeyo oo nagu xariirin kara Ilaahay, anagoo isticmaalayno erayadeenna khaaska ah.

DULUCDA:

Oo weliba waxaa kaloo aad qaadataan gaashaanka rumaysadka, kaas oo aad ku awoodaysaan inaad ku wada demisaan kan sharka leh fallaadhihiisa ololaya oo dhan. Mar kasta Ilaah wax kaga barya Ruuxa baryo iyo duco kastaba, oo taas ku dhawra adkaysasho oo dhan iyo u-ducaynta quduusiinta oo dhan.

Efesos 6:16, 18

DUCADA:

Rabbiyow, waad ogtahay inaan marar badan aan waqti dheer u ducaysto waxyaalo, laakiin waxna ma dhaco. Igu caawi inaan aammino duco walboo aan ku ducaysto magacaaga in la maqlo oo ay wax tarto, oo ugu dambayntii jacaylka iyo wanaagga Ilaahay uu ka guulaysan doono nacaybka iyo dembiga. Iga ilaali inaan quursanin oo aan qalbijabin. I tus waxyaalaha aan u ducaysan lahaa, igana dhig mid samar leh, adkaysi iyo dulqaadasho, markaan ducaysanaayo.

KA FIKIR:

Maxaad u umalaysaa inuu Ilaahay mar walba si dhaqso leh uusan ducada ka jawaabaynin? Inkastoo aan ogayn, mar walba Ilaahay wuu noo jawaabaa ducadeenna. Laakiin ma ahan sidaan rabno ama waqtigaan sugno laguugu jawaabo. Ducadeenna qaarkood Ilaahay ‘HAA’ ayuu ku jawaabaa. Kuwa kalena ‘MAYA’ ayuu ku jawaabaa. Haddana mid kalena ‘SUG’ ayuu ku jawaabaa. Saddexda sheekooyinka soo socoto waxay tusayaan jawaabta ‘Haa.’

Duco la aqbalay – Ilaahay markuu ‘Haa’ yiraahdo

Matayos 7:7-11

30. FASAXA XAGGA BADDA AGTEEDA

Waxay ahayd booqashadoodii ugu horraysay oo ay tageen xagga badda agteeda, aad ayeyna u farxad badnayd. Waxay lahaayeen hees khaas ah oo hooyadood iyaga u alliftay oo jiiib leh:

Majarafad yar oo guuxayso

Baaldiyaal oo qaylo bixinaya

Waxaana joognaa xagga badda agteeda!

Saddexda ugu waawayn oo jira lix sano, afar sano iyo saddex sano waxay bilaabeen inay maalin ka maalin ay is diyaariyaan, intii la gaarin maalinta la safri lahaa. Inkastoo ay subax walba ay haddana alaabtooda kala saaraan. Kuwa jira lix iyo afar sano waxay lahaayeen boorso duug ah, tan saddexda jirta waxay lahayd dambiil yar. Cunugga wuxuu lahaa alaab dadka kale ka badan. Laakiin isaga waa loo diyaariyey. Markii hooyadoo ay aragtay, iyagoo si xamaasad leh u diyaarsanayeen alaabta lagu cayaaraayo armaajadooda iyo iskafaalaha buugga, waxay bixisay amar. Waxay ku safrayeen tareen, sidaa darteed, waa inay alaabtooda yareeyaan, cunug walbana inuu qaato hal alaab lagu cayaaraayo, waayo ciidda badda ayey ku dheeli doonaan, iyo badda mana u baahanayaan alaabta lagu cayaarayo.

Tan saddexda sano jirto waxay u keentay inay aad u fikirto, waayo boombalaheeda oo dhan waxay rabtaa inay xagga

badda u qaadato, laakiin cunugga afarta sano jiro midka badan ma qaadanayo, waayo horay ayuu u go'aansaday inuu qaato boombalahiisa oo lagu magacaabo Sabriina. Boombalayaasha kale oo dhan muhiim uma ahayn, haddii Sabriina lays barbardhigo, waayo Sabriina waxay ka tirsanayd reerka. Mar ayey ahaan jirtay boombalo qurux badan, sida dadka waddanka qabowga leh deggan, iyadoo leh duf badan, iyadoo xirmo badan oo hal cunug dusheeda ku leh, laakiin dadka iyada yaqaanay hadda ma aqoonsan karaan, waayo Sabriina waxay lahayd nolol caadi ahayn! Waxay ku safartay boostada Baraasiil oo kadibna dib loo celiyey ilaa Ingiriiska, iyadoo gacan qofka leh ku jirtay. Waa la calaanjiyey, waa la koolkooliyey ama la seexiyey habeen walba, bannaankana loo bixiyey, iyagoo safar ku jira, la jijibiyey iyadoo ku jirto dambiishii oo bannaanka lagu aadayey. Gaariga carruurta ayeyna ka dhacday, waxaa laga badbaadiyey qubayska. Waqti dheer la soo dhaafay, Sabriina iyo cunuggeeda oo joogi jiray dhabarkeeda way kala tegeen. Haddaba, waxay u egtahay wax kuus ah oo dambas u eg oo wasakhna leh oo dufna leh. Laakiin qofka lahaa oo aammin ah ayaa jecelyahay sida ay tahay oo weligiisna meel tagin, isagoon wadanin.

Carruurta waxay fikireen in Muqdisho ay tahay meel aad u cajiib ah adduunkoo dhan, iyo waalidka sidoo kale, toddobaadka ugu horreeyey wuxuu ahaa fasaxa ugu wanaagsan. Qorraxda maalin walba ayey soo baxeysay, carruurtana ka ma daalin inay guriga carrada sameeyaan, oo barkadda fiirsadaan, iyagoo kuna ordaayo marna ka soo ordaayo biyaha badda. Maalin walba quraacda kadib, waxay xeebta ku wadaan gaariga carruurta, iyagoo bannaanka cuntada ku cunaya, oo ay ku laabtaan, markii la gaaro

waqtiga seexashada, iyagoo carro leh oo aad u faraxsan. Laakiin toddobaadkii labaad waxaa dhacay musiibo wayn!

Sabriina waxay reerka mar walba la aadaa xeebta. Sida caadiga ah, waxaa la geliyaa dambiisha bannaanka lagu aado oo halkaasa lagu dhaafaa, si ay muuqaalka u fiirsato, laakiin maalintii ay sameeyeen guriga carrada oo wayn, Sabriina waxay keligeed fadhiday guriga carrada ah oo u gaar ah. Hirarkuna dhaqso ayey u imaanayeen, carruurtiina waxay samaynaayeen caqabad oo waalidkoodna way caawinaayeen. Waa waxa ugu farxadda badnayd oo ay weligood samaynin, waayo hiraarku aad ayey u waynaayeen oo way kacsanaayeen maalintaas, waxay awoodeen inay cunug xitaa dhulka ku dhufaan, haddii ay derbiga soo jebiyaan. Carruurta aad ayey u qaylinaayeen oo ku faraxsanaayeen mar walboo hiraarka imaado oo carrada isku guraan. Qofna ma ogaanin in ay biyahu dhinaca gurigooda ku darsoomayeen, ilaa ay hooyada ka ogaatay in dambiishii biyo lagu soo qaaday, way ku orodday, si ay u soo badbaadiso. Dhabcan, hirarkii ayaa guulaystay oo saddexdii carruurta ah oo neeftuurayaan, ka soo laabteen ugu dambayntii, tan saddex sano jirtay waxay fuushanayd dusha aabbaheed. Markaas ayey ogaadeen in Sabriina ay joogin. Gurigeedii yaraa oo carrada ah mar horay ayaa hiraarkii dumayeen, iyadana biyaha ayaa sii qaaday.

Kan afar sano jiray aad ayuu u qalbijabay. Aabbihiis biyihii uu galay, si uu u raadiyo Sabriina, laakiin baddu aad ayey u kacsanayd, sidaa darteed, biyaha hoostooda ma arki karin, si kastaba ha ahaatee, Sabriina waxaa laga yaabaa inay biyaha qaadeen. Wax laga qaban karo ma jiro inay guriga aadaan mooyee. Kan afar sano jiray wuxuu isku celiyey oohin, waayo wuxuu ahaa wiil yar oo geesi ah. Waana ku adkayd inuu cashadiisa cuno, markii uu seexan rabay, carruurta waxay

iskugu yimaadeen ducada habeenkii, wuxuu cod hoos ah ku yiri inay u duceeyaan Sabriina. Sidaa darteed, Sabriina si kalgacal ah ayaa Ilaahay loogu duceeyey, waxay ku ducaaysteen inay soo laabato, intaas kadibna wuu raaxaystay oo seexday.

Laba maalin ayaa ka soo wareegatay, kii afar sano jiray wuu aammusnaa oo waqtigiis ku qaatay xagga xeebta, isagoo si naxariis leh uga raadinaayo meel kasta. Waalidkiis aad ayey ula yaabeen, ilaa goormaa ayuu murugadiisa ay ahaan doontaa, saddex habeenna way isla ducaysanaayeen sida reer ahaan, si ay Sabriina u soo laabato. Subixii saddexaadna habkii caadiga ayaa bilaawday oo la aadayo xeebta - Aabbo, Hooyo, gaariga carruurta, cunugga, dambiishii, majarafaddii, baaldigii iyo saddex carruur yaryar oo ordaayo, oona boodboodaya, si xamaasad leh hortooda baxeen.

Si aan la filanaynin ayey u soo laabteen, iyagoo ordaya, waayo ey wayn oo ul biyo badda ka daadanaayo ayuu afka ku wataa oo iyaga toos u imaanayey. Midda saddex jir ah waxay qabsatay surwaalka aabbaheed oo labada kalena waxay mareen gadaashiis. Eyga wuu yimaaday, isagoo boodboodaayo, ilaa uu ka soo dhowaaday, kan lix sano jiro ayuu ogaaday inuu wax afka ku wato! Waxaas qaab ma lahayn, dambas ayeyna u ekaayeen oona lagu tuntay, laakiin hooyadii ayaa si lama filaan ah hore ugu dhaqaaqday oo qabsatay, eyguna intuu soo daayey ayuu tagay. Waqti aammusnaan ah ayey noqotay, kadibna oohinta farxadda leh iyo qosolka ayey noqotay, goortii hooyo ay Sabriina kan afar sano jiro ay gacanta u gelisay, iyadoo fiirsanayso indhihiisa oo bunniga ah oo murugo ka buuxday oo ifeen sida xiddigyaal. Haddii aad leedahay, ‘Sheekadan run ma ahaan karto’, waan kuu xaqiijin karaa inay runtahay. Waayo aniga ayaa ahaa tan saddex sano jirtay.

DULUCDA:

Markaasay Rabbiga u qayshadeen iyagoo dhibban, Oo isna wuu ka samatabbixiyey dhibaatooyinkoodii.

Sabuurkii 107:6

Duco la aqbalay – ‘Haa’

Matayos 15:21-28

DUCADA:

Waad ku mahadsantahay, Rabbiyow, duco walba aad dhahday ‘Haa.’ Waad ku mahadsantahay waxyaalaha oo dhan aan waydiistay oo aad i siisay. Waad ku mahadsantahay waqti kasta aan kugu ooyey, anigoo dhibaato ku jiro ama xanuunsan oo aad i caawisay, oona i caafisay. Waad ku mahadsantahay daryeelkaad waxyaalaha yaryar igu tustay oo waad jeceshahay inaad i siiso waxaan waydiisto.

KA FIKIR:

Bal ka fikir saddex wax oo aad mar dhow Ilaahay waydiisatay, markii oo Ilaahay yiri ‘Haa.’ Ducadaada miyaa lagaga jawaabay sida aad rabtay? Miyaad Ilaahay u mahadcelisay?

31. FUNAANADDA QAANSA-ROOBAADKA

Waxay istaagtay albaabka hortiisa, iyadoo kabo la’aan ah oo lugta kale iskaga istaagayso, iyadoo fiirinayso wax jidka maraaya. Waxay xambaartay walaasheeda yar oo wasakhna leh, oo ku jiftay garabkeeda iyo cunug da’ tan ka wayn ayaa gacanta qabatay. Xagga waddadana roobka buurta ayey ka soo qoysay dharkoodii jeexan, sidaa darteed, waxay yimaadeen dugsiga. Muuna, Sumaya iyo Faadumo waxay ku noolaayeen aqal oo ri’yo ka buuxo xagga tuulada buuraha lahayd dhinaca Waqooyiga Afrika. Aabbahood wuu dhintay, maalin walbana hooyadood waxay ariga geysay halkay ku soo daaqi lahaayeen. Subixii markii la gaaro, suuqa ayey caanaha ka soo gaddaa, carruurteed ayey siisaa kibis, kadibna waxay u dirtaa jidadka, si ay u soo tuugsadaan. Aqalkii waa la xiraa ilaa ay galabtii la soo laabato xoolaheeda, haddii roobku aad u da’o mooyaane. Markaasna dhaqso ayeyna soo laabataa.

Ma wanaagsana in la joogjoogo xagga waddada maalinta oo dhan, sidaa darteed, markii ay Muuna iyo Sumaya maqleen in dugsi loo furay carruurta sidooda oo kale, ayey bilaabeen inay su’aalo waydiiyaan. Wax ay maqleen way u egtahay wax qof soo jiidanaaya. Waa dugsi la yaab leh. Waxaad galaysaa, markaad dhammayso tuugsiga, laakiin haddii aad halkaas imaato afar saac, waxaad helaysaa bun, kibis iyo

saytuun. Waxaadna baranaysaa sida wax loo tolo oo loona akhriyo, kadibna qofta diinta u adeegta oo ah kalkaalisad waxay qiso uga sheegtaa Kitaabkeeda, haddii aad leedahay nabarro, indha xanuun ama qufac, (walaalaha way haystaan wax walba oo dhan) waxay ku siinaysaa daawo. Waxay u ekayd wax fiican.

Sidaa darteed, Muuna, Sumaya iyo Faadumo mar walba ayey dugsiga yimaadaan oo ay waqtiga quraacda yimaadaan. Muuna aad ayey ugu fududayd xarfaha, oo Faadumo haddii ay dusheeda ku ooyso, way la socsocotaa, iyadoo ruruxaysa oona ku heesayso xarfaheeda. Laakiin waxay Muuna uga jeclayd ayaa ahaa tolitaanka. Waxay Sumaya u samaynaysay funaanad midab badan leh, iyadoo ka sameynaysa marada duf ah oo dhalaalaysa oo ka timid Ingiriiska, haddii ay si dhaqso ah u sameeysana, waxaa laga yaabaa inay Faadumo u sameeyso iyo iyadana sameeysato inta xilliga qabowga kale uusan imaanin. Mar walbana walaalaheed yar ayey hor marisaa.

Laakiin sida kale waxay ahayd qof danayste ah. Haddii uu qof ka qaato marada dufta leh ay rabto, way xoog ku garaacaysaa cagteeda oo ay indhahana ku taagtaa. Waxay isku daydaa inay marada dufta leh oo yar ku qariso barkimaha hoostood, laakiin waa la helaa mar walba. Funaanaddu waxay noqotay guduud, buluug, caddaan iyo huruud oo diillin leh. Markay ka fikirtay funaanadda, wuxuu keenay iftiin aqalka mugdiga ah iyo jawaanka ay sida busto ahaan u huwadaan.

Kadibna, maalin jimco ah kalkaalisada waxay u sheegtay wax laga naxo: marada dufta leh way dhammaatay. Waxay soo laaban karaan Isniinta, si ay u dhegaystaan qisada Kitaabka Quduuska ah, laakiin tolitaanku waa la sugi

doonaa. Markaasaa Muuna waydiisay si xanaaq leh, ‘Ilaa goormaa?’ Laakiin kalkaalisadii ma garanaynin. Malahayn maradaas dufta leh oo kale tuulada iyo magaalada, haddi laga soo gadana waxay noqonaysaa qaali. Waxay ka imaataa marmar saaxiibo oo deggan waddan kale, kalkaalisada walaalkeed hal mar bishii ayuu gaariga ku keenaa baakad kasta. Waxayna rajaynaysaa walaalkeed inuu imaado laba toddobaad ku dhow, laakiin hadduu keeni doono ama hadduu keeni doonin marada dufta leh, may garanaynin. Muuna waa inay sugtaa.

Laakiin Muuna ma lahayn ujeeddo ay ku sugto. Way fadhiday, iyadoo tixgelinayso. Si kadis ah, ayey intay kor fiirisay, ayey ku tiri si tartiib ah, ‘Laakiin adigu waxaad na dhahday, Ciise Masiix wuu ka jawaabaa ducada, haddaan ducaysano. Sidaa darteed, aan waydiisano inuu marada dufta leh noo keeno Isniinta.’ Kalkaalisadii way ka laballabeysay, sidee buu marada dufta leh ay ku imaan kartaa Isniinta? Baakadda la soo diro weligood tuulo ma imaanin. Laakiin kalkaalisada ma lahayn fursad ay Muuna wax ku dhahdo, waayo Muuna waxay diyaarinaysaa carruurtii iyo boorsadii eberka ahayd oo marada dufta leh la dhex dhigi jiray. Waxayna boorsada ku wareegsadeen oo ay ku jilbaha dhigteen, iyagoo oo dhan gacmahooda ay fidsadeen, si ay u helaan, sida ay u barteen, markay wax tuugsanaayeen. Si deggan, ayaa Muuna ku tiri Rabbiga inay u baahanyihiin marada dufta leh, si ay u dhammaystiraan funaanaddooda inuuna soo diro Isniinta subaxeeda. Kadibna dugsigu sida caadiga ah ayuu u socday, waxaan ka ahayn kalkaalisada dhibaataysan. Sidee baa marada dufta leh ay u imaan kartaa Isniinta subaxeeda?

Intay carruurta ay galbanin ka hor, buuq ayaa ka jiray waddada, albaabka ayaa si xoog leh la soo garaacay iyo qaylidda oo dhahaysto ‘Telefoonka! Telefoonka!’, waayo geeska suuqa waxaa ku yaalay guri oo nin beecmushtar oo taajir ah leh, wuxuuna lahaa telefoon. Hadduu jiro arrin degdeg ah, ayuuna siiyaa kalkaalisada, si ay u isticmaasho, haddaba qof ayaa kalkaalisada raadinaayey. Waxyaalahan markay dhacaan, waxay noqotaa waqtigii ugu xiiso badnayd, kuwa waddada joogay oo dhan ayaa ku soo daba ordaya oo ay albaabka ku sugnaa, si ay u maqlaan warka. Beecmushtarka reerkiisa guriga jooga, way ku soo ururaan, markay hadlayso, waxayna rabaan in eray walba loo gudbiyo. Maalintaas kalkaalisada walaalkeed ayaa soo wacay. Wuxuuna ku yiri, ‘Laba toddobaad kadib ma imaan karno, waan imaanaynaa berri. Ma wax ayaad u baahantahay? Waxaan aaday dekada, oo aan kuu soo qaaday baakad wayn, waxaa ka buuxaa marada duf badan leh...’

Markayna u soo laabatay carruurta oo ay u sheegtay warka, midna ma ka yaabin warka. Muuna waxay tiri, ‘Miyaanan kuu sheegin? Haddaba, waxaan u baahantahay maro duf leh oo guduud ah, fadlan, miyaan dooran karaa?’

DULUCDA:

Intaanay dhawaaqin ayaan u jawaabi doonaa, oo intay weli hadlayaan ayaan maqli doonaa.

Ishacyaah 65:24

DUCADA:

Rabbiyow, waad i jeceshahay
oo aadna i dhegaysataa, markaan ducaysto
Haddaba, waxaan kuu sheegayaa waxyaalaha aan u
baahantahay
Oona kuu aamminayaa, Rabbiyow, maanta
Sidaa hooyo ay jeceshahay
Inay carruurteeda siiso cunto
Sidaa oo kale ayaad ku faraxsantahay inaad siiso
Wax walboo sax ah oona wanaagsan.

KA FIKIR:

Bal isku day inaad Ilaahay kala hadashid qalbigaaga, una sheeg waxyaalaha yaryar aad u baahantahay waqti walbo, fiiri wuxuu kuu samayn doono.

Ducada la aqbalay – ‘Haa’

1 Boqorradii 17:8-24

32. DAMBIISHA EBERKA AH

Waxaan isaga kula kulannay meel cajiib oo qurxoon, halkaas oo sanado badan ka ahaa wardiyaha Beerta Xabaasha oo ku taalo Yeruusaalem. Waxaa jiraa beer oo hal xabaal duug leh oo dhagaxa lagu gooyey ku yaalay, iyo hal meel dhagax leh oo ku jiro halkii qof la dhigi jiray. Bannaankeeda waxaa ku yaalaa dalool oo ka sameysan dhagax wayn, kaasoo mar irridda laga garaangariyey, inkastoo ay hadda meesha dhagax yaalin. Xabaashu way furantahay, waana eber. Qaabkuu u yaalo iyo booskuu ku yaalo dartiis ayaa dad badan ay umaleeyeen inuu yahay xabaashii Yuusuf kii reer Arimataya uu u diyaariyey duugtii Ciise Masiix. Dalxiiseyaal badan ayaa yimaadaan, si ay u arkaan xabaasha iyo Mudane Daahir, ilaaliyaha Carabka ah. Aad buu u jeclaa inuu meelaha soo tuso beerta deggan oo si qurux badan loo ilaaliyey, oona iyaga kala hadlaa qisada Injiilka. Wuxuu nagu casumay cunto, kadibna waxaan waydiinay sidee isaga iyo naagtiisa ay halkan uga noqdeen mas’uul, oo hadduu halkaas joogay waqti dheer. Sidaa darteed, wuxuu noo sheegay sheekadiisa.

Ilaa waagii oo dhulka la kala qaybsanaayey, markii Yeruusaalem loo kala qaybiyey Carabta iyo Yuhuudda, Mudane Daahir wuxuu ahaa maammulaha bangiga. Dagaalkii markuu dhacay, ayaa isaga iyo naagtiisa iyo sagaalkiisa carruur ay xaafaddooda ka maqnayeen, oo ayna ku soo laaban waayeen dagaalka dartiis. Bangigiisa, gurigiisa iyo lacagtiisa

oo dhan waxay ku yaaleen meel oo la siiyey Yuhuudda, reerkiisa way xayirmeen oo ay si dhaqso ah ay u noqdeen masaakiin.

Wuxuu yiri, ‘Maalin walba waxaan tagaa qayb ka mida bangiga ku yaalo Yeruusaalem, laakiin ma lahayn lacag soo gasho, mana i caawin karin. Markaan gurigeenna joognay si fiican ayaan u noolayn, carruurtaayda weligood wax ma waynin, laakiin Yeruusaalem lagacteenna dhaqso ayey u dhammanaysay.’ Naagtayda iyo aniga aad ayaan u welwelnay. Kadibna, caawimaad ayaa loo diyaariyey qaxootiyaasha, waqtigaasna wax walba wuu wareersanaa. Mana garanaynin meel aan caawimaad ka helno. Laakiin maalin walba waxaan ku noqonaa Sayidka Ciise Masiix. Waxaana akhriinaa ballanqaadkiisa, carruurteenna ayaan isku keenaa oo aan u akhriinaa ballanqaadkaas. Waxaan ka akhriinaa Kitaabka Sabuurkii, ‘Aaranka libaaxa wax baa ka dhimman, wayna gaajoodaan, Laakiinse kuwa Rabbiga doondoona wax wanaagsan uma baahnaan doonaan.’ Waxaan ka akhriinaa Kitaabka Ishacyaah, ‘Oo dadkayguna waxay joogi doonaan rug nabaadiino, iyo hoyaal ammaan ah, iyo meelo xasilloon oo lagu nasto. Waxaa barakaysan kuwiinna biyo dhinacyadooda oo dhan wax ku abuura oo dibiga iyo dameerka u sii daaya inay daaqaan...’

Inta badan anagoo dhan waxaan aamminay erayada Ciise Masiix, ‘Laakiin horta doondoona boqortooyadii Ilaah iyo xaqnimadiisa, oo waxaas oo dhan waa layidinku dari doonaa.’ Oo waana hubaa inuu Ilaahay uu ballankiisa xajin doono, wax la cunana ma waayi doonno. Laakiin waxaan rabay in carruurtaayda tan ay hubsadaan sidaas oo kale. Maalin ayaa la gaaray, markaan cuntadeennii ugu dambaysay aan quraac ku cunnay, haddana waan la hadlay oo aan ku iri, ‘Carruurtaaydow,

Ilaahay wuxuu naga ballanqaaday inuu na siiyo waxaan u baahannahay, laakiin ma haysano lacag ama casho. Sidaa darteed, waa inaan arrintan u sheegno Sayidka Ciise Masiix oo qof kalena uma sheegayno. Dambiishan eberka ah aan la baxayaa, idinkuna guriga jooga. Kadibna waan arki doonnaa in ballamooyinka Ilaahay ay run ama been yihiin.’

Sidaa darteed, anagoo dhan ayaan dambiishii hareeraheeda ku ducaysanay oo carruurtana way fahmeen in arrintan ay muhiim tahay, wayna fiirsadeen anigoo waddada socdo oo dambiisha eberka ah gacanta ku wado. Ma ogayn intee aan aadi lahaa, laakiin waxaan go’aansaday inaan mid ka mida bangigeenna aan maro, lacalla hadday lacag imaatay. Laakiin jawaabtu waxay lamid ahayd sidii hore. Waan jeestay, si aan u tago, markaan arkay saaxiibkaygii hore oo ka yimaaday magaaladayda oo safka ku jiro. Laakiin degmadaas mar hore ayuu ka tagay oo lacagtiisana bangiga Yerusaaalem ayuu ku shubay. Saaxiibkayga wuxuu yiri, ‘Daahirow, maxaad halkan ka samaynaysaa?’

Waxaan ku jawaabay, ‘Guri yar ayaan ku leennahay Yerusaaalem, waqti fasax ayaana ku jirnay. Mana awoodin inaan laabano.’

Saaxiibkayga wuxuu yiri, ‘Waxaa laga yaabaa inaad leedahay dhibaatooyinka lacagta, bal ii sheeg sidee baad ku xalinaysaa?’

Waxaan rabay inaan u sheego dhibkan marayno, laakiin waan xasuustay eraydayda aan carruurtayda u sheegay. Waxaan ku dhahay, ‘Waxaan u sheegaynaa Rabbiga oo qofna uma sheegayno.’ Sidaas darteed, ayaan isaga ku iri waan fiicanahay, kadibna dambiishii eberka ah ayaan kala tagay bangiga. Mana ogayn meel aan tagi lahaa kadib, sidaa darteed, waan tagay oo aan ku fariistay kursi yaalay meel

hoostiisa ah oo beerta nasashada ah oo ka soo hor jeeda bangiga. Waxaanna is iri, ‘Runta ayaan ku hadlay, kuwa mar walba Ilaahay aamina, mar walba way ficanyihiin. Wax walba way hagaagayaan.’ Waan fadhiyey, anigoo dhulka fiirinaayo oo eray ama calaamad sugaayo. Ma maqlin, markuu saaxiibkay uu ii yimaaday, isagoo cawska soo dhex socday. Markaasaa saaxiibkay yiri, ‘Ma maqli rabi, waxaad igu tiri, Daahirow, xaaladdaadu ma ficno, adigoo sagaal carruur leh oo cunto siinayso.’ Markaasuu gacan lacag buuxdo ku dhex daadiyey dembiishii eberka ahayd oo uu kadibna baxay. Laakiin intaan baxay, ayaan suuqa aaday oo dambiishii soo buuxiyey, ilaa ay culays ka noqotay aan qaadi waayey. Waxaan soo gaday wax aan qado fiican ugu baahnayn oo lacagta soo hartayna, jeebka ayaan gashtay. Gurigaana aaday. Waxaa la joogay waqtiga qadada oo carruurtana waxay igu sugaayeen ganjeelka hortii, iyagoo fiirinaya dambiishii buuxday. Kadibna intaan isla fariisanay, ayaan wada cuntaynay. Toddobaadka xun una dhaafay kadib, haddana way wanaagsanayd inaan cunay in nagu filan, laakiin waxaa ka sii wanaagsanayd inaan ogaaday in Rabbigu uu ballantiisa xajinaayo.’

Waxyaalahan kadibna Mudane Daahir wuxuu helay shaqo, carruurtiisana way koreen, isaga iyo naagtiisana waxay ku guureen guri yar, kaasoo ku yaalo Beerta Sarakacid. Wuxuuna noqday ilaalayaha xabaasha iyo beerta ilaa dagaalkii lix malmood ah, markaasuu albaabka xabaasha furan lagu toogtay, wuuna dhintay. Waxaa laga yaabaa isaga oo aad u jeclaaday meesha, wuu ku farxi lahaa inuu ku dhinto isla meeshaas oo Sayidkiisa kaga adkaaday dhimashada oo dhagaxiina dib loo garaangiriyey. Weliba Ciiddii Masiixiyiinta subaxeedana dad badan ayaa ku soo

aruuray beertii inay xasuustaan sarakicidda Ciise Masiix oona heesaan, ‘Haddana, wuu jiifaa boqorkeenna ammaanta leh! Haleluya! Dhimashoy, haddaba aaway micidaadii? Haleluyah!’

DULUCDA:

Ilaahaygu wuu idin siin doonaa wixii aad u baahan tihiin oo dhan, sida ay tahay hodantinimadiisa xagga ammaanta Ciise Masiix ku jirta.

Filiboy 4:19

DUCADA:

Eebow, i caawi maalin walba, si aan u aammino ballamooyinkaaga oo aan u xaqiijiyo inay runyihiin. Maanta waxaan u ducaynayaa kuwa masaakiinta ah oona gaajaysan oo dunida joogo. Maanta kibis ku filan sii. Iyaga bar, si ay aaminaad kuugu soo laabtaan. I tus waxaan samayn lahaa, si aan u caawiyo.

KA FIKIR:

Miyaad si daacad ah u malaysaa inaad faraxsanaato ama ka fiicanaato, haddii uu Ilaahay ducadaada oo dhan ‘Haa’ ka dhaho?

Markii oo jawaabta ducada la soo daahiyo

Yooxanaa 11

33. BASKA AANAN ISTAAGAYNIN

‘Bal soo kac, Faadumo, waa inaan bilaabnaa, waayo qorraxdu way soo baxday.’ Faadumo intay hamaansatay, ayey soo fariisatay. Iyada iyo Maryan waxay jiiifteen tuulada, halkaas oo ay Talaado walba galabteeda ay daawo bixiyaan oo ay Injiilkana u sheegaan kuwa raba inay maqlaan. Salma oo ah naag waqti ugu horraysay ay Maryan ku aragtay isbitaalkeeda ayaa ka bariday inay u yimaadaan, iyaga inay gurigeeda yar ku casumto. Toddobaad walba qorraxdu markay dhacayso, aqalkii cawska waxaa ka buuxsamaa dad badan oo indhahooda madow yahay, iyagoo beerta ka soo laabanaya oo una socda guriyahooda. Qaar waxay rabaan daawo, qaarna way iska joogaan, iyagoo ku wareegsada dhuxusha oo qisooyinka Kitaabka Quduuska ah waydiinaya. Mararka qaar waxay wadhadlaan ilaa habeenbarkii, markaasay joodariga xagga derbiga yaalo ku seexdaan. Maryan iyo Faadumo waa inay subaxnimo kacaan oo ay u laabtaan si dhaqso ah, waayo carruurta waxay casharkooda u yimaadaan saddex saac, oo gurigooduna waa siddeed mayl ayuu u jiraa. Mararka qaarkood masaafadaas ayey socdaan, marar kalena waxay helaan baska suuqa, kaasoo saddex mayl geeyo, oo waddada isgooyiskana geeynayo.

Subaxaas xagaaga ah si caadi ah ayey u bilaabeen. Gurashadu waa la gooyey oo beertuna waxay u ekayd dahab, dabayshii galabtuna waxay kicisay meeshii masafka ah. Xagga

webigana galleydu way baxday oo ay cagaar noqotay, geedka berdena mirihiisa way koreen oo gurashadiisuna waa diyaar. Cirku wuxuu lahaa iftiin, isagoo oo la marayo ceeryaamada, aad ayeyna kulayl u noqon doontaa. Dhaqso inay guriga u tagaan ayaa u roon. Markay waddada wayn soo gaareen, nafis ayey u dareemeen, markay arkeen baska, kaasoo dadka tuulada ay ka buuxaan. Wayna awoodeen inay isku ciriiriyaan. Waqti yar kadibna Faadumo way is ruxday, waayo way ku soo dhowaadeen jidka isgooyaska. Waxayna bilaabeen inay baska hortiiisa yimaadaan. Faadumo waxay dhahday ‘Fadlan, noo jooji, waxaan rabnaa inaan halkan ku degno.’ Laakiin dareewalku wuxuu ahaa mid edeb lahayn, nin aan fiicnayn. Wuxuuna ku jawaabay, ‘Maya, halkan kuma joogsanaayo. Meeshan meel fiican oo la joogsado maahan. Waxaan wadayaa ilaa buundada xigto. Halkaasna waxaa ku yaalaa jid isgooyis kale, kaas ayaad qaadan kartaan ilaa tuuladiina.’

Laakiin Maryan waxay tiri, ‘Taas waxay nagu qaadanaysaa maylo ilaa aan ka gaarno togga. Waqti dheer ayey nagu qaadanaysaa inaan u soconno xagga buuraha dhaadheer. Fadlan, jooji!’ Qalbigeeduna waxay ku ducaysanaysay Ilaahay, iyadoo dhahaysa, ‘Rabbiyow, waxaan rabnaa inaan xaafadda tagno, aad ayeyno kulayl u noqonaysaa, fadlan jooji isaga.’ Laakiin dareewalku lama qancin karin, sidaa darteed, malahan wax la sameeyo oo way tageen oo ay fariisteen. Maryan aad ayey u xanaaqday, laakiin Faadumo way is dejisay si yaab leh. Waxayna tiri, ‘Saaka waxaan barinay in wax walba ay hagaagayaan, guriga waan tagi doonaa, bal aan samir lahaano.’ Laakiin Maryan maysan dareemin samir, markii uu baska ugu dambayntii uu dhigay buurta dheerayd hoosteeda, taasoo toddobo mayl ka fog gurigooda.

Way istaageen, iyagoo xagga togga hoos ay u fiirinayaan, lacalla inuu gaari kale imaanayo, laakiin maysan arkin bas. Kulaylkuna buuraha korkooda ayuu ka soo dhalaalayaa, webiguna wuu gursanayaa, wuxuuna dhexmaraa duurka. Mana maqlaynin naagta, iyaga u soo socoto. Waxay soo martay buurta iyaga ka shasheeyay, oo ay u imaatay halkii ay taagnaayeen, gacanteedana waxay ku wadatay xirmooyin oo lagu daboolay maro. Intay Maryan fiirisay, ayey xagga Faadumo u gudubtay.

Waxayna tiri, ‘Taasi miyey tahay kalkaalisadii Ingiriiska?’

Faadumo waxay ku jawaabtay, ‘Haa, walaashay.’

Naagtii waxay tiri, ‘Ii gey.’

Waxay ahayd naag xoog badan oo indha madow leh, tuulana ka imaatay, iyadoo gashan koofiyad oo ka difaacayo qorraxda oo caws laga sameeyey, iyo maro xariijimo leh dhexda ku xiran. Lugahana waxay ku xiratay kabo buud ah, taaso ka ilaalinayso qodaxyo iyo masku inuusan qaniinin, qoorteedana waxay ku xiratay xirsi, kaasoo ka celinaya ruuxyada xun. Intay Maryan ku soo dhowaatay, ayey xirmooyinkii ay gacanta ku wadatay marada ka qaaday. Waxayna ahayd cunug yar, waxay marada wejiga uga dabooshay, si u takhsiga uusan ka galin indhaheeda xanuunsan. Indhahu way barareen oo ay u ekaadeen laba canab isku xirmeen oo kale. Sida indhahu u yaalaan weli lama garanin.

Naagtii waxay tiri, ‘Adiga ayaan kuu keenay.’

Maryanna waxay waydiisay, ‘Ilaa goormay saan u ahayd?’

‘Afar berri. Way ooysaa, iyadoo jiipto oo wejigeedna u jeesan xagga derbiga, mana nuugayso naaska.’

‘Laakiin sidee baad halkan ku timaadday? Waayo maahan maalinta suuqa. Mana jiro qof tuuladaada ka imaaday oo jidka marayo.’

‘Xalay waxaan ogaaday in cunugtaydu ay xaaladdeedu ka sii dareeysay. Qandho ayaa haysay, anigoo murugaysan ayaan seexday, anigoo jiifo ayaan riyooday. Waxaa ii yimaaday nin oo qabo dhar cad, wuxuuna i yiri, “Cunugtan u geey kalkaalisada Ingiriiska ah.”

Riyadayda ayaan isku iri, “Ma garanayo halkay ku nooshahay, iyada xitaa ma garanayo.”

Ninkii dharka cad qabay, wuxuu igu jawaabay, “Aroortii soo kac, jidka wayn raac oo xagga buundada mar, halkaas ayaad ku arki doontaa, iyadoo ku sugayso. Wayna kuu sheegi doontaa, waxaad samayn doonta.” Sidaa darteed, waana imaaday oo halkan ayaad joogtaa.’

Sidaa darteed, waxay bilaabeen inay tagaan oo ay maraan waddada buurta dheer, taasoo ilaa guriga geynayso. Bas kale ayaa waqti yar kadib yimaaday oo iyaga sii qaaday. Naagtii maalinta oo dhan ayey halkaas joogtay, galabtii markii la gaaray, markii la duray daawadii antibiyootigga ahayd oo biyo badanna la siiyey, cunugtii way soo roonaatay. Maryan daawo ayey hooyadii u dirtay oo waxayna ka ballanqaaday inay maalinta Sabti ah soo booqato. Cunugtii way caafimaatay. Booqashadii Sabtidaasna waxay noqotay fursaddii ugu horreeysay fursadaha kale ka mid ah, markay Faadumo iyo Maryan reerkaas iyo dadka tuulada ay la hadlaan waxyaalaha ku saabsan jacaylka Sayidka Ciise Masiix. Hooyadaas iyo deriskeeda waxay tuseen xiiso khaas ah. Maryan iyo Faadumo, iyagoo dhulka fadhiya, ayaa uga sheekaynayey wax ku saabsan jacaylka Badbaadiyaha.

Waxay marar badan Ilaahay uga mahadceliyeen waqtigaas markuu yiri, ‘Sug’, markay Maryan ka barisay inuu baska istaajiyo.

MOWQIFKA QORAAGA:

Weligaa ha ka shakinin inuu Ilaahay uu maqlo ducadaada. Haddii uu isla markaas uusan kaaga jawaabin, aammin inuu leeyahay sababyo kale ee wanaagsan. Bal akhriso qisada Laasaros oo ku jirta kitaabka Yooxanaa 11. Waxay rabeen inuu Ciise Masiix imaado isla markaas, laakiin wuxuu sugay afar maalmood, si uu u sameeyo mucjiso ka wayn tan ninka xanuunsan caafiyo. Dad badan ayaa aamminay, markii ay arkeen Laasaros oo dhimashada ka soo sarakacay. Maarta iyo Maryan waxyaala badan ku saabsan Ciise Masiix ay barten, intii ay Ciise Masiix sugayeen!

DULUCDA:

Ciise Masiix wuxuu ku jawaabay, ‘Waxaan samaynaya, garan maysid imminka, laakiinse dabadeed waad garan doontaa.’

Yooxanaa 13:7

DUCADA:

Rabbiyow, si cad ah ayaan kuu keenayaa waxyaalaha aan horay ugu ducaystay oo aan jawaabtooda helin. Fadlan, aaminaadayda xooji, si aan u garto inaad garanaysid oo i jeceshahay oo i daryeeshid. I bar dulqaad inaan sugo waqtigaaga, waayo si fiican ayaad u garanaysaa waxa ii roon. Waad ku mahadsantahay, waayo hal maalin waan fahmi

doonaa, sababta aad ‘Sug’ ama ‘Maya’ igu tiri. Eebbow, isla waqtigana igu caawi inaan ku aammino.

KA FIKIR:

Miyaad xasuusan kartaa waqtiga ay jawaabta ducadaada ay soo daahday oo mar kale ay wax ka fiican kuu keentay? Tani miyey saamaynaysaa aamminka aad Ilaahay ku qabto oo ku saabsan waxyaalaha aad ku ducaysanaysay waqti dheer?

Ducada – Ilaahay markuu dhaho ‘Maya’

Falimaha Rasuullada 7

34. HOGGAAMIYIHII LUMAY

Qof walba wuu garanayey Istefanos. Wuxuu ahaa mid ka mid ah Masiixiyiinta, waxaana laga dhigay qofka ugu wayn adeegayaasha bulshada, iyadoo siinaya cunto carmalooyinka. Si fiican loo ma habeeynin markii hore, dhib ayey kala kulmeen naagihii duqoobay. Qaxootiyaasha Gariigta waxay Masixiinta ku dacweeyeen, iyadoo keliya is fiiriyaan oo ay u eexdaan kuwa Cibraaniga ah. Sidaa darteed, Istefanos waxaa laga dhigay qofka u istaago kooxda cunto qaybisa. Ilaa waqtigaasna wax cabasho ah malahayn. Carmalooyinkii way faraxsanaayeen oo ay Istefanos oo dhallinyaro ahaa u qaateen sida aabbahood oo kale.

Laakiin cunto-qaybiska waxay ahayd mid ka mid ah shaqooyinkiisa kale. Istefanos aad ayuuna u jeclaa Ciisihii reer Naasared, kaasoo mar dhow lagu qodbay bannaanka magaalada, Masiixii ay Yuhuuddu garan wayeen. Laakiin maadaama u ahaa Ilaahay, xitaa dhagaxa oo Yuusuf kii reer Arimataya albaabka qabriga uu dhigay wuu xajin waayey. Ciise Masiixna wuu soo sarakacay oo u laabtay Aabbahiisa. Intuu tegin ka hor, xertiisuna wuxuu u faray farriintan, ‘Taga dunidoo dhan oo ugu wacdiya Injiilka binu-aadanka oo dhan.’ Istefanosna aad ayuu u qalbijabay, waayo waqti dheer ayey ku qaatay inuu garto Ciise Masiix qofkuu yahay, mana u tageerin, markuu Ciise Masiix dunida joogay. Haddana, wuxuu qaatay fursad walba inuu ku wacdiyo

warka wanaagsan. Qofna muusan joojin karin. Markii ay naagta carmallada ugu dambayso tagtay, oo meeshaas waa la nadifiyey, Istefanosna wuu baxay.

Maalmahaas waxay aheeyeen maalmaha ugu fiicnayd, waayo waa sida Ciise Masiix wuxuu ku dhex noolaa xertiisa. Jacaylkiisa iyo xooggiisa ayaa ka dhex dhalaalaysay Istefanos. Markuu hadlo, waa sida inuu Ciise Masiix isaga ka dhex hadlaayo oo kale. Laakiin hoggaamiyayaashii kibirka leh oo naci jireen Ciise Masiix, ayaa Ciise Masiix mar kale Istefanos ku neceen oo isku dayeen inay Istefanos aammusiyaan, iyagoo u hanjabaya oo lana doodaya. Markay arrintan u ahaan waysay, ayey lacag siiyeen markhaatifuryaal oo beenayaal ahaa inay been ka sheegaan. Caddayntooda beenta ah ayey Istefanos ku qabteen oo ay hayeen. Boqollaal ayaa yimaadeen xukunkiisa oo dhegaysteen beentii laga sheegay. Cadowgiisa way fiirsanayeen, isagoo dhegaysanayo dacwadooda, waa laga yaabaa inay yaab la gariireen, waayo ammaanta Ilaahay ayaa ka dhex dhalaalaysay Istefanos. Wejigiisa wuu dhalaalayey, ‘Wuxuu u ekaa sida wejiga malaa’igta!’ hal qof oo dadka naxsan ka mid ah ayaa cod hoos ah ku yiri.

Markaasaa wadaadka sare, kaasoo Istefanos fursad uu iskugu difaaco siinaya, waydiiyey, ‘Dacwadan miyey run tahay?’ Haddii uu qorshe leeyahay, oo taxaddar leh waxaa laga yaabaa inuu baxsado. Waa fursaddiisa ugu dambaysay. Laakiin inkastoo uu Istefanos agagaarkiisa fiiriyey dadkii badnaa oo xanaaqsan, wejiyada naxsan lahaa, wuxuu is yiri, ‘Sidoo kale waa fursaddayda ugu dambaysay oo aan uga sheego Rabbigayga Ciise Masiix oo nool. Waqtigan maahan waqti taxaddar ah.’ Sidaa darteed, fursaddaas ayuu qaatay, isagoo iloobay ammaankiisa, wuxuu ku hadlay si qalbi furan

hadal dheer, oo lagu qoray cutubka Falimaha Rasuullada oo ku jiro Axdiga Cusub.

Wuxuu faahfaahiyey sida reer binu Israa’iil ay u diideen inay Ilaahay dhegaystaan taariikhdooda qaranka oo dhan, iyo sida nimcada iyo naxariista Ilaahay, iyaga mar walba siinayo fursad kale. Wuxuu dadkii u sheegay sida fursadda Ilaahay wayn oo ugu dambaysay oo binu-aadanka la siiyey, la diiday oona la qodbay. Weli wayna jirtaa ballanqaad kale – oo ah Ilaahay Ruuxiisa Quduuska ah, laakiin qaybtaas ugu muhiimsanayd Istefanos weli muusan gaarin. Gunuunucuna wuu batay, si kadis ah xanaaq dartiis ayey jirraqsadeen oo farahooda laablaaban ayeyna ruxeen, hoggaamiyayaashii Yuhuudda ayaa hor u yimaadeen si dhaqso ah. Laakiin waxaa dadkii ku dhex jiray dad Masiixiyiin ah, shaki la’aan bay u ducaysanayeen, ‘Rabbiyow, badbaadi, ka ilaali, ka difaac silac ama dhimasho.’

Xaalad tan ka xun ma jiri kartaa? Hal nin keligiis oo la kulmaya dad badan ay dhiiggiisa daadin rabaan! Laakiin Istefanos uma ekaynin inuu arko iyaga. Wuu adkaystay oo kor u fiiriyey ammaanta Ilaahay. Ganjeelka waa la furay, Istefanosna wuu fiiriyey. Wuxuu yiri, ‘Bal eega, waxaan arkayaa samooyinkii oo la furay iyo Wiilkii Aadanaha oo midigta Ilaah taagan.’ Waxaa laga yaabaa in kuwii ag taagnaa ay iyaguna kor fiirinayeen, laakiin waxa keliya ay arkeen waa cirka buluugga ah. Haba ahaatee, taliyaasha way maqleen wax ku filan. Dhegahooda ayey ka xirteen qaylidaas guusha oo way qabteen isaga. Waa la jiiday, haraanti lagu dhuftay, la feeray, isagoo dhulka jiifo ayaa magaalada bannaankeedii loo jiiday. Cadowyaashiisii, iyagoo jaakadahoodii ku turayeen cagaha nin la yiraahdo Sawlos, Istefanos dhagax ayeyna ku tureen. Si aan shaki lahayn, Masiixintuna way u

ducaynayeen, iyagoo dhahaya, ‘Rabbiyow, dhimashada ka badbaadi! Waan u baahannahay! Waxaan kaa baryeeynaa inaad badbaadisid.’

Istefanos wuxuu u dhacay jilbihiisa. Dhagaxyadii waxay ugu dhacayeen si isdaba joog ah, iyagoo waawayn, laakiin ganjeelkii jannaduna weli wuu furnaa. Sayidkiisuna wuu taagnaa si uu u soo dhoweeyo, isaguna wuu ku dhowaa inuu guriga gaaro. Wuxuuna yiri, ‘Rabbiyow, ruuxdayda aqbal’, sida uu ordyahanka markuu gaaro halkii uu ku dhammeeyo cayaarta, farxad iyo guul la qaylinayo. Wuu ku dhowaa oo laguna soo dhoweeyo jacayl. Gadaashiisa waxaa jiraa xumaan iyo nacayb. Jacaylka iyo cafiska Ciise Masiix ayaa ku qulqulay iyaga. Wuxuuna yiri, ‘Rabbiyow, tani ha u qabanin,’ kadibna intuu dhulka ku dhacay, ayuuna dhintay.’

Dadkii badnaa oo xanaaqsanaya ayaa kala tageen. Waxaa laga yaabaa inay ahayd galab, intii Masiixiyiintii baqayey oo wada ooyneyey ayaa ku dhiirraadeen inay isaga soo duugaan. Waxay ku ducaynayeen inuu la badbaado, laakiin wuu dhintay. Ilaahay ma maqlin umana jawaabin - ama miyuu maqlay? Ma laga yaabaa inay ‘haa’ tahay, oo ducadoodu ay ganjeelka jannada furtay oo Istefanos si ammaan ah lagu badbaadiyey oona la ilaaliyey - lagana badbaadiyey cabsi iyo guuldarro, laga badbaadiyey nacayb? Jacaylku miyuusan guulaysan ilaa dhammaadkii, oo looga badbaadiyey dhimashada, Istefanos haddaba ma la xukumayaa nolosha weligeed ah?

Markuu ku laabtay gurigiis, ninkaas Yuhuudda ah oo kibir leh oo lagu yeero Sawlos uu ku halgamay cabsidiisa iyo damiirkiisa, wuuna la dagaalamaayey Ilaahay. Wuu fiirsanaayey, isagoo ilaalinayo dharkii kuwa Istefanos dhagax ku tuureen. Sawlos wuxuu necbanaa Ciisahan Masiix.

Laakiin caawa si xun ayuu u gariirayey... Istefanos muxuu arkay? Sidee bay ku dhacday inuu nin sidaas ku dhinto, si nabad iyo jacayl leh? Haddii uu Masiixiyiinta ay hoggaamiye waayeen dhimashada Istefanos darteeda, Ilaahay wuxuu u diyaarinaayey mid kale, waayo Sawlos mar dhow ayuu noloshiisa siin doonaa Masiixa.

MOWQIFKA QORAAGA:

Waxaa jiri kartaa sababo badan oo Ilaahay mararka qaar ‘Maya’ ku jawaabay ducadeenna. Laakiin macnaheedu ma ahan inuu maqlin ducada mise in la waydiista ay muhiim ahayn. Sida caadiga ah, Ilaahay ‘Mayadiisu’ waxay macanaynaysaa ‘Haa’ ma noogu saxsana oo noogu ma fiicanayn. Laakiin mararka qaar markuu dhaho ‘Maya’, wuxuu leeyahay jawaab, tan aad waydiisatay ka wanaagsan, sida qisadan. Dad badan ayaa nolosha Istefanos lagu caawiyey, laakiin malaayiinta ayaa dhimashadiisana lagu caawiyey. Inkastoo mar walba aan arkin sida waxyaalaha u dhacayaan, waa inaan aammino hal maalin inaan fahmi doono oo aan Ilaahay ammaano inuu ducadeenna nooga jawaabay siduu isagu jeclaaday - sida uguna fiican.

DULUCDA:

Naftaydoy, Ilaah oo qudha sug, Waayo, isagaan wax ka filanayaa. Isaga oo qudha ayaa dhagaxayga wayn iyo badbaadadaydaba ah, Isagu waa munaaraddayda.

Sabuurkii 62:5, 6

DUCADA:

Eebbow, waxaan rabaa inaan kuu sheego inaan kuugu aammini doono ducada aan weli lii jawaabin. Waan aaminsanahay inaad maqasho oo inaad i jeceshahay oona ogtahay waxa ugu fiican. Waxaana aaminsanahay inaad si deggan uga shaqaynayso jawaab ka fiican, tan aan rabay. Waxaana kuugu mahadceliyaa inaan hal maalin fahmi doono.

KA FIKIR:

Miyaad qalbijab dareentaa, markuu Ilaahay ‘Maya’ kuugu jawaabo? Miyaad dareentaa inuu Ilaahay run ahaantii ku qalbijabiyey?

35. HEESTA HABEENBARKII

Waxay ku tiirsadeen derbiga dhagaxa qallafsan oo aad u aammuseen, waayo dhaqdhaqaaqa kasta aad ayuu u xanuun badnaa, laakiin sidoo kalena cagahoodu si adag ayey silsiladdii u qabatay oo wayna ku adkayd inay dhaqdhaqaaqaan. Xabsiga wuxuu ahaa meel aad mugdi u ah, laakiin habeenkii dheeraa oo silaca wuu sugayey. Sida ay subixii noqon doonto war u ma hayaan. Waxaa laga yaabaa in lagu xukumo dil. Laakiin beddelkii ay waxa soo socdo ka fikiri lahaayeen, waxay ka fikireen wixii la soo dhaafay, waayo maskaxdoodu waxaa ka buuxay wax yaab leh, waxyaalo sharaf leh, kuwa xun oo toddobaadyadii hore ee la soo dhaafay. Si deggan ayey ka hadleen waxyaalaha dhacay, waxay ku farxeen in laysku ag xiray. Waxay xasuusteen waqtigii ay yimaadeen magaalada Filiboy, laba musaafur daalan oona garanaynin waxay sameeyaan, laakiin waxay hubeen inuu Ilaahay hoggaamiyey.

... kadibna maalintaas deggan ee Sabti ah subaxdeed markay ku dhex socdeen togga ku yaalay buuraha dhexdooda, halkaasoo webigu qulqulayo, waxay ku arkeen koox yar oo naago ah oona ducaysanaayeen, Ludiya way ka mid ahayd. Ludiya! Ma ku adkayn inay waxna sharaxaan, waayo Ludiya qalbigeeda kol hore ayaa u furmay runta ku saabsan Ciise Masiix. Waxay ahayd tan ugu horrayso oo aammintay, kadibna gurigeed wuxuu si dhaqso ah u noqday halka lagu

wacdiyo oo Injiilkana lagu maqlo. Kadibna, kuwa kale ayaa aamminay, oo koox yar oo Masiixiyiin ahna halkaas ayey isku imaan jireen, iyagoo aad u raba inay wax la baro. Wax walba si fiican ayey u ahaayeen, ilaa ay ka gaartay dhacdada oo gabar addoon ah, taas xitaa waxay Ciise Masiix u noqotay guusha cajiibka ah. Ruuxda xun waa laga saaray, waxayna noqotay mid dabacsan, oo beddelantay. Laakiin sayidkeeda way xanaaqeen. Qofna wax uma bixinin in ruuxa xun ay hadlaan mar kale. Gabadhii waxay noqotay kharash oo dhintay, maxaa yeelay faa'iidada falalowgeeda ayaa dhammatay. Dhabcan, sayidkeeda waxay kharashkii ku eedeeyeen macallimiintaas Bawlos iyo Silas oo dhibkaas keeneen.

Sidaa darteed, Bawlos iyo Silas si kadis ah ayaa la weeraray oo la geeyey maxkamadda, taasoo ku taalo xagga suuqa, waxaa lagu eedeeyey inay nabadda qasaayeen. Qofna muusan dhegaysan waxyaalihii ay isku dayeen inay dhahaan. Halkaas iyagoo jooga ayaa ul lagu garaacay, kadibna lagu tuuray xabsiga magaalada. Xaakinkii ayaa yiri, 'Si fiican u ilaali, si aysan u baxsanin. Waxyaalo la yaab leh ayaa dhacayey, waa inaad taxaddarto.' Kan xabsiga ilaaliyana wuxuu yiri, 'Haye, waan ilaalin doonaa, waxyaalo la yaab leh xabsigayga kama dhici doono, cagahoodna wax ciqaab ah ayaan gelin doonaa.'

Sidaa darteed, halkaas way joogeen, jirkooda oo xanuunaaya, waana la wareeriyey, waayo waxyaalahan oo dhan si dhaqso ah ayey u dhacday. Mana kala jeclaysanin waxa iyaga ku dhacay. Way u barten waxyaalahaas oo kale. Laakiin ka warran Ludiya iyo Masiixiyiinta cusub, iyo gabadha mar dhow ruuxda xun laga saaray?

Bawlos wuxuu yiri, 'Waan u ducayn doonaa', waayo wuu ogaa in waxyaalahaas lagu ciqaabay ama alwaax ama

saqafka dhagax leh uusan ka celinaynin ducada inay gaarayo Ilaahay. Markay ducaysanayeen, waxay iloobeen xanuunka iyo mugdiga, waxayna u ekayd Ciise Masiixna inuu u soo dhowaaday oo uu agtooda taaganyahay xabsiga dhexdiisa.

Ciise Masiixii, iyaga si ka badan u silcay, kaasoo codkiisu uu iyaga ku hoggaamiyey magaalada Filiboy, kaasoo xooggiisu uu badbaadiyey Ludiya iyo ka saaray ruuxa xun. Kaasoo cafiskiisa, jacaylkiisu oo dadka qalbiqaboojiyo ayaa iyaga la joogaa xabsiga dhexdiisa, si kadis ah, ayey waxyaalahan oo dhan ula noqotay wax cajiib ah. Kadibna, waxay bilaabeen inay heesaan. Mana ay karin inay is adkeeyaan! Iyagoo codkoodi ay aad kor u qaadeen, ayey heeseen hees farxad leh, oona Ilaahay lagu sarreysiinayo. Maxaabiista intay hurdo ka soo kaceen, ayey fariisteen inay dhegaystaan, waayo qofna weligiis muusan maqlin xabsigaas lagu dhex heesayo. Laakiin waxaa ugu muhiimsan, Ilaahay wuu dhegaysanayey sidoo kale, waayo waxaa ku jira xoog wayn, haddii Rabbiga la ammaano, Shaydaankuna ma hor istaagi karo.

Heesta markii ay xabsiga ku soo dhex noqonoqonaysay, aasaaskii ayaa bilaabay inuu ruxmo, boolal iyo qufullo ayaa cadaadis galay iyo albaabka birtana wuu ku furmay shanqar. Silsiladuhuna way jabeen, oo iyagoo qaylinaya ay dhulka ku dhaceen oo maxaabiistii naxsanna gacmahood ku raadiyeen halkii laga bixi lahaa. Si kadis ah, ayey xor u noqdeen, laakiin aad ayey mugdi u ahayd, sidaa darteed, way arki waayeen halka ay maraan. Ma lahayn qofka naxsan sida kan xabsiga ilaaliya, waayo wuu ogyahay, haddii uu hal maxbuus fakado, noloshiis ayuu ku bixin doonaa. Dilka Roomanka ah aad ayaa looga naxaa oona ah mid naxariisdarro. Wuxuuna is yiri, 'Waxaa iga roon inaan halkan ku dhinto haddaba, keligay habeenkii.' Intuu seefta iska soo bixiyey, ayuu rabay inuu ku

duro wadnahiisa, noloshiisa oo dhan oo xun iyo mugdi ahayd ayaa hor yimaaday. Halkuu u socdaa? Wax ma ka badbaadin karaa ciqaabtii ilaahyada? Kadibna waxaa mugdigii ka dhawaaqay cod oo dhahaya, ‘Ha is dilin! Qofna muusan fakanin. Anagoo dhan halkan ayaan joognaa.’

Cabsidiisi way sii kordhisatay. Wuu garanayey codkaas. Waxay ahayd codka maxbuuska oo mugdiga ku heesayey, oo mana ka baqaynin dhimashada. Laga yaabaa labadaas waxay heleen jawaabta dhimashada, waxaa kaloo laga yaabaa inay u sheegi doonaan sirtooda. Wuxuuna ku qayliyey, ‘Nalka ha la shido!’ Intii oo saraakiisha ay la soo ordaayeen faynuusyo oona ilaalinayeen xabsiga, isagu wuxuu si dhaqso ah u aaday xagga codku ka imaanayey. Bawlos iyo Silas waxay dhex istaagayeen meel dhalaalayso, oona fiirinayeen xaaladda, ayaa ninkii xabsiga ilaalinaayey u yimaaday, isagoo gariirayo oo cagahood ku dhacay, wuxuuna yiri, ‘Mudaneyaal, maxaan sameeyaa, si aan u badbaado?’ Jawaab xoog leh oona hubaal ah ayaa ka soo baxday, isagoo dhahaya, ‘Aamin Rabbiga Ciise Masiix, waadna badbaadi doontaa - sidoo kale reerkaaga.’

Sidaa darteed, waa taasa sirta! Xabsiga ayuu nabarradoodi ku dhaqay, oona kiciyey reerkiisii oo hurdaya, waayo waqtigu wuu yaraa. Kadibna, Bawlos iyo Silas oo rabeen inay nastaan, ayaa u sheegeen wax ku saabsan Ciise Masiix, kadibna iyaga baabtiiseen sida Masiixiyiinta. Kadibna, ninkii xabsiga waardiyeeynayey wuxuu iyaga geeyey gurigiisa oo wayna isla cuneen oona isla farxeen. Waxay ahayd habeen yaab leh oo cajiib ah subixiina dhaqso ayaa la gaaray. Kutiri-kuteentuna magaaladoo dhan ayey gaartay, garsoorayaashii oo naxsan ayaa raalligeliyey Bawlos iyo Silas, oona ka

bariyey inay si dhaqso ah ay magaalada kaga baxaan. Wax aad u yaab leh ayaa xabsigaas ka dhacay! Sabaabtas waa laba maxaabiis ayaa bariday Ilaah, iyagoo xanuun iyo mugdi ku jira oo ay Ilaahay u mahadceliyeen oona ammaaneen.

MOWQIFKA QORAAGA:

Saddex shay oo muhiim ah ayaa ku xasuusinayaa saddex nooc oo duco ah - kuwani waa “waan ka xumahay”, “fadlan” iyo “mahadsanid”. “Waan ka xumahay” waxay u taagantahay ducada toobadkeenka. Anagoo xasuusanayno waxyaalo Ilaahay ka xanaajiyey oona murugo u keenay, waxaan waydiisan karnaa inuu noo cafiyo. “Fadlan” waxay u taagantahay ducada laysku ducaynaayo, markaan ducaysano, waxaan Ilaahay waydiisanaa inuu nacaawiyo, oona noo keeno waxyaalaha aan u baahanahay iyo waxyaalaha kuwa kale u baahanyihiin. “Mahadsanidna” waxay u taagantahay ducada Rabbi ammaanta iyo mahadnaqa, haddaan waxyaalo walba oo Ilaahay noo sameeyey xasuusano, iyo kuwa aan jecelnahay, iyo dunida, waan u mahadnaqnaa oona ammaanaa.

DULUCDA:

Ducadii Daa’uud oo mahadnaqa - Naftaydoy, Rabbiga ammaan, Oo inta igu jirta oo dhammay, ammaana magiciisa quduuska ah. Naftaydoy, Rabbiga ammaan, Oo ha illoobin wanaagga uu kuu sameeyo oo dhan. Isagaa kaa cafiya dembiyadaada oo dhan, Oo kaa bogsiiya cudurradaada oo dhan, Oo naftaada ka badbaadiya halligaadda, Oo raxmad iyo naxariis

*kugu barakeeya, Oo kaa dhergiya waxyaalaha
wanwanaagsan, Si ay dhallinyaranimadaadu ugu
cusboonaato sida gorgorka oo kale.*

Sabuurkii 103:1-5

KA FIKIR:

Bal isku day inaan erayadaada ku qorto duco mahadnaq ah, sida aad mar walba ku ducaysatid - adigoo Ilaahay ugu mahadnaqaaya waxyaalahaas aad ku faraxdo, laga yaabaa sidoo kale waxyaalaha aad jeclayn, laakiin aad garanaysid inay kuu wanaagsanyihiin.

KU KORITAANKA RUUXIGA II –
XARIIRKA LALA YEESHTO KUWA KALA
Muhiimadda oo dadka kale loo sheego

2 Korintos 5:14-21

36. XARIGGA CAWAYS

Wuxuu yimid, isagoo waddada ku dhutinaya, ushiisana dhulka gargaraacayso, oo baaquligiisa uu ku tuugsadana kor u qaaday, indhihiisa oo si fiican wax u arkeeyninna waxay ku fiirinayeen iftiinka. Qof catatabay ayuuna ahaa, wuu wasakhaysnaa, oo socodka ayuu ku daalay, wuxuuna u ekaa qof dhunsan. Halka waddadu ay ku kala baxayso ayuu istaagay. Wuxuuna ku cabaaday oo yiri, ‘Qof miyuu igu hoggaamin karaa isbitaalka la yiraahdo Bogsashada Jannada?’ Markaasaa cunug intuu funaanaddiisii gacmagaabka ahayd qabtay oo uu u kaxeeyey ilaa ganjeelka isbitaalka. Intuu ushiisa ganjeelka ku garaacay, ayuu waydiistay in loo oggolaado. Markaasaa ninkii waardiyaha ah ku yiri, ‘Laakiin sariiraha isbitaalku way buuxaan.’

Maskiinkii Caways wuxuu yiri, ‘Beertaan dhex seexan doonaa ilaa la helo mid eber ah. Laakiin waa inaad cunto i siisaa, waayo meel fog ayaan ka imid, anigoo arkaaya iftiinka iga horreeya iyo busta lugahayga ku taalo, aad ayuuna uga baryey. Maalmo badan ayaan jidka ku soo jiray, laakiin dadka oo dhan waxay i dhaheen halkaan ayaad naxariis ka helaysaa.’

Wardiyihii intuu tagay ayuu keenay dhakhtar oo yimaaday inuu Caways fiiriyo. Waana run sariiraha way buuxsameen,

laakiin sheekada tuugsadahana run bay u ekayd. Cagahiisu nabar ayey lahaayeen iyo wayna adkayd, wuxuuna u ekaa qof aad u daalan. Dhakhtarkii wuxuu yiri, ‘Wasakhda ka dhaq oo joodari u dhig halka la maro.’ Sidaa darteed, Caways waa la jiifiyey, oo waxayna ahayd markii ugu horreeysay oo sanado badan ka soo wareegatay inuu ku jiiftay joodari, oona cunay cunto fiican saddex mar maalintii. Waxay ahayd sida janno oo kale, maalmo qaar kadibna wuxuu tagay qolkii lagu qalaayey, isagoo aaminsan oo wixii indhaha ku jirayna waa laga soo saaray. Waqti yar kadibna faashadda waa laga saaray, ookiyaalana waa la siiyey. Caways araggisuu helay!

Laakiin wax kuwan ka sii wayn baa jiraa. Caways oo cidlo dishay oo la nacay muusan garanaynin wax jacayl la yiraahdo ilaa yaraantiisii. Hal sabab waxay ahayd inuu aad u rabay inuu wax arko, iyo sababta kale waxay ahayd magacaas, ‘Isbitaalka oo Bogsashada Jannada’ ah wuu soo jiiday, taas ayaa halkaas fog ka keentay, safarkaas oo daal badan, mararka qaar eyaha ayaa qaniineen, marar badan wuu gaajaysnaa. Haddaba, galab walba markay bariiskooda cuneen kadib, way isku yimaadeen oo ay heesaan oona dhegaystaan qiso ku saabsan jacaylka Ilaahay oo Ciise Masiix lagu muujiyey, kaasoo u egtahay inay ka jawaabayso waxyaalihii oo Caways uu raadinaayey, isagoon ogayn. Wuu dareemay inuu dhammaystiranyahay xagga jirka, qalbiga iyo ruuxa, wuxuuna helay iftiinka maalin cusub. Runtii, wuu bogsaday. Waqti dheer ayuu halkaas sii joogay, wax wuu arkaa oo wuuna tagi karay. Laakiin intuu sariirtiisa nin kale oo xanuunsan siiyey, ayuu halkaas ku sii wada joogay oo ku noolaaday aqal, oona samaynaayey shaqooyin kale duwan.

Wax badan ayaa jiray oo la barto oo kuwii isaga bareen aad ayey ugu farxeen fahankiisa. Waxaa laga yaabaa waqti dambe

in lagu tababbaro inuu ahaado kan warka wacdiya. Kadibna si kadis ah, ayuu Caways sheegay inuu xaafaddiisa tagaayo. Markii su’aalo la waydiiyeyna, wax caddayn ma sheegaynin. Waxayna waydiiyeen hadduu tuuladiisa u laabanayo oo halkaas ku baro, laakiin ma umalaynin inuu wax ku filan gartay oo dadka kale u sheego. Wuxuu ogaa keliya inuu tago, laakiin hal maalin wuu soo laaban doonaa. Intuu xushmad wayn darteed madax u soo foorarsaday, ayuuna tagay subaxii. Kuwii isbitaalka joogayna way fiirsadeen, isagoo tagaya, iyaguna way ka murugoodeen, waayo may umaleeynin inuu soo laaban doono.

Toddobaadyo badan ayaa ka soo wareegatay, Caways markuu soo laabtay. Tuuladii iyo isbitaalkii aad ayey u degganaayeen, waayo waxaa la joogay waqtigii duhurka ee nasashada. Kuwii jiiifayna markay maqleen usha dhulka lagu garaacayey, albaabka ayey ku ordeen, waardiyaha kor ayuu fiiriyey, intuu indhaha iska tirtiray, ayuuna mar kale fiiriyey. Intuu neeftuuray, ayuu u orday dhakhtarka, wuxuuna yiri, ‘Kaalay, kaalay oo arag! Kulligood waxay u socdaan isbitaalka. Maxaad ku samayn doontaan iyagoo dhan?’

Dhakhtarkii wuxuu ku orday albaabka oo naagtiisana way ka dambaysay. Waddadaasna waxaa ku soo socday Caways si kalsooni leh, ookiyaalihiisana sanku u saaran. Gacantiisna wuxuu ku hayey xarig, kaasoo ku xiran curcurka ninka kale oo indhoole ah oo ka dambeeyey, isagoo haysta baaquligiisa u uku tuugsado iyo ushiisa. Xarigga gacantiisa ku xiran waxaa lagu xiray curcurka indhoole kala oo tuugsade ah, kaasoo kuwa kale hoggaamiyo... kulligoodba waxay ahaayeen toban iyo shan. Inkastoo Caways ku bilaabay safarkiisa saddex ama afar duqooshin oo saaxiibadiis ah, kuwa kale ayey ka keeneen tuulo walboo ay marayeen, iyo turunturroodka yar

oo murugsan ayaa kicisay naxariista dadka, waxayna siiyeen cunto yar. Caways, isagoo faanayo, ayuu yiri, ‘Sidee baan u sheegaynin, anigoo arkay iftiinka!’

Way nasteen oo cuntana lagu siiyey hooska geedka beerta isbitaalka ku dhex yaalay, kulligoodna waa la baaray. Waxaa murugo leh iyaga oo dhan ma la bogsin karo, laakiin kulligood way ka maqleen jacaylka Ciise Masiix. Qaar waa la jiifiyey oo ay aragoodu u soo laabtay, ama waxaa la siiyey daawo oo xanuunka ka baabbi’iso. Waxay ahayd waqti mashquul badan, oona dhakhtarka iyo shaqaalaha isbitaalka shaqada ka badatay ku adag, laakiin may ka shallaaynin. Waayo Caways wuu soo laabtay oo si fiican ayuu u fahmay Ciise Masiix wuxuu ka waday, markuu xertiisa ku yiri, ‘Taga adduunkoo dhan uguna soo wacdiya warka wanaagsan dadkoo dhan.’

MOWQIFKA QORAAGA:

Haddii aan aammino, waxaan u baahanahay sida Caways inaan is waydiino, sidee baan ku aammusi karaa? Sidee baan ugu sheegaynin saaxiibayaasheen oo aan weli arkin oona aqbalin iftiinka Injiilka? Ciise Masiix wuxuu yiri, waxaan nahay iftiinka dunida, anagoo tusayno isaga dunida sida iftiinka faynuusta, kaasoo ka dhalaalaya dhexdiisa. Anagaan iftiinka aragnay, waa inaan kuwa kale tusnaa Ciise Masiix dabeecaddeenna jacaylka iyo farxadda ah. Haddii nala waydiyo, maxaan dadka uga duwanahay, waa inaan si diyaarsan ugu sheegno waxa Ciise Masiix noo sameeyey.

DULUCDA:

Sayidow, bushimahayga fur, Oo afkaygu wuxuu ku hadli doonaa ammaantaada.

Sabuurkii 51:15

DUCADA:

Ebbow, waxaan rabaa inaan u duceeyo saaxiibaday, gaar ahaan kuwa aan rabin Ciise Masiix oo aan waxba ka garanaynin jacaylka Ilaahay. I tus, sidaan ugu hoggaamin karo iftiinkaaga. Iga dhig kan aamminka ah, anigoo u ducaynaayo iyaga. Igu caawi, sidaan ugu noolaado jacaylka Masiixa. Haddii ay fursaddu soo baxdo, igu caawi inaan u sheego isbeddelka aad ii sameeysay.

KA FIKIR:

Bal ka fikir saaxiibkaa oo aan waxba ka garanaynin Ciise Masiix. Ka fikir sida aad ugu sheegi lahayd.

37. GABADHA AAN ILAAWAYNIN

Nasra waxay lahayd fasax waqtiga xagaaga, uguna fiican! Habeen walba markii ay joogtay Ingiriiska, sariirta intay ku jifto, ayeyna ka fikirtaa farxadda waqtiga badan. Sina uma ahayn fasax; waxay u ahayd koox shaqeeyo - waxay Faransiiska iyo Isbaanishka ku dhex safreen gaariga ilaa Gibraltar, iyadoo doon isticmaalaya, waxayna gaareen Waqooyiga Afrika. Halkaasna waxay joogeen laba qol oo eber ahaa isbitaalka dhexdiisa oo dadka diinta u adeega leh (Bukaanada hal bil ayaa guriga loo diray), labadaas qol ay hagaajisteen. Wax kasta macallinkooda bara barashada Kitaabka Quduuska ah ayaa u habeeyey, waxayna ku biireen laba koox kale. Sidaa darteed, Nasra saaxiibo cusub oo badan ayey yeelatay. Laakiin shaqo keliya ma ahayn. Maalintii qorraxdu markay kululaato, alaabtood ayey dhigteen oo cuntada ay qaateen, gaariga bay ku tegeen xagga xeebta.

Meditariyan xeebteeda waxay leedahay bacaad aad u kulul, sidaa darteed, kabo la'aan lagu ma socon karo. Halkaas biyuhu way degganyihiin, oo ay arki karaan dhagax walboo bacaadka hoostiisa ku jiro. Ama mararka qaar waxay tageen ilaa meesha Badda Atlantiga wayn ah, oo ay hirarkeedu ku dhufato biyaha qarkooda, kadibna biyaha waxay qaadeen sida boombalo wasakh oo kale ayey ku turaan xeebta. Kow iyo toban saac markii la gaarayna, way sii wada shaqeeyeen. Nasra waxay jeclayd inay sanduuqyada isbitaalka rinjiyeeyso.

Cashadooduna waxay ku cunaan beerta dhexdeeda, iyadoo fiirsanaya muujinta qorraxda dhacayso oo cajiibka ah. Kadibna, way iska sheekaystaan ama way bartaan Kitaabka Quduuska ah. Mararka qaar mid ka shaqeeyo isbitaalka ayaa u imaadaa, oo una sheegaa wax ku saabsan shaqada isbitaalka dadka diinta u shaqeeya, wax barashadanna waxay Nasra u noqotay mid aan la iloobi karin.

Bal maxay noqon kartaa, way la yaabtay, in Masiixi la noqdo, kadibna Kitaabka Quduuska ah la kala jeexo, ama in dugsiga laga saaro ama xabsi lagu geeyo, waayo Masiixi baad tahay? Waxaana jiray maskiinnimo, sideed noqon lahayd, adigoo arkaya ilmahaaga gaajaysan oo aadna caano u iibin karin? Qofku muxuu ka samayn karaa xaaladdaas, si uu u caawiyo?

Habeen ayaa mid kooxda ka mid ah u sheegay sheeko ku saabsan kulanka xagaaga, kaasoo ay u qabteen qaar ka mida carruurtaas. Kooxaha oo leh da'da kala duwan ayaa hal toddobaad yimaaday. Subixii waxaa la baraa Kitaabka Quduuska ah oo galabtiina waxay tageen xeebta. Qaar ayaa lahaa dharka lagu dabaalanayo, badanaa waxay ku qubaystaan mar kala duwan, si ay isla wadaagaan waxay haystaan. Waxayna ahayd sagaal bilood kadib, markaasoo xilliga xagaaga bilaabanayey, oo Nasra lahaatay fikirkeeda wanaagsan.

Hal bil kadib, ayaa shaqaalaha maammulayey wadajirka la hadlay carruurta. Way dhegaysteen, iyadoo niyadjabeen. Waxayna tiri, 'Kulligiinba waa inaad keentaan wax lagu dabaasho, waayo dharka lagu dabaasho ee horay waa duug. Qaar idinkaan idiin siiyey sanadkii hore, hadda waxba ma harin. Haddii aad waxba keenin, ma dabaalan kartiin. Idinkaan yaryarna, miyaad ku dabaalan kartaan kastuumadiina?' Gabdhihii yaryaraa way la yaabeen oo si

hubaal ah ay u sheegeen inay da'dooda toddobaad sano ah darteed isticmaali karin. Waxay u ekayd in xal la waayey. Dharka lagu dabaasho waa qaali, una dhow biilka reerka oo dhan ay biishaan toddobaadka. Iyagoo murugaysan, ayey guriga tageen, kuwii maammulayeyna way ka ducaysteen waxay u baahanyihiin. Kadibna, waxaa la keenay baakad oo warqad ku jirta.

Warqaddii waxaa ku qoran, 'Uma maleeynaayi inaad i xasuusatid, laakiin sanadka la soo dhaafay waxaan la joogay kooxda shaqeyso xagaaga, hal habeen ayaad nala hadashay, waana ilaawi waayey sida carruurtaas oo waqti kala duwan u dabaashaan. Muddo cusub bilawgeed saaxiibaday waxay la yimaadaan dharka lagu dabaasho oo cusub, waxaana waydiiyey waxay ku sameeyeen dharkooda dabaasha ee hore. Markaan u sharaxay inaan u baahanyahay, ardayda barkooda waxay keeneen dharkooda dabaasha ee hore, sidaa darteed, waxaan ku soo dirnay jacaylkeenna.' Waxaa saxiixday „Nasra”.

Nasrooy, waxaan jeclaan lahaa inaad aragtid dabbaaldega dhacay, carruurta markay arkeen waxa ku jiray baakadda! Waqti ayey igu qaadatay inaan iyaga dejiyo. Waxaan jeclaan lahaa inaad aragtid siday u boodboodayaan bacaadka, iyagoo gashan dharka lagu dabaasho ama siday si deggan u dhegaystaan qisooyinka ama u heesayaan! Waxaan jeclaan lahaa inaad aragtid yaabka indhahooda looga jeedo, markaan ku niraahnay, waan u ducaynay baakad. Waxaad umaleysaa in dhibaataadii lagu soo habeeyey baakaddaas iyo kharashka ku baxay in la soo diro inuu u qalmo. Waad mahadsantahay, Nasrooy!

DULUCDA:

Ido kale ayaan leeyahay oo aan kuwa xeradan ahayn, kuwaasna waa inaan keenaa, waxayna maqli doonaan codkayga, oo waxaa jiri doona adhi keliya iyo adhijir keliya.

Yooxanaa 10:16

DUCADA:

Waan ogahay in waddamo fog
oo loo maro badda wayn ee buluug ah
ku nool carruur badan
aad jeceshahay, sidaad aniguna i jeceshahay.
Laakiin weligood magacaaga ma maqlin,
mana oga inuu Ciise Masiix yimid.
Rabbiyow, igu caawi, si aan farriinta u diro,
Iyadoo u maraysa badda wayn ee buluug ah
Inaan u sheego carruurtaas kale
Waxaad ii samaysay
Rabbiyow, i tus waxaan samayn lahaa
Si ay ku gartaan oona ku jeclaadaan.

KA FIKIR:

Mar walba ma garanayno waxaan abuurno, mise mar walba ma aragno miraha dadaalkeenna. Laakiin wax badan ayaa laga helaa camalka ugu yar oo naxariista leh ee aan samayno.

Muhiimadda wax bixinta

Malaakii 3:10

38. RABBIGA DIGAAGTIISA CADDAYD

Sheeko ka dhacday Suuriya, halkaas oo sanado badan oo la soo dhaafay lamaane Mareykan ah oo da' yar ayaa degeen gobol waddankaas ah. Gurigooda halkaas ku dhisteen oona bilaabeen inay ku wacdiyaan Injiilka. Dadka tuuladaas badidood waxay ahaayeen beeraley iyo arijir. Weligoodna ma akhrisan Kitaabka Quduuska ah, mana garanaynin in dembiyadooda loo cafin karo, haddii ay aamminaan Masiixa. Waxyaalahan way ku fiicanayeen oo habeen walba beerta ayey ka yimaadaan, iyagoo daalan, kulayl iyo wasakhna dareemaya ayey fariistaan, si ay u dhegaystaan, intuu Rooble Kitaabka Quduuska ah baraya. Badidooda way aamineen waxay maqleen, oona waydiisteen in Ruuxa Quduuska uu noloshooda soo galo. Hal habeen, markay ka hadlayeen wax ku saabsan jacaylka Ilaahay, isagoo bixiyey Ciise Masiix, iyo jacaylka Ciise Masiix, isagoona noloshiisa bixiyey, markaasaa midkood waydiiyey, 'Laakiin anagu maxaan siin karnaa, si aan u tusno inaan jecelnahay?'

Markaasaa qaar yiraahdeen, 'Anagu lacag ma haysano, waxaan haysanana, waxaan ku bixinaa alaabta beerta iyo shaqadeenna. Dhammaanteen waan ognahay inaan ku noolnahay waxaan beerta ka helno, masaakiin ayaan nahay. Xilliga qaboowbga si dhif ah ayaan u helnaa kibis aan carruurteenna siino, sidaa darteed, sidee baan wax ku bixinaa?' Rooble intuu kitaabkii Malaakii ku laabtay, ayuu

ka hadlay waqti hore oo Ilaahay ku yiri dadkiisi inay keenaan meeltobnaadyo waxay leeyihiin oo dhan, in shaqada Rabbiga lagu qabto. Laakiin dadku waxay noqdeen kuwa caajis leh iyo hunguri wayneyaal, waxyaalahooda oo dhan meel ayey dhigteen. Sidaa darteed, Nebi Malaakii wuxuu u gudbiyey farriinta xagga Ilaahay ka timid, 'Meeltobnaadyada oo dhan khasnadda soo geliya in gurigayga cunto ku jirto aawadeed, oo haddaba taas igu tijaabiya, haddii aan idiin furi waayo daaqadaha samada, oo aan idinkaga soo shubi waayo barako aan meel qaadi karta la arag.' (Malaakii 3:10) Laakiin kooxdii intay is fiiriyeen, ayey iyagoo shaki ku jira su'aal waydiiyeen, 'Meeltobnaadyo oo galleydeenna, ukumaheenna, iyo miraheenna? Laakiin ka warran, haddii ay anaga xitaa ay nagu filneen?'

Rooble wuxuu waydiiyey, 'Aayaddu maxay leedahay?'

'Waxay leedahay, Rabbigu wuxuu furi doonaa samadda oo soo daadin doonaa barwaaqo waxyaalaha fiican ah. Way wanaagsan tahay, laakiin ma run baa?'

Rooble wuxuu yiri, 'Bal isku day oo arag.'

Sidaa darteed, way isku dayeen. Qof walbana wuxuu Rooble u keenay meeltobnaadyo oo wuxuu beertiisa ka helay, isagana wuu gataa ama ku sii noolaadaa ama iibiyo, lacagtana meel ayuu dhigaa. Waqti yar kadibna waxay lahaadeen lacag ku filan alaabta wax lagu dhiso. Waxayna dhiseen kaniisad yar, halkaasoo ay ku kulmeen, si ay ugu cibaadaystaan. Farxad iyo barako badan ayaa tuuladan ku soo degtay oo wax bixintana waxay noqotay wax fudud. Waxay aad u jeclaadeen inay tagaan tuulada kale oo ay u sheegaan Badbaadiyahooda cusub, laakiin may awoodin inay ka tagaan xoolahooda iyo beertooda. Haddii ay lacag yar meel dhigaan, waxaa laga

yaabaa inay diraan qof, si uu u tago. Kaydkii yaraa ayaa waynaaday.

Waxaana imaaday waqti abaar ah oo hadiyaddihii way yaraadeen. Si ayaa looga jeeday in dadka ay saas u faraxsanayn, oo hoggaamiyaashii kaniisadda way dhibaatoodeen. Qof kalena wuu dhibaataysnaa. Beer yar oo halkaas ku dhow waxaa degganaa carmalo. Ninkeed wuxuu u dhintay qandho tiifow ah, waxayna la soo hartay saddex carruur yar. Noloshu way adkayd, laakiin waxayna lahayd dhul, ari iyo digaag u dhow soddon, taas ayaa ku caawinaysay inay ku noolaato. Laakiin sanado la soo dhaafay habkeeda caadiga ah ayey wax ka baratay ku sabsan Ciise Masiix, nolosheeduna way beddelatay, markay baratay inay dhibkeedoo dhan duco ugu hor geysa Ilaahay.

Waxayna ahayd maalin wanaagsan, markay ogaatay in digaagteed caddayd ay ukumo badan ku fadhido. Waxayna rabtay inay Rabbiga hal ukun meel u dhigto, laakiin waxay tiri, 'Waxaa roon Rabbiga inaad siisid digaag beddelkii ukun.' Waqti yar kadibna ukumaha waxaa ka soo baxay toban jijiilayaal huruud ah oo qurux badan. Isla markii waxay qabatay hal oo ay lugaheed ku duudduubtay xarigga dufta laxda. Markaasaa gabadheeda oo sagaal jir ah oo Maryan la dhaho ayaa waydiisay, 'Maxaad saan u samaynaysaa?'

Hooyadiina waxay ugu jawaabtay, 'Waayo waa digaagta Rabbiga, waa inaan si fiican u ilaalinaa.'

Jijiilayaashii way koreen oo Maryan aad ayey u jeclayd. Waxayna waydiisay, 'Hooyo, goormaad Rabbiga digaagtiisa siin doontaa?'

'Hadda ma ahan, gabadhayda. Waa inay kortaa, waxaa roon inaad Rabbiga siisid digaag beddelkii jijiil yar.'

Kadibna waxaa dhacay wax la yaab leh. Digaagta oo dhan iyagoo si fiican ee xoog leh ayey koreen, laakiin digaagta Rabbiga ka si fiican oo ka xoog leh ayey u kortay. Runtii, waxay ahayd digaag qiimo fiican leh, way adakayd oo baalasheeda aad ayey u caddaayeen. Maryan way ku faraxsanayd, waayo iyada way la wanaagsanayd, laakiin hooyadeed kuma faraxsanayn. Dalaggii si fiican uma baxin xilligan abaarta ah, sarreenkii ma korayaan oo yaanyana way isku qalloocdeen. Digaagtii Rabbigana lacag fiican ayaa lagu iibsanaa lahaa, haddii suuqa la geeyo. Maalintii marar badan ayey isku tiraahdaa, 'Doqon ayaan ahaa inaan xarigga dufta laxda digaagta lugaheed ku xiray. Mudane Rooble wuxuu yiri keliya, 'Digaag iska keena.' Waan iska bixin lahaa digaagta caato ah oo madow ah. Qofna ma ogaan doono.' Arrintaas way ku waynaatay, sidaas darteed, hal Axad aroorteed ayey ceysatay digaagtii Rabbiga oo ay ka furtay duftii laxda oo ay ku xirtay digaag kale oo caato ah. Kadibna intay khamarkeeda isku dabooshay, ayey saddexdeeda carruur u qubaysay oo ay u diyaarisay kaniisadda, si ay u soo cibaadaystaan cibaadad miiska Ilaahay la isla wadaagaya.

Mar walbana ma aysan lahayn cibaadada miiska Ilaahay dhammaadka cibaadada subixii, laakiin Axaddaas way lahaayeen. Nin Suuriyaan oo Masiixi ah ayaa tagay xagga miiska oo kibista iyo cabitaanka canabka ah sarnaa, taasoo ah xasuusta jirka iyo dhiigga Rabbiga Ciise Masiix. Intuusan dadka u yeerin, si ay u qaataan, wuxuu heesay hees ammaan ah oo lagu turjumay af Carabi -

‘Noloshaydaan idin siiyey,
Dhiiggayga oo qiimo leh ayaan idin daadiyey,
Si laydiin furto
Aad ka soo noolaataan dhimashada
Noloshaydaan idin siiyey,
Idinkuna maxaad i siiseen?’

Si macaan oo murugona leh ayaa heestii su’aashaas ku dhammaanaysay. Laakiin intii aan heestii dhammaanin, buuq ayaa kaniisadda ka dhacay. Carmaladii ayaa horay timaadday, iyadoo wejigeed gacmaheed ku qarinsay, aad u ooynayso, waxay ku hadlaysana aan la fahmaynin. Way isku dayeen inay maqlaan, laakiin qofna ma fahmi karin waxay ku hadlaysay. Laba eray ay ku celcelisay keli la fahmi karaa – ‘Digaagta Rabbiga! Digaagta Rabbiga!’ Ugu dambayntii, Maryan ayaa u faahfaahisay dadka waxa hooyadeed ka hadlaysay. Intay horay ku orodday, iyadoo aan xishoonaynin ayaa hooyadeed gacanteed saartay hooyadeed dhexdeeda. Maryan waxayna tiri, iyadoo cod hoos ah ku hadlayso, ‘Waxay dhahaysa “Suga!” Suga, ilaa ay guriga ka soo noqoto, waayo waxay doonaysaa inay xarigga dufta ku celiso lugaha digaagta Ilaaha. Mana doonin inay kibista iyo cabitaanka canabka cabto ilaa ay sidaas samayso.’

Qofna muusan dhollacadeeynin. Hadda dadku way fahmeen. Carmaladii wejigeedi ee illinta lahaa ayey kor u qaadday oo cod hoos ku tiri, ‘Wuxuu i siiyey in badan, laakiin anigu waxaan siin rabay waxayga ugu xun. Sidee baan isaga u mahadcelin karaa? Bal suga, suga... waxaan doonayaa inaan waxayga ugu fiican siiyo.’ Runtii, Ruuxa Ilaahay wuu shaqaynaayey. Midkood ayaa yiri, ‘Walaal Rooble, aniga xitaa waa inaa xaafadda u laabtaa, waayo ma bixinin toban meeloodka sarreenkayga. Sidee baan u mahadcelin karaa

wuxuu i siiyey?’ Ku kale oo gunuunucay, wuxuu yiri, ‘Aniga xitaa, waxaan ka cabsanayey abaarta. Ilaahay caano ma siinin toddobaadyo badan.’ Ku kalena wuxuu yiri, ‘Walaalayaalow, yaan cunin miiska Rabbiga subaxan, waayo laga yaabaa badideenna waxaan u baahannahay inaan xaafadda tagno. Aan kulano galabtan.’ Qof walbana wuu oggolaaday, oo kadibna si deggan ugu kala tageen.

Rooble muusan nasanin duhurkaas, waayo dadkii ayaa saf la soo galay hadiyaddooda. Galabtiina kaniisaddii way buuxsantay. Farxad iyo amman ayaa tuulada ku soo laabatay. Waxay dareemeen in Masiixu u dhow yahay, aad ayeyna u farxeen. Maryan iyo hooyadeed halkaas ayey jooheen, carmaladii indhaheedu illin ayey la nuuraayeen, iyadoo xasuusanayso jacaylka dhammaan la siiyey. Wadajir way isla heeseen heestii -

‘Rabbiyow, noloshaydu aan kuu bixiyo,
Waqtii walbana aan u isticmaalo
Ilaahay, nafta iyo jannada darteed,
Dunadoo dhanna wuxuu yahay mid la maraayo.
Waxaaga oo dhan waad i siisay,
Haddaba, aniguna wax walba waan ku siinayaa.’

Xagga beertii yaraydna, digaagtii Rabbiga oo cad ah ayaa ku dhex soconaysay, iyadoo lugteeda ku xiran xarig duf leh oo cusub.

DULCUDA:

Xasuuso hadalka Sayidka Ciise Masiix, ‘In wax la helo, waxaa ka barako badan in wax la bixiyo.’

Falimaha Rasuullada 20:35

DUCADA:

Sidaa darteed, waan kuu mahadcelinaynaa, Eebow
Waxyaalaha walboo iftiimaya iyo wanaagsan,
Waqtiga la beeraya iyo waqtiga gurashada,
Nolosheenna, caafimaadkeenna iyo cuntadeenna.
Naga aqbal hadiyaddeenna aan ku siino
Jacaylkaad na siisay dartiis,
Iyo waxaad aad u rabtid,
Qalbiyadeenna dareen jacayl leh oo mahadnaqaaya.

KA FIKIR:

Ilaahay mar walba wuxuu barakeeyaa ku wax bixiya -
hadday tahay waqtigood, lacagtood, dadaalkood, ama xitaa
noloshood. Laakiin Ilaahay abaalgudkiisa ma ahan sidaan
u filayno. Haddii aad Ilaahay wax siini rabto, waa inaad
ugu imaataa si xor leh oo jacayl dartiis u samaysaa. Wax
bixi, adigoo waxba filanaynin in lagu siiyo, adigoo si
dhammaystiran u aamminayso inuu Ilaahay ku barakayn
doono waqtigiisi iyo qaabkuu rabo.

Muhiimadda damiir nadiif ah

1 Yooxanaa 1

39. WIILKA OO KA BAQAY IFTIINKA

Waxay ahayd waqtiga Ciidda Masiixiyiinta, jawiguna wuxuu
ahaa mid mugdi ah iyo duufaan ah. Daa'uud iyo Axmed
waxay u degdegaayeen xaafadda maalintii ugu dambeysay
ee muddada dugsiga. Iyagoo u xiisa qaba inay istagaan
daaqaddii dukaanka ifaayo horteeda, laakiin nalka waddada
mar hore ayaa la shiday, waddadii tagayso ilaa beerta halkii
ay deganaayeen waxaa ku badnaa bohollo iyo balliyo, sidaa
darteed, way ogaayeen inay dhaqso guriga tagaan intay
mugdi sii noqonin.

Markaasaa Daa'uud si sabar la'aan ah u yiri, 'Bal na wad
Axmed.' Laakiin Axmed yariisow wuxuu dareemay inuu
joogo dunida khiyaaliga ah. Wuxuu ka soo hor tagi waayey
dukaan alaabta carruurta ku dheelaan lagu iibiyo... hadduu
heli lahaa kubadda oo lagu gadayo dukaankaas, mise
alaabtaas qaar oo quruxda badan sida hadiyadda Ciidda
Masiixiyiinta. Wuuna iloobay Daa'uud oo ku sugayey
jiiradii ay waddada kaga leexanayaan. Isla markiiba Daa'uud
wuxuu arkay wax oo sababay inuu ilaabo Axmed. Wuxuu ag
taagnaa fuustoo aad u wayn oo liinmacaan ah, kuwaasoo ku
quruxoon nalkii waddada oo midabka dahabka ah. Mulkiilaha
fuustada dhabarkiis ayaa u jeeday Daa'uud, isagoo warqad ku
qoraya qiimaha liinmacaanka, oo qofna halkaas ma joogin.
Waxay ahayd waqtigii dukaamada la xirayo oo qof walbana
wuxuu u degdegaayey gurigiisa, laakiin ninkii liinmacaanka

gadaayey, wuu haray ilaa qofkii ugu dambeeyey tareenka ka raacay. Daa'uud keligiis ayaa haray, isagoo fiirinayo boqolaal liinmacaanka oo qurux badan oo dhalaalaya.

Isagoo iska taxaddaraayo ayuu gacanta taagay, intuu dhaqso soo bixiyey saddex ama afar xabbo, kadibna boorsada dugsiga ku ritay. Waxna ma dhicin. Afar xabbana wuxuu ku ritay jeebkiisa. Qofna muusan arkin. Haddana, wuxuu soo qabsaday shan xabbo kale oo uu ku ritay jeebka jaakaddiisa. Wax walba way degganaayeen oo dukaanlaha weli ma u soo jeedin. Daa'uud wuxuu aammini waayey nasiibkiisa. Laakiin wuxuu u ekaa qof aad u buuran, hadduu jirada mugdiga ah si degdeg ah u galo, way u roonaan doonta. Axmedna tartiib ayuu u imaanayey, isagoo aad uga fikirayo hadiyadda Ciidda Masiixiyiinta, oo waxba mu arkaynin, waxaan ka ahayn baabuurtii carruurta fiicnayd, laakiin si kastaba ha ahaatee... Daa'uud wuxuu isku qariyey deyrar dhaadheer iyo hooska qoto dheer ah. Qofna halkan kama arki doono qaabkiisa. Bakhaarka ayuu gali lahaa, intuusan guriga galin oo maalkiisa halkaas ku qarín lahaa. Kadibna wuxuu tagi lahaa halkuu doono, wuxuu jiifsan lahaa xagga gulufka jilicsan oona leh bus oo kadibna liinmacaanka cunaa. Waxay ahaan doontaa Ciidda Masiixiyiinta mid aad u wanaagsan.

Axmed oo mugdiga ka cabsado ayaa farxad darteed la qayliyey oo yiri, 'Fiiri! Feynuuska! Aabbo wuu noo imaanayaa!' Axmed horay ayuu u orday. Daa'uud wuu isku naxay. Markaasaa aabbahood yiri, 'Carruurtaydiyey, mugdiga dhaqso ayuu soo galayaa caawa oo balliyada ayaadna ku dhici doontaan. I ag soco, Daa'uudow.' Daa'uud wuu isku qariyey deyrka, isagoo dareemayo cabsi iyo murugo. Weligiis ma ka fikirin arrintan cabsida leh. Mana u tegi karin aabbihis oo ahaa nin daacad ah, isagoo qarínaayo

sirtiisa dembiga ah. Axmed wuu la boodboodayey iftiinka feynuuska, isagoo aabbihis gacanta haysto, cabsidii oo dhanna wuu ilooway. Laakiin Daa'uud tartiib ayuu gadaashiisa u socday. Markaasaa aabbihis ku yiri, 'Maxaa jiraa, Daa'uudow?' Isaga oo si fiican u garana wiilkiisa yar. 'Maanta ma wax xun ayaad samaysay?'

Laakiin Axmed si daacad ah wuxuu yiri, 'Daa'uud wax xun ma samaynin maanta. Macallinka wuxuu yiri isaga waa ordyahanka ugu fiican fasalka oo dhan. Aabbe, miyaad garanaysaa sigsaantayda way...'

'Daa'uudow, bal kaalay oo ku soco iftiinka. Waxaa laga yaabaa inaad ku kuftid godka.'

'Waan fiicanahay, Aabbe.'

'Haddaba, ha noqonin mid doqon ah, Daa'uud! Kabahaaga ayaad dhoobo daran la gali doontaa...'

'Halkan ayaan jecelahay inaan ku socdo...ala...alaa!'
Daa'uud wuxuu ku kufay xidid oo dhulka ayuu ku dhacay. Liinmacaankii ayaa ka soo dhex baxeen boorsadiisa, iyagoo dhinac walba u kala finiinayeen oo kuwii jaakaddiisa ku jirayna si xun ayey u madhiiqmeen. Aabbihis intuu dhinaca kale waddada istaagay, ayuu feynuuskii kor u qaaday, Daa'uud wuu isku naxay, isagoo oohnayo in badan. Markaasu Aabbahiisa, isagoo murugo leh, yiri, 'Waan u jeedaa.'
Intuu Daa'uud kor u kiciyey, ayuu iftiinka soo istaajiyey. Gacamihis iyo jilbihis aad ayey u dhaawacmeen, afkiis carro ayaa ka buuxday oo bushintiisuna dhiig ayaa ka socday. Wuxuu u ekaa qof murugo leh oo cabsina ka qaba in aabbihis ayaa is waydiiyey laga yaabee in ku filan in lagu ciqaabay.

Aabbahiis wuxuu yiri, ‘Ma waxaad ka soo qaadatay Shariif dukaankiisi?’

‘Daa’uudow, waxaad tahay tuug, oo hadda ayaad u laabanaysaa halkaas oo aad qiimahood bixinaysaa.’

‘Laakiin... laakiin lacag ma haysti... oo...oo waxaa laga yaabaa inuu booliska igu soo yeero!’

‘Taas isaga ayey u taalaa. Haddii uu Shariif booliska u yeero waad u qalantaa. Haddaba, waa tan lacag. U tag Shariif, u sheeg waxaad sameeysay, kadibna waydii darsanka liinmacaanka waa immisaa. Axmed iyo anigu waxaan kugu sugayaa jirada.’

Shariif aad ayuu u yaabay, markuu arkay wiil yar oo naxsan oo weji wasakhsan oo si aan la filanaynin meel mugdi ah ka soo baxay, isagoo ooynaayo sheekadiis sheegay. Intuu lacagtii ka qaaday, ayuu ku yiri, ‘Haddii aan waxaan oo kale kugu qabto mar dambe, waxaan isla markaas kuugu yeeri doonaa booliska.’ Markii oo Daa’uud sii jeestay Shariif, il ayuu u jibiyey ninka beeraleyga ee taagnaa nalka waddada kale.

Kadibna wax kastoo wayba dhammaatay. Waana hubaal inuu lacagtaas ka bixin doono lacagtiisa u uu ku sii joogi lahaa, laakiin taas dhib maba ahayn. Liinmacaankii lacagtooda waa la bixiyey oo isaga waa loo cafiyey. Waddadii ayuu ku sii dhutinayey, isagoo dhex socda iftiinkii feynuuska, isagoo neefsanayo oo hiqhiqleeyey oo aadna xanuun u hayo. Laakiin aabbahiis gacantiisi ayuu ku duudduubay oo ku caawinayey inuusan ku dhacin balliyaha. Aabbahiis wuxuu ku yiri, ‘Waxaas oo kale mar dambe ha samaynin, Daa’uudow. Bal arag, waxba makuu faa’iidaynayso.’ Daa’uud oo

aabbahiis haysto ayaa ballan ka qaaday inuusan mar dambe samaynaynin.

MOWQIFKA QORAAGA:

Haddaan dembaabno, iftiin kuma wada socon karno Ciise Masiix. Haddii oo waxa damiirkaaga ku jiraan, waa inaad si dhaqso ah u qiratid oo aad Ilaahay la heshiisid. Kadibna waa lagu nadiifin oo laguna cafin doonaa, waxaadna ku soo laabanaysa iftiinka, si aad ula socoto Ciise Masiix.

DULUCDA:

Ciise Masiix wuxuu yiri, ‘Waxaan dunida u imid inaan nuur u ahaado, in mid kasta oo i rumaystaa uusan gudcurka ku sii jirin.’

Yooxanaa 12:46

Nuurka ayaa dunida yimid, dadkiise waxay nuurkii ka jeclaadeen gudcurka, maxaa yeelay, shuqulladoodu shar bay ahaayeen.

Yooxanaa 3:19

Laakiin haddaynu nuurka ku soconno siduu isaguba nuurka ugu jiro, wehelnimo ayaynu isla wada wadaagnaa, oo dhiigga Ciise, oo Wiilkiisa ah, wuxuu inaga nadiifyaa dembi oo dhan.

1 Yooxanaa 1:7

DUCADA:

Rabbiyow, waxaan kaa baryayaa in dembigaan qiran waayey uu na soo dhex gelin. Iga dhig, si aan iftiinka kugula socdo Ciise Masiix, anigoo waxba qarinnaynin. Igu dhowee Ciise Masiix. I bar inaan lahaado damiirkayga saafiga ah. Igu caawi inaan ahaado isla qofkaas, markaan kuwa kale la joogo.

KA FIKIR:

Ma jiro dembi aad u yar mise dembi aad u wayn oo joojin karo Ilaahay jacaylkiisa ee cafiska leh.

Muhiimadda wehelnimada Masiixiyiinta

1 Korintos 12

40. KA SOO BIXIDDA DABKA

Aadan Masiixi ayuu noqday, isagoo jooga kulanka dhallinyarada, laakiin muusan dareemin inuu si fiican ku socdo. Ugu horrayntii aad ayuu farxad u dareemay, wuuna ka helay, markuu Kitaabka Quduuska ah iyo xasuus qoriddiisa wax ka baranayey, wayna u fududayd inuu ducaysto. Way ku cusubnayd, wuxuuna dareemay farxad badan, xaafadda aad ayuuna u caawin jiray, waa qof furfuran, waa qof naxariis leh oona ka fiirsado hadallada uu ku hadlo.

Laakiin taas ma waarin. Subaxdii qaboob ayey sii noqonaysay oo wayna adkaatay in la soo tooso, wuxuuna arkay in Kitaabka Quduuska ah akhriskiisi iyo ducaduna cajiis noqotay. Wuxuuna la saaxiibay wiil iskuulka joogay oo diinta ku qoslayey, Aadanna wuxuu dareemay cidlo iyo niyadjab. Wuxuu ku fikiray, 'Laga yaabaa waxaan mala-awaalay waxyaalahan oo dhan ee ka dhacay kulanka dhallinyarada, laga yaabaa inay wax run ahayn.' Laakiin intuusan ka quursan ka hor, wuxuu go'aansaday inuu booqdo oday, wiilashaas qaar awoogood ah, kuwasoo casumay inuu iyaga la joogo kulanka dhallinyarada. Labada reer way is booqan jireen marmar. Aadan mar ayuu maqlay, isagoo ka khudbaynayo kaniisadda, wuxuuna dareemay inuu yahay qof Ilaahay garanaya. Wuxuu ahaa oday deggan oo calool jilicsan, Aadanna wuxuu dareemay inuu la hadli karo. Wuxuu wacay odayga, odaygiina wuu casumay isaga.

Markuu xagga u socday oo ganjeelka ku soo dhowaaday, wuxuu dareemay welwel oo mana hubin wuxuu ku hadli lahaa, ama in wax laga hadlo ay jiraan. Laakiin odaygii aad ayuu u soo dhoweeyey, laba kursi ayuu dhigay meel oo dabka laysku kululeeyo, goortii ay naagtiisana shaah keenaysay. Qalbigiisa wuu furmaday, markii si fiican loo soo dhoweeyey. Aadan wuxuu dareemay inuu dhibaatooyinkiisa si fudud uga hadli karo oo waqti dheer ayey hadleen. Kadibna odaygii wuxuu yiri, ‘Bal ka warran kaniisadda? Dadka ka qaybqaata waa inay ku caawiyaan oo ayna kuu duceeyaan. Waxyaalahan oo dhan miyaad kala hadashay wadaadkaagii?’

Aadan ceeb ayuu dareemay. Ugu dambayntii wuxuu yiri, ‘Run ahaantii, anigu maba tago kaniisadda. Reerkaygana waxay tagaan oo keliya waqtiga Ciidda Masiixiyiinta, Axadduna aad ayaan mashquul u ahay. Waxaan akhristaa iskuulka sare, sidaa darteed, Sabtida iyo Axadda waxaan u baahanahay inaan waxyaalo kale sameeyo. Waan tegay hal ama laba mar, laakiin waana ku soo cajisaa. Waan isku dayaa inaan akhriyo Kitaabka Quduuska ah in badan siiba Axadda, mararka qaarna waxaan u lugeeyaa baadiyaha, laakiin kuma mashquulin waxyaalo ku saabsan kaniisadda.’

Odaygii wuxuu u ekaa mid fikir ku jiro. Kadibna wuxuu qaatay kelbedda intuu horay u durqay ayuu dabka ka soo qabsaday dhuxul kulayl oo si taxaddar leh dul dhigay shabagga, markaasuu si deggan ku yiri, ‘Bal firso dhuxushaas, kadibna ii sheeg waxa ku dhici doono.’

Aadan wuu fiirsaday dhuxushii caddayd oo kulayl ah iyo sida ay u baabbi’isay, wuxuuna arkay in dhuxushii baabba’aday isaga oo u jeeda. Guduudkii wuxuu u beddelmay dambas oo iftiinkiina wuu baabba’ay, kulaylkiina wuxuu noqday qaboob. Kadibna, odaygii intuu qaaday ayuu ku celiyey dabka

holcaya. Wuxuuna ku yiri, ‘Bal haddana fiiri.’ Dhuxushii dambas oo dhintay way shidmatay, way dhalaatay oo ay ka mid noqotay kuwa kale oo qaxmay.

Kadibna odaygii wuu u faahfaahiyey in Masiixiyiintu aysan ahayn inay keligood noolaadaan, sidoo kale askari keliya dagaal ma geli karo, mise gacan ama lug keligeed ma shaqayn karto. Wuxuuna ku yiri, ‘Askarigu wuxuu ka mid yahay ciidan, gacantana waxay ka mid tahay jir. Markaad Masiixi noqotayna, waxaad ka mid ahaatay wadajirka Ciise Masiix taas oo ah qof kasta oo joogaa waddan kasta oo jecel Ciise Masiix, laakiin dadka waxay ku kulmaan dhismaha kala duwan oo waxay u cibaadaystaan si kala duwan sahlanaanta darteed. Si kastaba, dhammaantood mid ayey yihiin Ilaaha hortiiisa. Keligaa waxaad ku jirta khatar inaad qaboob ku korto, laakiin markaad la kulantid Masiixiyiinta kale, wax baratid, wax la qaybsatid, wax bixisid oo aad la ducaysatid, iimaankaaguna wuu adkaan doonaa, jacaylkaaguna wuu kori doonaa, iftiinkaaguna wuu ifi doonaa.’

Intuu Aadan baaskiilka waday oo u socday xaafadda, habeenkaas wuxuu go’aansaday inay Axadda kale aysan dhaafin isaga oo ka qaybgelin kaniisadda dadka Ciise Masiix jecel, uuna wax la barto, lana ducaysto, waayo wuxuu ogaaday baahidiisa inuu ku laabto kaniisadda sida dhuxusha ay ku noolaatay markii lagu celiyey dabka.

MOWQIFKA QORAAGA:

Dadka qaar waxay ka helaan wehelnimada inka badan dadka kale. Waxaa laga yaabaa inaad tahay qof kelinimo raba bedelkii qof bulshaawi ah, taasoo keenaysa qofku inuu noqdo mid xishoonaya oo aan raaxo ku dareemaynin hadduu

dad dhex joogo. Si kastaba, waxaa laguugu caawin karaa noloshaada Masiixnimada, haddad ka mid noqotid kooxyada Masiixiyiinta sida kooxda dhallinyarada, dugsiga Axadda ama ururka wadajirka dhallinyarada kale. Waxaa laga yaabaa inay fudayd ahayn, marka la bilaabayo waxay qaadanaysaa toddobaadyo ilaa aad la qabsatid oo aad ku raaxaysatid. Laakiin sii wad, waad la kulmi doontaa kuwa kale oo aadna la saaxiibi doontaa kuwa aad isku wax ka heshaan, kuwa aad qaybsataan su'aalo iyo dhibaato iyo farxad - waxaa wax walba ka sarreeya iimaankaaga xagga Ciise Masiix. Caawimaad ayaad heli doontaa, waadna awoodi doontaa inaad kuwa agtaada joogo caawisid.

DULUCDA:

Yeynan iska daynin isku ururkeenna sida ay tahay caadada dadka qaarkood.

Cibraaniyada 10:25

DUCADA:

Eebow, waxaan u ducaynayaa wadajirkeenna, kuwa halkaas wax ku bara oo wacdiya. Igu caawi, si aan u noqdo mid aammin ah oo mar walbana cibaadada taga, iguna caawi inaan Axadda (Maalinta nasashada) si fiican u isticmaalo inaan xasuusto inay tahay maalintaada khaaska ah. Waxaan kaa baryayaa inaan toddobaad walba barto wax kugu saabsan, oo aan noqdo mid wadajirkayga ay ku tashan karaan. Fadlan, i tus waxaan sameeyo, si aan u dhiso kaniisadda Ciise Masiix.

DUCADA CIISE MASIIX:

'Inay dhammaan mid ahaadaan, sidaad adigu, Eebow, iigu jirtid, aniguna aan kuugu jiro, inay iyaguna inoogu jiraan, in dunidu rumaysato inaad i soo dirtay.'

Yooxanaa 17:21

KA FIKIR:

Inkastoo aad nafsadaada uga hesho faa'iido, bal xasuuso, haddii aad ku biirtid kooxda Masiixiinta, waxaad caawimaad iyo dhiirrigelin u noqon kartaa kuwa kale.

AAMMINIDDA ILAAHAY –
XILLIGA WANAAGGA IYO XILLIGA XUNBA
Ilaahay wuu u daryeelaa dadkiisi

Sabuurkii 27; Sabuurkii 91

41. BAAKADDA KABRIIDKA IYO SHILINKA

Gabar oo laba iyo toban sano jirta oo ku nool waddan Masiixiyiintu lagu xadgudbaayey oo lana silcinayey, ayaa waxay ka fikiraysay inay Masiixi noqoto, laakiin waxay ka welwelsanayd wax ku dhici doono. Waxay la yaabtay oo is tiri, ‘Haddii aan Masiixa raaco, miyuu nabadayda i ilaalin doonaa oona dhibka iga ilaalin doonaa?’ Saaxiibteed ayaa waxay qaadday shilin oo ay gelisay baakadda kabriidka oo eberka ah oo kadibna ku tiri, ‘Fiiri, baakadda kabriidka waa sida jirkaaga, shilinkana waa sida ruuxdaada. Haddii aan baakaddan kabriidka ah dhulka ku tuuro, maxaa shilinkii ku dhici doonaa?’

‘Waxna, waxba ma gaari doonaan.’

‘Haddii aan gacantayda ku burburiyana?’

‘Baakadda kabriidka way kala dillaacaysaa; laakiin shilinku gacantaada ayuu ku soo haraa.’

‘Haddii aan dabka ku tuurana?’

‘Baakadda kabriidka way gubanaysaa; laakiin uma maleeynaayo in shilinku gubanayo. Waadna ka soo bixin kartaa mar labaad.’

‘Midkee baad u aragtaa inuu aad u qiimo leeyahay?’

‘Waa hubaal inay tahay shilinka.’

‘Isla sidaas ayaad jirkaaga iyo ruuxdaada u dhiiban kartaa Ciise Masiix, maalin walba. Jirkaagu mararka qaar wuu xanuunsanaa oo maalinna wuu dhiman doonaa. Laakiin adiga shaqsi ahaan, qaybkaaga oo muhiim ah weligiis ma dhiman doono. Gacmaha Sayidka Ciise Masiix waa lagaga nabadgelin doonaa cabsida iyo dembiga.’

MOWQIFKA QORAAGA:

Rabbigu wuu awoodaa inuu na ilaaliyo oo na nabadgeliyo. Qofna ma kala saari karo, waxna jirkeenna kuma dhacayaan, hadduusan Ilaahay oggolaanin isaga oo weliba jacayl ku samaynaya.

DULUCDA:

Ciise Masiix wuxuu yiri, ‘Waxyaalahaas waxaan idiinkula hadlay inaad nabad igu haysataan. Dunida ayaad dhib kala kulantaan, laakiinse kalsoonaada, anaa ka adkaaday dunidaye.’

Yooxanaa 16:33

In kastoo aan ku dhex socdo dooxada hooska dhimashada, Sharna ka baqi mayo, waayo, waad ila jirtaa.

Sabuurkii 23:4

DUCADA:

Rabbiyow, waxaad rabtaa inaan si dhammaystiran isu kaa dhiibo. Waan ogahay inaad waxyaalo ugu wanaagsan nala rabtid. Laakiin waxaan ka cabsanayaa xanuun iyo silac ama inaan dadka ka duwnaado. Waxaan ka baqayaa waxaad iga waydiisatid. Igu caawi inuu iimaankayga bato, oo aan aammino waxyaalaha dhaca inaad oggolaatay jacaylkaaga darteed.

KA FIKIR:

Heerku gaaray in iimaankaagu iyo jacaylkaagu aad Ilaahay u qabtid ku saamayn ku yeeshtaan xaaladaha fiican iyo xalaadaha xun? Sidee baad u aragtaa in iimaanka aad Masiixa ku leedahay uu is beddelo, hadday dhibaato daran noloshaada ama nolosha reerkaaga ku dhacdo?

Aamminaadda Ilaahay wax bixintiisa

Sabuurkii 31:1-5

42. WAARDIYIHII AYSAN KU DHICIN INAY DILAAN

Magaciisu waa Cabdi, wuxuu tagay waddanka Saire, isaga oo dhallinyaro ah, boqol sano ka hor la soo dhaafay inuu Injiilka ku soo wacdiyo dad aan ilbaxnimo gaarin oo dad cunayaal ah. Kadibna, naagtiisi ayaa qandho u dhimatay, Cabdina wuxuu noqday indhoole. Laakiin weli halkaas ayuu sii joogay, isagoo wax kala habeeynaayo oo kala toosinaayo, taasoo markaas ahayd shaqo diimeed oo si fiican u kala socotay. Wuxuuna ku dhex dhintay dadka uu jeclaa. Waxay ahayd mid ka mid ah booqashadiisii dhifka ahayd oo uu tagay Ingiriiska, markuu sheekadan ka sheekeeynayey. Wuxuu ahaa nin duq ah oo timo caddaan leh, laakiin wuxuu u socday si taagnaan ah oo aan cabsi lahayn, taasoo adkayd in la ogaado inuu indhoole yahay. Indhihiisu waxay u ekaayeen inay dib ugu laabteen sannadihii hore, markii uu ahaa nin dhallinyaro ah.

Isaga iyo saaxiibadiis waxay teendhadooda ku dejiyeen meel oo aqallo ku badnaayeen oona u dhow warta. Waa meel biyo ah oo qurux badan oo kala baxsan, laakiin waxaa ka buuxay jeer iyo yaxaas. Gadaasheeduna waxaa ku yaalay xudduud kayn cagaaran oo qariib ah. Laakiin dadku way wanaagsanaayeen oo waxay u keenayeen moos iyo miro kale. Markay beer qodidda iyo kalluumaysiga soo dhammeeyaan galabtii, waxay yimaadaan halkii dabka ka

shidnaa oo ay ku ag wareegsadaan oo ayna fariistaan, iyaga oo dhegaysanaya waxa nimankii dhallinyaradii u sheegayeen. Tartiib ayaa kuwa yar ogaadeen in farriinta oo jacaylka iyo nolosha weligeed ah ay xitaa toodi tahay. Hal hal ayey u dhaafeen diintooda oo aan runta ahayn, waxayna bilaabeen inay bartaan sida loogu noolaado nolosha Masiixiyiinta - daacadnimada, iyaga oo nabad la ah deriskooda, oo iskuna daryeelaya.

Dadkaas oo Afrikaankii hore ah oo diinta qaatay aad ayey geesi u ahaayeen, waayo noloshoodi waxay halis ugu jirtay ruuxaanta sharta leh, wayna adkayd in la aammino in Aabbahan cusub oo iyaga jacayl uu dhab ahaantii iyaga badbaadin karo. Waxaana jiray nin sixiroole ah oo ay ka cabsadaan, kaasoo sixirkiisu iyo mucjisooyinkiisu ay degaankaas oo dhan saamayn ku yeeshteen. Waxaa la maqlay inuu aad uga xumaaday, markuu maqlay dadkiisa oo ku laabanaya Ilaaha runta ah oo nool, dhammaan iyaga oo welwelsan ayaa sugayeen waxay argoosashadiisu noqon doonto.

Waxayna ahayd waqtiga cashada oo xerada ay ku mashquulsanayd babbiska dabkii oo dheriyo dhoobo ah soo karayey. Cabdi iyo saaxiibadiis way karinayeen cunto sidoo kale, markii ay arkeen wiil naxsan oo ka soo yeeraya xagga duurka, kaasoo gacanta wax uga sheegayey. Way tageen, si ay ula soo hadlaan, laakiin wuu gariirayey oo indhahiisna waxaa ka muuqatay cabsi. Wuxuuna cod hoos ah ku yiri, ‘Waxaan u imaaday inaan idiin digo, waa inaad halkaan ka carartaan caawa. Aabbahay ayaa idin caawin doonaa. Doontiisu diyaar ayey u tahay, wuxuuna idin ku sugaa xagga webiga caawa intaysan bisha soo bixin. Wuxuu yiri waa fursaddiinna oo keliya.’

‘Laakiin maxaan u cararaynaa? Yaa dhib noo geysan raba?’

‘Waa ninkii sixiroole oo awood badan leh. Caawa wuxuu soo dirayaa dadkiisi oo dadka dilaya. Markay mugdi tahay, ayey waran idin ku weerari doonaa. Oo mana ka baxsanaysaan.’

Saddexdood si dhaqso ah ayey isla tashteen. Waxay lahaayeen qori oo ay xayawaannada ku toogtaan, laakiin ma rabin inay ku isticmaalaan dilka dadka, mida kale maxay ka celin kartaa, haddii oo teendhadu dadkaas waran leh ku soo wareegsadaan? Sidoo kalena, waxay dhallinyaradan bareen inay ku dhiirranaadaan ilaalinta Ilaaha, iyaga oo ah Masiixin ma carari doonaan. Si kastaba ha ahaatee, meel ay u cararaan ma haystaan. Cabdi wuxuu u jeestay wiilkii oo naxsanaa, oo sugayey.

Wuxuuna ku yiri, ‘Aabbahaa mahadsanid ku dheh, laakiin u sheeg Ilaaheenna noo ma sheegin inaanu cararno. Waxaan aamminaynaa ilaalintiisa oo aan sugaynaa waxa dhici doono.’

Wiilkii wuu orday oo saddexdiina waxay isku diyaariyeen inay hurdaan. Sida caadiga ah waxay cuneen cashadood oo mugdigiina si degdeg ah ayuu u yimaaday. Weligood miyirkoodu sidaas ma ahayn oo iska eegaya dhaqdhaqadii laamaha, masaska iyo shimbiraha iyo qaylida daanyeerka. Waqti dheer ayey fariisteen albaabka teendhada, iyaga oo ducaysanaya oona sugaya. Bishii way soo baxday oo dunidoo dhan waxaa ka buxamay iftiin dhalaalayaa, laakiin saddexdii ma rabin inay soo seexdaan teendhadooda dhexdiisa. Waxay arkeen inay u roontahay inay dhintaan iyagoo soo jeeda, iyagoo u jeeda cadowyadooda beddelkii sida jiid la qabtay camal loo dilo. Waxayna go’aansadeen inay qorigii isticmaalin. Maxaa micno ay leedahay inaad dishid hal ama labo, markay lix kale ay gadaashood waranka

ka soo tuurayaan? Weliba waxay soo xasuusteen qisada ninka la yiraahdo Istefanos ee Kitaabka Quduuska ah ku jiro, kuma dhiman qori, wuxuu qaatay dabeecadda Ciise Masiix. Habeenkii oo dhan way sugeen iyagoo cabsanyey. Kadibna bishii way dhacday. Waxay ahayd xilliga qabow oo ceeryaamo ayaa ka soo kacday wartii, adduunkoo dhan ayaa ceeryaamadii dabooshay. Laga yaabaa waa hadda?

Laakiin qofna muusan imaanin, ugu dambayntii qorraxda ayaa soo baxday, nimankii daalanaa oo aan ogayn inay maalin kale arki doonaan, ayaa indho cusub ku fiirsaday ceeryaamadii kala baxaysay. Kadibna, waxay maqleen cod ka imaanaya xagga ceelka, qaxidda shidaalka iyo qodidda dhulka, qiiq ayaana ka soo baxay xafadda. Weligeedna noloshu saas dhan ma qurux badnayn! Intay teendhadoodu u gurguurteen, ayey si fiican u seexdeen. Kooxdii yareed oo Masiixiyiintana si tartiib ah ayey u yimaadeen teendhadoodii oo fiiriyeen, iyagoo cabsanaya, intay Ilaahay ammaaneen, ayeyna yaabeen, waayo waxay umaalayeen inay dhinteen. Wayna murugoodeen, si oo kuwa aabbahood lumiyey. Runtii, gacanta Rabbiga way la jirtay macallimiintan.

Bilooyin ayaa ka soo wareegatay oo dhibaataana u ma imaanin kuwa oo joojiyey inay ruuxaanta caabudaan. Qaar kale way dhiirraadeen. Jacayl iyo xoriyad ayaa ka wanaagsan addoonsiga cabsida hore. Sidoo kale ma baqaynin sida hore, waayo ninkii sixiroolaha oo duqa ahaa awoodiis way ka dhammaatay. Qaar waxay yiraahdeen aad ayuu u duqoobay, kuwa kalena waxay yiraahdeen ruuxaanta ayaa deyriley. Waxay tahayba, dadku mar kale kama baqaynin. Laakiin si kastaba ha ahaatee, Cabdi aad ayuu u yaabay hal maalin, markuu arkay duqii sixiroolaha ahaa oo ku jilba dhigtay marinka teendhadiis ah, isagoo quruxda labbiska ka hallabay

oo u ekaaday wax xun. Markii uu soo dugay, Cabdi wuxuu arkay inuu daciif yahay oona indhihiisi hog ka muuqdaan, wuxuuna yiri keliya, ‘Waxaan rabaa inaan wax Ilaaha nool ku saabsan barto.’ Waqti dheer ayeyna hadleen oo Cabdi wuxuu kagala hadlay dembi iyo toobadkeenta. Taasna si wanaagsan uma qaadanin, waayo waxaa jiray dembiyo badan iyo hal dembi oo aad uga cuslaa damiirkiisa.

Cabdi wuxuu ku yiri, ‘Qiro, si lagu cafiyo.’ Sidaa darteed, wuxuu sheegay wixi oo dhan. ‘Waxay ahayd habeenka bisha cusub soo baxaaysay.’ Wuxuuna soo diray nimankiisi oo waran leh, si ay saddexdii u soo dilaan, laakiin warankood oo nadiif ahaa ayey la yimaadeen. Dhiigna ma soo daadin. Markaasaa Cabdi waydiiyey, ‘Sababta waa maxay? Anagu ma hubaysno. Qofna iyaga ma joojin lahayn.’

Ninkii sixiroolaha wuxuu yiri, ‘Waayo waxaad ahaydeen afar qof, oo nimankayguna ma lahayn amar ay ku dilaan afar qof, mana idin kala garanaynin. Waxay sugeen ilaa ay ceeryaamada ka baabba’aan, laakiin ma baabbi’in. Saaxiibkaygiyow, yaa waayey ninka kula fadhiyey habeenkoo dhan?’ Laakiin Cabdi kama jawaabi karin su’aashaas. Rabbiga maa la fadhiyey mise malaa’igtiis ayuu soo diray? Ma garanaynin. Waxaa ku filnaa inay subixii arkeen oo odaygii sixiroole ahaana ku soo laabtay nuurkii Sayidka Ciise Masiix.

DULUCDA:

Malaa’igta Rabbigu waxay hareeraysaa kuwa isaga cabsada, Oo weliba way samatabbixisaa.

Sabuurkii 34:7

*In kastoo aan ku dhex socdo dooxada hooska
dhimashada, Sharna ka baqi maayo, waayo waad ila
jirtaa.*

Sabuurkii 23:4

Ilaahay wuu u daryeela kuwiisa –
Hagista markaad dhibaataada ku jirto

Matayos 10:16-42

DUCADA:

Rabbiyow, waad ku mahadsantahay daryeelkaad ii daryeeshid, maalin iyo habeenkaba. Waad ku mahadsantahay waqti walba oo noloshayda, markaan xanuunsanahay ama markaan khatar ku jira, waayo waad i ilaalisaa oona i badbaadisaa. Ku ilaali jacaylkaa iyo xooggaa mid walba oo caawa khatar ku jira - kuwa oo xaqdarro lagu geliyey xabsi, kuwa oo Masiixnimo darteed silac u marayaan. Jacaylkaagu ha ka qaado cabsidooda, oo ha dhiirranaadaan oona xoogaystaan. Na sii nabad iyo dhiirrigelin maanta.

KA FIKIR:

Way fududahay in xaaladda wanaagsan lagu aammino oo lagu ammaano Ilaah. Aad ayeyna u adadgtahay inaad xalaadda adag ku aammintid oo aad ku ammaantid Ilaah, laakiin aamminaadda sidan oo kale way ka farxisaa Ilaahay.

43. BUURTAY FUULI WAAYEEN

Sheekadan waxay dhacday waqtigii dagaalka sokeeye ah oo waddanka Ruwanda sanadka kun sagaal boqol iyo lixdameeyadii, markii u qabiil ku kaceen qabiil kale. Waxayna ku dhex socdeen baadiyaha oo dhan, iyagoo wata masaar, yaanbo, seef oo ay dadka ku dilayeen, waxayna gubayeen dadka guriyahooda. Xaggaa isbitaalka ku yaala oo ku dul dhisan buurta waxaa ku noolaa wadaad Afrikaan ah iyo naagtiis iyo laba kalkaalisooyin oo Ingiriis ah, Nimco iyo Sahra. Waxay sameeyaan ma garanayaan, markay arkeen qiiqa meel ka soo baxaaya. Iyagoo welwelsan, ayey seexdeen oo aroortii soo kaceen, si ay u arkaan qiiqii ka imaanayey buurta hoosteed, waxayna ogaadeen in dilayaashu soo dhowaadeen.

Miyey meel hooy ah siiyaan qaxootiyaasha guryahooda laga gubay mise way iska daayaan? Sidaas haddii ay sameeyaan, waa inay ka soo hor jeestaan kuwii habsanaa ee caasiyoobay, taasi waxay keeni karta in dilayaasha ay soo fuulaan buurta korkeeda, si ay u dhacaan oona dilaan. Qaxootiyaasha keliya maahee, laakiin sidoo kale kuwa xanuunsan oo isbitaalka joogo iyo kuwii ay hooy siiyeen. Laakiin haddii loo diido waxay dadkii badnaa ee saddex boqol ah u noqon doontaa dhimasho, iyagoo argagaxsan oo bilaabeen inay buurta soo fuulaan, iyagoo carruurtooda yar wata iyo waxay ka

badbaadiyeen alaabtooda gubanaysay. Isbitaalkan Masiixiga ah miyuu awoodi karaa inuu albaabada ka xirto dadka ka soo cararaya dilka iyo dabka oo ku celin karaa silaca? Waxay go'aansadeen inaysan u diidin dadkii ooynta oo daalnaa oo ka buuxsamay gees walba oo guriga, isbitaalka iyo kaniisadda.

Laakiin waxay ku sugnaayeen khatar, sidaa darteed, waxay iskugu yeereen shaqaalahooda. Waxay go'aansadeen in wadaadka Afrikaanka iyo Sahra si qarsooni ah ku tagaan baabuurka, iyadoo mugdi ah, iyadoo rajaynayaan inay caawimaad soo helaan. Naagtii wadaadka Maryan iyo gabadha kale Nimco waxay go'aansadeen inay joogaan oona wajihinayaan waxa imaan doona. Dhammaan waxay ku ducaysteen inuu Ilaahay ilaaliyo labadii gaariga ku baxday, iyo inuu Ilaahay siiyo xigmad iyo nabad labadii soo hartay iyo kuwii badnaa ee isbitaalka joogay. Nimco waxay soo xasuusatay sawir yar oo la siiyey. Wuxuu ahaa sawir oo ido badan ah, qaar caddaan, qaarna madow ah, iyadoo yeey xanaaqsan isku dayeysay inay weerarto. Laakiin idihii iyo yeeydii dhexdooda gacan mudan ayaa ku soo fidsan oo waxna gacantaas mudan ma gudbi karin.

Mugdigii markuu soo galayna, gaarigii wuxuu bilaabay safarka, isagoo dhex maraya gurigii gubanaya iyo kooxdii caasisay. Nimco waxay isku dayday inay dejiso cabsida martideeda oo ay qalbiqaboojiso oo si fiicanna u soo dhowayso. Ugu dambayntii, iyadoo daalan, ayey seexatay. Laakiin subixii markay soo kacday, waxay u orodday daaqaddii oo ay fiirisay. Waa hubaal inay ciidanku ay ku dhowaayeen inay buurta soo fuulaan, iyadoo badan oo argagax leh oo hubaysan oo dhiigdaadin u socda. Mana ogayn waxay samayn lahayd. Waxa keliya ay leedahay waa inay

isku qanacdo. Waxay u yeertay Maryan, si wadajir waxay ku tageen ilaa buurta hoosteeda, si ay ula kulmaan cadowgaas, nimankii oo yaaban cabsi la'aanta noocaas ah ayaa istaagay.

Nimco intay istaajisay, ayey la hadashay. Waxay u sharaxday inaysan cadow lahayn, waxa oo keliya ay halkaan ka samaynayaan waa inay dadka caafiyaan oo ay uguna sheegaan jacaylka Ilaahay. Markaasaa si deggan hoggaamiyahooda ugu jawaabay, taasi way fiicantahay, laakiin waxay hoy u siinayeen cadowyo oo haddii aan niman gaar ah la dhiibin, habeennimo way weerari doonaan isbitaalka, oo soo afduubayaan qaxootiyaasha oo ayna gubayaan dhismaha. Markaasaa codkii Nimco oo u jawaabay ula ekaaday qof kale. Iyadoo yaaban oo aanan cabsanaynin, ayey is maqashay, iyadoo dhahaysa, 'Ma soo fuuli kartaan buurtan; waa buurta Ilaahay.'

Waqti aammusnaan ayaa dhacay, markaasaa wiil oo indhihiis ay nacayb ula ololayaan ayaa wejigiis u soo dhoweeyey iyada oo ku qayliyey oo yiri, 'Ma jiro Ilaahay, naagyahay.'

Way is maqashay, iyadoo dhahaysa, 'Haa, wuu jiraa, waadna arki doontaan ma idiin oggolaan doono inaad buurtan fuushaan. Wuuna ilaalin doonaa.'

Waxaa jiray kuwa xanaaqsan oo gunuunucaya, intay hor yimaadeen ayey rabeen inay dhinac u tuuraan oo ay sii dhaafaan, laakiin Gacantii mudsanayd ayaa soo fidsantay. Markaasaa fallaagadii waxay samayaan waayeen oo dib u dhaceen. Oo Nimco iyo Maryan way laabteen oo keligood fuuleen buurtii. Laakiin khatartii weli maysan dhammaanin. Intay qaxootiyaashii iskugu soo yeertay, ayey uga sheegtay hanjabaaddii, waxayna kula talisay inay xudduudka Yugaandha ku cararaan habeenkii marki la gaaro. Markay la

hadashay, way ducaysteen, markaasaa aammusnaan wayn dhacday dadkii badnaa dhexdooda. Dadkii badnaa oo cabsi ka buuxdo ayaa waxay waydiisteen ilaalinta Ilaahay mar kale. Laakiin aammusnaantii waxaa beddelay shanqarta dhibcaha roobka ee saqafka, markaasaa roob badan da'ay oo biyaha hoos u qulquleen. Weerarkii lagu waday buurta waa u suurtoobi wayey dhiiqada iyo biyo qulqulaya dartood, qaarna waxay bilaabeen inay farxad darteed u heesaan.

Galabtaas ayaa gaarigii kharriban soo maray jidkii oo daad leh oo mugdina ah. Wadaadkii iyo Sahra way soo laabteen, iyagoo soo heleen awood ay ciidanka ku wacdaan. Waqtigan la joogo way nabad qabeen, maalmo yar kadibna qaxootiyaashii waxaa lagu guray gaariga dowladda oo la weheliyey ilaa xudduudka Yugaandha nabadgelyadooda darteed.

DULUCDA:

Ballanqaad haddii aadan hubin waxaad samaysid:

Laakiin haddii midkiin xigmad u baahan yahay, ha ka baryo Ilaah, kan kulli si deeqsinimo ah u siiya isagoo aan canaan, oo waa la siin doonaaye.

Yacquub 1:5

Ballanqaad haddaad su'aal ka qabtid iimaankaaga:

Laakiin goortay idin gacangeliyaan, ha ka welwelina sidaad u hadli doontaan ama waxaad ku hadli doontaan, waayo, waxaad ku hadli doontaan ayaa

saacaddaas laydin siin doonaa. Waayo, ma aha idinka kuwa hadlayaa laakiin waa Ruuxa Aabbihiin kan idinka dhex hadlayaa.

Matayos 10:19-20

DUCADA:

Rabbiyow, markaan xaalad adag ku jiro oo aan garanaynin waxaan sameeyo xigmaddaada i sii. Marka aan fursad ku hadlo helo oo aan garanaynin waxaan ku hadlo, eraydaa i sii. Isku keen dhowee, si aan ugu dhowaado waxyaalaha kugu saabsan waqtigaan rabo, waadna ku mahadsantahay, waayo mar walba waad ila jirtaa.

KA FIKIR:

Ilaahay sareentiisa way ka wayntahay xoogga binu-aadanka. Marka Ilaahay muxuu u aqbalaa inaan dhibaato iyo niyadjab ku marno nolosheenna? Maxay dadka aan waxna galabsan u marayaan dhibaato? Mar ayaan hor istaagay warshadda roog lagu sameeyo oo waxaan fiirsaday dadka oo tolayaan roogga ugu caansanaa adduunkoo dhan. Agtood waxaa yaalay dun midab iftiimaya iyo mid madow ah leh. Midabka iftiimaya aad ayuu qofka u soo jiidayaa, laakiin farahooda waxay u isticmaalayeen labaduba. Markaan wareegsaday oo dhinaca kale ka fiiriyey oo aan arkay naqshad quruxda badan oo soo muuqanayso waan ogaaday sababta. Naqshadda way hallaabi lahayd, haddii aysan lahayn dunta madow.

Sheekada ku xigto waa sida wax madow oo xanuun leh oo Ilaahay u isticmaalay, si uu naqshad qurxoon uga sameeyo.

Waxa walba wanaag ayey ugu shaqeyaan

Rooma 8:28

44. IFTIINKA AAD U IFAYA

Sida kuwa kaloo badan ee wiilal arijir ah, Xirsi wuxuu u xiisay inuu dugsiga aado oo waaye-arag kordhisto. Noloshu arijirku ee xagga waddanka Labanon ma ahan mid loo xiiso. Laakiin Xirsi waxaa loo baahnaa inuu subax walba ariga u foofiyo cawska, oo ilaaliyo saacaddo dheer ee maalinta oo dhan, kadibna xaafadda u soo celiyo habeenkii. Sidaan ayuu wiilka ku qaatay waqtigiisii ee carruurnimada, laga yaaba inuu sii wadi doono shaki la'aan waqtigiis badan oo soo socda oo noloshiisa ah ilaa ay wax ka dhacaan maahee.

Waxay ahayd maalin caadi ah. Xirsi meelaha uu iska warwareegaayey, goortii ay xoolahu daaqayeen, markuu arkay wax oo dhalaalaya oo qaybteeda qaar ku qarsoonaayeen dhirta, intuu soo dugay ayuu fiiriyey. Miyey ahayd dhagax siman? Wuu qaaday oo wixii ku dhacay waxaa laga yaabaa inuusan xasuusan, waayo wuxuu qaaday bam aan weli qarxin. Waxa ku xigay oo uu oгаа inuu dareemay xanuun iyo mugdi - dad badan ayaa ku wareegsamay, laakiin mar walba waxay ahayd mugdi, xitaa ma kala sheegi karin inay tahay habeen ama maalin.

Laakiin ugu dambayntii, markuu fiicanaaday oo awooday inuu si fiican u fikiro, wuxuu ogaaday inuu isbitaal ku jiro, oo inyar inyar kadibna wuxuu ogaaday inay ahaan doonto mugdi noloshiisa inta ka hartay. Waayo bamkii labaadiisa indhood ayuu tiray. Wuxuuna ogaaday inuu lumiyey gacantiisi midigta

ah, laakiin khasaaradan aad ugama xumaanin sida uu uga xumaaday, markuu lumiyey aragtidiisi. Wuxuu umaleeyey inuusan weligiis tan ka haraynin, wuxuuna rabay inuu dhinto. Markay guriga geeyeen, wuu iska jiiifay isaga oo derbiga fiirinaya oo qofna ku mashquulaynin.

Marti badan ayaa timid, si ay naxariis u tusaan shilka dhacay darteed. Inkastoo u si fiican ula hadlaynin, waxay ku hadlayeen wuu maqlayey. Waxba muusan xiisaynin, ilaa ay ka gaartay maalin oo laba naag oo shisheeya ah yimaadeen. Markaasaa midkood tiri, 'Waxaan u imaanay inaan caawino oo aan geyno dugsiga dadka indhoole ah oo ku yaala magaalada Beyruud.' Way sii wadday oo ay ka hadashay dugsigan aan caadi ahayn. Haddaba wiilashu waxay barteen sida wax loo akhriyo iyo sida gacamahooda loogu shaqaysto. Waxay u ekaatay inay faraxsanyihiin, oo Xirsina geeskiis ayuu isku riday, oo iska dhigay qof aan ku mashquulaynin sheekadood, laakiin wuu dhegaysanaayey. Waxyaalaas oo dhan micno la'aan bay ula ahayd. Sidee buu wiil indhoole ah wax ku akhrin karaa, oo shaqayn karaa oona farxi karaa? Wiilasha indhoole ayaa derbiga fiiriyaan, iyagoo sugaan inta noloshu ka dhammaato. Waxay samayn karaan malahan. Sidaa darteed, martidii way tageen, laakiin markii ay tagayeen oo ay nabadgelinayeen, waxay cod hoos ah ku yiraahdeen, 'Haddii uu imaado, waxaan ka ballanqaadaynaa boos.'

Waqti ayaa ka soo wareegtay oo sheekadan dugsiga weligeed ma la soo qaadin haddana. Laakiin Xirsi mar walba ayuu ka fikirayey, waayo habeenkiisa oo dheer wax kale uu ka fikiro ma lahayn. Si tartiib ah, wuxuu ogaaday inaysan waxba ka qaadaynin, hadduu isku tijaabiyo. Maalin waalidkiis ayuu ka yaabiyey, markuu soo jeestay oo yiri, 'Dugsiga carruurta

indhoolayaasha oo ku yaala magaalada Beyruud! Waa inaad halkaas i geysaan, halkaas ayaan tagi rabaa.’ Sidaa darteed, way is diyaariyeen oo ay ka safreen magaaladii buuraha lahayd ilaa magaalada wayn oo badda ku taalo, waxayna dhex mareen waddada dadka ku badnaayeen.

Markay ciwaanka heleen oo ay albaabka soo garaaceen, waxay dareemeen welwel, laakiin si edeb leh ayaana loo soo dhoweeyey, oo lagu hoggaamiyey qolkii la isku sugo. Markii ay marayeen, ayaa waalidkiis arkeen wiilal oo samaynaya dambiil iyo kursi, wiilal kaloo akhrisanaya oo farahood ay bogagta buugaag waawayn dul marinayeen, waana run, way faraxsanaayeen. Aad ayey yaab u ahayd. Maammulaha ayaa u yimaaday oo sheekadoodi dhegaystay, laakiin aad ayuu uga xumaa, markuu arkay wiilka oo aammusan oo iska fadhiyo. Markuu waxa walba maqlay ayuu murug darteed madax u lulay. Wuxuuna yiri, ‘Ma noqon karto, waayo waad soo daahdeen, boosaskii oo dhan way buuxsameen.’

Laakiin wuxuu go’ aansaday wiilka aammusan la’aantiis. Markaasaa si aan la filanaynin kor u fiiriyey oo aad u ooyey, isaga oo leh, ‘Laakiin waad iga ballanqaadeen.’ Isagoo ooynta, ayuu ka baryey inay fursad siiyaan. Maammulahiina markuu arkay wiilka oo aad ka xumaa, ayuu ka ballanqaaday inuu boos siiyo. Sidaa darteed, Xirsi wuxuu bilaabay waxa u ahaan doonto shaqadiis inta noloshiisa ka dhiman, waayo isaga ayaa hadda ka ah macallinka ugu wayn dugsiga indhoolayaasha. Ilaa bilowgii ayuu diiday in curyaanimadiisi ay caqabad u noqonin, wuxuu bartay sida loo akhriyo farta indhoolayaasha, sida kuwa kale isagoo isticmaalaya gacantiisa bidixda ah. Dambiil samaysku wuu ku adkaa marka ugu horreeyso, laakiin wuu ku guulaystay, markuu usha ku hoos qabtay gacantiisa midigta ah, maammulihii mar walba Ilaahay

ayuu u mahadceliyaa inuu aqbalay wiilkan xiisaha badan ee dadaala, kaasoo muujintiisu ay tartiib ka beddelmatay caajislow oo noqday wiil caqlilow ah.

Sanado kadib, hal galab, wiilasha oo dhan qolka wayn ayey iskugu imaanayeen oo ay dhegaystaan hadallo ku saabsan Kitaabka Quduuska ah. Markuu hadalku dhammaado qofkii la hadlayey, wuxuu waydiiyaa in mid ka mid ah wiilasha uu la wadaagi karo, waxay barteen. Xirsi wuu soo kacay. Wuxuu si deggan u yiri, ‘Waxaan Ilaahay ugu mahadcelin rabaa inaan indhoolayaasha, waayo iyada la’aanta ma garan lahayn iftiinka dunida.’

DULUCDA:

Oo waxaynu og nahay in wax waliba wanaag ugu wada shaqeeyaan kuwa Ilaah jecel, xataa kuwa qasdigiisa loogu yeedhay.

Rooma 8:28

DUCADA:

Rabbiyow, waxaan kuugu mahadcelin rabaa waxyaalaha aad noloshayda ku soo oggolaatay oo aad u adkaa, oona mid niyadjab ah. Igu caawi inaan aammino inay ka tirsantahay naqshadda. Iga ilaali gunuunuc iyo shaki. Iga dhig mid faraxsan oo ku ammaanaya, waayo waan ku aamminaya.

KA FIKIR:

Miyaad dib u fiirin kartaa waxyaalaha aan farxad lahayn ama xanuun badan oo noloshaada ka dhacay, oo aad haddana aragtid waxyaalo ka fiican inay ka soo baxeen, haddii dhib dhaci lahayn?

DHIMASHO IYO WIXII KA DAMBEEYA –
DUNIDA IYO WIXII KA DAMBEEYA

Dhimasho

1 Korintos 15

45. U DHASHAY DUULID

Shimbirtu waxay tiri, ‘Soo bax fadlan, si dhaqso ah ma socon kartid, miyaa? Qorraxdu way ku ifaysaa caleemahaas. Waxaan umaleeyaa inaad inta sare fuuli karin, laakiin dhabarkaa waad ka dareemi kartaa kulaylka.’

Diirdiirtu waxay tiri, ‘Haa’, iyadoo tartiib caleenta cunaysa, ‘Waan ka helaa kulaylka. Laakiin maxaa yeelay qorraxdu marmar ayey iftimaysaa godka, ma arko sababta aan kor u sii fuulo. Waan ku qanacsanahay gurigayga oo xitaa waxaa jiraa caleemo aad u fiican.’

Shimbirtii waxay ku qaylisay oo tiri, ‘Godad! Caleemo! Haddii aad garan lahayd keliya! Weliga ma u xiistaa qorraxda iftiinkeeda, iyo geedaha lulmaaya, cirka buluugga ah iyo shimbiraha heesaya iyo daruuraha cad iyo dabaysha?’

Diirdiirtii waxay ku jawaabtay, ‘Maya saaxiibtay, inkasto aan hubo inay wanaagsanatahay. Laakiin mar walba waxaan buluugga ka dooran lahaa cagaar, weligayna ma jeclaanin dabaysha. Geedaha lulmaayana, waxaan ka sii helaa meel deggan. Way ka nabadgeliyo badantahay.’

Shimbirtii way qososhay. Waxayna ku tiri, ‘Waan ogahay inaad is celin karin, laakiin waan ku faraxsanahay, aad ayaana u faraxsanahay inaan baalal ku dhashay.’ Waxay ku duushay

geedka quraca oo lulmaayey oo halkaas joogsatay, iyadoo heesaysa oo heesaysa.

Diirdiirtii waxay gabalkeeda gadaal kor isku qaadday, ayey waqti dheer dhegaysatay. Heestii farxad lahayd ayaa soo dhex mariyey caleemihii. Way gunuunucday oo ay tiri, ‘Baalal? Waan yaabanahay!’ Jirkeedi si aan la filanaynin ayuu dareemay daal iyo culays xadka aragtideeduna wuu dhowaa. ‘Laakiin anigu la ii ma dhalin inaan geedaha korkooda joogo, iyo cirarka ballaaran iyo meelaha bannaana oo ay ka hadlayaan... maba ogi siday u egyihiin, waxaan u dhashay godad iyo duur, iyo dhirta gaagaaban, taasna nolol xun maahan, markay sii jirayso.’ Way sii wadday inay caleenteeda ay cunto, iyadoo dareemaysa qanacsanaan. Laakiin waxay ku jirtay niyad yaab leh oo mana degnayn. Waxayna tiri, ‘Waxaa laga yaabaa inaan duqoobay mise saan ma dareemi lahayn. Baalal... Baalal!’

Waxaa korkeed ka jiray dhaqdhaqaaq yar, markay kor firinaysay, waxay aragtay balanbaalis oo ku kor wareegaysay ubaxa oo hawo qaadanayso. Iftiinkii qorraxda oo dhex marayey baalasheeda. Diirdiirtii waxay is tiri, ‘Weligay ma arkin wax saan u khafiif ah oo quruxsan ah’, waxayna damiirkeeda ka dareentay xumaan, waayo jir wayn ayey lahayd. Waxay rabtay inay is qariso, laakiin waqti ma haysan. Balanbaalistii way aragtay oo ay ku soo ag degtay laantay cunaysay, wayba is ilowday jacaylkay u qabtay iyo quruxda martideeda darteed. Waxay cod hoos ah ku waydiisay, ‘Halkeed ka timid? Ma tihid kuwa godadka.’

Balanbaalistii way qososhay oo ay tiri, ‘Adiga xitaa, waxaad halkaan ku tahay marti keliya. Waxaad u dhalatay iftiinka, baalasha, hawada iyo cirka buluugga ah. Waxaan u imaaday inaan arrintan kuu sheego.’

Diirdiirtii, iyadoo neeftuuraysa, ayey tiri, ‘Ma garanayo waxaad ka hadlayso, xitaa... mararka qaar waxaan leeyahay dareen yaab leh inaan godkan shisheeyaha ku ahay... wax kale ayaa jiraa... laakiin runtii, anigaan tartiib u socda oo jirka culus leh, weligay sidaada oo kale ma noqonayo. Tani sidee ayey ku dhici kartaa?’

Balanbaalistii intay neefsatay, ayey tiri, ‘Weli ma ii muuqato waxaad ahaan doontid, laakiin waxaan ogahay inaad sidayda noqon doonto. Ha ilaawin inaad u dhalanin inaad godadka joogto. Waa qayb ka mid ah safarka. Waxaad u dhalatay inaad duushid...’ laakiin codkeeda lama maqlaynin, waayo way duushay, diirdiirtiina cidla ayey ku soo hartay, iyadoo rabta baalasheeda. Waxay isku dayday inay dhowr caleemo cunto, laakiin ma u dhedhemaynin. Malahayn waxa dejinayey. Galabtii markii la gaaray, way daashay oo ay isku dhex duudduubtay godkii, kaasoo nolosheedoo dhan gurigeeda ahaa. Waxay fikirtay oo tiri intaysan seexan ka hor, ‘Laakiin waxaan leeyahay dareen inaan halkan sii joogi doonin. Waxaa jira meel kale!’

Way seexatay, oo sii seexatay. Waxay isku kor samaysay dahaarka, kaasoo u adkaaday sida dahaar, kadibna waxaa qariyey roobka iyo caleemaha. Deriskeeda oo godka ku jira, jirarka ku nool beerta, xiddigdhulka, reerka geesoolaha yaryar oo dhan waxay umaleeyeen inay dhimatay, aad ayeyna uga xumaadeen, waayo way wanaagsanayd oo edeb bay lahayd, wayna u xiiseen. Laakiin maysan dhimanin; ma ahan ugu dambayntii! Maalin waxay lahayd riyo aan caadi ahayn: wax ayaa meel fog uga yeerayey, laakiin si dhaqso ah, sida qaylada gambaleelka oo meel fog ku jira oo farxad leh. Laakiin way xirxirnayd oo uma jawaabi karin. Waxayna fikirtay, ‘Kama soo bixi karo xabsigan, anigoo jirkayga daciif

yahay, laakiin haddii aan ka jawaabin wacitaankan, waan garanaya inaan dhiman doono.’

Kadibna waxay ogaatay inay riyo ku jirin. Waxay la dhibaatoonaysay xoog ay weligeed lahayn, silsiladaheedana way furmayeen. Waxay isku riixaysay iftiinka iyo kulaylkii iyo heestii shimbirta. Mana fahmi karin xooggeeda waa sida ay mar labaad u dhalatay camal. Waxayna cod hoos ah ku tiri, ‘Waan ka duwanahay, jirkayga ma ahan culays iyo mid tartiib ah. Wacitaankaas wuu iga waynyahay, laakiin waan kacayaa. Waxaan umalayn jiray inaan cajiib dareemayo, markaan godka wax yar ka dul kaco, laakiinse kuma ihi shisheeya hawadan macaan. Waxaan dareemayaa qanacsanaan buuxda... Tani ayaan u dhashay.’

Intay aammustay ayey ku dul degtay ubax oo waxaana ku soo biiray balanbaalis qurxoon oo buluug ah. Waxayna ku tiri, ‘Ku soo dhowow kooxdeenna, waan u jeedaa in baalashaadu si dhif ah u furmeen. Ii oggolow inaan ku tuso halkii loo mari lahaa quraca. Anagoo dhan ayaa halkaas joogna.’

‘Baalal!’ diirdiirtii yarayd inyar ayey suuxi gaarin. Yey tahay oo maxay tahay? Ceeb ayey ku hor dareentay kuwaan qurxoon oo shisheeya ah, oo si aan caadi ahayn ayey ugu duushay xagga shimbirta ku qubaysato. Iyadoo aan garanaynin, waxay samaynayso, ayey hoos biyihii dhex fiirisay oo ayna aragtay qaabkeeda. Waxay aragtay balanbaalis heer sare ah oo guduudan oona leh baalal madow oo dhibicyo guduudan leh. Waxayna cod hoose isku tiri, ‘Waxaan u dhashay inaan duulo, waxaanna u dhashay iftiinka.’ Intay baalasheeda kala fidisay, ilaa meesha ugu dambayso ayey raacday hoggaamiyaheeda oo dhalaalayey oo ay ku biirtay kuwa kale oo dul joogo quraca.

MOWQIFKA QORAAGA:

Waayo waxaan leennahay xad, mana garan karno kaamilnimada waxay tahay. Laakiin xaqiiqdii ma ogaan karno tusaale ahaan nolol kaamil, markaan dhimano kadib, ama jir kaamil ah, kama dhigayo waxyaalaha inay run ahayn. Adduunkeenna kama dhex aragno malayiin xiddigo ah oo ku jira meelaha bannaan, laakiin waan ognahay inay halkaas joogaan.

DULUCDA:

Sarakicidda kuwii dhintayna waa sidaas oo kale. Waxaa lagu beeraa qudhun, waxaana lagu sara kiciyaa qudhunla'aan. Waxaa lagu beeraa maamuusla'aan, waxaana lagu sara kiciyaa ammaan, waxaa lagu beeraa itaaldarro, waxaa lagu sara kiciyaana xoog. Waxaa la beeraa jidh naf leh, waxaana la sara kiciyaa jidh ruux leh. Dhammaanteen waa layna beddeli doonaa.

1 Korintos 15:42-44, 51

Oo sidaynu ugu eg nahay kan cammuudda ah, sidaas oo kale ayaynu ugu ekaan doonnaa kan jannada.

1 Korintos 15:49

DUCADA:

Waad ku mahadsantahay Rabbiyow, farxadda, xoogga iyo quruxda oo dadka dhintay, iyagoo aaminsan Ciise Masiix, waadna ku mahadsantahay maalinta aan haddana kulmi doono.

KA FIKIR:

Ciise Masiix wuxuu yahay barta taariikhda iska beddeshay, isagoo dhintay, kana sarakacay dhimashada kadibna is tusay isaga oo nool niman iyo naagaba ... sidaa darteed, dhimashadu runtii ma ahaan dhammaadkii. Waxay tahay bilow cusub.

46. TALLAABADA SOCODKA HABEENKII

Sayidku wuu sii tagaayey, oo qofna ma ogayn waxay u dhacaysay. Aad ayey u xiiso lahayd, waayo adeegayaashu wax badan ay ka hadlaan ayey lahaayeen. Sayidku wuxuu ahaa dhallinyaro oo mana guursanin, qaar waxay cod hoos ah ku yiraahdeen inuu naag la soo laaban doono. Qaar kalena waxay yiraahdeen, wuxuu tagay safar ku saabsan ganacsiga oo laga yaabo inuu dibadda tagay; waayo dhogortiisi, khamrigiisi iyo sarreenkiisi waxaa laga garanayey waddankoo dhan. Mid waa hubaal, waxay noqon doontaa maqnaanshaha dheer. Wuxuu ninka maammulaha ah siiyey tilmaamaha saxda ah oo ku saabsan xiiridda iyo goyska, wuxuuna ugu talagalay inuu xilliga xagaaga soo maqnaado; waxaa kalo uu la hadlay maammulihii beerta canabka ka shaqeeya, sidaa darteed, laga yaabaa inaan soo laaban doonin ilaa bilowgii dayrta. Dabcan, wuxuu bixiyey tilmaam caddaan ah oo ku saabsan sida guriga loo maammuli lahaa. Qof walba wuu ogaa in shaqadiisu ay sida caadiga ah sii socon doonto.

Wuxuu baxay subax wanaagsan, isagoo ballanqaaday inuu mar dhow soo laaban doono. Adeegayaashii way fiirsadeen, isagoo gaariga xagga togga ku sii wadayey oo waxay lahaayeen dareemo kala duduwan. Wuxuu ahaa nin naxariis leh oo xaq ah, iyagoo dhan ayaa xushmeeyey, laakiin shaqadiisa wuu ku adkaa. Oo qaarkood waxay ka

heleen rajada ay caajis ku ahaadaan intuu maqanyahay. Maammulaha wuxuu rabay inuu caajislow noqdo intuu sayidka ka maqanyahay, oona aad isku mashquulinin sida waxa loo qabto, shaqadood ayey ku laabteen si tartiib ah.

Hal iyaga ka mid ah ayaa illin isku celinayey, isagoo fiirsanaya qofkii dheeraa oo xoogga badnaa oo laga dhex arkaynin muuqaalka geedaha quraca ah. Aadan wuxuu u dhashay addoonnimo, wuxuuna ku koray xukunka sayid aad shar u leh. Isagoo shaqo badan sameeyo, marna aad u gaajoonaya, marar badanna si xun loo garaaco. Laakiin sayidkiisa oo hadda joogo mar ayuu yimaaday guriga inuu adeego, wuxuuna arkay cunugga jirkiisa oo nabarro lahaa iyo muujintiisa argagaxsan. Aadanna weligiis ma iloobin araggiisi ee naxariista lahaa iyo carada ka muuqato indhihii martida. Isla markii ayuu waydiistay inuu iibsado wiilkii, qiimo badan ayuuna ku bixiyey xornimadiisa; isaga oo yar oo qurux badan wuxuu u qalma addoon qiimo leh.

Haddaba, sayidkiisa cusub kor ayuu u qaaday oo faras hortiiisa taagan saaray, gacantiisa naxariista leh ayuu ku qalbiqaboojiyey, isagoo ka ballanqaadaya. Markay guriga soo gaareen, Aadan wuuna jeclaaday ninkii isaga soo badbaadiyey jacayl wayn ayuuna u qaaday siday u sii socdeen. Wuxuu samaynayey shaqo oo is-hooseysiin ah: wuxuu xaaqay deyrka, wuxuuna ilaaliyey eyaha, wuxuuna ag seexdaa albaabka, haddii ay martidi habeenkii yimaadaan uu ka furo. Laakiin wuxuu u shaqaynaayey jacaylkuu sayidkiisa u qabay dartiis, iyo farxadda nolosha waa inuu u adeego isaga oona ku dhowaado, sidaa darteed, Aadan wuu iska faraxsanaa.

Sidoo kale wuu u adeegi lahaa. Toddobaadyada dhaqso ayey u dhammaanayeen, isagoo shaqadiisa ku dadaalaya, markii

sayidkiisa soo laabtana, wuxuu arki doonaa in deyrku nadiif yahay oo eyuhuna fiicanyihiin oo xaalad fiican ku jiraan. Intuu gacma-dheerehiisa kor u laabtay oo isku diyaariyey awooddaas, markaas ayey tii cunto karinaysay aad u qosashay. Waxayna tiri, 'Ilaahay ha ku barakeeyo! Qof walba wuxuu umaleeyaa in sayidku caawa soo laabanayo!'

Waqti badan ayaana tagay si dhaqso ah. Idihii waa loo xiiray oo gurashadiina waa laysku aruuriyey, khamrigiina waa la soo miiray. Xagaagiina wuu dhammaanayaa, Aadan mar walbana wuxuu dhex socdaa togga, iyadoo qaboob ay tahay galbihii laga yaaba... Waa hubaal inuu mar dhow imaan doono! Aad uma uu daryeelin guriyaasha addoommada maalmahan. Qof walba wuu murmaa oona gunuunucaa, oo waxayna xamanayeen maammulaha faa'iidada uu samaysanayey intuu sayidka joogin. Maammulaha laftirkiisa bannaanka lagu ma arko waqtiga shaqada la hayo, waana la sheegay inuu u guuray gurigii sayidka oo halkaas ayuu saaxiibadiis kula dabbaaldegaayey, isagoo isticmaalaya khamrigii hore ee sayidkiisi.

Laamaha geedahana waxay isku beddelayeen midab dahabi ah, roobkana wuu ku da'ay, laakiin weli sayidku ma imaanin; markaas ayaa sheeko bilaabatay. Kuwa jidka ku safraya way yar yihiin, sidaa darteed, waxaa guud ahaan laysku raacay inuu imaan doono xilliga guga, haddii ay suurtagal noqoto. Qaar waxay yiraahdeen, wuxuu aaday dibadda oo haddaba qofna badda ma soo mari karo, waayo duufaanta ayaa kacsan. Qaar kalena waxay umaleeyeen in tuugo ay weerareen isaga oo dhammaan way wada murugsanyihiin. Haddaba, gurashadu way dhammaatay oo khamrigana waxaa lagu shubay weel wayn, kuwii ilaalinayey waxay noqdeen caajislowyaal, wayna sakhraansanyihiin. Qof walba wuxuu

sameeyaa wixii isaga ka farxiyo oo wayna shaqaystaan. Laakiin Aadan keligiis ayaa u shaqaya jacayl dartiis.

Kadib, maalin waxaa dhacay wax xiiso leh oona sheegaya. Maammulahana wuxuu iyaga dhan ku casumay dabbaaldeq wayn oo lagu qabtay qolka wayn. Wax ayaa loo dabbaaldeqayey, inkastoo oo qofna ogayn waxa laga dabbaaldeqayo, waxay ogaayeen in loo sheegi doono. Aadan wuxuu ku fikiray in loo sheegi doono soo laabashada sayidka. Wuxuu dabbaaldeqii yimaaday, isagoo faraxsan oo rajo indhihiisana ka iftiimayaan. Isagoo yaaban ayuu agagaarkiisa iyo miiska cuntada kor buuxdo fiiriyey. Laba ido oo sayidkiisa leh ayaa la qalay oo lagu kariyey malab, qaybihii hilibka macaanaa waa laygu aruuriyey oo waxyaalahaas oo dhan waxaa laga sameeyey sayidka weelashiisa waynayd. Kadib, maammulaha intuu kacay, ayuu miiska garaacay, aammusnaantii dadka ayuu ku sheegay war isaga soo gaaray oo ku saabsan dhimashada sayidka, oo dabbaaldeqana wuxuu ahaa inuu la wareego booskiisa. Wuxuu iyagoo dhan u casumay inay isaga daacad u ahaadaan.

Si nasiib wanaag ah, Aadan wuxuu fadhiyey meesha ugu dambaysa miiska, isagoo la joogayso adeegayaasha ugu hooseeya, qofna muusan arkin inuu qolka ka soo baxayey. Wuxuu u orday sariirtiisa caws ka samaysanayd oo albaabka agtiisa, intuu istaagay, ayuu aad u ooyey ilaa uu ka ooyay waayey. Oo eyaha waawaynaa baqdinta leh waxay dareemeen dhibkiisa, intay u yimaadeen, ayey ag fariisteen oo ay aayar sankooda ku taabanayeen. Tani way qalbiqaboojisay, waayo iyaguna sayidkay jeclaayeen.

Qaylada ka imaanayso qolka aad ayey u dheereed, markay adeegayaashii dhalo ka dhalo cabeen, laakiin Aadan wuxuu jifay, isagoo wejigiis oo hoos u jeeday oo cidlo dareemaya,

isagoo isku dayeyo wuxuu samayn lahaa. Waayo, weligiis daacadnimadii uu u qabay sayidka qof kale ma siinayo.

Kadibna, si kadis ah, ayaa eygii waynaa oo ag joogay wax dareemay, kan lugihiisi fadhiyeyna wuu guuxay oo madaxiisa kor u qaaday. Aadan intuu fariistay, ayuu dhegastay, laakiin waxba muusan maqlaynin, waxaan ka ahayn qaylida iyo qosolka kuwii qolka ku jira oo sakhraansanaa maahee.

Kadibna, eyihii waxay bilaabeen inay aad u qayliyaan oo ay tageen xagga albaabka. Aadanna wuu soo qabtay oo iskuna dayey inuu iyaga celiyo; laakiinse gacmihiisu xoog ay ku celiyaan malahayn, waayo eyuhu waxay maqleen socod tartiib ah, waana ogaayeen. Bannaanka waxay u soo baxeen bishii oo iftiimaysa oo ay ku boodboodeen muqaal dheer oo ag istaagnaa faraskii oo ku jira deyrka, kadibna Aadan sidoo kale wuu ogaaday. Intuu istaagay, ayuu fiiriyey sayidkiisii, isagoo garan waayey, wuxuu ku hadli lahaa.

Markaasaa sayidkiisi ku yiri eyihii, ‘Is dejiya, haddaba aammusa.’ Eyihii intay foorarsadeen, ayey sayntooda wareejiyeen si xoog leh. Kadibna, intuu hoos fiiriyey wejigii cad oo illin leh, ayuuna ogaaday in wax ay qaldanyihiin. Markaasuu si naxariis leh u waydiiyey, ‘Maxaa dhacay Aadan, ma adiga keliya ayaa igu soo dhowaynaya guriga? Waa maxay qaylidan aan maqlayo, oo maxay nalku uga shidanyihiin qolka wayn? Aawayna adeegayaashii kale?’

Aadan wuxuu cod hoos ah ku yiri, ‘Way dabbaaldeqayaan, sayidow, waxay umaleeyeen inaad dhimatay.’ Intuu fariistay, ayuu wejigiisa gacanta ku qariyey. Sayidkii markuu hadlay codkiisii murugo, ayaa ka muuqatay, wuxuuna yiri, ‘Sidee bay ku dhacday in adiga keligaa aad dabbaaldeqan ku jirin?’

Aadanna intuu afka furtay, ayuu halkaas oo bishu jirto ku sheegay waxa qalbigiisa ku jira. Wuxuuna yiri, ‘Miyaadan qiimahaas igu bixinin, sayidow, oo aad iga dhigin adeegahaaga? Miyaadan iga ballanqaadin inaad soo laabato? Sidee baan ugu dhaaran karaa inaan mid kale daacad u noqdo? Anigu miyaan kaagi ahayn, sayidow? Miyaanan adeegahaaga ahayn ilaa dhammaadka?’

Wuxuu umaleeyey in mid eyaha ka mid ah ay sankooda saarteen madaxiisa, laakiin kadib wuxuu ogaaday inay tahay gacanta sayidkiisa oo timahiisa dul saarantahay. Sayidkiina wuxuu yiri, ‘Aadan, maaha adeege, laakiin waxaad tahay wiilkayga ilaa dhammaadka, kaalay aan gudaha tagnee.’

MOWQIFKA QORAAGA:

Mararka qaar waxay u egtahay inay shartu xukunto dunida, laakiin dadku waxay iloobeen inuu Ciise Masiix ballanqaaday inuu soo laaban doono. Xitaa calaamado badan ayuu tusay oo ku saabsan soo laabashadiisa, taasoo lagu qoray Axdiga Cusub. In ku filan oo calaamadaas waa loo oofiyey Masiixiyiinta badan inay ka fikiraan imaanshaha Ciise Masiix inuu dhowyahay.

DULUCDA:

Ciise Masiix wuxuu yiri, ‘Oo haddaan tago oo meel idiin diyaariyo, mar dambe waan soo noqon doonaa, oo xaggaygaan idiin qaadan doonaa, in meeshaan joogo, idinkuna aad joogtaan.’

Yooxanaa 14:3

Sidaa darteed idinkuna diyaar ahaada, waayo, saacad aydnaan u malaynaynin ayaa Wiilka Aadanahu imanayaa.

Matayos 24:44

DUCADA:

Waad ku mahadsantahay, Rabbi Ciisow, ballanqaadkaaga inaad soo laaban doonto oo aadna carruurtaada guriga geyn doonto. Inkastoo aan garanaynin tani markay dhaci doonto, i bar inaan diyaarsanaado oo aan sugo soo laabashadaada. Waadna ku mahadsantahay farxadda cajiibka ah oo aan lahaan doono, markaan ku aragno.

‘Haddaba kan waxyaalahan ka markhaati furayaa, wuxuu leeyahay, ‘Haah, anigu dhaqsaan u imanayaa.’
Muujiintii 22:20

Aamiin, Rabbi Ciisow, kaalay!

KA FIKIR:

Anagoo Masiixiyiinta ah waxaa noola yeeray inaan dadaalno, si u eg inuu Ciise Masiix maanta soo laabanayo, oona u dulqaadano, sida uu u soo laaban doono kumanaan sano ee soo socda.

